220

# HANTIWADAAGGA CILMIGA AH

(HEERKA KOOWAAD)

# HANTIWADAAGGA
# CILMIGA AH

## "HEERKA KOOWAAD"

MUQDISHO, JANNAAYO 1976



**Hantiwadaaggu waa mid keli ah, waana kan cilmiga ah, dal kastana looga fuliyo sidii uu uga hirgeli karo, taas oo u ah fidin iyo ballaarin hantiwadaagga cilmiga ah.**

Madaxweynaha G.S.K.

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

# HORDHAC

Madaxweynaha GSK, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, wuxuu wax badan ku guubaabiyey aqoon-yahannada Soomaaliyeed ee Kacaanka ah, in ay ummaddooda ugu deeqaan aqoonta ay leeyihiin, isaga oo tixraacaya baaqii Kacaankeenna ee dhahayey: «haddaad taqaan bar, haddaadan aqoonna baro». Arrintaas oo suurageli karta marka aqoon-yahannada Soomaaliyeed qoraan buugaag oo ku qoraan Afkeenna hooyo.

Waxaynu ogsoonnahay in aqoonta u baahan in Afka Soomaaliga lagu qoraa ay badan tahay, laakiinse cilmiga qof kasta ee xoogsatada Soomaaliyeed ka mid ah waajib ku ah, in uu aqoodo ee suurageliNaya mideynta adduun-aragga iyo ideoloojiyada dadweynaha Soomaaliyeed waa barashada Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ah, kana mid ah go'aannadii Shirweynihii Koowaad ee dhinaca Siyaasadda qodobka lixaad (6) ee faraya in la kordhiyo faafinta aragtida mabda'a hantiwadaagga, laguna habeeyo heer kasta ee nolosha Bulshada.

Sidaas daraaddeed buuggan qoruhu wuxuu la kaashaday Manaahijta tacliinta ee Wasaaradaha tacliinta, kuna bannaan yahay in laga dhigo Jaamacadaha, macaahidyada iyo dugsiyada kala duwan ee dalka.

Waa aan ku rajo weynahay in buuggani qayb weyn ka qaato fidinta Mabda'a hantiwadaagga cilmiga ah. Waxan qoraha Jaalle G/le Axmed Maxamed Maxamuud (Cashuur) u soo jeedinayaa hambalyo iyo ammaan.

(G/le Sare Ismaaciil Cali Abokor)
M/Ku-xigeenka GSK, ahna Guddoomiyaha
Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada - GSK

## RAADRAAC «REFERENCES»


1. Buugga Hantiawdaagga Cilmiga ah.
   B.N. Fedoseyey.
   Progress Publishers
   Moosko - 1972.

2. Buugga Dalkayaga iyo Dadkayaga,
   Jaalle Sarreeye Gaas Maaxmed Siyaad Barre.
   Wasaaradda Warfaafinta ee J.D.S. - 1974.

3. Afrika Maanta, I.V. Milovanova,
   Moosko - 1962.

4. Buugga Hantiwadaagga Cilmiga ah,
   Professor Sarreeye-Gaas E.V. Suulimoova iyo
   PHD G/le Sare V.A. Karamii Sheva,
   Madbacadda Wasaaradda Gaashaandhigga
   ee Midowga Soofiyeeti.

5. Class Struggle in Afrika,
   Kwame Nkruma - 1973.

6. Buuggii Sahankii wadajirka ay u sameeyeen Aqoonyahanno Soomaali ah iyo Midowga Soofiyeeti - Instituutka Afrika - V.G. Salodoovnikov. - 1974.
   Madacadda «Nauuka».

7. Dhaqaalaha siyaasiga habka wax tacabka hantigoosadka,
   Doctor cilmiga dhaqaalaha,
   Professor P.V. Sokoloova,
   Madbacadda Wasaaradda Gaashaandhigga Midowga Soofiyeeti.
   Moosko - 1972.

8. Xiddigta Oktoobar,
   Wargeyska Wasaaradda Warfaafinta ee J.D.S.,
   15-5-1972, 2-8-75 iyo 8-8-75.

9. Buugga How Europe underdeveloped Afrika,
Walter Rodney - 1972.

10. Buugga Problems of Afrika,
V.G. Solo Doovnikov.

11. Wargeyska la yiraahdo Barashada Hantiwadaagga,
1-2-1974 - Beyruud.

12. Buugagtii «Volumes» Marks iyo
Engels iyo kuwii V.I. Lenin.

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo
iyada oo aan qoraha laga helin oggolaansho

Waxaa lagu daabacay Madbacadda Qaranka
XAMAR — 1976

Qore G/le AXMED MAXAMED MAXAMUUD (Canshuur)

Waxaa la qoray 1975 — 1976

# ARAR (Introduction)

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya waxay ku dhawaaqday Sannadguuradii labaad ee Kacaanka 1970kii Xaashidii labaad ee Kacaanka in ay Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ah qaadatay oo ay hirgelinayso si ay u gaarto horukac degdeg ah, taasoo isla markaasna ku caddayd baaqii koowaad ee Kacaanka qodobkiisa koowaad walow aan erayga hantiwadaagga cilmiga ahi ku qorneyn, qodobkaas oo dhahayey in la dhiso bulsho Soomaaliyeed oo ku dhisan sinnaan, shaqo iyo caddaalad. Sidaas daraaddeed waxaa noqotay lagama maarmaan in hantiwadaagga cilmiga ah la barto lana ogaado:

1) Halka uu culuunta kaga jiro;

2) Taariikhda uu soo maray cilmiga hantiwadaaggu;

3) Sida uu dal kasta uga hirgeli karo;

4) Waxa mabda'a hantiwadaaggu u horseedayo xoogagga bulshada ee uu danahooda daryeelayo;

5) Sida uu u dhasho iyo sida uu ku barbaaro;

6) In la garto adduun-aragga hantiwadaagga cilmiga ah dhinaca falsafadda, dhaqaalaha iyo bulshada intaba, taas oo aad iyo aad uga duwan habka hantigoosadka. Intaas oo dhan ka sokow, waxaa lagama maarmaan ah in hantiwadaagga cilmiga ah qaybihiisa oo dhan lagu qoro afkeenna hooyo ee Af Soomaaliga ah, sida ummad kasta ugu qorato afkeeda, si dadweynuhu u barto oo aanay ugu noqon ku tiri ku teen, isla markaasna ummaddu yeelato adduun-arag iyo ideoloojiyad keli ah oo isku mid ah, xoogsatada midnimadeedu u adkaato, kasmadooda dabaqiga ahina u korto oo aan dibusocodku u duufsan karin. Sidaas daraaddeed ayaan xilkaas weyn isugu deyey in aan u guto.

Hantiwadaagga cilmiga ahi, waa aqoon ku baahsan adduunka oo dhan, kumaankun malaayiin qof oo

aadamiga adduunka ka mid ah ayaa arkay, kuna qanacsan guulaha mabda'a hantiwadaagga cilmiga ahi u qabbaanayo, sida horumarka dhinaca dhaqaalaha, cilmiga, dhaqanka iyo horudhigga nolosha dadka.

Karl Marks iyo Fredrikh Engels ayaa dhigay jidkii, habkii iyo qaabkii aadamigu ugu gudbi lahaa habka hantiwadaagga, isla markaasna V. I. Lenin ayaa kaalintii weyneyd ee barbaarinta, fidinta iyo naaxinta aqoonta hantiwadaagga qaatay, si camali ahna u hirgeliyey markii taariikhda ugu horreysey, faallo sax ahna ka saaray waaga imberyaalisamka, aragti cusubna ku soo kordhiyey Kacaanka hantiwadaagga hirgelintiisa. Bacdama buuggani yahay buuggii ugu horreeyey ee noocaas ah, afka Soomaaligana ku soo baxa, wuxuu u badan yahay dhinaca taariikhda mabda'a hantiwadaagga cilmiga ah, buugaagtii iyo qoraalkii asaasiga ahaa ee abwaannadii cilmiga hantiwadaagga cilmiga ah Karl Marks, F. Engels iyo Lenin.

Waxaa kale oo uu buuggu qiimo weyn siiyey khud badihii Madaxweynaha GSK, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, go'aannadii GSK, waaya-aragnimadii dalalka hantiwadaagga si buuxda ugu guuleystay, waaya-aragnimadii Kacaanka Soomaaliyeed intii uu jirey iyo fadhiyadii axsaabta shaqaalaha adduunka.

Buuggu wuxuu kale oo qiimo weyn siiyey, faallo falsafi ahna ka bixinayaa Kacaanka Soomaaliyeed, xoogaggii dhaliyey, bislaanshahii Kacaanka, qaabkii uu u dhashay, xoogagga Kacaanku niyaddooda iyo danahooda cabbirayey, sababaha dhaliyey in Ciidammada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed noqdaan hormoodkii iyo dhaliyihii Kacaanka iyo guud ahaan kaalinta Ciidammada Qalabka Sida ee dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ka cayaaraan siyaasadda dalalkaas iyo sababaha la xiriira.

Buuggu wuxuu naqdi ku sameynayaa afkaarta mufakiriinta hantigoosadka, daneystayaasha midigta, kuwa bidixda fog iyo dogmada, qaseyaasha «Anarchists» iyo toostoosiyeyaalka «reformists».

Wuxuu kale oo farta ku fiiqayaa kuwa aragtida Marksismka beenta ka sheega oo duwa iyo kuwa imberyaalisamka u qabbaanaya ee ku soo gabbada hantiwadaagga dhalanteedka ah ee ku dhawaaqa «hantiwadaag Soomaali ah», hantiwadaag Afrikaan ah» iyo iwm. Buuggu wuxuu kale oo qiimo siiyey micnaha Xisbiga Marksiga-Leninigu leeyahay iyo waaya-aragnimada axsaabta dalalka hantiwadaaggu gaartey.

Sidaas daraaddeed buuggani wuxuu ka hadlayaa aragtida guud ee Marksismka, hannaanka «Methodology» Marksismka iyo sida bulsho hantiwadaag ah loo dhiso.

Waxaan mahad shakhsi ah u naqayaa Madaxweynaha GSK, Jaalle Maxamed Siyaad Barre oo igu guubaabiyey in aan ku dhiirrado oo qoro buuggan, isaga oo arkayey baahida weyn ee loo qabo.

Waxaan kale oo mahad u celinayaa Guddoomiyaha Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada ee GSK, Jaalle Ismaaciil Cali Abokor iyo Jaallayaasha kale ee Guddiga oo ii siiyey awood ballaaran qoritaanka buuggan.

**Qoraha buugga**
**G.le A.M.M. «Cashuur»**

# QAYBTA KOOWAAD

## MADAXA 1aad

## HANTIWADAAGGA CILMIGA AHI WAA QAYB KA MID AH MARKSISM-LENINISM

**Hantiwadaaggu, intii uu noqday cilmi, wuxuu u baahan yahay in si cilmi ah loo adeegsado, taas oo ah in la barto.**

**F. ENGELS**

**Mawduuca Hantiwadaagga cilmiga ah.**

Hantiwadaagga cilmiga ahi, waa qayb ka mid ah cilmiga Marksism-Leninism. Wuxuu dersaa qaab kacaameedka loo burburiyo hantisoosadka iyo gumeysiga, xeerarka suuragelinaya dhalashada, abuuridda iyo barbaarinta bulsha hantiwadaag ah. Xeerarkaasi waxay sheegayaan murtida asaasiga u ah isbeddelka bulshada waagan cusub. Waagan oo ah waagii aadamigu ka guurayey hantigoosadka ee u guurayey hantiwadaagga.

Halganka aadamigu uu la halgamayey darxumada, isku dul-noolaashaha iyo gumeysiga wuu dheeraa, laakiin intii uu curtay Kacaankii weynaa ee Oktoobar ee hantiwadaagga ahaa «Midowga Sofiyeti» nolosha aadamiga waxaa ku dhacay isbeddel weyn oo aan taariikhda hore u soo marin. Saddex meelood ka meel aadamigu wuxuu dhisayaa hantiwadaag, waxaana baaba'ay habkii hantigoosadka. Waxaa aad iyo aad u xoogeystay dhaqdhaqaaqii kacaannimada ee shaqaalaha dalalka hantigoosadka, halgankii dadyowga Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ee ay u halgamayeen xornimo waddani ah, nabadgelyo dimuqraadinnimo iyo hantiwadaag. Burburintaas

aadamigu burburinayo habkii hore ee bulshada ee xumaa iyo dhisitaanka uu dhisayo nolol cusub, iyada oo ay halgan kula jiraan xoogagga hantiwadaaggu iyo horusocodku xoogagga imberyaaliyadda iyo dibusocodka, waxaa shaki aan lahayn inay dhalanayaan su'aalo adag oo weydiinaya jidkii iyo habkii lagu barbaarin lahaa bulshada cusub, kuwa weli gumeysiga iyo hantigoosadka ku jiraa uga bixi lahaayeen. Arrintaas oo saameyneysa mustaqbalka aadamiga oo dhan. Su'aalahaas oo micne iyo qiime weyn u leh aayaha dambe malaayiin qof, jawaabta keli ah ee saxa ah waxa bixin kara cilmiga Marksism-Leninism. Taariikhdu ma taqaanno aqoon dhaqan bulsho siyaasadeed kale oo ku sameyn karta barbaarinta adduunka isbeddel weyn sida hantiwadaagga cilmiga ah oo kale, waa cilmi u iftiiminaya xoogsatada adduunka oo dhan jidkii loo abuuri lahaa bulsho cusub. Marksism-Leninism, wuxuu awood siinayaa axsaabta hantiwadaagga ah, shaqaalaha iyo xoogagga Kacaanka adduunka, sidii ay u suura gelin lahaayeen in adduunka uu ka hirgalo hantiwadaag.

**Jaalle Siyaad wuxuu yiri: «Habka dhaqan siyaasadeedka ee aannu ku soconeynaa waa habka hantiwadaagga cilmiga ah (Marksism-Leninism) oo aannu la kaashanayno wixii dalkayaga iyo dadkayaga u khaas ah, taas oo naaxin u ah aqoonta Marksism-Leninism».** (Buugga dalkayga iyo dadkayga) Q. 3.

### b) Hantiwadaagga Cilmiga ahi waa qayb ka mid ah Marksism.

Qof kastaa marka uu bilaabayo barashada cilmi cusub, wuxuu jecel yahay inuu ogaado dabeecadda guud ee cilmigaas uu baranayo, halka uu kaga jiro aqoonta iyo kaalinta uu ka ciyaaro bulshada aadamiga. Sidaas darteed waxaa lagama maarmaan ah in la caddeeyo meesha hantiwadaagga cilmiga ahi kaga jiro aqoonta Marksism-Leninsm.

Marksism-Leninism waa aqoon mid keliya ah, waa aqoonta adduun-aragga shaqaalaha, waa hab falsafadeed, dhaqaale iyo dhaqan bulsho, oo midba midka kale kaabayo. Lenin wuxuu viri, **«Waxaad mooddaa in aqoonta Marksism laga soo shubav hal koob oo keli ah».**

Marksism-Leninism, waa aqoon si cilmi ah jawaab ka bixinaysa su'aalaha khuseeya nolosha iyo garaadka aadamiga, wuxuu barayaa shaqaalaha iyo xoogsatada oo dhan jidkii lagu gaarsiin lahaa bulshada isbeddel u horseedaya dhisma hanti-wadaag.

## MEESHA HANTIWADAAGGA CILMIGA AHI KAGA JIRO MARKSISM-LENINISM

F. Engels isaga oo ka hadlaya Marksism wuxuu ku caddee-yey buuggiisii (Anti-duhring) in Marksism-Leninism ka koo-ban yahay falsafad, dhaqaale-siyaasadeed iyo hantiwadaagga cilmiga ah.

Lenin Buuggiisii «Saddexdii ilood iyo saddexda qay-bood ee Marksism» wuxuu ku yiri isaga oo sii raacaya Engels:

Aqoonta Marksism dhalashadeedu waa sii wadid iyo kordhin aqoontii abwaannadii hore ee keenay falsafadda, dhaqaalaha, siyaasadda iyo hantiwadaagga (Lenin B-23 Bogga 40). Kuwaas oo qaybahoodu kala yihiin falsafadda, dhaqaalaha siyaasiga iyo hantiwadaagga cilmiga ah. Qaybahaas Marksism-ku ka kooban yahay ma aha kuwo iska hor imaanaya isla mar-kaana mid kastaa gaar ahaanteeda ayaa loo bartaa una fiddaa.

Falsafadda Marksismku, waa cilmi ka hadlaya xeerar-ka guud ee barbaarinta dabeecadda, bulshada iyo fekeraadda-ba. Xeerarkaas guud iyo barashada katagoriyooyinkooda waxa qofku ka helayaa adduun-arg cad oo saxa.

Falsafadda diyaalektikada maddiga ahi «Dialec-tical materialism» waa asaaska hannaanka u ah arag-tida Marksismka (Methodolojical theory of Marxsism) iyo culuunta kaleba, iyada oo si qoto dheer u fa-lanqaynaysa socodka subjektifka ah ee taariikhda adduun-weynaha, ee la taaban karo, sameynaysana hore u kaca bul-shada. Falsafaddu waxay ina garadsiinaysaa, hantiwadaaggu in uu dhismo oo guuleysto inay tahay lagama maarmaan. Falsafad-da Marksism-Leninism waxay tusaysaa in hantigoosadku ku noqday hakis iyo turunturro horukaca bulshada, inuu yahay

hab gumeysi oo dibusocod ah, beddelkiisana uu imaanayo hab horusocod ah, habkaas oo ah habka hantiwadaagga cilmiga ah.

Dhaqaalaha siyaasadda Marksismku, waa cilmi ka hadlaya barbaarinta wax soo saarka bulshada, wax is-dhaafsiga iyo qaybinta. Wax soo saaridda alaabtu waa waxa ugu muhiimsan nolosha bulshada, xiriirka dhaqaalaha ee ka dhexeeya dadka ayaa u ah asaas xiriirrada kale oo dhan ee bulshada.

Cilmiga dhaqaalaha siyaasadda ee Marksismku wuxuu bixinayaa aragti dhaqaale oo ku dhisan horumarka bulshada, halgannada Kacaannada iyo libeysiga shaqaalaha iyo xoogsatadaba. Wuxuu sheegayaa khalkhalka iyo iska horimaadka ka dhexeeya xoogagga tacabka, xiriirk tacabka iyo qalabka wax soo saarka ee bulshada hantigoosadka, farqiga u dhexeeya qaabka wax soo saarka ku dhisan wax wada lahaanshaha, iyo qaabka wax soo saarka ku dhisan keli lahaanshaha, wuxuu muujinayaa, in iska horimaadkaas iyo khalkhalkaas habka hantigoosadku uu keenayo kacaan hantiwadaaga oo dhasha.

Isaga oo uu saldhig ka dhiganayo cilmiga falsafadda iyo kan dhaqaalaha ee Marksismka, hantiwadaagga cilmiga ah intiisa badani waxay ka hadlaysaa sidii jidka habboon bulshadu ugu socon lahayd, dadweynaha, dabaqadaha iyo axsaabtuna xeerarkaas u aqoon lahaayeen marka ay u halgamayaan nolol cusub iyo sidii ay ugu guuleysan lahaayeen, taasoo ah in bulsho hantiwadaag ah la dhiso. Hantiwadaagga cilmiga ahi waa aragti iyo brograam kacaannimo. Wuxuu micnaynayaa qaabka dhaqanka-siyaasadda ee bulshada hantiwadaagga. Wuxuu tusayaa kaalinta la rabo dadku inuu ka qaato taariikhda, wuxuu caddeynayaa kaalinta taariikhiga ah ee shaqaaluhu ku leeyahay taariikhda, taasoo ah inuu xoreeyo shaqaaluhu naftiisa iyo xoogsatada adduunka oo dhan, xornimadaas oo diiddan isku dul-noolaanshaha, gumeysiga, dulliga, midabtakoorka iwm. Wuxuu sheegayaa fikradihii iyo mabaadi'dii loogu halgami lahaa guusha hantiwadaagga. Halbowlaha hantiwadaagga cilmiga ahi waa aragtida Kacaanka hantiwadaagga ee broletaariyaadka iyo dhismaha hantiwadaagga.

Hantiwadaagga cilmiga ahi waa aragti ka warbixinaysa

waaga cusub ee jooga, waagaas oo ah waagii burburinta hantigoosadka iyo gumeysiga iyo u gudbitaanka aadamigu u gudbayo hantiwadaag. Waa aragti ka warbinaysa danaha shaqaalaha iyo xoogsatada oo dhan, waa aragtidii xoogagga kacaannada, sidaas daraaddeed aqoonta hantiwadaagga cilmiga ahi waa aqoon u qabanaysa danta guud ee aadamiga adduunka.

Aqoonta hantiwadaagga cilmiga ah maalinba maalinta ka dambeysa way koraysaa dagaalna waxay kula jirtaa aragtida iyo fikradaha burjuwaasiyadda, dibusocodka iyo danaystayaasha oo dhan, wuxuu halgan kula jiraa hantigoosadka iyo gumeysiga, wuxuuna u baaqayaa hab cusub oo horusocod ah, kaas oo ah hantiwadaag. Jaalle Siyaad isaga oo micnaynaya hantiwadaagga cilmiga ah wuxuu yiri, «Hantiwadaagga cilmiga ah waa habka keliya ee ummadaha adduunka gaarsiin kara caddaalad, horukac iyo barwaaqo», (Buugga dalkayga iyo dadkayga).

## MAWDUUCA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH:

Hantiwadaagga cilmiga ahi wuxuu dersaa sidii loo abuuri lahaa bulsho hantiwadaag ah, xaalaadka dhaliya iyo sida loo barbaariyo. Qaybaha cilmiga Marksism-Leninsm ee kaleba way dersaan sidii loo abuuri lahaa bulsho hantiwadaag ah, mid kastaaba dhinaca ka khuseeya, sidaas daraaddeed waxaa loo baahan yahay in si run ah oo cad loo sheego hantiwadaagga cilmiga ah iyo waxa gaarka u ah.

F. Engels buuggiisii «ka barbaarinta hantiwadaagga min dhalanteed ilaa cilmi» wuxuu ku yiri buugga «K. Marks iyo F. Engels B. 19-B. 230), waxa ugu weyn ee loo sameeyo adduunkan xoroobay waa (Kacaan Hantiwadaag ah), waana waajib taariikhi ah oo saaran broletaariyaadka adduunka maanta, taas oo ah in dadka dulleysan oo dhammi gartaan kaalintooda taariikhiga ah iyo xilka saaran, waana kaas waajibka hantiwadaagga cilmiga ahi. F. Engels ujeeddadiisu waa hantiwadaagga cilmiga ah, wuxuu micnaynayaa xaaladda taariikhiga ah iyo dabeecadda Kacaanka hantiwadaagga ah iyo kaalinta broletaariyaadka la rabo inay ka qaataan.

Lenin buuggiisa Karl Marks wuxuu ku sifeeyey in

hantiwadaagga cilmiga ahi yahay aragtidii iyo brograamkii dhaqdhaqaaqyada shaqaalaha ee adduunka ilbaxa ah oo dhan Lenin B. 26 B. 50-51). Cilmi kastaa wuu barbaaraa oo fidaa, micnihiisa iyo ulajeeddadiisuna way barbaaraan.

Karl Marks, F. Engels iyo V. I. Lenin markii ay ka hadlayeen hantiwadaagga cilmiga ah ma jirin bulsho hantiwadaag ahi adduunka, mana jirin waayo-aragnimo dhisme hantiwadaag. Sidaa daraaddeed murtida aragtida hantiwadaagga cilmiga ahi waqtigaas waxay ka hadlaysay sidii broletaariyaadku halgan dabaqi ah oo suurta geliya kacaan hantiwadaaga u geli lahaa, ulana wareegi lahaa xukunka. Markii ugu horreysey ee bulsho hantiwadaag ahi dhalatay waxaa taariikhda adduunka ku dhacay isbeddel weyn, socodsiiska habka iyo xeerarka lagu barbaariyo bulsho hantiwadaag ah. Lenin kaddib, aragtidii hantiwadaagga cilmiga ahi waxa hore u dhiga axsaabta hantiwadaagga ee adduunka, waxay is-dhaafsadaan waayo-aragnimada ku saabsan socodka kacaannada cusub ee adduunka iyo dhismaha hantiwadaagga, waxay ku dareen oo ku naaxiyeen cilmigii hantiwadaagga qodobbo cusub iyo go'aanno cusub, intaas oo dhami waxay suura gelinaysaa in mawduuca hantiwadaagga cilmiga ahi hore u maro oo ballaarto.

Sidaas daraaddeed: **Hantiwadaagga cilmiga ah waa barashada halganka dabaqiga ah ee broletaariyaadka, barashada** xeerarka, jidadka iyo hababka loo **sameeyo kacaan hantiwadaag ah, iyo sidii loo dhisi lahaa hantiwadaag.** Isaga oo tixraacaya qodobbadaas Jaalle Siyaad wuxuu yiri: **«Hantiwadaagga cilmiga ahi ma aha garmaqaate (Dogmatic) ee waa cilmi u baahan waayo-aragnimo siyaasadeed iyo fidin ku qotonta taariikhda iyo waaga lagu jiro, sidaas daraaddeed hirgelinta hantiwadaagga cilmiga ah ee Soomaaliya waxay u tahay Marksism-Leninism ballaarin iyo waayo-aragnimo cusub».**

### t) MURTIDA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH:

Maadaama hantiwadaagga cilmiga ahi uu yahay aragti iyo brograam, istratiijiyad (strategy) iyo tab (tactics), halgan kacaannimo oo shaqaale iyo dadweyne, heerkiisu iyo murtidiisu

waxay la xiriirtaa sidii loogu halgami lahaa in la dhiso hantiwadaag.

Waxaa jira saddex heer oo halgan :

a) Diyaarinta iyo sameynta Kacaan hantiwadaag ah.

b) Dhisidda bulsho hantiwadaag ah.

t) Barbaarinta hantiwadaagga iyo u guuritaanka heerka labaad ee hantiwadaagga.

Iyada oo u saddexdaas heer la xiriiro waxa jirta in hantiwadaagga cilmiga ah loo qaybiyo saddex qaybood:

a) Xeerarka iyo jidadka loo afgembiyo habka ku dhisan isku dulnoolaanshaha, iyo sida kacaan hantiwadaag ahi u guuleysan lahaa;

b) Xeerarka iyo jidka loo maro min bulsho isku dulnoolaansho ilaa bulsho hantiwadaagga;

t) Xeerarka iyo jidka loo barbaariyo bulshada hantiwadaagga, looguna wareegi lahaa heerka labaad ee hantiwadaagga.

Qodob kastaa wuxuu dersaa oo ka warramaa dhowr arrimood, mitaal qaybta koowaad waxay derseysaa oo falanqaynaysaa habkii iyo qaabkii kacaannimo, ee loogu beddeli lahaa bulsho hantigoosad ah bulsho hantiwadaag ah, wuxuu sheegayaa qodobbada asaasiga u ah Kacaanka hantiwadaagga ah. Xeerarka loo barbaarin lahaa socodka kacaannimada ah ee waaga cusub, halganka dabaqiga ah ee broletaariyaadka, dhaqdhaqaaqyada gobannimo-doonka waddaniga ah iyo dhaqdhaqaaqyada hantiwadaagga ee adduunka. Qaybta labaad waxay derseysaa qawaaniinta guud ee dhismaha hantiwadaagga iyo qaabkii looga hirgelin lahaa dalal kala duwan, waxay derseysaa arrimo ku saabsan dhaqaale, bulsho, siyaasad iyo ideoloojiyad, lana xiriira sidii loo dhisi lahaa loona barbaarin lahaa hantiwadaagga iyo sidii looga daafici lahaa cadowga.

Qaybta saddexaad waxay ka hadlaysaa arrimo ku saabsan barbaarinta bulshada hantiwadaagga ah, waxay falanqaynaysaa waxyaalaha saldhigga u ah dhismaha asaaska


teknoloojiyadda hantiwadaagga, dhaqaalaha iyo dhaqanka dabaqiga ah, dhaqanka-ideoloojiga iyo arrimo kale oo la xiriira sidii loogu guuri lahaa nolol hantiwadaaga.

Falanqaynta murtida hantiwadaagga cilmiga ah, waxaa kale oo ka mid ah arrimaha ku saabsan hoggaaminta cilmiga ah, daafacaadda bulshada cusub laga daafacayo cadowga, naqdiga aragtida iyo ideoloojiyada Marksism-Leninsm, sidii loo hoggaamin lahaa ummadda, looga beddeli lahaa min heer ilaa heer.

Marka la diyaariyo lana sameeyo Kacaan hantiwadaag ah, markaasna uu taagan yahay halgan dabaqi ahi, waxaa loo baahan yahay halgan, marka la afgembiyo dabaqadda burjuwaasiyadda, lana taago diktaatuuriyadda broletaariyaadka waxaa loo baahan yahay habayn cusub oo saameysa nolosha bulshada, taas oo lagu heli karo hoggaamin cilmi ah iyo ciidan ka daafaca Kacaanka gudaha iyo dibedda, si halganka shaqaaluhu u guuleysto hantiwadaaggana loo dhiso, waxaa loo baahan yahay faallo sax ah oo ku saabsan waqtigaas la joogo go'aan ku habboonna la gaaro, looma baahna dhalanteed (illusions) ee waxaa loo baahan yahay in loo xisaabtamo si qota dheer, ma aha hadallo hadoof ah iyo erayo Kacaan ah oo ciyaar ciyaar loogu dhawaaqo ee waxaa loo baahan yahay wax isuqiyaas iyo dheellitir saxa iyo wax arag dheer oo cilmi ah, Jaalle Siyaad isaga oo arrintaas kaga faalloonaya kuwa uu ku tilmaamay hantiwadaag xumayaasha wuxuu yiri, **«Waxaa jira dad dadka dalka ka mid ah oo isku magacaaba hantiwadaag yaqaanayaal, dadkaasi weligood arrimaha Soomaaliya uma eegaan si cilmi ah, mana qabtaan shaqooyin lagu taageerayo dhismaha hantiwadaagga, waxay iska soo tuuraan hadallo aad moodid in ay hantiwadaag ku hadlayaan, kuwaasi uma qabanayaan dhisme hantiwadaag ee waxay u qabanayaan xoogagga dibusocodka ah, hantiwadaaggu ma aha aragti madhan, waa maskax iyo fikrad ficil la geliyo, waa dadaal, feker iyo shaqo ay xoogsatadu ku raadinayaan sidii ay arrimahooda bulshada u daryeeli lahaayeen». Aragti sax ihi ma jirto ilaa ficil lagu rumeeyo oo la hirgeliyo hantiwadaagga cilmiga ahi waa aragti sax ah, waayo way hirgashay, aadamiguna waaya-aragnimo ayuu ku leeyahay. Haddii dad-**

## MAWDUUCA HANTIWADAAGA CILMIGA

**Hantiwadaagga Cilmiga ahi waa qayb ka mid Marksism — Leninism**




**H/C — waa cilmi ku saabsan halganka dabaqadda Broletaariyaadka iyo Kacaanka hantiwadaagga, xeerarka dhaqanka siyaasadda bulshada ee dhismaha hantiwadaagga iyo socodka kacaanka adduunka guud ahaan.**

**yow adduunka ka mid ahi ay hantiwadaagga uga hirgeliyaan dalalkooda sidii iyaga u dan ah oo la socota danaha dadkooda, annaguna awood ayaannu u leennahy in aannu hantiwadaagga cilmiga uga hirgelinno dalkayaga si u qalanta danahayaga** (B. Dalkayga iyo dadkayga B.3/126). Hantiwadaagga cilmiga ahi waa cadowga joogtada ah ee dibusocodyada midigta iyo bidixda fog, iyada oo ay saldhig u yihiin dhaqanka dhaqaalaha subjektifka ah, xaaladda siyaasiga ah ee markaas taagan iyo wixii suuragala, wuxuu dadweynaha Kacaanka ahi iyo horseedkooda u tilmaamayaa sidii ay himilooyinkooda u xaqiijin lahaayeen. Hantiwadaagga cilmiga ahi dagaal joogta ah ayuu kula jiraa ideoloojiyada burjuwaasiyada iyo dibusocodka, kuwaas oo raba in ay xoogsatada adduunka maskaxda ka addoonsadaan si ay danahooda burjuwaasiga ugu fushadaan.

## ARRIMAHA DAGAALKA IYO HANTIWADAAGGA CILMIGA AH:

Taariikhdu waxay sheegeysaa in aanay jirin dabaqad wax dulleysata ama addoonsata oo iska dhiibtay xukun, ee had iyo goor halgan iyo dagaal ayaa lagaga qaadi jirey, dagaalkaas oo lahaa qaabab kala duwan, mid dhaqaale, mid siyaasadeed, mid ideolooji iyo mid dagaal intaba, bacdamaa hantiwadaagga cilmiga ahi uu ka soo horjeedo wixii dulli iyo isku-kornoolaansho oo dhan. Hababkaas hore u jiri jirey waxaan shaki lahayn in ay sameynayaan is-hortaag iyo xataa dagaal ay la dagaallamayaan xoogsatada iyo ideoloojiyadoodaba af iyo addinba. Iyaga oo taas maskaxda ku haya Karl Marks, F. Engels iyo Lenin waxay wax badan wax ka qoreen oo ka hadleen arrimaha milleteriga ee dabaqadda shaqaalaha, waxay sameeyeen oo dhigeen aqoon la yiraahdo **«Daafacaadda dalka hooyo ee hantiwadaagga ah».**

Marksiyiintu waxay had iyo goor jecel yihiin in arrimaha ka dhexeeya bulshada iyo kuwa ka dhexeeya dadyowga iyo dawladaha adduunka lagu dhammeeyo si nabadgelyo ah, laakiin dabaqadaha hantigoosadka iyo gumeysigu waxay xoogsatada dawladaha hantiwdaagga ah iyo dadyowga u halgamamadax bannaanidooda ku kallifayaan oo ku khasbayaan dagaal iyo dhoollatusid xoog. Lenin wuxuu baaray in is-hortaag-

ga milleterinimada ah ee burjuwaasiyadda lagaga dugbi karo xoog dab leh oo la qabbaansado (Dagaal milleteri) jidka kale oo lagu ilaalin karo ama lagu barbaarin karo waaga cusub ma jiro.

Daafacaadda hantiwadaaggu waa **waajibka shaqaalaha iyo xoogsatada adduunka oo dhan, waa xaal lagama maarmaan ah iyo xeer ka mid ah xeerarka dhalashada iyo barbaarinta habka hantiwadaagga cilmiga ah iyo dabargoynta gumeysiga, waa qaab dagaal dabaqadeed, oo lagu xallin karo iska hor-imaadka waaga cusub.** Sidaas daraaddeed arrimaha milleteriga, cilmiga hantiwadaaggu wuxuu u arkaa wax dabiici ah sida dhaqaalaha, siyaasadda iyo ideoloojiyada. Wuxuu soo geleyaa madaxyada cilmiga hantiwadaaggu ka hadlo sida :

b) Xiriirka ka dhexeeya dagaalka iyo kacaanka hantiwadaagga;

t) Arrimaha dagaalka ee ku saabsan istratiijiyada iyo tabta dhaqdhaqaaqyada xornimo-doonka.

j) Arrimaha dagaalka iyo nabadda.

x) Xeerarka guud ee barbaarinta ciidammada dawladaha hantiwadaagga ah iyo sidii loo habeyn lahaa daafaca dalka hantiwadaagga;

kh) Xoojinta isbahaysiga iyo xiriirka milleteri-siyaasadeedka dalalka hantiwadaagga dhexdooda iyo dalalka soo koraya ee hore u socodka ah ciidammadooda.

## XEERARKA IYO KATEGORIYOOYINKA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH:

Sida cilmi kasta hantiwadaaggu wuxuu leeyahay kategoriyooyinkiisa iyo xeerarkiisa, kuwaas oo laga dhex helo aqoonta Marksism-Leninism, qawaaniintaas waxaa ka mid ah:

b) In nolosha dhaqanka-dhaqaalaha bulshadu xukumo garaadka bulshada.

b) In qalabka wax soo saarku ka ciyaaro kaalinta ugu weyn nolosha dadka;

j) In qaacidadu «basis» ka horreyso Saabka «Superstructure».

Hantiwadaagga cilmiga ah waxaa lagu bartaa qawaaniinta dhaliya iyo kuwa barbaariya habka hantiwadaagga. Haddii aynu ka hadallo kuwa ugu muhiimsan iyo waxa ay kaga duwan yihiin kuwa burjuwaasiyiinta waxaynu ka soo qaadan karnaa:

b) Khalkhalka iyo xiisad la'aanta barbaarinta nolosha bulshada dhinac kastaba ee habka hantiwadaagga;

t) Sinnaanta bulshada iyo suulinta dabaqadaha oo tallaabo tallaabo ku yimaada;

j) U gudubka bulsho hantiwadaaga oo tallaabo tallaabo ah;

x) Socodka bulshada iyo hoggaamintiisa oo lagu dhiso qorshe;

kh) Barbaarinta iyo horumarinta qofka aadamiga dhinac kastaba, bacdamaa uu yahay ulajeeddada ugu weyn ee bulshada, taas oo ah daryeelka qofka.

Waa kuwaas qodobbada ugu muhiimsan barbaarinta habka hantiwadaagga, loona baahan yahay in lala kaashado socodka taariikhda.

Kategoriyooyinka hantiwadaagga cilmiga ahi waa la mid xeerarka hantiwadaagga, waxayna micneeyaan isku wax, waxana ka mid ah:

1. Hantiwadaagga;
2. Diktaatuuriyada broletaariyaadka;
3. Heerka sare ee labaad ee hantiwadaagga;
4. Kaalinta taariikhiga ah ee dabaqada shaqaaluhu leedahay waajibna ku ah;
5. Kacaan hantiwadaag ah;
6. Shaqada hantiwadaagga;
7. Garaadka hantiwadaagga;

8. Barbaarinta qofka (shaqsiyadda);

9. Broletaariyaadnimada caalamiga ah iwm.

Xeerarka iyo kategoriyooyinka hantiwadaagga cilmiga ahi waa tiirarkii cilmiga hantiwadaagga. Marka qofku si is-dabajoog ah oo isku xiriirsan uu u barto wuxuu helayaa oo yeelanayaa garasho buuxda oo ku saabsan sida bulsho hantiwadaag ahi u taal, sida ay u dhalato iyo sida ay u barbaarto.

## J) HANNAANKA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH:

Hannaanka guud ee hantiwadaagga cilmiga ahi waa falsafadda Marksism-Leninism. Falsafaddaasi waxay bixinaysaa adduun arag iyo sida loogu baahan yahay in arrimaha adduunka loo arko. Habkaas iyo adduun araggaasi ma aha mid ku dhashay heshiis lagu heshiiyey ama waxa kale oo subjektif ah ee waxaa xaddiyada dabeecadda cilmiga naftiisa, meesha uu aqoonta guud kaga jiro, ujeeddada cilmiga iyo kaalintiisa.

Hantiwadaagga cilmiga ahi wuxuu saameynayaa:

1. Arrimaha bulshada, hantiwadaagga cilmiga ahi wuxuu ka eegaa dhinaca dhaqanka, siyaasadda, bulshada iyada oo la isku xiriirinayo oo la isla kaashanayo aragtida iyo ficilka lana dersayo oo la tixgelinayo kaalinta dadweynuhu, dabaqaduhu iyo axsaabtu ka qaataan socodka taariikhda;

2. Hantiwadaagga cilmiga ahi wuxuu tusaa oo baraa siyaabaha, xoogagga iyo qalabka la qabbaansado iyo jidkii loo mari lahaa in bulsho hantigoosada ama ku nool hababkii hantigoosiga ka horreeyey loogu beddeli lahaa bulsho hantiwadaag ah;

3. Hantiwadaagga cilmiga ahi wuxuu falanqeeyaa xaaladka iyo arrimaha bulshada ee taagan, isla markaasna wuxuu qorsheeyaa sidii mustaqbalka loo aloogi lahaa bulsho hantiwadaag ah;

4. Caalaminimada hantiwadaagga oo ah xeerarka

guud ee dhismaha hantiwadaagga iyo sidii looga hirgelin lahaa dalal kala duwan, iyada oo la dersayo waxyaabaha khaaska u ah dal kasta ee la xiriira xaal taariikheedka dalku marayo iyo sidii waaya-aragnimada adduunka hantiwadaagga loogaga faa'iideysan lahaa dhismahaas.

5. Hantiwadaagga cilmiga ahi waa gabagabeyntii ideoloojiyada Marksism-Leninism, wuxuuna cuskisiisan yahay aqoonta taariikhda, falsafadda iyo dhaqaalaha ee Marsism-Leninism, waana taas arrinta muujinaysa isku mid ahaanta waaxaha ama qaybaha uu ka kooban yahay Marksism-Leninism.

6. Hantiwadaagga cilmiga ahi, falanqaynta amuuraha wuxuu kaga duwan yahay aqoonaha kale ee jira ee dersaa arrimaha bulshooyinka sida mitaal ahaan taariikhda, in uu falanqeyntiisa la kaashado hab dhisan oo xeerar iyo kategoriyooyin leh, waxaana loo baahan yahay marka arrimaha bulshada la xiriira la falanqaynayo in lala kaashado xaalaadka taariikhiga ah ee markaas bulshadu ku sugan tahay, kuwaas oo dhalinaya in xeerarkaas badankooda isbeddel ku dhacayo la xiriira heerka barbaarinta taariikhda ee bulshada. Sidaas daraaddeed hantiwadaagga cilmiga ahi wuxuu u baahan yahay in la barto.

## MADAXA LABAAD

### 1. HANTIWADAAGGA DHALANTEEDKA AH

**B) Hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa ee Qarnigii XVI — XVIIaad.** Waxaa la ogyahay fikradda ah in la helo hab bulsho oo xaq iyo caddaalo ku dhisan waxay jiri jirtey ilaa iyo waqtigii habka isadoonsiga iyo dhulgoosiga, fikradahaasi ma habeysneyn ee way kala firirsanaayeen, Qarnigii XVI iyo kii XVII ayaa hantiwadaagga dhalanteedka ahi aad culumo badani, wax uga qoreen oo uu si fiican u soo shaac baxay, waqtigaas oo ahaa markii hantigoosadku barbaaray. Culumadaas fikradahoodu waxay u badnaayeen (Protest), is-hortaag iyo diidmo ay diiddanaayeen xaqdarrada, dulliga dad yar oo maalqabeen ahi ku hayeen dadweynaha tirada badan, shaqo-maalmeedka shaqaalaha wershadihii markaas jirey waxay ahaayeen 13-14 saacadood, mararka qaarkoodna ilaa 16 Saacadood, qaabka tacabku aad ayuu u dhibaato badnaa lacagta (Mushahar) shaqaaluhu qaadan jireen aad ayey u yarayd, carruurta iyo haweenku lacag ka yar tan ragga ayey qaadan jireen, barbaarintii Wershaduhu waxay dhalisay in makiinadihii yar-yaraa qiimo beelaan, waxaas oo dhami waxay dhaliyeen in shaqaalihii cadhoodo.

Dhinaca beeraha, beeraleydu nolol xun ayey ku noolaayeen, iqdaaciyiintii (Land lords) aad ayey u dulmi jireen beeraleyda, dhulkana way ka qaadi jireen oo eryi jireen, khaas ahaan dalka Ingriiska, tallaabooyinkaasi waxay keeneen in beeraleydii hanti beelaan oo gaajoodaan, waxay ku soo qamaameen magaalooyinkii oo ka noqdeen suuq joog, iyo xammaaliin aan jogta ahayn. Culimaadii hantiwadaagga dhalanteedka ahayd waxay arkeen dhibaatadii haysatey shaqaalaha iyo beeraleyda, dhibaatooyinkaas oo uu sabab u ahaa habkii bulshada ee markaas taagnaa, sidaas daraaddeed ayey ugu muujiyeen buugagtoodii ay ka qori jireen bulshada, dhibaatooyinkii jirey, iyaga oo isku deyeyey inay dhibaatooyinkaas daawo u helaan.

## T.MOOR IYO KAMBANELLA

Abwaannadii hantiwadaagga dhalanteedka ahaa waxaa ugu weynaa mufakirkii Ingiriiska ahaa Toomas Moor (1479 1535), wuxuu ahaa nin aqoon sare leh, meel sarena ka haya Baarlamaanka Ingriiska, (1516) wuxuu qoray buug la yiraahdo (buuggii dahabka ahaa), markii dambana waxa uu ku magac baxay (Utopia) ama **dhalanteed.**

Qiimaha taariikhiga ah ee T. Moor sameeyey, wuxuu noqday, in uu soo jeediyey in tacabka (production) la hantiwadaageeyo, wuxuu aad ula dagaallamay hantigoosadnimada iyo keli lahaanshaha. Wuxuu yiri: **«Haddii qof kasta doono in uu yeesho oo helo intii uu yeelan karo, si kasta oo adduunyadu u badan tahay, gacmo tirsan ayey ku soo ururayaan».** Sidaas daraaddeed T.Moor wuxuu soo jeediyey in waxlahaanshanimada ku dhisan keli ahaanta la burburiyo. Afkaartaasna waxa ka mid ahaa in asaaska wax tacabku ka bilowdo xaaska, in shaqada la shaqeeyo lix saacadood inta kalena wax la barto, in wixii la soo tacbo lagu uruuriyo bakhaar, dadkana mushahar lacageed la siin, ee qof kastaa wixii uu rabo laga siiyo bakhaarka, dharka in labadii sano hal isku-joog la siiyo qofkiiba, midab ka iyo qaabka dharkuna mid keliya ahaado. Doorashada in ay wax doortaan aabayaasha oo keli ahi, in la yareeyo oo la xadido awoodda boqorka, T. Moore noloshiisii waxay ku dhammaatay si foolxun taas oo ah in boqorkii VII ee Ingiriisku dilo markii uu diiday in uu u dhaarto inuu boqortooyada boqorkaas daacad u noqdo.

**Tomaaso Kambanella (1568-1639)** wuxuu ku dhashay Koonfurta dalka Talyaaniga,markaasna waxa xukumayey koonfurta Talyaaniga Isbaanishka, Kambanella fikradihiisii aadaminimada iyo caddaaladda u baaqayey aawadeed waxaa lagu tuuray xabsi, wuxuu ku jiray 27 sano. Kambanella wuxuu ahaa nin hammad weyn, intii uu ku jiray xabsiga ayuu qoray buug, buuggaas oo uu u qoray si sheeko ah, kuna saabsan nin dalmar ah oo tegey dal kale oo ku dhaqma hab bulshanimo oo cusub, Buugga wuxuu ku magacaabay **«Magaaladii Iftiimeysey».** Nolosha magaaladaas uu tilmaamayey waxay u ekeyd sidii buuggii (Utopia) ee T. Moor qoray, Kambanella ma durin dhaqankii nolosha ee markaas taagnaa, ee wuxuu micnaha

buuggiisa ku ururiyey tilmaantii uu is lahaa way ugu fiican tahay in hab bulsho oo xaqa la helo. Buuggiisa wuxuu kaga hadlay sidii bulshadu wax u qabsan lahayd iyo qof kastaa waxa uu heli lahaa ee kama hadlin qaabka tacabka.

«Magaaladii iftiimeysey» dadku waxay soo saaraan oo dhan waxaa la isugu geeyaa maqaasiimo, qof kastaana wuxuu maalkaas ka qaataa wixii uu ku noolaan lahaa. Magaalada lacag laguma isticmaalo, qofna intii uu u baahan yahay wax ka badan ma qaato, dadka magaalada ku nooli waxay shaqeeyaan afar saacadood inta kale, waxay ka shaqeeyaan barbaarinta maskaxda iyo jidhka. Shaqada beeraha iyo xooluhu dad gaar ah uma go'na ee dadka oo dhammi waa ka shaqeeyaa. Magaalada waxaa madax u ah urur culimo ah, hoggaamiyaha magaaladu waa nin cilmi badan iyo waaya-aragnimo ballaaran leh, wuxuuna leeyahay gacan yareyaal ugu qaybsan arrimaha dagaalka iyo nabadda. Waxaa magaaladaas qiimo weyn la siiyaa cilmiga iyo hiddaha barbaarintooda, xannaanada iyo edbinta carruurta.

## WILSON, MELAR, MAABEL IYO BABEL

Qarnigii XVII - XVIII fikradihii hantiwadaagga dhalanteedku way koreen, mufakiriintii markaas jiray waxay bilaabeen in ay duraan habkii dhulgoosiga iyo kii hantigoosiga intaba, dadweynihiina aad ayey fikradahoodii ugu soo joogsadeen oo ugu riyaaqeen. Kacaannadii burjuwaasiga ahaa ee ka dhacay Yurub waxa ka qayb galay beeraleydii, reer magaalkii iyo dad masilaya shaqaalaha, dadweynihii waxay wax badan ku doodeen in loo sinmo wax lahaanshaha iyo in la xaqo dhulka.

Waxaa qayb weyn ka qaatay dhaqdhaqaaqyadaas nin Ingiriis ah oo culumadii hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa ee qarnigii XVII ka mid ahaa (Wilson 1609-1652), buugagtiisii waxaa ugu weynaa buuggii la oran jirey «Qaanuunka xorriyadda», wuxuu yiri Iglan waa in ay noqotaa Jamhuuriyad aan lahayn hantigoosadnimo, dadka oo dhammi waa in ay danta guud u shaqeeyaan, waa in aanay jirin shaqa la'aan iyo suuq wareeg. Beeraleyda waa in laga xoreeyaa iqdaaciyiinta. Wuxuu soo jeediyey in tusaale lagu sameeyo dad ka mid ah

bulshada oo la eego sidii fikradahaasi u hiregli karaan, taas oo ka heer sarreysa Afkaartii Moor iyo Kambanella. Wuxuu Wilson aamminsanaa in bulshada loo beddelo karo min dhulgoosi ilaa hantiwadaag, sidaasina ay suurageleyso haddii la qaado tallaabooyin sharci ah. Afkaartii Wilson waxay ahaayeen kuwo ka waaqicisan kuwii culumadii ka horraysay, taas oo uu muujiyey tixgelin uu tixgeliyey in uu isku xiriiriyo dadka iyo dhaqdhaqaaqyadii Kacaannimada ee taagnaa.

**SHAN MOOLYE** (1664-1729) wuxuu ahaa baaderi Fransiis ah wuxuu aad iyo aad u duri jiray dhulgoosiga iyo isku-dul-noolaanshaha, buuggii uu qoray oo uu ku magacaabay (Urur) wuxuu ku soo gabagabeeyey oo uu yiri: **«Jidkii loo mari lahaa in bulsho cusub oo aan isku dul noolaansho lahay la dhiso wuxuu ku jiraa gacmaha dadweynaha, wuxuu ku taliyey in la dhiso bulsho hantiwadaag ah».**

**«Wuxuu yiri: «Dadweynaha dulmanow isu taga, is garabsada, mid ahaada, iqdaaciyiinta idinka ayaa isu duleeyey, idinka ayaana iska celin kara oo wanaag kasta isu haya, waxa idin dulleynayaa waa xooggiinna aad idinku leedihiin».**

**(MORELLI - 1755)** wuxuu qoray buug la yiraahdo «Nidaamka dabeecadda» wuxuu aad u duray hab wax lahaanshaha keli ahaanta ku dhisan, wuxuu yiri: «Qofku wixii u shaqsi ahaan isticmaalayo uun ha yeesho, wixii la tacbaana dadka ha ka dhexeeyo, shaqadana qof kastaa intii uu qaban karo ha qabto».

**JEBRAIIL MAABLI (1709 - 1785)** wuxuu aad u duray habka isku dul-noolaanshanimada ku dhisan, wuxuu ku dooday in bulshada lagu dhaqo hab hantiwadaag.

Wuxuu yiri dabeecaddu dadka way sintay, iyaga oo siman ayey abuurmeen, isku qaab iyo maskax ayaa la siiyey, haddaba barwaaqada dhulka ma qofbaa lagula ballamay, mise gobol dhulka ka mid ah ayaa dabeecaddu gooni ahaan ugu roonaatay. **Wuxuu yiri dabeecaddu ma abuurin taajir iyo faqiir, wax lahaanshaha gaar ahaaneed waxay burburisey sinnaantii dabiiciga ahayd ee bulshada, waxay xumaysay sharaftii iyo**

**wanaaggii dadka ka dhexeeyey, waxay keentay oo ku abuurtay dadkii dabbaalnimo, hunguri weyni iyo xoolo urursi.**

Haddaba si dadku uga xoroobaan waxyaalahaas xun xun Maabli wuxuu soo jeediyey in la soo saaro xeerar bulshada simaya oo wax lahaanshaha qiyaasaya.

Afkaartii saameyneysey sinnaanta bulshada waxay si fiican u soo shaac baxday waqtigii Kacaankii Faransiiska ee burjuwaasiga ahaa (1789 - 1794). Sannadahaas waxaa aad u faafay fikradihii ku saabsanaa in la helo bulsho sinnaan iyo caddaalad ku wada noolaata oo hantiwadaag ah, si taas loo helana waxaa dad badani ku qanceen in loo baahan yahay Kacaan, Kacaan dadku ku kaco oo xoogsatadu gacanta sare yeelato.

Raggii fikradahaas aad u faafinayey waxaa ugu horreeyey (Babeef 1760 - 1797), markii mufakiriintii burjuwaasiyiintii Fransiisku yiraahdeen Kacaanka ka dhashay Fraans waa Kacaan simaya dadka, Babeef iyo saaxiibbadiis waxay yiraahdeen, burjuwaasiyiini xaq iyo sinnaan ka talin maayaan ee waa in xukunka ay xoogsatadu la wareegtaa si sinnaan run ah loo helo. Waxay ku doodeen in dalka aanu jirin taajir iyo faqiir, qofna waa in aanu xoolo urursan, shaqadu waa in ay ku noqotaa waajib qof kasta oo bulshada ka mid ah, intuu qaban karo iyo wixii awooddiisu tahayna qabtaa. Babeef iyo saaxiibbadiis afkaartoodii uma qorin si sheeko ah, waxay ku faafiyeen oo ay u qoreen si baaqa, si brograam ahaan ah, taas oo dhalisay in ay dalkii oo dhan wada gaarto oo ku faafto.

## HANTIWADAAGGII DHALANTEEDKA AHAA EE DALALKA YURUBTA GALBEED EE QARNIGII 19aad

Markii ay ka dhaceen Kacaanno burjuwaasi ahi dalalka Ingiriiska iyo Fransiiska, hantigoosadkii aad ayuu u koray, markii burjuwaasiyadii qabsatay xukunkii, waxay ka xoreeyeen warshadihii jidkii dhulgoosiga ahaa, warshadihii waxay bilaabeen in ay soo saaraan baabuuro iyo makiinado, waxaa kordhay tacabkii warshadaha iyo ganacsiga intaba.

Si dhaqso ah waxa u batay warshadihii, shaqaalihiina waa batay, heerrkii nolosha bulshada ayaa aad u kala tegay, waxaa abuurmay dabaqad burjuwaasi ah iyo dabaqad shaqaale ah, si tallaabo tallaabo ah shaqaalihii wuxuu aqoonsaday heerka dullinimada iyo addoonsiga ah ee ay ku jiraan.

**HENERI SEN-SIMON** (1760 - 1825), wuxuu ahaa nin mufakir Fransiis ah, aad ayuu u duray habka burjuwaasiyadu ku dhaqmeysey kaas oo ah habka hantigoosadka, wuxuu yiri waxaan hubaa in hab bulsho cusub oo xaq ahi imaan doono oo beddeli doono habka hantigoosiga uuna ku magacaabay (Casrigii dahabiga ahaa), Sen-Simon wuxuu su'aalay jidkee ayaa loo mari karaa casriga dahabiga ah?, Nuxda horusocodnimada Sen-Simon waxay ahayd in uu arkay in aadamigu dabeecadda ka adkaan karo oo isagu sidii uu rabo ku fali karo.

Wuxuu yiri: «**Marka aadamigu iska dhaafaan is-gumeysiga ay is-gumeysanayaan, xoogaggoodana isugu geeyaan sidii ay u hantiyi lahaayeen dabeecadda, markaas ayuu imanayaa casrigii dahabiga ahaa.**

Sen-Simoon inkasta oo uu tallaabo weyn oo horukac ah keenay misana wuxuu ahaa qof idiyaaliste ah, fikradihiisuna yihiin hantiwadaag dhalanteed ah. Wuxuu aamminsanaa in burjuwaasiyadda iyo shaqaalaha la heshiisiin karo oo wax la wadaajin karo, ma aanu garan nuxda halganka dabaqiga ah iyo kaalinta ay ka qaadato barbaarinta bulshada, inkasta oo Sen-Semoon ka hadlay sidii dhibaatooyinkii markaas taagnaa looga bixi lahaa, laakiinse ma ahayn mufakir shaqaale, mana uusan garan kaalinta ay ka ciyaari karaan taariikhda.

Wuu gartay culeyska iyo dhibaatada weyn ee shaqaalaha haysatey, wuxuuna yiri, ujeeddadeydu waa in aan ka yareeyo shaqaalaha adduunka oo dhan dhibaatooyinka haysata.

Wuxuu ahaa mufakirkii ugu horreeyey ee yiraahda ra'yiga oranaya: «**Qof kastaa kartidiisu inta ay le'eg tahay ha shaqeeyo, tamarta shaqadiisana wax ha ku helo».** Waxaa kale oo qiime lahaa ra'yigiisii ahaa: «Ha laga beddelo dawladda dawlad shaqadeedu tahay dad hoggaamin iyo xukun oo ha laga dhigo dawlad qabanqaabisa tacab dhalin».

**SHAARL FURYE (1772 - 1837)**, noloshii bulshada ee Yurub waxaa qarnigii XIXaad aad u soo shaac baxdey fikrad hantiwadaag dhalanteed ah oo la oran jiray Furyeerism, mufakirkaas oo ahaa Fransiis.

Waxay isku fikro dhawaayeen Sen-Simon, wuxuu yiri haddii dhaqan bulsho oo cusub aan la samayn, **barbaarinta tacab dhalintu ma keeni doono raaxo iyo farax ee waxay keeni doontaa gaajo iyo faqri, taas oo ku iman doonta xoogsatada oo dhan.**

Furyee wuxuu yiri qofka waa in hal shaqo oo keli ah aan loo gooyn, waa in qofku xor u ahaadaa in shaqadii uu wax ka keeni karo doorto, shaqo kastaa waxa lagu qiimeyn karaa hadba inta shaqadiisu u faa'iideyneyso bulshada.

Furyee wuxuu soo jeediyey in shaqada beeraha iyo xoolo dhaqatada xoogga la saaro. Furyee ma garan kaalinta warshaduhu ka qaataan barbaarinta iyo horumarka bulshada. Wuxuu kale oo uu soo jeediyey in dadka loo qaybiyo ururo, urur kastaana wixii uu soo saaro ku noolaado, loona sameeyo guryo, cunto, farsamayaqaanno (dawaarayaal) iyo kabotolayaal iwm. Ururradaasna ay ka soo qayb galaan burjuwaasiyiintu, burjuwaasiyiintana la siiyo guryo, qalab iyo hunguri ka fiican kuwa dadka shaqaalaha la siiyo.

Engels, isaga oo ka hadlaya ra'yigaas Furyee, wuxuu yiri: «Ururrada uu soo jeediyey Furyee in ay dadku ku noolaadaan, waxba ma doorinayso qaab nololeedkii bulshadii hantigoosadka, **waayo wuxuu ku taliyey maalqabeen iyo sabool, hantigoosad iyo shaqaale in dadku kala ahaado».**

Furyee ma aamminsaneyn halgan dabaqadeed iyo Kacaan, wuxuu ka soo horjeedey in ay suuragalaan. Wuxuu yiri, si fikraddaydu ay u hirgasho waa in laga fidiyaa dicaayad shaqaalaha dhexdiisa iyo maalqabeenkaba.

**ROBERT OWEN (1771 - 1858)**, wuxuu ahaa Ingiriis lana jaad ah culumadii hantiwadaagga dhalanteedka. Waqtigiisii Ingiriisku wuxuu hore ugu maray dhinaca warshadaha. Wuxuu aamminsanaa in dhibaatada iyo kadeedka dadka ay ugu

wacan tahay wax lahaanshada ku dhisan hantigoosadnimada, in ay is-hortaagayso sharafta, aqoonta iyo horukaca aadamiga. Wu xuu yiri: «Shaki ma leh in uu imanayo hab bulsho oo ku dhisan sinnaan iyo caddaalad». Hantiwadaag dhalanteednimadii-su waxay ahayd in uu sidii Furyee iyo Sen-Simon aamminsanayd halganka dabaqiga ah. Wuxuu isku dayey inuu afkaartiisii ka dhaadhiciyo Baarlamaanka Ingiriiska iyo boqoradii ee la dhihi jiray Fiktooriya. Afkaartii Robert ma hirgelin.

**V. I. Lenin wuxuu qoray:** Raggii Rober Owen uu ka mid ahaa maxay ku ahayd afkaartoodii mid aan suuragal ahayn?, Waxay ku ahayd iyaga oo rabay in bulsho cusub oo hantiwadaag ah u beddelaan bulshadii jirtay ee hantigoosadka ahayd, iskana indhatiraan oo aanay qiimo siin qodobbadii ugu muhiimsanaa arrinta, kuwaas oo ah halganka dabaqiga ah, xukunka siyaasiga oo ay la wareegeen shaqaaluhu iyo in la burburiyo dabaqadaha wax dulleysta (Burjuwaasiyadda).

## J. HANTIWADAAGGII DHALANTEEDKA AHAA EE RUUSIYA :

Intii aan Marksismku ku faafin Ruusiya ka hor, ayaa mufakiriintii Ruushka ee markaas jirey wax badan ka hadleen oo ka qoreen sidii loogu barbaarin lahaa bulshada, hab bulsho oo ku dhisan sinnaan.

Garashadii iyo qaadashadii dadka Ruusku ay qaateen oo ay ku qanceen Marksism, waxaa sabab u ahaa oo jidka u sii xaadhey dhaqankii dhaqaalaha bulshada oo hore u maray, halgankii dabaqiga ahaa oo xoogeystay iyo caado kacaaneedkii dad ku yeeshay ee ay ka mid ahayd kicitaankii beeraleydu kaceen, shaqadii iyo baraarujintii ay qabteen raggii ay ka mid ahaayeen Raadisheef, Gersen, Jernijeef, Belenski, Dobroluubof iyo kuwo kale oo badan.

**BELENSKI (1811 - 1848)**, qarnigii XIXaad afkaarta hantiwadaagga waxa aad u faafiyey Belenski, wuxuu yiri : «Hantiwadaaggu waa runta, aqoonta iyo fikradda nolosha». Wuxuu kaga duwanaa mufaakiriintii hantiwadaagga dhalanteedka oo dhan, in uu aamminsanaa in jidka hantiwadaagga loo mari karaa uu yahay dadka oo Kacaan sameeya.

Gersen (1821 - 1870), wuxuu aad u duray hantigoosadka, dulleyntii iyo dhiigmiiradkii beeraleyda lagu hayey ee ka taagnaa Ruusiya. Wuxuu qiime xoog leh siiyey halganka dadweynaha iyo falsafadda maaddiga, kuna tilmaamay in ay u qabbaanayso horukaca aadamiga oo dhan, Gersen wuxuu soo jeediyey in hantiwadaag laga dhiso Ruusiya, kaas oo ah in ururro beeraley loo qaybiyo bulshada, wuxuu yiri: **«Wax wada lahaansho ku dhisan wax wada tacab iyo wax wada hoggaamin waxa la heli karaa iyada oo dadka loo qaybiyo beel beel beeraley ah».**

**JERNIJEEF (1828 - 1889),** Jernijeef wuxuu ka mid ahaa mufakiriintii Ruushka ee u halgamayey hantiwadaagga. Wuxuu kale oo si aad ah ula dagaalamay boqortooyadii Ruushka, Kacaannimadiisii awgeed wuxuu soo maray caddibaad, masaafuris iyo xadhig ilaa iyo 27 sannadood gaaraya.

Jernijeef wuxuu diiday ra'yigii Sen-Simon iyo Furyee ee ahaa in hantiwadaaggu mar uun iska imaan doono, wuxuu aaminsanaa in hantiwadaaggu uu ku dhalan karo halgan-siyaasadeed iyo Kacaan dadku la yimaado.

Jernijeef wuxuu yiri Bulshada Dalka oo la beddelaa waxay ku iman kartaa iyada oo wadajir dadka tuulooyinku wax u wada tacbaan iyo magaalooyinka oo Warshadaha la isu geeyo oo laga dhigo hanti dadka ka wada dhaxaysa, wuxuu yiri hantiwadaaggu waa wax aan suuragal ahayn waqtigaan, mustaqbalka fogse imaan doona.

Dobroluubof (1836-1961), Dobroluubof wuxuu ahaa saaxiibkii Jernijeef, wuxuu keenay fikrad uu leeyahay **«Waxa la suuragelin karaa in la dedejiyo socodka taariikhda ee Ruusiya, looma baahna in Ruusiya marto jidkii iyo waqtigii Yurubta Galbeed mareen, ee heerarka qaarkood waa laga boodi karaa».**

Dadkeennu horumarkiisu ayuu yiri Dobroluubof wuu ka dhaqsan karaa meelo badan oo dadka Yurubta Galbeed waqti dheer ku qaateen.

Culimadii Hantiwadaagga dhalanteedka ee Ruusiya ma ayna garan qiimaha iyo kaalinta shaqaaluhu ka qaadan ka-

ro isbeddelka bulshada, rajadooda Kacaannimada ah oo dhan waxay ku xireen beeraleyda iyo xataa shaqsiyaad xoog lahaa oo markaas jirey. Laakiinse Afkaartii iyo dadaalkii mufakiriintii Ruusiya ee ay ka mid ahaayeen Beliinskii, Gersen, Jernijeef iyo Dobroluubof waxay jidka u sii xaareen xisbi shaqaale oo mustaqbalka dhasha iyo fidintii Marksismka.

Dhammaadkii qarnigii XIXaad iyo bilowgii qarnigii XXaad fikradihii hantiwadaagga dhalanteedka ahaa, Kacaannimadii Diimoqraadiga ahaa iyo halgannadii u baaqayey sinaanta, gobannimada waddaniga ah iyo daafacaadeedaba kuma ekeyn qaaradda Yurubta Galbeed iyo Ruusiya oo qur ah, ee waxay ku fidday oo ka oognayd dalal kale oo badan, waxaana ka mid ahaa: Booland Demboofiskii (1866-1925), Yuuguslaafiya Maarko (1846-1876), Kuuba Xosii Maartii (1853-1895), Hangeeriya Sh. Betef. (1866-1925) Shiinaha Sun-Yat-Sen iyo kuwo kale oo badan.

Hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa wuxuu ahaa fikradihii gundhigga u ahaa hantiwadaagga cilmiga ah, inkasta oo aanay fikradahaasi tijaabo gelin, misana waxay waqtigaas dadka xoogsatada ah u horseedeen inay halgan la galaan korku-noolayaashii bulshooyinkii jiray.

## x) KAALINTA TAARIIKHIGA AH EE HANTIWADAAGGA DHALANTEEDKA AH

Dhalashada iyo barbaarinta hantiwadaagga dhalanteedka ahi waxay la xiriirtay barbaarinta dhaqaalaha ee bulshada, iska horimaadka dabaqadaha bulshada iyo halganka dabaqiga ee xoogsatada ee ka dhashay hantigoosadka. Hantiwadaagga dhalanteedka ahi wuxuu barbaaray waqtigii Kacaanka burujwaasiga ahi ka dhacay Yurub iyo qarnigii XIXaad ee hantigoosadku aad u barbaaray.

## SALDHIGGA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH.

Hantiwadaagga dhalanteedka ahi waa fikrad ka mid ah fikradihii saldhigga u ahaa hantiwadaagga cilmiga ah. Han-

tiwadaagga dhalanteedka ahi wuxuu cabbirayey dhaliilkii iyo duritaankii ay durayeen xoogsatadu habka hantigoosiga. Lenin wuxuu yiri **«Mufakiriintii hantiwadaagga dhalanteedku waxay eegayeen dinaca barbaarinta bulshada ee saxa ahi ku jirtay, run ahaantiina way u horseedeen barbaarintaas».** Abwaannadii hantiwadaagga dhalanteedka ahayd, waxay u dhaafeen hantiwadaagga cilmiga ah fikrado qiimo weyn u yeeshay. Engels wuxuu yiri **«Aragtida hantiwadaagga ee Jarmalku marnaba illaawi mayso inay ku taagan tahay garbihii St, Simoon, Furye iyo Owen, saddexdaas mufakir inkasta oo ay fikradahooda ka muuqatay dhalanteed iyo (Fantasiyad) misana waa abwaanno weligood taariikhdu xusuusan doonto, kuwaas oo sii sheegay oo dhidibbada u taagay Afkaarta maanta si cilmi ah aynu u caddaynay iyaga oo aan haysan xaalaadka isbilay ee aynu maanta haysanno.** K. Marks iyo F. Engels. B/498-499). Abaalka weyn ee ay ka geysateen mufakiriintii hantiwadaagga dhalanteedka ahi barbaarinta aadamiga waxay tahay:

1. Si aad ah ayey u dureen hantigoosadka;

2. Wav caddeeyeen in dhaqanka bulshada ee ku dhisan wax lahaanshaha gaar ahaaneed iyo isku kor-noolaanshuhu uusan siin karin dadka adduunka xornimo, sinnaan iyo walaalnimo.


3. Mufakiriinta qaarkood waxay gaareen in tirtiridda wax lahaanshaha gaar ahaaneedka ahi iyo u guuritaan bulshadu u guurto hantiwadaag ay ku imaan karto kacaan dadku sameeyo iyo gacanta sare ee xukunka oo ay yeelato xoogsatadu;

4. Waxay sheegeen in mabda'a ugu muhimsan ee bulshada hantiwadaagga ee mustaqbalku noqon doono qof kasta oo bulshada ka mid ahi inuu shaqeeyo;

5. Waxay keeneen ra'yi horusocod ah oo sheegay lagama maarmaanka in la tirtiro farqiga u dhexeeya tuulooyinka (Miyiga) iyo magaalooyinka;

6. In la tirtiro farqiga u dhexeeya shaqada gacanta iyo tan maskaxda;

Hantiwadaagga dhalanteedka




Hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa, wuxuu ahaa fikradihii gudhiga u ahaa hantiwadaagga cilmiga ah, in kasta oo aanay fikradahaasi tijaabo gelin, misana waxay waqtigaas dadka xoogsatada u horseedayeen in ay halgan la galaan dulku noolayaashii bulshooyinkii jirey.

7. Waxay qiimo weyn siiyeen caddaalo wax ku qaybinta tacabka la soo saaro oo ay yiraahdeen in wax lagu qaybiyo qof kastaa shaqaduu geystay iyo sida wax loogu kala baahan yahay;

8. Waxay sheegeen in aan dawladi jirayn marka bulshada hantiwadaagga ee heerarka sare (labaad) la dhiso.

9. Waxay soo jeediyeen in qofku ku xoogsado xoog xor ah.

## DHALANTEEDNIMADII HANTIWADAAGGA DHALANTEEDKA AH.

Mufakiriintii hantiwadaagga dhalanteedu afkaar badan oo fiican ayey keeneen, laakiinse fikradaha ay ka qabeen iyo sida ay u sawireen bulshada mustaqbalka ay rajaynayeen, waxay ahayd mid aad u kooban, una hooseysa oo badawnimo ah (Primtive), habkii iyo jidkii ay soo jeediyeen in loo dhiso bulshada mustaqbalkana wuu qaldanaa, mufakiriintii hantiwadaagga dhalanteedku waxyaalihii ay ku qaldanaayeen waxaa ugu waaweynaa :

1. Ma ayna garan xeerarka barbaarinta bulshada;

2. Ma aanay garan jidkii ay ku beddelmi lahayd bulshadu ee asaasiga ahaa;

3. Waxay arki waayeen inay isku xiriiriyaan oo ay isku dhafaan afkaarta hantiwadaagga iyo dhaqdhaqaaqyada kacaanka ee dadweynaha;

4. Dabaqadda shaqaalaha waxay ku eegeen eegmo ah in ay tahay dabaqad dhibaataysan, laakiinse una arag in ay tahay dabaqad wax taransan karta.

**Lenin wuxuu yiri «Hantiwadaaggii bilowga ahaa, wuxuu ahaa hantiwadaag dhalanteed ah, wuxuu duray habka hantigoosadka, wuxuu ku fekeray sidii uu ku burburin lahaa, wuxuu ka fekeray hab ka fiican hantigoosadka, wuxuu ku qanciyey maalqabeennadii aadami xumada isku-dul-noolaanshaha, laakiinse hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa ma sheegin sidii**

**looga bixi lahaa; wuxuu kari waayey inuu sheego nuxda addoonnimada hantigoosadka, ma sheegin xeerarkii barbaarinta hantigoosadka. Wuxuu kari waawey inuu helo oo garto xoogga bulshada ee kari kara inuu noqdo halyeyga iyo horseedka bulshada cusub. (Lenin B.23. B. 46)».**

Hantiwadaagga dhalanteedka ahi barbaarinta bulshada kaalin fiican ayuu ka qaatay in muddo ah, laakiinse markii ay kortay garaadkii iyo kasmadii dabaqiga ahayd ee broletaariyaadku ayaa qiimihii uu lahaa joogsaday. **Dhalashadii iyo faafintii hantiwadaagga cilmiga ka dib, soo nooleynta afkaartii hantiwadaaggii dhalanteedka ahayd, garab dhigitaanka iyo ka soo horjeedintooduba waa dibusocodnimo.** Kuwaas oo ay u badan yihiin (Mufakiriinta burjuwaasiyiinta yar-yari) oo yiraahda hantiwadaag ayaa la dhisi karaa halgan dabaqi ah la' aantiis. Waa lagama maarmaan in la ogaado waajibka taariikhiga ah ee broletaariyaadka, in lagu hubeeyo garasha da xeerarka barbaarinta bulshada iyo brograam cilmi ah oo uu ugu halgamo hantiwadaagga.

## MADAXA III

**1. Dhalashadii iyo heerarkii barbaarinta hantiwadaagga cilmiga ah.**

Qarnigii XIX badhtamihiisii hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa, waxaa beddelay oo soo shaac baxay aragtidii runta ahayd oo dhinac walba ka tifaftirnayd, Hantiwadaagga cilmiga ah. Abwaannadii aragtida hantiwadaagga cilmiga ahi waxay ahaayeen Karl Marks iyo F. Engels.

**b) K. Marks iyo F. Engels waa abwaannadii hantiwadaagga cilmiga ah.**

Soo bixitaankii aragtida hantiwadaagga cilmiga ah waxa u sabab ahaa barbaarintii dhaqanka-dhaqaalaha, dhaqankii siyaasadda ee bulshada iyo kasmadii (dhaqanka, tacliinta iyo garaadka bulshada), bulshadii hantigoosadka ahayd, waxayna ka turjumeysey baahidii taariikhdu keentay in la abuuro bulsho cusub oo xiriir cusubi ka dhexeeyo.

**Xaalaadkii taariikhda la xiriirey ee dhaliyey hantiwadaagga cilmiga ah.**

Xaalaadkii dhaqanka dhaqaalaha bulshada ee aasaasiga u ahaa dhalashadii hantiwadaagga cilmiga ah waxay ahaayeen :

— Barbaaritaankii qaab wax tacabkii hantigoosadka;

— Iska horimaadkii dabaqiga ahaa ee bulshadii hantigoosadka oo xoogeystey;

— Broletaariyaadkii (shaqaalihii) oo xoog iskiis halgan siyaasadeed geli kara noqday.

Dalal badan oo ay ka mid yihiin Ingiriiska, Holand, Jarmalka iyo Faransiiska ayaa afartanaadkii qarnigii 19aad uu

ka hirgalay wax tacabkii hantigoosadnimadu, isla markaas waxa kordhay tiradii broletaariyaadka oo noqday xoog awoodi kara inuu hoggaamiyo halganka dadweynaha si kacaannimo ahna uu u beddelo bulshada. Taasi waxay ku caddaatay bannaanbaxyadii shaqaalaha Ingiriiska (Charitson movement) (1830-1840), kii shaqaalihii Faransiiska (Lyon's uprising 1831-1839), kii shaqaalihii Jarmalka (Silesian weavers not 1844).

Dhaqdhaqaaqii broletaariyaadku waxay u baahdeen aragti, aragtidii tusi lahayd shaqaalaha yoolkii iyo jidkii halgankooda. Khidmadda taariikhiga ah ee K. Marks (1818-1883) iyo F. Engels (1820-1895) waxay tahay, in iyagu ay sameeyeen aragtidii shaqaaluhu u baahnaa taas oo ah **hantiwadaagga cilmiga ah.** Hantiwadaagga cilmiga ahi wuxuu ku dhashay isbeddel, kacaannimo oo K. Marks iyo F. Engels ku sameeyeen afkaartii bulshada, baadhis iyo fidin ay ku sameeyeen waayo-arag nimadii dhaqdhaqaaqyadii broletaariyaadka ee kacaannimada ahaa iyo dib uga shaqayn naqdi ku jiro oo ay ku sameeyeen afkaartii iyo aragtiyooyinkii hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa. U beddelitaankii hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa cilmi waxaa kaalinta weyn lahaa labadii hindise ee Marksismka:

— Taariikhda oo loo garto si maaddi ah (Materialism);

— Aragtida qiimaha dheeraadka (surplus value).


Hindiseyaalkaas cusub K. Marks iyo F. Engels waxay caddeeyeen xeerarka dabiiciga ah ee bulshada aadamigu ku barbaarto, barbaarintaas oo objektif ah, kuna xirnayn garaadka iyo rabitaanka dadka ee isbeddelka qaabka bulshadu la xiriiro, isbeddelka nolol dhaqaaleedka dadka ee xukuma, taas oo iyana la xiriirta wax tacabka wixii nolosha looga baahnaa. Aqoonta Marksismka ee maaddiga ahi waxay ka soo horjeeddaa wixii xeerarkaas ka soo horjeeda iyo wixii garaadka, kartida iyo awoodda aadamiga liida ee aan rumaysneyn in barbaarinta bulshada aadamigu ku taxakumi karo.

K. Marks iyo F. Engels waxay qabeen in dadweynuhu yahay xoogga ugu weyn ee bulshada, inuu yahay kan abuura wixii lagu intifaaco iyo wixii lagu dhaqmo intaba, in uu yahay



KARL MARKS 1818 — 1883

**Dhalashadii iyo barbaarintii hantiwadaagga Cilmiga ah.**




Hantiwadaaggii wuxuu u beddelmey min dhalanteed ilaa cilmi «Science»

kan beddeli kara dabeecadda iyo habka bulshooyinka. Waxay sheegeen oo si cilmi ah u caddeeyeen kaalinta runta ah ee bal-laaran ee dabaqadaha iyo halgankoodu u saameeyo nolosha bulshada, waxay tilmaameen kaalinta taariikhiga ah ee broletaariyaadka adduunka oo dhan, kaalintaas oo ah inuu yahay burburiyihiin iyo xabaal qodihii hantigoosadka iyo dhisihii bulsho cusub oo hantiwadaag ah, waxay caddeeyeen asaaska iska horimaadka hantigoosadka iyo sida uu u barbaaro, meesha iyo kaalinta broletaariyaadku kaga jiraan bulshada burjuwaasiga ah. Waxay caddeeyeen lama huraanka objektifka ah in uu dhasho kacaan hantiwadaag ahi, waxay tusaaleeyeen in hantigoosadku keenayo oo xoojinayo iska horimaadkiisa.

Iska horimaadkaas oo ka dhexeeya wax tacabka bulshada iyo wax lahaanshaha ku dhisan qaabka hantigoosadka. Iska horimaadkaas ka dhexeeya xoogagga tacabka iyo xiriirka tacabka oo sii xoogeystaa waxa lagama maarmaan ah inay dhalinayaan kacaan hantiwadaag ah, xoogga awooddaas yeelan karaa waa broletaariyaadka oo keli ah. Marka uu hantigoosadku barbaaro oo iska horimaadkiisu weynaado, borletaariyaadku wuxuu noqonayaa xoog leh garasho siyaasadeed oo habeysan, awoodna u leh inuu si kacaannimo ah u burburiyo habka hantigoosadka oo abuuro hab hantiwadaag ah oo cusub. Lenin isaga oo qiimeynayey hindisayaalkii K. Marks iyo F. Engels wuxuu qoray :

**Falsafaddii maaddiga ahayd ee Marks oo keli ah ayaa broletaariyaadka tustay sidii ay uga bixi lahaayeen addoonsigii ay ku noolaayeen dabaqadaha la dulmiyo oo dhami. Aragtidii dhaqaalaha ee Marks oo keli ah, ayaa caddeysey meesha runta ah ee broletaariyaadku kaga jiro dhismaha guud ee hantigoosadka (B. 23, B. 47).**

Jaalle Siyaad oo ka hadlay arrintaas 18-7-1972kii Dugsiga Xalane wuxuu yiri «**K. Marks iyo F. Engels iyo Lenin waxay aadamiga oo dhan ka mudan yihiin sharaf, waayo waa kuwii u soo saaray aragtida aadamiga oo dhan ugu baaqaysa sinnaan iyo horumar**».

## ABUURITAANKII AARA'DA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH, BAAQII XISBIGA SHUUCIGA (MANIFEST OF THE COMMUNIST PARTY).

Hantiwadaagga cilmiga ahi, soo bixitaankiisu wuxuu la xiriiray barbaarintii afkaartii falsafadda, dhaqaalaha iyo siyaasadda ee Karl Marks iyo F. Engels, bilowgii hore ee ay billaabeen baaristoodii iyo dadaalkoodii cilmiga iyo dhaqanka siyaasadda bulshada ku saabsanaa, waxay aamminsanaayeen idiyaalisam «Idealism) iyo kacaan diimuqraadi ah.

Baaristoodii iyo falanqayntoodii cilmiga bulshada ayey ku aammineen falsafadda maaddiga ah, kuna keeneen aragtida hantiwadaagga cilmiga ah. Aragtida hantiwadaagga cilmiga ahi waxay abuurantay markii K. Marks iyo F. Engels ay gaadheen: **aragti falsafo oo adduun arag cusub leh. Diyaalektiikada iyo taariikhda maaddiga ah (Dialectical and historical materialism)** iyo aqoon dhaqaale cusub oo ah dhaqaalaha siyaasiga ee cilmiga ah.

Waxaa qiimo weyn ka qaatay hirgelinta aragtidaas cusub ee kacaanka ah, buugagtii ay qoreen K. Marks iyo F. Engels :

1. Holly family: «Marks iyo F. Engels».
2. German ideology 1846 «Marks iyo F. Engles».
3. Condition of the working class in England 1845 «Engels».
4. Critics of the Hegel's philosophy rights 1843 «Karl Marks».
5. (Proverty of philosophy) «Karl Marks».

Buugagtaas ayey ku fidiyeen asaaskii falsafadda ee hantiwadaagga cilmiga ah iyo qaybihii ugu muhimsanaa cilmiga hantiwadaagga. Qarnigii XIXaad afartanaadkiisii ayaa afkaartii falsafadda, dhaqaalaha iyo dhaqanka siyaasadda ee abwaannadii hantiwadaagga cilmiga ahi dhammaystireen. **Marks wuxuu yiri «Kacaan waa halgan shaqaale iyo dadweyne oo si habsami ah loo dhisay, garashana leh, halgankooda kacaanni-**

**mada ah, u yeela ujeeddooyin cilmi ah. Kacaan bulsho kama dhasho iska horimaad ka dhexeeya xoogagga tacabka iyo xiriirka tacabka oo keli ah, ee wuxuu kale oo ka yimaaddaa iskhilaaf ka dhex dhaca labadaas xoog, oo ah qaab halgan dabaqadeed oo heer sare gaaraya».**

K. Marks iyo F. Engels uma fekerin aragtidan kacaanka ah si aan la socon halgan dabaqadeedkii markaas jiray, ee waxay xiriir adag oo joogto ah la lahaayeen dhaqdhaqaaqyadii shaqaalaha Jarmalka iyo adduunka kale oo dhan. 1847 iyaga oo hoggaaminaya ayaa waxaa abuurmay ururkii ugu horreeyey ee shaqaalihii Jarmalka. (Communist union), Brograamkiisiina iyagu qoreen 1848, loona bixiyey **Baaqii Xisbiga Shuuciga (Manifest of the communist party).**

Baaqaas waxay si cilmi ah ugu caddeeyeen, xeerarka dhalinaya lama huraanka burburitaanka hantigoosadka iyo guuleysiga kacaanka broletaariyaadka, waxa si tifaftiran ugu cad kaalinta taariikhiga ah ee broletaariyaadka adduunka saaran, taas oo ah inuu noqdo burburiyihii hantigoosadka iyo dhisihii hantiwadaagga.

**Lenin wuxuu brograamkaas ku tilmaamay «Afkaarta Marksismka mid ka mid ah kuwii ugu fiicnaa ee ugu muhiimsanaa»** (Lenin B. 33 B. 24), inkasta oo aan laga heleyn (Manifest of the communist party) hadalka oranaya (Dictatorship of the proletariat), misana si cad ayaa looga fahmi karaa erayada dhahaya: **Tallaabada ugu horreysa ee Kacaanka shaqaaluhu waa broletaariyaadka oo yeesha gacanta sare xukunkana haysta (Marks iyo F. Engels B. 4 B. 446) Brograamka waxaa ku cad in xisbiga hantiwadaaggu yahay horseedka dabaqada shaqaalaha.** Si uu shaqaaluhu u fuliyo xilka weyn ee saaran, waa inuu leeyahay xisbigiisa, xisbigaas oo u hadla oo cabbira danta iyo ulajeeddooyinka shaqaalaha, habeeyaanna halgankooda ay kula jiraan burjuwaasiyadda iyo dhisitaanka bulsho cusub. Waxa kale oo brograamkaasu qorayaa:

1. Mabaadi'da asaasiga ah ee khuseeya istratiijiyada (strategy) iyo tabta xisbiga hantiwadaagga ah.

2. Isbeegsiga ulajeeddooyinka halganka shaqaalaha ee dhow iyo ujeeddooyinka dambe ee fog.

3. Awoodda ah isku xiriirinta waajibaadka khaaska ah ee horyaal dal kasta shaqaalihiisa iyo waajibaadka guud ee caalamiga ah ee horyaal dhaqdhaqaaqa shaqaalaha adduunka oo dhan.

4. In la taageero dhaqdhaqaaqya kasta oo kacaan diimuqraadi ah.

5. Mideynta caalamiga ah ee dhaqdhaqaaqyada xubnaha hantiwadaagga ah (Communist) iyo kuwa shaqaalaha si ay ula wada halgamaan burjuwaasiyiinta.

K. Marks iyo F. Engels waxay halkaas ku dureen aragtiyooyinka aan hantiwadaagga ahayn oo dhan, iyo hantiwadaagga dhalanteedka ah ee arbushaya dhaqdhaqaaqyada kacaanka ah ee shaqaalaha. Baaqii Xisbiga Shuuciga (Manifest), barnaamijkiisii wuxuu ku gabagabaysan yahay baaqa odhanaya: **(Broletaariyaadka adduunkow midooba).**

Baaqaas oo noqday baaqii halganka dhaqdhaqaaqa shaqaalaha iyo hantiwadaagga adduunkaba· Wuxuu isgarbsiiyey, haddana isgarabsiinayaa shaqaalaha adduunka halgankooda ay kula jiraan hantigoosadka, gumeysiga iyo xornima u dagaallankooda iyo dhismaha hantiwadaagga. Isagoo qiimaha brograamka wax ka qoray Lenin wuxuu yiri «Buuggaas yar ee aan weyneyn wuxuu la qiime yahay buugaag (Volumes) badan, waxaa niyadda iyo qiimaha buuggaas ku nool dhaqdhaqaaqyada halganka broletaariyaadka habsamida u halgamaya ee adduunka ilbaxa ah oo dhan (Lenin B. 2 B. 10)».

Daabacaaddiisii hore ee uu ku soo baxay Afka Jarmalka Karl Marks iyo F. Engels kuma ayna caddeyn labada heer ee hantiwadaagga, ee waxay ku caddeeyeen kaddib «Heerka koowaad iyo kan labaad ee sare».

## FIDINTII HANTIWADAAGGA CILMIGA AH KADDIB KACAANKII 1848-1851 EE YURUB ILAA KOMUUNKII BAARIIS (PARIS COMMUNE 1871 IYO INTERNASHANALKII KOOWAAD (1 INTERNATIONAL).

Kacaankii 1848-1851 ee ka dhacay Yurub kaddib, Ameerika, iyo dalal Aasiya ah, khaas ahaan Jabbaan waxaa



**FREDRIKH ENGELS 1820—1895**

Halganadii ugu horeeyey ee Broletaariyaadku la galay habka hantigoosadka

| 1831 | 1834 | 1844 |
| --- | --- | --- |

aad u barbaaray hantigoosadkii (Warshadihii iyo baayacmush-tarkiiba), tiradii shaqaalaha iyo dhaqdhaqaaqoodii kacaannimada ahaana way kordheen.

Waqtigaas K. Marks iyo F. Engels waxay goosteen in ay ka faa'iideystaan Kacaannadii Yurub, ururiyaan oo habeeyaan broletaariyaadka, kuna habeeyaan afkaarta hantiwadaagga cilmiga ah, kana gooyaan oo ka yareeyaan saameynta iyo xiriirka burjuwaasiyiinta iyo ganacsatada yaryari la leeyihiin shaqaalaha. Go'aankaas ay goosteen nuxdiisii waxay ku qoreen buugaagta :

1. The class struggle in France «K. Marks» 1848-1850) «K. Marks».
2. Capital.
3. Revolution and counter-revolution in Germany.

K. Marks buuggaas dambe wuxuu ku qoray gabagabeyn oranaysa Kacaannada bulshadu waa: **shaagga roga taariikhda).** Buugaagtaas waxaa ku soo baxay **aragtida Kacaanka Broletaariyaadka-Diktootuuriyada Broletaariyaadka iyo isdabajoogga Kacaannada** waxay sameeyeen gabagabeyn oranaysa suuragalka u guuritaanka min kacaan burjuwaasi ilaa kacaan hantiwadaag ah, ra'yiga ah wadajirka broletaariyaadka iyo beeraleyda, Marks wuxuu yiri, broletaariyaadka dalal badani ma gaari karaan guul haddii ayna isgarabsan beeraleyda. Buugga (The class struggle in France) markii ugu horreysey ayuu Marks ku dhawaaqay, in diktaatooriyadda broletaariyaadku ay suura gelinayso burburinta dabaqadaha iyo u gudubka bulsho aan lahayn dabaqado. Kacaankii 1848-1851, Marks iyo F. Engels waxay kala soo baxeen **gabagabeyn oranaysa lagama maarmaanka in la jebiyo tiirarka iyo taliska dawladdii burjuwaasiga ahayd marka ay dhalato Diktaatuuriyad Broletaariyad ah. (K. Marks iyo F. Engels B. 8. B. 206).**

Lenin buuggiisii (State and revolotion), wuxuu ku yiri **«Ra'yiga ah in la jebiyo taliskii dawladda burjuwaasiga, waa waxa ugu weyn, ugu muhiimsan,**

**asaasiga u ah aqoonta Marksismka ee ku saabsan Kacaan Hantiwadaag ah, barbaarin iyo fidin horumarka diktaatooriyadda broletaariyaadka.** Aragtida hantiwadaagga cilmiga ah, saldhiggeeda K. Marks wuxuu ku caddeeyey buuggiisii (Capital), Qaybtiisii koowaad waxay soo baxday 1867, intiisii kale waxay u diyaar ahayd daabacaad, waxaana soo saaray Engels dhimashadii Marks kaddib) buugga (Capital) Marks wuxuu ku caddeeyey bartilmaamyada asaasiga u ah bulshada hantiwadaagga.

1. Qalabka wax soo saarka oo u dhexeeya bulshada.
2. Tacabwadaag.
3. Wax soo saarid qorshe leh.

Marks wuxuu yiri: **«Bulshada hantiwadaagga ahi waa tan ku shaqaysa: wax wada tacab, dhul wada lahaansho iyo qalab wax soo saara oo ku yimaada wax wada soo saarkooda».** (K. Marks iyo F. Engels B. 23, B. 773).

K. Marks iyo F. Engels waxay fiiro badan siin jireen habeynta iyo isu ururinta xoogagga broletaariyaadka adduunka. Ururradii shuuciyiinta (Communist league) ee ay ka abuureen ee baaba'ay 1852 beddelkiisii waxay abuureen 1864 ururkii koowaad ee shaqaalaha adduunka oo dhan kulminayey (1st international) waxaa markii hore ka soo qayb galay broletaariyaadkii Ingiriiska, Faransiiska, Jarmalka, Talyaaniga, Boolishka iyo Aysland oo ku magacbaxay (Jaallennimada shaqaalaha adduunka), markii dambe shaqaale dalal badan ayaa ku soo biray ururkaas koowaad ee shaqaalaha adduunka, wuxuu taariikhda dhaqdhaqaaqnimada kacaannimada ah ee shaqaalaha adduunka ka qaatay kaalin weyn, wuxuu ku dhisnaa afkaar Marksisam ah, ururkaasi wuxuu la dagaallamay wixii afkaar burjuwaasiyiin iyo daneystayaal lahaayeen «Bidix iyo midigba» ee ku jiray dhaqdhaqaaqyada shaqaalaha, wuxuu abuuray mabaadi'dii istratiijiyada (Strategy) iyo tabta (tatics) halganka broletaariyaadka dalal kala duwan. Ururkaas jiritaankiisii wuxuu keenay in dalal badan ay ka abuurmaan axsaab Marksiyiin ahi, kana dhexeeyo xiriir joogta ahi. Waqtigaas K. Marks iyo F. Engels waxay halgan ku qaadeen afkaartii burjuwaasiyiinta yaryar ee jirtay iyo fawdawiyiintii qaseyaalka ahaa «**Anar-**

chists» sidii PROUDHON (1809-1865), Bakunin (1814-1876) iyo kuwii hantiwadaagga dhalanteedka ah watey, khaas ahaan Marks wuxuu si fiican ugu weeraray Proudhon iyo Bakunin buuggiisii (poverty of philosophy). Taasoo aad iyo aad gacan uga geysatay wadajirkii iyo halgankii kacaannimada ahaa ee broletaariyaadka lidkana ku ahaa hantigoosadka.

## QIIMIHII IYO WAAYO'ARAGNIMADII KOMUUNKII BAARIIS UU (PARIS COMUNE) KA GEYSTEY BARBAARINTA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH.

Komuunkii Baariis wuxuu ahaa tajriibadii ugu horreysay ee broletaariyaadku isku dayaan inay burburiyaan talis dawlad burjuwaasi ah oo ku beddelaan talis cusub. Waxay u geysteen dhaawac weyn maamulkii burjuwaasiga ahaa ee dawladdii burjuwaasiga ahayd, waxay beddeleen oo casileen madaxdii dawladda oo dhan kuna dhawaaqeen in la doorto, waxay kala gooyeen dawladdii iyo kiniisadihii, waxay ku dhawaaqeen in tacliinta dadka laga simo iyo waxyaalo kale oo danta guud ahaa.

K. Marks iyo F. Engels aad ayey u qiimeeyeen micnihii taariikhiga ahaa ee Komuunkii Baariis iyo kaalintii ay ka qaateen broletaariyaadku. Buuggiisii (The civil war in France) (1871) ayaa Marks u qoray kaalin murtiyeedkii iyo kaalintii taariikhiga ahayd ee ay lahayd Komuunkii Baariis, wuxuu u arkayey dawlad dhalatay oo nooc cusub ah, (Dictatorship of broletariat) Kacaan broletaariyaadkii ugu horreeyey oo bilaabay inuu dhiso mabaadi'dii ugu horreysey ee hantiwadaagga cilmiga ah si ficil ah. Karl Marks si dhab ah ayuu u dersey habkii taliskii Komuunkii Baariis ee ku yimid doorasho dadku doorteen, dadkana u shaqaynaya lana xisaabtamayo, dadkuna beddelayo, lehna awood sharci (legislative powers) iyo awood fulitaan (Excutive powers). Marks wuxuu u arkay diimuqraadiyad nooc cusub ah, taasoo ah diimuqraadiyad broletaariyaad. Wuxuu qiime iyo micne weyn siiyey beddelaaddii ay beddeleen ciidankii dawladdii hore oo ku beddeleen ciidan milleteri oo ka kooban shaqaale, taas oo uu yiri Marks **«Waa sababtii awoodsiisay Komuunkii Baariis inuu is daafaco»** (K. Marks iyo F. Engels B. 17, B. 242) sababtii ay u jabeen Marks wuxuu ku tilmaamay :

— Iyaga oo aan si xamaasad leh ula dagaallamin cadowgoodii;

— Iyada oo aanay jirin hoggaamin dhexe oo isku xidha Ciidanka Milleteriga iyo daaficii Baariis.

Komuunkii Baariis kaddib ilaa iyo Kacaankii 1905 ee Ruusiya wuxuu ahaa waqtigii ugu dheeraa ee hantigoosadku si ballaaran u barbaaray una dallacay imberyaalism. Markii uu dhashay imberyaalismku waxaa kordhay tiradii broletaariyaadka, waxaa ballaartay ka soo qayb galkii halgannada Kacaanka ah iyo garashadii siyaasiga ahayd ee broletaariyaadka. Dalalkii hantigoosadka ahaa oo dhan waxa ka abuurmay axsaab shaqaale, Marksismkiina wuu fiday oo wuxuu galay maskaxdii ugu horukacsanayd aadamiga, isla markaana waxaa barbaaray afkaartii daneystayaasha iyo burjuwaasiyadda yaryar, madaxdii shaqaalaha qaarkoodna waxay u beddelmeen ustuqraadiyiin adeegayaal u noqday ideoloojiyadii burjuwaasiyiinta. K. Marks iyo F. Engels waxa la gudboonaadey in ay ballaariyaan oo ay kordhiyaan halgankii ay kula jireen danaystayaasha ku jira dhaqdhaqaaqa shaqaalaha, in laga dhigo axsaabta shaqaalaha axsaab Kacaan ah, in la xoojiyo isgarabsiga xoogsatada dadweynaha kuna dhisan Jaallannimo broletaariyaadnimo adduunweynaha (Broletariyat internationalism), lagu habeeyo afkaar Kacaan ah, lana tuso jidka saxa ah ee halgankooda. Markaas abwaannadii hantiwadaagga cilmiga ahi waxay qoreen dhowr buug :

1. Civil War in France «K. Marks».
2. Critique of the Gotha programme «K. Marks».
3. The origin of the family private property and the state «F. Engels».
4. Antiduhring «F. Engels».

Buuggiisii (critique of the Goth programme), Marks wuxuu kaga faallooday **waqtiga ka guuritaanka min hantigoosad ilaa hantiwadaag iyo labada heer ee hantawadaagga.** Marks labadaas heer wuxuu ka yiri : «Hantiwadaaggu — waa heer koowaad, heerkaas oo bulshadu markaas ka soo baxday hantigoosad, maskaxdana ay weli ka-

ga jiraan xusuusihii xumaa ee hantigoosadku, heer labaadse wuxuu ka dhashaaa bulsho hantiwadaag ah oo barbaartay, bulshadaas oo ka bislaatay dhinac kasta. Engels buugaagtiisii waxa uu kaga faallooday sida dawladdu u suurto marka hantiwadaaggu dhismo, taas oo qaadanaysa waqti dheer. K. Marks iyo F. Engels waxay kale oo aragtiyooyin ka qoreen arrimaha dagaalka ee la gudboon axsaabta shaqaalaha, waxaana fiiro badan arrintaas u yeeshay Engels oo ahaa Mufakir milleteri oo broletaariyaadku yeesho kii ugu horreeyey. Engels wuxuu falanqeeyey oo dabagalay arrinta ku saabsan xoogga iyo dagaalka, wuxuu u arkay in ay tahay **qaab halgan siyaasadeed oo dabaqi ah**, wuxuu sheegay dabeecadda dabaqinimada ah ee ay leeyihiin dagaallada iyo ciidammada milleterigu, wuxuu si sax ah u caddeeyey inuu jiray waqti aanay jirin jirin ciidammo mileteri iyo dagaal toona, sidaas darteed wuxuu yiri dagaalka iyo jiritaanka ciidammaduba waxay baaba'ayaan marka ay baaba'aan oo la tirtiro sababaha iyo wixii keenaya inay dhashaan. Engels buugaagtiisaas wuxuu ku caddeeyey **xiriirka ka dhexeeya dagaalka iyo siyaasadda, teknikada, qofka iyo dagaalka, kaalinta dadweynaha iyo abbaanduulayaashu ka qaataan dagaalka iyo kaalinta macnawyadu ka qaadato, wuxuu sheegay xiriirka u ah aasaasi barbaarinta arrimaha mileteriga.**

K. Marks iyo F. Engels waxay wadajir uga wada shaqeeyeen arrimo badan oo ku saabsan aragtida dagaalka, sida aragtiyooyinka hantiwadaagga cilmiga ah, aasaaskana u taageen aqoonta mileteriga ee broletaariyaadka. Waxay fiiro gaar ah siiyeen himilooyinka iyo tabta loo dhigo halganka broletaariyaadka marka ay la dagaallamayaan burjuwaasiyadda, sida bannaanbaxyada hubka loo isticmaalo iyo daafacaadda dalka hooyo. Engels wuxuu ka sii faallooday suuragalka in dagaallo adduunka wada saaqaa dhici doonaan, wuxuuna ka sameeyey gabagabeyn uu yiri waxaa dhici karta xaalaadka qaarkood in dagaalladaasi xoojiyaan dhaqdhaqaaqyada kacaannada, markaasna waa in braletaariyaadku ka faa'iideystaan si ay uga libeystaan burjuwaasiyadda. Engels wuxuu yiri marka broletaariyaadku libeystaan waa in ay sameeyaan ciidan militeri oo cusub oo iyagu leeyihiin. Markii uu K. Marks dhintay (1883), F. Engels ayaa madax ka noqday dhaqdhaqaaqyadii broletaariyaadka Marksismkana barbaariyey. Engels kaalin weyn ayuu ka qaatay qabanqaabintii «II international» (1889) In-

internaashnalkii labaad. Markii Engels dhintay (1895) internaashnalkii labaad waxaa afka qabsaday daneystayaal, taasina na waxay gayeysiisay in internashanaalkii labaad uu baaba'o intii dagaalkii koowaad ee adduunku socday. Internashanaalkii labaad dagaalkii wuxuu taageeray burjuwaasiyiyiintii, wuxuu khayaaneeyey danihii shaqaalaha iyo arrimihii hantiwadaagga intaba. Xisgibii Balshafiiga ahaa ee Ruusiya madaxna uu ka ahaa Lenin ayaa dagaalkii diidey, kuna dhawaaqay in dagaalka imberyaaliyadda ay uga fiican tahay broletaariyaadka dagaal ka dhex dhaca shaqaalaha iyo burjuwaasiyadda, shaqaalaha adduunkuna waa in uu u beddelaa dagaalka socda dagaal ahliya (Civil War). Xisbigii Balshafiigu wuxuu fashiliyey afkaartii daneystayaasha ee internashanaalkii labaad. Haddii aynu soo gabagabeyno taariikhdii ku saabsanayd Karl Marks iyo F. Engels ay ku abuureen aragtida hantiwadaagga cilmiga ah, waxaa lagama maarmaan ah in la sheego in hantiwadaagga cilmiga ahi ku dhex barbaaray halgan adag oo dabaqi ah, oo ay jireen aragtiyooyin badan oo kala jaad ahi leeyihiinna burjuwaasiyiin iyo burjuwaasiyiin yaryar.

**Abwaannadii hantiwadaagga cilmiga ahi waxay muujiyeen geesinnimo weyn, geesinnimadaas oo ay ku dhaliyeen aragtida broletaariyaadka kuna daafaceen, waxay ahaayeen dad mabda' adag leh oo aad u aamminsan, gayeysiiyeyna in ay danaha shaqaalaha daafacaan, waxay ahaayeen dad u go'doomay in ay mustaqbalka u abuuraan iftiin aan damin aadamiga adduunka oo dhan.** Waxay caddeeyeen in hantigoosadku yahay hab baab'aya sidii hababkii ka horreeyey ay u baaba'een ee isagu beddeley, beddelkiisana iman doono hab cusub, habkaas oo ah hantiwadaag. K. Marks iyo F. Engels fiiro gaar ah ayey siin jireen Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika, dalalkaas oo markaas ahaa kuwo ku jira gacmo gumeysi. Marks iyo Engels waxay cadeeyeen in **dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka waddaniga ahi yihiin qaab ka mid ah Kacaannada hantiwadaagga adduunka, waxay kaloo sheegeen dalalka ku jira hababkii habka hantigoosadka ka horreeyey jidkii ay ugu gudbi lahaayeen hantiwadaagga iyaga oo aan marin jidkii Reer Yurub soo mareen (F. Engels on social relations in Russia).** Dhimashadii F. Engels kaddib waxaa Marksismka aragtidiisii sii fidiyey oo ballaariyey V.I. Lenin.

## QAYBTII V. I. LENIN KA GEYSTEY BARBAARINTA IYO FIDINTA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH (1871 - 1924)

Qarnigii XIXaad dhammaadkiisii iyo qarnigii XXaad horraantiisii hantigoosadku wuxuu galay heerkii ugu sarreeyey barbaarintiisii — **Heerkii Imberyaalisamka.** Iska hor imaadkiisii iyo antagonisamkiisii aad ayuu u weynaadey· Isbeddel Kacaan ah min hantigoosad ilaa hantiwadaag wuxuu noqday wax bulshada barbaarinteedu u baahan tahay. V.L. Lenin isaga oo la kaashanaya xaalaadka taariikhiga ah ee cusub ayuu barbaariyey oo fidiyey qaybaha Marksismada oo dhan, kuna daray aara'a iyo gabagabeyn cusub. Lenin wuxuu ku qaaday madaxdii Internashanaalkii labaad halgan kulul, kuwaasoo ah kuwii iibsaday danihii shaqaalaha, Lenin wuxuu noqday Mufakirkii dabaqadda shaqaalaha iyo dadka dulman oo dhan una horseeday xoogsatada sidii ay ku heli lahaayeen xuquuqdooda.

### J. BARBAARINTII UU KA QAATAY V. I. LENIN HANTIWADAAGGA CILMIGA AH INTII KACAANKII OKTOOBAR KA HORREYSEY

Markii uu aad u barbaaray hantigoosadku oo uu gaadhay heerkiisii ugu sarreeyey (Imberyaalism) dhaqdhaqaaqyadii kacaannimada ee broletaariyaadku aad ayey u xoogeesteen, dhaqdhaqaaqyadii waxaa badhtame (Centre) u noqday Ruusiya, taas oo ay keentay inuu shaqaalihii Ruusiya noqdo horseedkii dhaqdhaqaaqyada Kacaanka ee adduunka, V.I« Lenin iyo Marksiyiintii Ruushka ahaa waxay garteen in waajibkooda koowaad yahay in ay maskaxdii (Aqoontii) Marks iyo F. Engels ku suura geliyaan nolosha, oo ay abuuraan Xisbi Marksi ah oo Ruush ah, in ay isku duwaan oo ku hubeeyaan Marksisamka shaqaalaha iyo xoogsatada dadweynaha si ay u sameeyaan Kacaan Diimuqraadi ah, marka dambana mid hantiwadaag ah, dhisaanna hantiwadaag.

V. I. Lenin fidintii iyo barbaarintii uu ka geystey hantiwadaagga cilmiga ah wuxuu ku qoray buugaagtiisii ahayd :

1. What is to be done? (1902).
2. One step forward, two steps back.
3. Two tactics on social Democracy in the democratic revolution.
4. Imperialism the highest stage of capitalism (1908).
5. Development of capitalism in Russia.
6. The collapse of the II International.
7. The state and Revolution, iyo kuwa kale oo badan.

Buuggii (what is to be done?) wuxuu ka qaatay fidinta Marksismka kaalin weyn. Buuggii (Development of Capitalism in Russiya), Lenin wuxuu ku sii faahfaahiyey ra'yiga ah isgarbsiga shaqaalaha iyo beeraleyda oo uu yiri, kaalinta hoggaaminta waa in shaqaaluhu yeeshaan. Qarnigii XX Lenin wuxuu buuggaas ku caddeeyey: **«Ma jiri karo dhaqdhaqaaq Kacaannimo oo aan lahayn aragti Kacaannimo»** (Lenin B.6.B.244), wuxuu kale oo yiri: **«Kaalinta horseednimada iyo hoggaaminta waxaa fulin kara oo keli ah xisbi ku socda aragti horusocod ah»** (Lenin B. 6. 25).

Lenin wuxuu buuggiisaas ku yiri waa in Ruusiya laga abuuraa xisbi jaad cusub ah, xisbigaasuna waa in uu noqdaa horseedka broletaariyaadka, wuxuu ka sii digay in xisbigu noqdo meel daneystayaasha iyo afkaartooda laga ilaasho, in aanay fadhiyada xisbigu noqon hadal iyo buuq, in laga ilaaliyo kala jab iyo qayb qayb dhexdiisa ah, wuxuu yiri xoogga xisbiga Marksiga ahi wuxuu ku jiraa wadajirka iyo isgarabsiga xubnihiisa iyo dadka ka tirsan midnimada fikradahooda, filickooda iyo asluubtooda.

Mabaadi'idii uu ku taliyey in loo tixgeliyo dhismaha xisbiga waxay anfacday oo kaalin weyn ka qaadatay diyaargareyntii fadhigii labaad ee xisbigii Balshafiiga (R. S. D. L. P.) fadhigii labaad ee xisbiga Balshafiiga (R. S. D. L. P.), waxaa ku dhacay kala jab loo kala jabay Balshafiigyo (kuwii badnaa) iyo Menshafiigyo (kuwii yaraa), Lenin iyo saaxiibbadiis waxay ku dadaaleen in xiriirka ka dhexeeya dadka xisbigu ka kooban



VALADAMIIR ILIIJ LENIN
1870 — 1924

yahay iyo xubnihiisu ku dhisnaadaan **(Democratic Centralism) Dimoqraadiyadda Guddoominta Dhexe.** In qof kasta oo xisbiga ka tirsani ku jiro xubin ka mid ah xubnaha xisbiga, si fiicanna uga qayb qaato shaqadiisa una fuliyo go'mmadiisa, Menshafiigyadii ayaa diiday oo yiri, waxaannu rabnaa in xisbigu ku dhisnaado mabaadi'dii Xisbigii Internashanalkii labaad. Buuggii Lenin «One step forward, two steps back». Lenin wuxuu kaga faallooday mabaadi'da ugu muhiimsan dhismaha Xisbiga iyo kuwa u ah asaasi nolosha iyo shaqada xisbiga. Buuggiisii «Two tactics of the social democratic in the democratical Revolution», Lenin wuxuu kaga faallooday Kacaankii 1905 ee Ruusiya oo uu ku qoray wixii uu kaga duwanaa kacaannadii Burjuwaasiga ahaa ee Yurubta galbeed, halkaas Lenin wuxuu ku sii fidiyey aragtidii Marksismka ahayd ee (Isdabajoogga Kacaanka) isaga oo soo xiganaya waaya-aragnimadii Kacaankii 1905 ee Ruusiya ayuu yiri **Kacaanka dimuqraadiga ahi wuxuu u dallici karaa Kacaan Hantiwadaag ah.**

Buugagtaas iyo kuwo kale Lenin wuxuu ku fidiyey oo ku ballaariyey Marksismka, khaas ahaan diktaatooriyadda broletaariyaadku kaalinta weyn ee la rabo inay ka qaadato kacaanka shaqaalaha iyo beeraleyda, xisbiga nooca cusub ah, u dallicitaanka kacaanka dimuqraadiga ahi kacaanno hantiwadaag ah, straatiijiyada iyo tabaha axsaabta waqtiyada kacaannada ee kala duwan.

Waxaas oo dhami qiimo weyn ayey u yeeshay halgankii kacaannimada ahaa ee lagula jirey hantigoosadka iyo suuragalka dhismaha hantiwadaagga. Waxaa qiimo weyn lahaa oo waqtigaas Lenin qoray laba buug oo kala ahaa (Materialism and imperiocriticism) iyo (Imperialism the highest stage of capitalism) buugga hore Lenin wuxuu ku duray naqdigii «critics» makhisam iyo danaystayaashii «falsification» beenta iyo khaladka ay ka sameeyeen (Dialectical and historical materialism) isaga oo soo xiganaya horukaca laga gaaray cilmiga iyo teknikada, Lenin wuxuu keenay gabagabeyn falsafadeed oo badan. Buuggaasi kaalin weyn ayuu ka qaatay fidinta falsafadda Marksismka iyo ballaarinteeda, culumo badan ayuu wax ka taray sidii ay jidka saxa ah ugu heli lahaayeen aqoontooda una yeelan lahaayeen adduun arag

maaddi ah, wuxuu xisbiyadii shaqaalaha u sameeyey aqoon cusub una tilmaamay jidkii ay ugu halgami lahaayeen dhismaha hantiwadaagga.

Buuggii «Imperialism the highest stage of capitalism» 1916 Lenin wuxuu qoray 50 sano kaddib markii uu soo baxay buuggii «Capital», markaas Lenin buuggaas ayuu ku qoray faallooyin cilmi ah oo cusub. Wuxuu tusay in hantigoosadkii gaarey heer sare oo cusub - Hantikoobad - (Monopolistic) heerkaas oo keenay in ay tahay lama huraan in kacaan hantiwadaag ahi dhasho. Wuxuu yiri, **waxaa suuragal ah in hantiwadaaggu ka dhasho oo ku guuleysto marka hore had dal oo ka mid ah dalalka hantigoosadka»** taas oo noqotay gabagabeyn cusub oo Marksism ah, fidinna u noqotay **aragtidii Kacaanka hantiwadaagga.**

Lenin wuxuu kale oo abuuray fikrad lagu xallin karo arrimaha qawmiyaadka «Lenin's policy of nationalities», wuxuu soo jeediyey in la isku xidho halganka dabaqiga ah ee broletaariyaadka iyo halganka lidka ku ah quudhsashada iyo dulleysiga qawmiyaadka, halganka loo halgamayo hantiwadaagga iyo halganka dadyowga u halgamaya xornimadooda ee ka soo horjeeda imberyaalisamka. Lenin qoraalkiisii **«On the slogan for a united states of Europe» (1915) «The Military programme of the proletariat revolution», «Socialism and war», «The programme of peace»** iyo kuwo kale oo badan, wuxuu si cilmi ah u caddeeyey arrimaha nabadda iyo dagaalka casriga imberyaalisamka iyo kacaannada broletaariyaadka, wuxuu sharraxay xiriirka ka dhexeeya kacaannada hantiwadaagga, kacaannada dimuqraadiga ah iyo kacaannada xornimo-doonka waddaniga ah, wuxuu sheegay xiriirka maaddiga ah ee broletaariyaadku la yeelan karo dagaallada iyo xoog isticmaalka. Wuxuu ka faallooday lagama maarmaanka in uu daafaco broletaariyaadku dawladdooda marka ay ku guuleystaan dhalinteeda. Buuggiisii «The state and Revolution», Lenin wuxuu sharxay sida qaab wax tacabka hantiwadaaggu uga gacan sarreeyo tan hantigoosadka, wuxuu tilmaamay jidka loo maro beddelaadda dhaqanka-siyaasadda, bulshada iyo dhaqaalaha dalalka, wuxuu hore u mariyey Fikraddii K. Marks iyo F. Engelis ee ku saabsanayd labada heer ee ku saabsan dhismaha bulsho hantiwadaag ah.

Wuxuu kale oo waqtigaas Lenin hore u dhigay arrimo ku saabsan hantiwadaagga cilmiga ah sida: dawladda diktaatooriyada broletaariyaadka, xeerarka loogu gudbo min hantigoosad ilaa hantiwadaag, arrimahaas oo qiimo weyn u yeeshay sameynta kacaannada hantiwadaagga ah iyo dhismaha hantiwadaagga. V. I. Lenin isaga ayaa hoggaaminayey xisbigii iyo shaqaalihii Ruusiya waqtigii kacaannadii burjuwaasiga - dimuqraadiga ahaa ee 1905 iyo 1917, isagaa ahaa halyeygii iyo isku duwihii kacaankii weynaa ee Oktoobar ee hantiwadaagga ahaa Straatijiyooyinkiisii iyo tabihiisii indheer-aragtida lahaa ayaa suuro geliyey guulihii Oktoobar.

**Barbaarintii V.I. Lenin hantiwadaagga cilmiga ah Kacaankii Oktoobar kaddib.**

Guuleysigii kacaankii hantiwadaagga ahaa ee Ruusiya wuxuu noqday arrin taariikh iyo qiimo weyn adduunka u yeelatay. Kacaankii Oktoobar wuxuu ridey taliskii hantigoosadka ee ka talinayey Ruusiya, wuxuu abuuray diktaatooriyad broletaariyaad, wuxuu u furay waa cusub taariikhda aadamiga, waa'-gaas oo noqday waa'gii hantiwadaagga, wuxuu dhigay asaaskii kacaannada hantiwadaagga ee adduunka.

Guushii kacaankii Oktoobar kaddib waxaa noqday lagama maarmaan in hore loo dhigo oo la barbaariyo hantiwadaagga cilmiga ah. Lenin iyo axsaabtii Marksiyiinta ahayd ee adduunka waxaa la gudboonaatey in la hirgeliyo waayo-aragnimadii laga dhaxlay kacaannadii hantiwadaagga ahaa ee Oktoobar (K.H.O.), in la caddeeyo micnaha taariihiga ah ee ay u leedahay adduunka, xeerarka iyo xoogagga bulshada cusub ee hantiwadaagga ah, biya shubadka (tendency) barbaarinta socodka kacaannada ee adduunka. Arrimahaas iyo kuwa kale oo badan Lenin wuxuu kaga hadlay buugaag iyo qoraallo badan oo ay ka mid yihiin:

1. **The urgent tasks of our movement.**
2. **The proletariat revolution and the renegade kautsky.**
3. **Economics and politics during the dictatorship of the proleteriat period.**

4. **The tax in kind.**
5. **On the dictatorship of proletariat.**
6. **Left wing - Communism - an infantile disorder.**
7. **The tasks of the youth league.**
8. **Granting legislative functions to the state planning commission.**
9. **On co-operation.**
10. **How we should reorganaise the worker's and the peasants inspection.**
11. **Better but better.**

iyo khudbadihiisii internashanalkii III, fadhiyadii Xisbiga iyo dawladda iyo kulamadii iyo fadhiyaashii xoogsatada.

Shaqadaas badan ee Lenin qabtay wuxuu ku sharxay oo ku micneeyey dulucda waqtiga kala guurka min hantigoosad ilaa hantiwadaag iyo waxyaalaha u gaarka ah, waajibaadka koowaad ee shaqaalaha iyo xisbigiisu ka qaadanayaan dhismaha hantiwadaagga, waajibaadka ugu muhiimsan waqtiga kala guurka, Lenin wuxuu u arkay in uu yahay:

1. In laga gudbo anarkiyada «fawdada» burjuwaasiyadda yaryar;

2. In la tirtiro kala geddisnaanta badan ee dhismaha dhaqaalaha dalka jira (Economical structure);

3. In la xoojiyo qaab dhaqaaleedka hantiwadaagga ah, lagana dhigo ka ugu weyn, marka dambena kan keli ah.

Lenin wuxuu sameeyey xeerarka guud ee barbaarinta dhaqaalaha waqtiga kala guurka, taas oo uu yiri:

1. In la dhiso asaaskii teknoloojiyada hantiwadaagga;

2. In la abuuro xoogga wax soo saarka oo tacliinta sare leh;

3. In tacab soo saarka hantiwadaaggu ka sarreeyo kii hantigoosadka, lana habeeyo.

Xoogga ugu weyn ee waqtiga kala guurka waa taabba-qaadnimada iyo kacaannimada xoogsatada, in ay ka qayb qaataan nolosha bulshada iyo hoggaaminta dawladda.

Lenin - **Hantiwadaagga noloshiisu iyo taabba-qaadkiisu waa jiritaanka dadka (shaqaalaha) (Lenin b. 35, B. 57). Lenin** oo ka hadlay awoodda dalka Ruusiya leeyahay si ay u dhisaan hantiwadaag, wuxuu yiri: **«Dal macdan badan (Natural resources) iyo dad badani awoodi uu u baahnaa wuu haystaa si uu u dhiso bulsho hantiwadaag ah»**, Lenin wuxuu dhigay brogaraamkii dhismaha hantiwadaagga.

1. Dalka oo la warshadeeyo oo loo sameeyo (Electirification);

2. Beeraha oo la tacab wadaageeyo;

3. Kacaan dhaqan oo la sameeyo (Cultural Revolution).

Lenin wuxuu yiri: «Diktaatooriyadda broletaariyaadku waa hubkii lagu dhisi lahaa hantiwadaagga, waa hubkii lagula dagaallami lahaa dadka hantigoosadka ah, laguna baabi'in lahaa, waa xiriirkii isku xirayey isuna aruurinayey broletaariyaadka iyo xoogsatada oo dhan, una abaabulayey in ay dhisaan bulsho cusub oo hantiwadaag ah. Diktaatuuriyada broletaariyaadka ayaa siin karta shaqaalaha, xoog, kalsooni, garasho, isku duwanaan iyo dishibliin (Descipline)». Lenin wuxuu yiri: «Dhismaha hantiwadaaggu wuxuu suura geli karaa marka uu hoggaaminayo dadka xisbi hantiwadaag ah oo ku hubeysan aragti horusocod ah, dadkana xiriir joogto ah oo adag la leh, kalsoonidii iyo taageeradii xoogsatadana haysta, awoodina kara in uu cabbiro niyadda dadweynaha, ayna ku kalsoon yihiin dadweynuhu». Lenin, dhalashadii kacaankii Oktoobar kaddib iskuma koobin arrimaha dalka Midowga Soofiyeeti oo keli ah ee arrimaha adduunka fiiro weyn ayuu siin jirey. Maarso 1919 Lenin wuxuu abuuray oo dadaalkiisii awgiis la qabtay internashanaalkii III fadhikiisii koowaad, kuwaasoo ka qaatay kaalin weyn barbaarinta hantiwadaagga cilmiga ah iyo dhaqdhaqaaqyadii kacaannimada ee shaqaalaha iyo isgarabsigii xoogagga shaqaalaha, si ay u abuuraan axsaab cusub oo hantiwadaag ah halganna la gala imberyaa-

lisamka. Fadhigii internashanalku wuxuu dhaliyey in laga guuleysto toostoosiyeyaalkii (social reformists), awoodiyeyna in hore loo mariyo aragtidii iyo ficil-gelintii arrimihii kacaannada broletaariyaadka iyo dhismaha hantiwadaagga. 1919 - 1920 axsaab shuuci ah ayaa ka abuurmay dalal ay ka mid yihiin: Bulgaariya, «USA» Ameerika, Turkiya, Yuugoslaafiya, Asbaaniya iyo dalal kale, axsaabtaasi waayo-aragnimo la'aan awgeed ayey ku dhaceen khaladaad, Lenin buuggiisii **«Left wing» Communism and infantile disorder**, ayuu kaga faallooday oo ku duray khaladaadkoodii. waayo-aragnimadii xisbiga Balshafiiga, saddexdii kacaan ee Ruusiya iyo waayo-aragnimadii intii ay jirtay dawladdii Soofiyeetku isaga oo soo koobay oo gundhig uga dhigaya ayuu Lenin hore u dhigay aqoontii diktatuuriyada broletaariyaadka, qorshaha himilooyinka iyo tabaha, wuxuu sheegay micnaha iyo qiimaha kacaankii Oktoobar ee hantiwadaagga ahaa uu leeyahay, xeerarka guud ee hantiwadaagga cilmiga ah iyo sida ay u kala jaad tahay habka dhismaha hantiwadaaggu dalalka kala duwan. Aragtida hantiwadaagga cilmiga ahi sida Marksism-Leninism giddi ahaantii waa aqoon si joogta ah u fideysa oo u barbaaraysa. Shirkii saddexaad waxaa dhashay in si wadajir ah looga wada shaqeeyo aragtida Marksism-Leninism. Gacan weyn fidinta hantiwadaagga cilmiga ah waxa ka geysta axsaabta hantiwadaagga ah ee dalalka hantiwadaagga khaas ahaan, Xisbiga Shuuciga ah ee Midowga Soofiyeeti isaga oo hoggaaminayey dawladdii hantiwadaagga ahayd tii ugu horreysey adduunka, (X. SH. Midowga Soofiyeeti) wuxuu ku soo kordhiyey hantiwadaagga cilmiga ah waayo-aragnimo cusub oo ku saabsan:

1. Sida loogu beddelo dhaqaalaha dalka dhaqaale hantiwadaag ah;

2. Sida loo qorsheeyo oo loo hoggaamiyo dhaqaalaha dalka;

3. Sida loo hormariyo xiriirka tacabka iyo xiriirrada bulshada ka dhexeeya oo dhan.

Go'aanno badani waxay barbaarin u noqdeen dhismaha xisbiga, dawladda hantiwadaagga, kacaanka dhaqanka, iyo xiriirka ka dhexeeya ummadaha ku wada dhaqan dalalka hantiwadaagga ah.

Axsaabta shuuciga ahi ee adduunku waxay ka hadleen oo barbaariyeen arrimaha ku saabsan dhalashada adduunka hantiwadaagga, dhaqdhaqaaqyada shaqaalaha iyo kuwa gobannimodoonka waddaniga ah. Sannadihii dambe waxaa la qabtay kulanno dhowr ah oo ay yeesheen axsaabta shuuciga ahi iyo axsaabta shaqaaluhu, kulamadoodii waxay ku qaateen go'aanno u noqotay hantiwadaagga cilmiga ah fidin. Cilmiga hantiwadaaggu waa cilmi caalami ah, wuxuu ku barbaari karaa wadajir iyo maskax isku biirin ay yeeshaan axsaabta shuuciyiinta iyo shqaalaha ee ka dhisan dalalka kala duwan ee adduunka

Waxa qiimo weyn oo wax ku biirin iyo barbaarin ka geysanaya hantiwadaagga cilmiga ah dalalka ka xoroobey gumeysigii, kuna socda mabda'a hantiwadaagga cilmiga ah sida Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

**Leninism waa Marksismkii waaga (casriga) imberyaalisamka iyo Kacaannada Broletaariyaadka, waagii dabargoynta gumeysiga iyo gumeysiga cusub, waagii dhaqdhaqaaqyada xornimo-doonka waddaniga ah, waagii aadamigu ka gudbayey hantigoosadka ee u gudbayey hantiwadaag.**

## MADAXA IX

### I. HALGANKA DADYOWGA AFRIKA.

Afrika iyo Jasiiradaheedu waxay ku fadhidaa 30,05 malyuun oo Km 2, dadkeeduna waa ilaa 350 malyuun oo qof, Afrika inta ay baaxad le'eg tahay waxay qaadi kartaa Indiya, Yurub, Jabaan, Dalka Ingriiska, Iskandaneefiya «Scandinavia» iyo Niyuusiiland» «New Zealand» giddi ahaantood. (Economic geograPhy of the World K. Spidchenko).

Dalka Maraykanka «U.S.A.» waxa qaadi kara lama degaanka Saxaara oo keli ah, Afrika waa qaaradda ugu qanisan Qaaradaha adduunka.


Qaarad qaaradaha adduunka ka mid ahi ma soo marin gumeysigii, dulligii iyo dhacii ay aragtay Afrika. Gumeysigu intaas oo keli ah kuma ekeyn ee wuxuu ku kacay tallaabooyin xun xun oo ay ka mid ahaayeen:

a) Inuu ka dilo niyadda iyo macnawiyada (Moral) dad ka Afrika;

b) Inuu jebiyo casiimaddooda ah halganka iyo gumeysi la dirirka;

t) In uu ku abuuro dadyowga Afrika isku kalsooni la'aan.

Waxaas oo dhan gumeysigu, wuxuu uga jeedey **inuu** dheereeyo gacan ku hayntiisa Afrika. Afrika waxay noqotay dhul, dalal iyo dadyow kale loo nasbiyo, waxaa loo bixiyey magacyo: **Afrikada Qorax kasoo bax ee Ingriiska, Afrikada qorrax u dhac ee Ingiriiska, Kongada Belginka iwm.** Waxaa loo bixiyey dadkii Afrika eray aad u hirgalay (Nigar), Laatiinka la yiraahdo Nigger (madow). Gumeysigu wuxuu eraygaas uga jeeday midab kala sooc uu leeyahay dadka madoobi waa ka



hooseeyaa dadka cad, erayguna wuxuu ku soo baxay markii la daadguraynayey Afrika dadkeedii ee loo dhoofin jirey Ameerika si loogu shaqaysto, ilaa iyo maanta erayga Nigar wuxuu ku caan baxay oo la micne yahay Addoon.

Gumeysigu wuxuu Afrika ka faafiyey been badan iyo duudsi uu duudsiiyey taariikhda Afrika, wuxuu yiri «Afrika intii aaney soo gelin reer Yurub ma lahayn taariikh, dhaqan, waxay ahaayeen dad islaaya oo isdhaca, Marka si Afrika loogu gargaaro oo mugdiga looga saaro ayaa reer Yurub ugu soo gurmadeen». Taas waxaa beeninaya taarikhda, dhowr kun oo sano ka hor taariikhda aynu joogno, Afrika waxaa jirijirey dawlado (Webiga Niilka), waxaa jirey far Afrikaan ah, waxaa jirey cilmi (science), barbaaray oo ay ka mid ahaayeen xisaabta, cilmiga xiddigeynta (astronomy), cilmiga dhakhtarnimada, cilmiga waraabinta beeraha (irrigation system), buurihii ahraamta ee fraacinada, jaamacado sida jaamacaddii Timbagtuu.

Intii aanu gumesigu soo gelin, Afrika waxaa jirey Dawlado waaweyn sida Al-qarnaadiyiin — oo ka dhisnaa waqooyi Afrika, Askuun — oo ka dhisnayd dalka maanta loo yaqaano Itoobiya, dawladihii ka dhisnaa Soomaaliya — Awdal, Dawladihii Gaana, Maali, Songay ee ka dhisnaa galbeedka Suudaan, Dawladihii Koongo, Baaluuba ee ka dhisnaa bartamaha Afrika, Dawladihii Manomataaba ee ka dhisnaa Koonfur — qorrax u dhaca Afrika iyo kuwa kale oo badan.

Dadyowga Afrika waxay leeyihiin taariikh taajir ah, waxay abuureen dhaqan iyo cilmi adduunka oo dhami ka faa'iideysteen, khaas ahaan dadyowgii gumeystayaashii Afrika hororay ay ku abtirsadaan.

Qarnigii XV, ayaa reer Yurub soo hororeen Afrika. Markaas ayuu u billaabmay habeen madoobi Afrika, dadyowgii Afrika ayey laayeen, socodkii taariikhda Afrika ayey ceejiyeen oo qaseen, barbaarintii xoogagga tacabka ayey joojiyeen. 1441 Boortaqiisku wuxuu billaabay markii ugu horreysey ee taa riikhda laga mushtaro aadami, waxaa ku dayday Boortaqiiska, Ingiriiska, Fransiiska iyo Isbaaniyiin. Dadkii Afrika laga qaadi

jirey waxaa la geyn jirey Ameerika iyo Yurub, si ay bilaash uga shaqeeyaan beeraha, qodista dahabka iyo almaaska.

Reer Yurub aadami ka mushtarkii oo socday 400 sano waxay ku dareen baayac mushtareyn aan sinnayn oo ku dhisan dhac.

Abwaan Afrikaan ah: Diyuuba, wuxuu qoray in dadkii gumeystuhu dilay gaarayaan 100 malyuun oo Afrikaan ah markii loo rarayey Ameerika.

1876 10,8% dhulka Afrika waxaa qabsaday reer Yurub, intii u dhaxaysay 1876 ilaa iyo 1900 reer Yurub 80% dhulkii Afrika way qabsadeen. 1879-1902 Ingriisku wuxuu la dagaallamayey dadkii reer Suulu ee reer Koonfur Afrika, halkaas oo uu 1902 gacanta ku dhigay.

Badhtamaha Afrika gumeystayaashii (Fransiiska, Belginka iyo Burtuqiisku) waxay ku qaybsadeen Shirkii Barliin 1884-1885, waxaa shirkaas ka qayb galay 13 dawladood oo reer Yurub ah iyo Ameerika. Galbeedka Afrika (1870-1900) Fransiis iyo Ingiriis ayaa kala qaybsaday oo kala qaatay.

Qorax kasoo baxa Afrika 1884 Shirkii Baarliin ee Afrika ay ku qaybsanayeen, ayey Soomaaliya ku qaybsadeen, 1888 Talyaanigu wuxuu qabsaday dhinaca Koonfureed ee Soomaaliya isaga oo kasoo galay magaalooyinka Marka iyo Muqdisho, isla taariikhdaas Fransiisku wuxuu qabsaday Xeebta Soomaaliya Jibuuti, 1884 Ingriisku wuxuu qabsaday qaybta waqooyi ee Soomaaliya, kana soo galay magaalada Berbera si uu u xalaalaysto qooriga Cadmeed iyo Badda Cas. Qaybsadka gumeystayaashu ay qaybsadeen Afrika ka sokow, waxay dadka Soomaaliyeed u galeen si aad u fool xun, taas oo ay u qabiyeen Ummadda Soomaaliyeed shan qaybood, Soomaalida Fransiiska (Jibuuti), Soomaalida Ingriiska, Soomaalida galbeed ee xabashidu gumeysato, Soomaalida waqooyi Keeniya (N.F.D.) ee Keeniya gumeysato, qaybtaas iyo kala irdhayntaas Ummadda Soomaaliyeed gumeystuhu ku falay, waxaa u halyey ahaa Ingriiska, ulajeedaduna waxay ahayd: dadka Soomaaliyeed waxaa weeye dadyowga Afrika dadka keli ah ee isku af ah, isku caado ah, isku diin ah, isku dhaqan-nololeed ah, sidaas daraa-

deed gumeystayaashii Afrika waxay arkeen in qodobadaasi yihiin wax khatar u ah cimri dhererka gumeysigiisa, warranna ku ah, markaas si uu dadka Soomaaliyeed u qaybsamo, u kala qoqobmo, caadaad iyo dhaqamo kala geddisani ugu dhex ab-uurmaan ayey gumeystayaashii Ummadda Soomaaliyeed si-daas u qaybiyeen iyaga oo higsanaya aragtida (Qaybi oo xu-kun), laakiin sida taariikhdu caddeysay gumeysiga uma suura-gelin siyaasaddiisii foosha xumayd. Jaalle Siyaad wuxuu yiri isaga oo arrintaas ka hadlay sannadguuradii la aasaasay urur-kii dhallinyarada Soomaaliyeed 15 May 1975, (Ummadda Soo**maaliyeed — waa ummad keli ah, af keliya ah leh, diin iyo caa-do keliya ah leh, jecel gobannimadooda, horumarka iyo midni-madooda, waxyaalahaasina waa kuwii fashiliyey Siyaasaddii gumeystaha, gayeysiiyey gobannimo, haddana gayeysiin doona gobannimo buuxda).**

## GUMEYSI LA DIRIRKII DADYOWGA AFRIKA :

Dadyowga Afrika isuma dhiibin gumeystayaashii ee way la dagaallameen horornimadii gumeystayaashana is-hor-taag (resistence) xoog leh ayey kula kaceen, xornimo-doonka Afrika ma bilaabmin maanta ee waxay leedahay taariikh dheer. Halganka dadyowga Afrika ku xoreeyeen dalalkooda iyo hal-ganka xoraynta ah ee ay maanta ku jiraan kuwa ku haray ga-canta gumeystaha (Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gu-meysto, Jibuuti, Rudiisiya, Koonfur Afrika Namiibiya) waa mid la xiriirta halgankii billaabmay markii uu gumeystuhu soo weeraray Afrika.

XVI - Dadka Soomaaliyeed waxay ku guuleysteen da-gaalkii ay la galeen gumeystayaasha Boortuqiiska iyo Nagaash-kii labaad ee Xabashida xukumayey oo xulufo ahaa. Dagaalkaas oo uu hoggaaminayey geesigii Soomaaliyeed **Imaan Axmed Gurey**. Dagaal la mid ah waxaa XVI la galay Boor-tuqiiska dadka Koongo ee uu hoggaaminayey geesigii Mabuula Mataadi.

1580 dadka reer Angoola waxay ku kaceen gumeysigii Boortuqiiska, halkaas oo ay ka saareen dalkoodii, nasiib dar-rose uu ku soo noqday.

Halgankii dadyowga Afrika wuxuu soo xoogeystay qarnigii XIXaad markii xoogagga imberyaalisamku qabsaday Afrika, waqtigaas qorayaasha reer Yurub waxay ku tilmaameen waagii wax wadaagga ee Yurub. Inkastoo dadyowga Afrika ayna haysan hub fiican, misana iyaga oo ku dagaallamaya waran, dhagax iyo gaashaan ayey goobo badan kaga guuleysteen gumeystayaashii.

1870 Ciidankii Suulo (dadka Afrikaanka ee deggan Koonfur Afrika) waxay jebiyeen oo ilaa iyo 1500 oo Askari ka dileen Ciidammadii Ingiriiska ahaa, 1879 F. Engels, isaga oo ammaanaya ciidammadii Suulo ee jebiyey askartii Ingiriiska wuxuu yiri: **«Reer Suulo waxay sameeyeen wax aan ciidan keliya oo reer Yurub ahi sameyn karin».**

1881 Almahdi Maxamed Axmed, Ciidammadii dadka reer Suudaan ee uu hoggaaminayey, waxay ka libeysteen Ciidammadii Ingiriiska ee haystey Suudaan, halkaas oo ay ka qabsadeen magaalooyin badan, waxa iyana dagaallo xoog leh la galay qarnigii 18aad gumeystayaasha dadyowgii dalalka Liibiya, Aljeeriya, Marooko iyo Masar.

1901 Dadka Soomaaliyeed waxay ku qaadeen gumeystayaashii dagaal soconayey 20 sannadood, dagaalkaas waxaa hoggaaminayey geesigii waddaniga ahaa Sayid Maxamed Cabdulle Xasan.

Dagaalkii qarnigii labaatanaad ee Sayid Maxamed Cabdalla Xasan hoggaaminayey dadka Soomaaliyeed waxay ahaayeen kuwii gumeysiga ugu adkaa intii uu dadyowga Afrika la dagaallamayey, dagaalladaasi waxay socdeen ilaa iyo labaatan sano, Ciidammadii waddaniga ahaa ee dadka Soomaaliyeed (Daraawiishtii) waxay wax badan soo hooyeen guulo inta xeebaha mooyaane gobollada waqooyi inta kale oo dhan waxa haystey ciidammadii uu geesigii Maxamed Cabdalla Xasan hoggaaminayey.

Gumeystaha Ingiriisku markii ugu horreysey taariikhda dagaallada adduunka, wuxuu kula dagaallamay ciidammadii «Daraawiishta) gobannimo-doonka ee Soomaaliyeed dayuurado iyo madaafiic culculus, wuxuu kale oo keenay dad ba-

dan oo reer Aasiya iyo Afrika ah oo uu soo kireystay si ay ula dagaal galaan. 1921 gumeystihii Ingiriiska ahaa wuxuu jebiyey ciidammadii (Daraawiishta) Soomaalida, halkaas oo uu markaas ku qabsaday dhulkii goballada waqooyi oo dhan. Muddo ka dib, dhinaca goballada waqooyi, waxa bilaabmay halgan hub leh oo lid ku ah gumeysiga oo uu hoggaaminayey Shiikh Bashiir, laakiinse nasiib-darro kuma libeysan, wuxuuna ku baxay gacantii gumeysiga Ingiriiska isaga oo la dagaallamaya. Dhinaca Koonfureed ee Soomaaliya, dadka Soomaaliyeed waxay ku qaadeen dagaallo gumeysigii Talyaaniga ee doonayey inuu qabsado, dhaawac xoog lehna lagu gaarsiiyey gumeystihii Talyaaniga, kuwaas oo ka dhacay Marka, Lafoole iyo Warsheekh.

## AFRIKA GUMEYSIGII REER YURUB MUXUU GAYEYSIIYEY.

Qarnigii XXaad Afrika oo dhami waxay ku jirtey gacanta imberyaaliyiinta aan ka ahayn Itoobiya iyo Libeeriya, kuwaas oo run ahaan jeebka Ameerika iyo gaashaanbuurtiisa reer Yurub ku jirey.

Qiimihii iyo barwaaqadii Afrika waxay u noqotay saadkii gumeystayaashii reer Yurub, imberyaalisamkii wuxuu helay xoog siduu doono ugu shaqeysto oo bilaash ah, iyo faa'iidadii ugu sarreysey adduunka oo aan waxba kaga baxayn.

Intii aan gumeystayaasha reer Yurub soo gelin Afrika, tirada dadka Afrikaanka ahi waxay ahaayeen 20% dadka adduunka, raxmad la'aantii ay u laynayeen iyo dhoofintii ay u dhoofinayeen Ameerika awgeed dadkii Afrika tiradoodu waxay noqotay 8%.

Ummadda Soomaaliyeed dagaalkii gumeystayaashu waxay gayeysiiyeen in 15% ay dhintaan, Koongo 80 sano gudahood ee uu gumeysiga Biljimku haystey tiradii dadku waxay yaraatay laba goor.

Shaqooyin khasab ah ayaa lagu qaban jirey dadka Afrikaanka oo aan xad lahayn, dhulkii barwaaqada iyo biyaha lahaa ayaa laga eryey oo waxa lagu ciriiriyey dhulkii ay iyagu

lahaayeen, taas oo dhalisay in ay ka dillaacaan cudurro badani, cudurro aan Afrika hore u aqoon ayaa reer Yurub keeneen oo ay ka mid yihiin, Sifillis, Qaaxo iwm. Cumrigii dadka Afrika aad ayuu u soo gaabtay, carruurtiina aad ayey u dhimatay.

Dhinaca Siyaasadda, gumeysigii dadka Afrika wuxuu ku xukumi jirey caddaaladdarro, arrimahooda waxaa ku tagrifali jirey raggii gumeystayaasha amarradooda fulinayey ee xukumi jirey dalalka Afrika ee loo yiqiin (Governors) badhasaab, xuquuqda aadamiga looma oggoleyn, xeerar midab kala sooc ah ayaa lagu dhiqi jirey.

Gumeystayaashii waxay dhaceen barwaaqadii Afrika, 60kii sano ee ugu dambeeyey oo keli ah 4,3 milyard oo Giniga Ingiriiska ah oo macdan ah ayey ka rareen Afrika oo geeyeen Yurub. Qaabka iyo hannaanka ay Afrika u beeran jireen gumeystayaashu waxay gayeysiisey in ciddii is dhalan rogto oo dhuux beesho, qalin iyo carrab midna laguma koobi karo dulligii, duudsigii, dilkii iyo dhaci gumeystayaasha reer Yurub u geysteen Afrika.

Adduunku maanta waa ogyahay iyo qof kasta oo reer Afrika ahiba in horukaca iyo xadaaradda ka dhisan maanta galbeedka Yurub ay ku timi xooggii iyo maalkii laga dhacay Afrika, dibudhaca, gumeysiga, midabtakoorka iyo dhibaatooyinka maanta ka taagan Afrikana ay sabab u tahay gumeysigii, dhacii, dilkii iyo aadami xumadii gumeystayaasha reer Yurub ku faleen reer Afrika. Gumeystayaashu waxay aad isugu dayeen in ay ku hayaan Afrika weligood, xornimo la'aan, addoonnimo sandulle ah, gaajo iyo cudur, laakiin taariikhdu waxay caddeysey in dadyowga Afrika u noqdeen xabaal dheer gumeysigii, una guntan yihiin in ay gaarsiiyaan xorriyad iyo horumar barwaaqo qaaraddooda. Sida aynu aragnay waxaa caddaan ah in Afrika intii aan gumeysigii dib u dhigay soo gelin ay jireen dawlado, mufakiriin, cilmi iyo horukac, Yurubna aanay qarnigii 15aad waxba ka horreyn qaaradaha adduunka ee kale.

Haddii Yurub qarnigii VI - XIX mufakiriinteeda iyo xoogsatadoodu ay ku fekerayeen sidii ay uga bixi lahaayeen hababkii ku dhisnaa isku kor-noolaanshaha iyo wax lahaanshaha gaarka ah, gaarsiinna lahaa hab u horseedaya sinnaan iyo wax

wada tacab, iyada oo la ogsoon yahay in socodka taariikhda, wax soo saarka tacabka iyo heerka teknoloojiyadu isku xiran yihiin, Afrika mufakiriinteedii iyo dadkeeduba waxay markaas ku fakerayeen una halgamayeen sidii ay uga bixi lahaayeen gumeystayaashii hororka ahaa ee reer Yurubta Galbeed una soo ceshan lahaayeen xornimadoodii, oo ilaa iyo qarnigan aynu ku jirno ay u halgamayaan. Waxaa maanta madaxbannaan Afrika 45 dal, waxaa su'aashu tahay, haddii Afrika heshay gobannimadeedii siyaasiga ahayd, waa kee jidka iyo **habka siyaasiga** ay dooran doontaa?, Jidkaas oo la rabo in uu u suurageliyo in xornimo buuxda (dhaqaale, dhaqan iyo siyaasad) gaarsiiyo Afrika si degdeg ah. Ma habka hantiwadaagga mise habkii addoonsaday ee gayeysiiyey Afrika dhibaatooyinka ay maanta ku jirto, adduunka intiisa badanina ka baxay ama ka baxayo **habka hantigoosadka.** Habkaas oo ah habkii gayeysiiyey Yurub in ay si caddaan ah isaga indha-tirto baahidii Afrika inteedii madax-bannaanaatay inay xirfadda, aqoonta iyo teknoloojiyada wax ka siiso, iyo diidmadii ay diideen markii Afrika codsatay, waxa mitaal u ah diidmadii dawladaha hantigoosiga ee Yurubta galbeed diideen in ay waqtigii Kuwame Nkrumah (Gaana) ay u dhisaan biya-xidheenkii webiga «Volta», ilaa ay ogaadeen in (Czechslovakia) dhisi doonto hadday ay ku adkaystaan in ay diidaan. Waxay diideen in ay (Aswan dam) biyaxidheenka Aswan u dhisaan dadka reer Masar, markaasna Midowga Soofiyeeti (USSR) u dhisay Masar biya-xidheenkii sidoo kale ayey ku hayaan maanta dhibaatooyinka iyo dacaayado been ah, saaxiibtinimada iyo gacan isasiinta J.D.S., dalalka horusocodka ee Afrika iyo dalalka hantiwadaagga, si aanay u suura gelin horukaca Soomaaliya ka socda iyo nolosha cusub ee Soomaaliya u halgamayso in ay dhisto.

## t) MARKISISM-LENINISM IYO AFRIKA.

Aqoonta Marksism-Leninism, waxaynu ka heli karnaa jawaabaha arrimaha maanta adduunka ka taagan oo dhan. Marka aqoonta Marksismku falanqaynayso arrimaha la xiriira bulshada, waxay deristaa qawaaniinta ay ku barbaarto iyada oo si diyaalektika ah u dabageleysa, waana la col Marksismku in arrimaha si dulmar ah loo eego, waana sidaas sida Marksism-Leninism ku gaaro, gabagabeynta iyo qiimeynta arrimaha,

waana sababahaas sababaha aanay u gaboobin aragtida Marksismku sida aanay u gaboobin barbaarinteeda mawduuciga ahi.

V. I. Lenin wuxuu caan ku ahaa hannaanka uu u falanqayn jiray arrimaha ku saabsan bulshada, taas oo ku dhisan Marksism, waxayna ahayd:

1. Had iyo goor Lenin wuxuu arrimaha bulshada u falanqayn jiray, oo ka soo geli jiray dhinaca dabaqadaha, bulshada dabaqado u kala baxdaana waxay u kala baxsan tahay dabaqado bulshadeed oo kala du-duwan, ujeeddooyinkooda dhaqaalaha iyo siyaasadduna ay kala duwan yihiin.

2. Arrin kasta Lenin wuxuu kale oo ka eegi jirey dhinaca taariikhda iyo arrimaha ay xiriirka la leedahay arrin kastaa.

3. Had iyo goor Lenin wuxuu isku xiri jirey aragtida iyo ficilka.

Dalalkii hore ee la gumeysan jiray ee ay ka mid tahay Afrika Marksismka waxay u arkeen inuu tusi karo jidka ay bulshooyinkooda u hore marin lahaayeen. Dadka reer Afrika ka mid ahi waxay yiraahdaan Afrika ma leh dabaqado, sidaas daraaddeed kama dhici karo halgan dabaqi ah, taas oo tusaysa in aanay garan sidii diyaalektikada ahayd ee Afrika u barbaartay, waxayna u eegayaan si idiyaalisam ah arrimaha Afrika waqtigii hore iyo mustaqbalka intaba.

Waxaa dad Afrikaan ahi yiraahdaan hantiwadaagga aannu hirgelnaynaa waa hantiwadaag «Afrikaan ah» iwm. Kuwaas oo u qabbanaya danaha imberyaaliyiinta iyo hantiwadaag la diriryaalka.

Marks ma furin qawaaniinta bulshada hantigoosadku ku barbaarto oo keli ah iyo sidii hantiwadaag loogu gudbi lahaa ee wuxuu kale oo qoray aqoon ku saabsan xiriirka bulshooyinka ku nool hababkii hantigoosadka ka horreeyey iyo habkooda wax tacabka, markaasna waqtigaas wuxuu ulajeeday dalal badan oo Aasiya ah, heerka dalalka Afrika badankoodu maanta marayaan dhinac kastabana uu la heer yahay kuwaas waqtigaas Marks tilmaamayey.

Marks Buuggiisii «Capital» aad ayuu ugaga hadlay gumeysiga, wuxuu caddeeyey in dhacii iyo horornimadii reer Yurubta Galbeed kula kaceen Afrika iyo Aasiya iyo ganacsigii dadkooda ay ganacsadeen ay ahaayeen sababihii dhaliyey raasamaalka Yurub iyo Ameerika, sababna u ahaa in hantigoosadkii barbaaro, wuxuu kale oo Marks sheegay sababihii dhaqaalaha ee dhaliyey raasamaalka laga daadgureeyo Afrika iyo Aasiya, oo la geeyo Yurub.

Haddaba waxaa loo baahan yahay in marka aynu qiimaynayno kaalinta iyo waxa Marksism-Leninism u yahay Afrika iyo sida ay uga faa'iideysan karto, waxaa loo baahan yahay in aqoonta Marksism-Leninism looga faa'iideysto oo loo qaato aqoon ahaan giddigeen ee aan la isku dayin in laga uriyo oo laga fiirsado qodob, ama qoraal keli ah oo Marks, Engels ama Lenin kaga hadlay Afrika.

Qoraalladaasi iyo qodobbadaasi waxay qiimo u leeyihiin marka la qiimeynayo arrin khaas ah, laakiinse in si buuxda loo garto taariikhdii hore ee Afrika dhinac kasta iyo arrimahooda maanta taagan fallanqayn saxna lagu sameeyo mustaqbalka, waxaa lagama maarmaan ah in la barto, lagana heli karaa buugaagtii Marks, Engels iyo Lenin wixii ay ka qoreen qawaaniinta guud ee barbaarinta bulshooyinka aadamiga, dabeecadda hantigoosadka iyo wixii ay ka qoreen bulshada hantiwadaagga iyo qawaaniinteeda.

Gacanta weyn ee Marksism-Leninism waxay tahay in ay tahay ideoloojiyad aqoonsan, bilowgii soo bixitaankeedana ku dhawaaqay in dadyowga la gumeysto xaq u leeyihiin in ay madaxbannaanidooda u barbaaraan, dadyowgaasna ay ka mid yihiin Afrika.

Haddii qarnigii 19aad dabayaaqadiisii culimadii burjuwaasiyiintu qori jireen in Afrikaanku yihiin, dad loo sameeyey in reer Yurub gumeystaan oo ah jinsiyad aan aadaminnimo buuxda lahayn kuna fiican oo keli ah in ay dadka ilbaxa ah ee reer Yurub ku shaqaystaan, abwaannadii Marksisamku waxay waqtigaas ku dhawaaqi jireen dadyowga adduunkana ku baraarujiyeen in «Ummadaha adduunka oo dhan la siiyo madaxbannaanidooda» waxay dodyowga reer Afrika u arkeen

in ay ka mid yihiin ummadaha taariikhda aadamiga wax hore uga wada, una dhigi kara. Waqtigaas qorayaasha reer Yurub ee burjuwaasiyiinta ahaa waxay qoreen in is-hortaaggii iyo ka daafacii dadyowga Afrika dalkooda ka daafacayeen hororradii burjuwaasiyiinta reer Yurub ay ahayd oo ku tilmaameen in «Shuftooyin» badow ah oo mutawaxashiin ah is-hortaagayaan dadyowga cadcad oo adduunka horumarkiisa wada, F. Engels wuxuu isla waqtigaas arrintaas u arkayey oo qoray in is-hortaagaas Afrikaanku is-hortaageen horornimadii burjuwaasiyiintii reer Yurub ay ahayd micnaheedu dad u dagaallamaya gobannimadooda iyo ummadnimadooda. Engels wuxuu kale oo aad u ammaanay oo u qaddariyey dagaalyahannadii dadyowga Afrika dhiiranaantoodii iyo gobannimo jeclaantoodii wuxuu qoray in dayowgii Afrika iyaga oo dhagax iyo waran ku dagaallamaya ay ciidammadii Ingiriiska oo hubkii ugu dambeeyey wata jebiyeen. Qarnigii 19aad dhammaadkiisii iyo kii 20aad bilowgiisii hantigoosadkii wuxuu u dallacay imberyaalisam, Lenin buuggiisii «Imperialism the highest stage of capitalism» ayuu si tifaftiran ugu sharxay nuxda dhaqaalaha iyo siyaasadda imberyaalisamka. Wuxuu buuggaasi u noqoy kacaannadii hantiwadaagga ahaa iyo dhaqdhaqaaqyadii gobannimadoonka qarnigii XXaad indhafur. Lenin in ka badan 30 qoraal ayuu kaga faallooday arrimaha Afrika, waxaa ka mid ah qoraalladiisii, kuwii uu kaga hadlay :

1. Imberyaalisamka.

2. Gumeysiga ummadaha Afrika iyo Aasiya burjuwaasiyiintu ku hayaan.

3. In xaq ummad kastaa u leedahay in ay sidii ay rabto loo yeelo, (Self determination of nations).

4. Sidii hantiwadaag ay u dhisi lahaayeen dalalka ku jira hababkii habka hantigoosadka ka horreeyey iwm.

Lenin 1912 wuxuu qoray qoraallo badan oo Afrika ku saabsan sida :

1. Dhammaadkii dagaalkii Talyaaniga iyo Turkiya oo uu ku soo qaaday aadami xumada imberyaalisamkii Talyaanigu waqtigaas kula kacay dadka reer Liibiya.

2. Qoraalkii Lenin uu kaga hadlay arrimaha nabadgelyada adduunka, ee uu kaga hadlay gumeysiga burjuwaasiyiintu ka wadaan Afrika iyo Aasiya.

3. Khudbaddii Lenin ka jeediyey shirweynihii «Kongreeskii» labaad 1920 Internationaalkii, halkaas oo uu kaga hadlay sidii dadyowga ku jira hababkii hantigoosadka ka horreeyey ee aan lahayn broletaariyaad u dhisi lahaayeen hantiwadaag.

Lenin aragti ahaan iyo ficil ahaan intaba wuxuu caddeeyey sidii xoogsatadu u dhisi lahaayeen hantiwadaag ugana feejignaan lahaayeen cadowga dibedda iyo kan gudaha intaba, wuxuu caddeeyey in ay tahay lagama maarmaan in ay jiraan Xisbi Kacaan ah iyo ideoloojiyad Kacaan ah labaduba.

Waxa hubaal ah in Marksism-Leninism uu yahay ideoloojiyada ugu fiican adduunka maanta, ahna hab siyaasadeedka ugu caansan. Dadyowga Afrika iyaga oo ogsoon in hantiwadaaggu yahay hab dhaqan siyaasadeedka keli ah ee ay qabaansan karaan si ay u suurageli karto in ay Istratiijiyadooda dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshadaba u xaqiijiyaan, waxaa maanta hirgelinaya hantiwadaagga cilmiga ah dalal badan oo Afrika ah :

1. Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.
2. Gini.
3. Koongo Brasafiil.
4. Moosambiik.
5. Gini Bisaaw, iwm.

Jaalle Siyaad oo ka hadlay hantiwadaagga wax badan 20kii Oktoobar 1975 fadhigii sannadguuradii lixaad wuxuu yiri: **«Hantiwadaaggu waa hab siyaasadeedka, ugu fiican ee Soomaaliya ku socon lahayd, ahna waajib in dadyowga Afrika iyo adduunka oo dhammi ku dhaqmaan, waayo waa hab u baaqaya in sinnaan, nabadgelyo, horukac iyo walaalnimo adduunka saamaysa». Hadalladaas Jaalle Siyaad yiri waxay Afrika ku rumaysan karaan oo tilmaan fiican u ah hantiwadaaggu yahay hab Afrika ku gaari karto horukac, horumarkii dadka**

**Soomaaliyeed gaarey intii ay qaateen hirgelinta habka hantiwadaagga.**

Burjuwaasiyiinta adduunka iyo dabadhilifyadoodu dagaal joogta ah ayey ugu jiraan in hantiwadaagga dadyowga reer Afrika qaadanin, si dadyowgaasi xataa gobannimadooda kaddib ay ahaadaan kuwo ku dhaqma hantigoosad oo hoos jooga hantikoobadyada (Monobolists) adduunka, arrintaas oo la xiriirta gumeysiga cusub.

Afrika dhiig badan ayey u daadisay halgankii gobannimadoonkeedii, maantana dadyowga Afrika in yar mooyaane madaxbannaanidoodii siyaasiga ahayd way heleen.

Afrika way leedahay wixii awood siin lahaa horumar iyo qalle ay qalleyso waqtigii gumeystayaashu ka lumiyeen ee dib u dhigeen, «dad iyo qaninimo intaba», habka iyo aqoonta keli ah ee dhaxalsiin kara Afrika himilooyinkeeda dhinac kasta oo horumar iyo gobannimo buuxda gayeysiin karaa waa cilmiga Marksism-Leninism oo ay qabaansato.

## QAYBTA II

## U GUDBITAANKA HANTIWADAAGGA
## MADAXA V

**Aragtida kacaanka hantiwadaagga ah, waaga cusub iyo socodka kacaannada adduunka :**

Aragtida kacaanka hantiwadaagga ahi, waa qodobka ugu muhimsan qodobbada Marksismka, waa xeerarka suura gelinaya in bulshadu ka gudubto hantigoosad oo u gudubto hantiwadaag, waxay u qabanaysaa burburinta taliska dawladda burjuwaasiga ah iyo taagitaanka talis shaqaale leeyahay «Diktaatooriyadda broletaariyaadka», halkaas oo ay ka billaabmayso u beddelka bulsho hantigoosad ah loo beddelayo bulsho hantiwadaag ah.

**Lagama maarmaanka taariikhiga ah, waxyaabaha dhaliya iyo qaababka kacaannada hantiwadaagga cilmiga ah :**

Kacaanka hantiwadaagga ahi waa lagama maarmaan taariikhi ah, waxaana uu ka dhashaa xeerarka objektifka ah ee barbaaritaanka hantigoosadka, waxaana sameeya xoogsatada dadweynaha ee Kacaanka ah iyagoo uu hoggaaminayo xisbi Marksi-Lenini ahi.

**b) Waxyaabaha objektifka ah ee dhaliya u gudbitaannka hantiwadaagga :**

Marka habka hantigoosadku barbaaro oo gaadho heer sare waxaa dhaca in xoogagga tacabka iyo habka wax lahaanshaha gaarka ahi ayna wada socon karin khaas ahaan marka hantigoosadku u dallaco imberyaalism. Tacabka oo la koobo (concentration of production), monoboliga hantigoosadnimada ah oo u dallaca hantikoob monoboli dawladeed iyo warshadaha oo qaarkood dawladdu la wareegtaa waxay u

baahan yihiin in loo helo meelihii qalabka qaydhiin looga heli lahaa iyo meeshii loo iibgeyn lahaa, sidii shaqaalaha loogu qaybin lahaa, dhaqaalahana loo qorshayn lahaa oo loo borogramayn lahaa, halkaas waxaa laga arkayaa in hantigoosadka ay ka dhex dhalanayso xaalad muujinaysa in loo baahan yahay in «la hantiwadaageeyo» in hantida dalka caam laga dhigo. Hantigoosadnimadu waxay is-hortaagaysaa barbaaritaanka xoogagga tacabka, hantigoosadka muriggiisa iyo cunaqabatayntiisaas uu barbaarintiisa cunaqabataynaya, waxay keeneysaa in hirkii hantiwadaaggu soo muuqdo.

Dawlad monoboli ah oo dhisanta marka hantigoosadka, waxaa weeye tacabkii oo caam noqday, tallaabada ku xigtaana ay tahay hantiwadaag. Qorshe iyo isku habeyn ku dhisan hantigoosadnimo kama reebeyso hantigoosadka tartanka ka dhexeeya wax tacabka qas «anarchism» ku dhisan, khalkhal dhaqaale, shaqo la'aan iyo dagaallo ka dhex dhaca xoogagga imberyaalisamka. Xilliga imberyaalisamka, xoogagga tacabku way kordhayaan, iska hor imaadka gudihiisa ah ee ku saabsan xiriirka tacabka iyo xiriirka dhaqanka siyaasadda ee bulshaduna wuu sii weynaadaa.

**Shaqaalaha oo warshad*a*ha ku soo bata, tacab badanna dhaliya, natiijadii tacabkoodana ay qaataan dad yar oo hantigoosad ahi waa aas*a*aska iska hor imaadka hantigoosadka dhalinaya halgan dabaqi ah oo xoogeysta iyo Kacaan hantiwadaag ah oo dhasha.**

Tacabka oo caam noqda iyo iska hor imaadka hantigoosadka oo heer sare gaara waa calaamad tuseysa in habka hantigoosadku uu u bislaaday Kacaan Hantiwadaag ah.

## J. BISLAANSHAHA KACAANKA :

Habka hantigoosadka oo u bislaaday kuma filla in Kacaan Hantiwadaag ahi dhasho, waxa loo baahan yahay halgan dabaqi ah oo sare iyo iska hor imaadka dhaqanka-siyaasadda bulshada hantigoosadka oo xoogeysta, intaas oo dhan ayaa keena bislaansho Kacaan iyo dadweynaha oo si fiican uga qayb gala halganka. Qodobbada bislaanshaha u aasaasiga ahi waa:

1. Dabaqadaha wax ku kor nool oo aan gacan sareyntoodii iyo dul ku noolaanshahoodii sii wadan karin haddii ayna habkii ay wax ku hoggaaminayeen wax ka beddelin iyo dabaqadihii lagu dul noolaa oo muujiya in aanay dooneyn in ay ku noolaadaan noloshii hore.

2. Iska horimaad xoog leh oo ka dhex dhaca dabaqadda wax ku kor nool iyo dabaqadaha lagu kor nool yahay, taas oo la xiriirta ama dhaqaale xumo ay qabaan shaqaalaha iyo xoogsatada kale ee bulshadu iyo caddaaladarrada lagu hayo. Waqtigan cusub oo maanta la joogana waxaa kaalin weyn ka qaata halganka guud dadweynaha oo kula jiro gumeysiga, musuqmaasuqa, dabadhilifnimada iyo qaran xumada ku xiran monobooliga adduunka iyo gumeysiga wuxuuna u halgamayaa dimuqraadiyad, xornimo waddani ah, qarannimo buuxda iyo caddaalad.

3. Garaadka siyaasidda ee dadweynaha iyo dadaalkooda oo kordha, taas oo ah dadka oo ka baxa niyada isdhiibku, oo ay ku abuuranto niyad kacaannimo iyo dhaqdhaqaaq siyaasadeed.

Si kacaan u suuro galo waa in saddexdaas qodobi jiraan; waqtiga iyo qaabka bislaanshaha kacaanku wuxuu ku xiran yahay sida habda maamulka dawladdu u jilco oo u xumaado, sida xoogga broletaariyaadku u diyaarsan yahay, sida broletaariyaadku ula leeyahay xiriir dabaqadaha kale iyo guud ahaan iyo sida xaaladda dhaqanka-siyaasadda bulshada dalku ku sugan tahay.

U bislaanshaha Kacaanku - waa lagama maarmaanka dhaliya isbeddel siyaasadeed, laakiin bislaanshaha oo keli ihi ma keeni karo kacaan hantiwadaag ah.

Qodobbada objektifka ah ka sokow, si kacaan u dhasho waxaa lagama maarmaan ah in la helo bislaanshaha qodobbada «Subjective» subjectifka ah, taas oo awood siinaysa dabaqadda kacaanka, in ay awood u yeeshaan in ay **burburiyaan taliska gaboobey ee aan weligii dhacayn haddii aanu helin wax turuntureeya oo tukhuntukheeya.** (Lenin B.B. 26,

B219). Qodobka ugu muhiimsan qodobbada subjektifka ah waa in uu jiro xisbi Marksi-Lenini ahi oo shaqaaluhu leeyahay awoodina kara in uu dadweynaha hoggaamiyo oo horkaco, haddii aanay barbaarin oo aaney hana qaadin qodobbadaas subjektifka ahi, qodobbada objektifka oo keli ihi ma suura gelin karaan in kacaan dhasho oo guuleysto, xaaladdaas oo kale ama ma dhacayo kacaan ama haddii laysku dayana wuu fashilmaa.

Kacaan si uu u guuleysto waxaa lagama maarmaan ah in ay jiraan xaalaadka objektifka ahi iyo khalkhal guud oo qarannimo. Lenin wuxuu yiri, waa kuwaas xeerarka u ah gundhig in kacaan dhasho isaga oo soo ururiyey waayo-aragnimadii Saddexdi Kacaan ee Ruusiya qarnigii XXaad. Xeerarkaasi way ku dabaqmeen xataa kacaannadii dhashay dagaalkii labaad kaddib.


## T) XOGAGGA KACAANKA

Xoogga ugu weyn xoogagga kacaan hantiwadaag dhalin kara, waa dabaqadda shaqaalaha. Dabaqaddaas oo waajibkeedu yahay in ay aadamiga oo dhan ka xoreeyaan oo ka samata bixiyaan isku kornoolaanshaha, dagaallada, antagonisamka ka dhexeeya dabaqadaha iyo ummadaha, waayo shaqaaluhu waa kan keli ah ee danaha xoogsatada dalalka hantigoosadka oo dhan mesili kara, uguna awood badan broletaariyaadka, halganka iyo meesha uu kaga jiro bulshada ayaa ka dhigaya xoog bulsho-siyaasadeed weyn oo leh xisbigiisa ku hubeysan aragtida Marksism-Leninism.

Dabaqadda shaqaalaha waxaa halganka ku weheliya dabaqadaha iyo xubnaha kale ee dadweynaha, dantooduna tahay kacaan hantiwadaag ah oo guuleysta sida (Beeraleyda, maalqabeenka yaryar iyo aqoonyahanada horusocodka ah), Marks iyo Engels waxay sheegeen in broletaariyaadka oo kari kariwaayey in ay isbahaystaan beeraleyda ay ahayd sababihii jebiyey Kacaankii Yurubta Galbeed ee qarnigii XIXaad khaas ahaan kommunkii Baariis.

Lenin aad ayuu u diiday kuwa yiraahda si kacaan hantiwadaag ahi u dhasho waa in dadka intiisa badani shaqaale

ka Hantiwadaagga
yaalaha dhaliya




Dalalka adduunka oo dhami hantiwadaagga ayey qaadan doonaan, laakiinse dal kastaa waaya aragnimo cusub ayuu la imanayaa «qaabka iyo tabta kacaanku u dhasho» lana xiriirta xaalaadka taariikhiga, heerka xoogagga tacabka, bislaanshaha xoogsatada iyo hoggaaminta Xisbiga.

noqdaan; kuwaasoo uu ku tilmaamay (daneystayaal midig ah) wuxuu yiri, waxaa lagama maarmaan ah in shaqaaluhu ay la jiraan beeraleyda, maalqabeennada yaryar, aqoonyahanada iyo dadka xafiisyada dawladda ka shaqeeya, taasoo uu yiri Lenin iska horimaadka iyo dhibaatooyinka hantigoosadka ee soo gaaraya dabaqadahaas iyo xubnahaas bulshada ayaa keenaya in ay isgarabsadaan iyaga iyo broletaariyaadku taageeraanna Kacaanka. Lenin wuxuu yiri, **Kacaan hantiwadaag ah wuxuu ka dhalan karaa xataa dalalka aan lahayn broletaariyaad badan oo dadka intiisa badani yihiin, taas oo taag iyo sallaan ay u noqon karaan xubnaha bulshada ee kale, broletaariyaadkuna leeyahay miisaankiisa.** Haddii qodobbadaas aynu ka bixinno mitaal, waxaa mitaal run ah u noqon kara kacaankii ka dhashay Soomaaliya oo aan xoogaggii dhaliyey u badneyn broletaariyaadka ee ay ahaayeen (Ciidammada Qalabka Sida, shaqaalaha, Beeraleyda, xoolo raacatada, shaqaalaha dawladda iyo aqoonyahannada), taasoo xubin kasta iyo dabaqad kasta oo bulshada Soomaaliyeed ka mid ahi ay wax ka soo gaareen, dhibaatooyinkii musuqmaasuqa, caddaaladdarrada iyo qarannimo dhaawicii dalka yiilley, waxaa kale ee Kacaanka Soomaaliyeed ku kordhiyey in iyada oo uu yahay kacaan xoogsatada ummadda Soomaaliyeed dhalisay, misana waxaa kaalintii hormoodnimada xoogsatada iyo fulintii kacaankaba ku dhaqaaqay ciidammada qalabka sida oo ay la jiraan xoogsatada Ummadda Soomaaliyeed inteedii kale. (Arrintaas madaxyada soo socda ayenu ku falanqayn doonnaa).

Dabaqadaha aan broletaariyaadka ahayn wuxuu yiri Lenin waxay kaga duwan yihiin broletaariyaadka, waxay kaga jiraan tacabka (wax soo saarka) bulshada meel u keeneysa hal adeyg la'aan iyo isrogrog badan oo ku saabsan arrimo asaasi u ah halganka dabaqiga ah. Hoggaaminta siyaasadda oo uu yeesho broletaariyaadku ayaa xubnaha iyo dabaqadaha kale ee bulshada siin kara in ay isgarabsadaan oo ku wada dhaqaaqaan Kacaan hantiwadaag ah, waayo broletaariyaadka oo keli ah ayaa noqon kara dabaqad u horseeda dan dadka oo dhami wada leeyihiin sababta oo ah meesha uu kaga jiro tacabka bulshada.

Sidaas daraaddeed wadajir ay wadajiraan shaqaalaha iyo xoogsatada kale, khaas ahaan beeraleyda oo ay hoggaa-

minta leeyihiin shaqaaluhu waa arrin muhiim u ah in kacaan hantiwadaag ahi dhasho oo guuleysto.

## X) HALGANKA DIIMUQRAADIGA IYO HALGANKA HANTIWADAAGGA AH.

Waxaa lagu burburin karaa hantigoosadka oo lagu gaari karaa hantiwadaag waa halgan dabaqi ah oo ay ku dhaqaaqaan broletaariyaadku qabsadaanna Taliska Siyaasadda ee dalka, laakiinse waxaa dhici karta in shaqaalaha ayna la soo gudboonaan xil hantiwadaag ah in ay fuliyaan ee ay la soo gudboonaato in ay gutaan xil dimuqraadi ah.

Xilkaa dambe waxaa dhici karta in uu saddex sababood la xiriiro:

1. Xil dimuqraadi ah oo ka hadhay dhulgoosadkii hantigoosadku beddeley;

2. Xil dimuqraadi ah oo ka dhasha habka hantigoosadka khaas ahaan marka uu u dallaco imberyaalisam.

3. Xil dimuqraadi ah oo la xiriira dhaqdhaqaaqa xornimo-doonka waddaniga ah, oo ku saabsan dabargoynta gumeysiga, tirtiridda raadkii gumeysiga iyo dib u dhaca dhinac kasta ah.

Waqtiga hantigoosadka waxaa dhici karta in tallaabooyin dimuqraadi ahi qabsoomaan tallaabooyinkaas oo unkaya ulajeeddooyin hantiwadaaga. Dhaqdhaqaaqyadaas dimuqraadiga ahi, waxay kaalinayaan dabargoynta imberyaalisamka, dadweynahana ayay ku dhiirrinayaan in ay si ballaaran halganka uga qayb qaataan, shaqaalahana waxay u sahlaysaa sidii ay guul u gaari lahaayeen.

Isku xirnaanta diyaalektikada ah ee ka dhexeysa Kacaanka dimuqraadiga ahi iyo kan hantiwadaagga ah Lenin ayaa ku caddeeyey aragtidiisii, **«Sida Kacaanka Dimuqraadiga ahi ugu dallaco Kacaan Hantiwadaag ah»**, isaga oo gundhig uga dhigaya aragtidii Marks ee ahayd **«Isdabajoogga kacaanka ama kala go' la'aanta kacaannada»**, Lenin wuxuu caddeeyey in kacaanka burjuwaasi - dimuqraadi ah ee la halga-

maya dhulgoosigu uu isla markiiba yahay halgan lid ku ah imberyaalisamka. Sidaas daraaddeed shaqaaluhu waa in uu ka qayb galaa oo qayb weyn ka qaataa. Arrintaasi waxay tusaysaa in kacaanka dimuqraadiga ahi uu u adeegayo kacaanka hantiwadaagga, isaga oo misana gudanaya xilkiisa u gaarka ah, Lenin wuxuu yiri, **«Jidka dhexdiisa istaagimayno ee waxaannu u gudbeynaa kacaan hantiwadaag ah»** (Lenin B. 11, B. 222). Dalalka imberyaalisamka suuragal ma aha in tallaabooyin dimuqraadi ah la qaado iyada oo aan la tirtirin taliska monobooliga, sidaas oo kale ilaa dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka ahi ku guuleystaan halgankooda (Madaxbannaani Siyaasadeed) lagama qaadi karo dalalka gumeysiga gacantiisa ku jira tallaabooyin dimuqraadinimo ah, xilkaasna waxaa fulin kara shaqaalaha - dabaqadaha iyo xubnaha kale ee bulshada oo uu hoggaaminayo broletaariyaadku. Marka shaqaa laha iyo dabaqadaha kale ee xoogsatadu ay xoogeystaan, guud ahaan adduunweynaha iyo gaar ahaan dal keli ah, isbeddel dimuqraadi ah oo la sameeyaa wuxuu u qabanayaa kacaan hantiwadaag ah, Lenin wuxuu ku tilmaamay isbeddelkaas dimuqraadiga ahi sida:

Qaranaynta (Sindicates, trusts, baananka, dhulka qalabka qaydhiin laga qaado iwm), tallaabooyinkaasi oo dhami waxay abuurayaan in kacaan hantiwadaag ahi, noqdo lagama maarmaan.

Nuxda dimuqraadiga ahi waxay sidaas oo kale u saameyneysaa dhaqdhaqaaqa xornimo-doonka waddaniga ah, kuwaas oo ah in lagu dabargooyo habka gumeysiga iyo imberyaalisamka, keydna u noqda kacaanka hantiwadaagga ah. Waajibaadka dimuqraadiga ah ee uu qabaanaya in bulsho hantiwadaag ah laga dhiso dalalka soo koraya ee ku guuleystay in ay helaan xornimadii siyaasiga ahayd waa sida soo socota:

1. In laga tirtiro bulshada raadkii gumeysiga.

2. In la dhammeystiro tallaabooyinka kacaannimada ah ee lidka ku ah imberyaalisamka iyo dhulgoosiga.

3. In la qarameeyo qalabka wax soo saarka (Shirka-

daha, baananka iyo meelaha kala duwan ee ajnebigu leeyahay, dhaqaalaha dalkana halbowle u ah).

4. In la joojiyo sedka gaar ahaaneed ee dad yar oo maalqabeen ahi qaataan.

5. In la koobo wax lahaanshaha gaar ahaaneed.

6. In la dimuqraadiyeeyo dhismaha dawladda iyo xuquuqda xoogsatada (in la abuuro ururro Ijtimaaci ah oo maamulka wax laga wadaajiyo, in Ciidammada qalabka sida la dimuqraadiyeeyo).

7. In la abaabulo oo la kiciyo dadka shaqaalaha, beeraleyda iyo xoogagga kale ee horusocodka ah, korna loo dhigo ka qayb galkooda hoggaaminta dalka.

8. In la sameeyo isbeddel xagga beeraha oo la siiyo dadka beeraleyda dhul, gacanna lagu siiyo qalabka beeraha, laguna dhiso habka tacab wadaagga.

9. In dalka la warshadeeyo khaas ahaan kuwa abuuraya madax-bannaani dhaqaale.

10. In la sameeyo olole waxbarasho iyo kordhin garaadka siyaasiga ah ee dadweynaha.

11. In la koobo waxlahaanshaha gaar ahaaneed lana xoojiyo waaxda Dawladda.

12. In la tirtiro oo la xidid saaro wixii dadka midnimadooda iyo qarannimadooda wax yeelaya.

13. In la ballaariyo oo la naaxiyo dhaqanka dadka, laguna naaxiyo dhaqanka hantiwadaagga ah iyada oo laga faa'iideysanayo waayo-aragnimada dalalka hantiwadaagga.

14. In si joogta ah loola diriro imberyaalisamka, gumeysiga cusub, midab-takoorka, lana qaado siyaasad dibadeed horusocod ah.

15. In gacan kaalmo ah loo geysto dhaqdhaqaaqyada gobanimo doonka iyo kuwa horusocodka ah.

16. In xirriir iskaashi iyo wadajir lala yeesho dalalka hantiwadaagga ah iyo xooggagga Kacaanka ee Adduunka.

Si loo hirgeliyo qodobadaas kor ku qoran waa in ay

jirtaa Dawladda Dimuqraadiga wadani ah, Dawladdaas oo asaas dhaqaaleedkeedu yahay:

b) Waaxda Dawladda;

t) Waax tacab wadaagnimo ku dhisan.

Dhinaca dhaqanka-siyaasadda bulshada, waa in la abuuro jabhad ballaaran oo ay kasoo qayb galaan xooggagga horusocodka ah oo dhami ee diyaarka u ah in la dhammeystiro kacaanka u qabaanaya xornimo waddani ah oo buuxda (Shaqaalaha, Beeraaleyda iyo Reer Guuraaga, Burjuwaasiyada yar yar, aqoon-yahannada horusocodka ah iyo Ciidammada Qalabka Sida).

**KH) QAABABKA UU KU DHASHO KAACAN NABADGELYO AMA DAGAAL.**

Iyada oo ay ku xiran tahay hadba sida xaaladdu tahay, Kacaan wuxuu ku dhalan karaa qaab nabadgelyo ama qaab dagaal (dabaqadda shaqaalaha oo adeegsata hub) dalalka monoboliyadu ay ka talineyso, militerisamka iyo burjuwaasiyadduna xoogga ku leedahay dadweynahana ay ku sandulleeyaan, Kacaan hantiwadaag ahi wuxuu ugu habboon yahay iyada oo ay broletaariyaadku isticmaalaan xoog hub leh. Marks iyo Lenin aad ayey fiiro gaar ah u siiyeen xoog isticmaalka, taasoo ay yiraahdeen waa «Xeel». Lenin wuxuu yiri xoog isticmaalka broletaariyaadku ma aha in uu isku haleeyo oo ku tashado hadal meel la isla dhigay, ama xisbi ee waa in ay jirtaa dabaqad horusocod ah ee Kacaan ah, waa in laga faa'iideystaa oo lagu dhaqaaqaa marka xamaaska iyo Kacaannimada dadku ay marayso halka ugu sarraysa, niyadxumida, welwelka iyo khalkhalka dawladda burjuwaasiga ama dibusocodka ahi marayo halka ugu sarreysa. Marksism-Leninism xoog isticmaalka xeeshiisa waxa ay ku tilmaantay:

1. Waa in aan lagu dheeldheelin xoog isticmaalka, ee haddii la bilaabo waa in ilaa halka ugu dambeysa la wadaa.

2. Waa in xoogga la saaraa meesha ugu adag waqtiga ugu habboon.

3. Haddii la bilaabo waa in si sugan oo aan kala go' lahayn, qaab weerarna ah loo galaa, lagana digtoonaadaa in aan difaac la gelin.

4. Waa in ku kicitaanka la bilaabaa marka cadowgu kala daadsan yahay.

5. Waa in saacad kasta, maalin kasta guul haba yaraatee la soo hooyaa, taas oo xoojinaysa niyadda broletaariyaadka.

Xoog isticmaalka ka sokow, taliska hantigoosadka iyo dibusocodka waxaa lagula halgami karaa qaab (Xarbal Cisaabad) «Guerilla War fare», taas oo lagu ogaaday qiimaha qaab dagaaleedkaasi leeyahay waayo-aragnimadii ay ka soo meereen dadyowga Midowga Soofiyeeti, Kuuba, Fiyetnaam, Komboodiya iyo Shiinuhu.

Hantiwadaagga Cilmiga ahi wuxuu aqoosan yahay in dadweynuhu ku dhalin karo kacaan hantiwadaag ah si nabadgelyo ah.

Taasna waxaa kaalin weyn ka qaadan kara iyada oo ay jirto haba yaraatee wax xornimo dimuqraadi ah oo burjuwaasiyiintu oggol yihiin, si ay u suura gasho in shaqaaluhu sameysto ururro iyo isgarabsi uu la yeesho xoogagga kale ee bulshada.

**Lenin wuxuu yiri, «Casriga imberyaalisamka - Kacaan in uu ku dhasho si nabadgelyo ah way adag tahay, sababta oo la xiriirta biruqraadiyada, mileterisamka iyo dimuqraadiyo la'aanta ay ku isticmaalaan burjuwaasiyaddu.**

Ruusiya Febraayo 1917 markii la riday Boqortooyadii ee ay jirtay Dawladdii burjuwaasiga ahayd ee ku meel-gaarka ahayd, waxaa jirey sababo suuragal ka dhigayey in Kacaankii Burjuwaasiga - Dimuqraadiga ahaa uu u dallaco kacaan hantiwadaag ah oo ku dhasho si nabadgelyo ah oo ay ka mid yihiin jiritaankii goleyaashii shaqaalaha iyo beeraleyda.

Lenin wuxuu caddeeyey in ay suura geli karto in xoogsatada oo shaqaaluhu hoggaaminayo ay qabsan karaan taliska

dawladda haddii ciidammada qalabka sidaa ay suura geli karto in aanay noqonnin kuwo burjuwaasiyiintu isku halleeyaan oo ay ku jebiyaan shaqaalaha, kana sii fiican tahay marka ciidammada qalabka sidaa ay yihiin kuwo la jira kacaanka, taasna waxa ay ku rumowday waayo-aragnimadii laga gaarey kacaannadii dadka ee dimuqraadiga ahaa ee dalalka bariga Yurub. Waxa dalalkaas ka dhashay kacaanno dimuqraadi ah oo xoog ku dhashay, markii dambena u dallacay kacaanno hantiwadaag ah oo si nabadgelyo ah ku yimi. Dal kasta waxa ay ku xiran tahay sida kacaan kaga curtaa hadba xaaladda taariikhiga ah ee dalkaas ka taagan gooni ahaantiisa. Waxa dhici kara in kacaan ku dhasho si xoog ah, marka dabena uu u barbaaro si nabadgelyo ah, waxa kale oo dhici kara in kacaan ku dhasho si nabadgelyo ah, marka dambena dhibaatooyin ay abuuraan dabaqaddii dadka ku kornooleyd, sidaas awgeed uu dalkaas ka dhaco dagaal ahliya (Civil War).

Guud ahaan si hantigoosad looga gudbo oo loogu gudbo hantiwadaag, waa in uu kacaan dhashaa.

Su'aal oranaysa ma loo baahan yahay kacaan mise looma baahna kuma fekeraan Marksiyiintu, waayo kacaan la'aan ma dhici karo isbeddel u horseeda bulsho hantiwadaag. Marksismku wuxuu aamminsan yahay in kacaan aan la dhaafi karin, si kacaan hantiwadaag ahi uga dhasho dal, waxay ku xiran tahay hadba sida iska horimaadka ka dhex taagan xoog u leeyahay. Haddii aynu ka hadallo qaabkii Kacaankii 21kii Oktoobar ee Soomaaliya wuxuu ku dhashay si xoog qabbaansı ah, waxaana dhaliyey xoogsatada bulshada Soomaaliyeed. Kaalintii hoggaaminta iyo horseednimada waxaa qaatay Ciidammada Qalabka Sida, sababtoo ah:

1. Ciidammada qalabka sidaa waxay ka soo dhex baxeen bulshada Soomaaliyeed, una badan dabaqadaha xoogsatada ah.

2. Waa xoogga keli ah oo laga heli karo gobol kasta oo J.D.S. dad ka mid ah.

3. Waa xoogga keli ah ee loo abuuray in uu daafaco danaha dadweynaha gudaha iyo dibeddaba.

4. Waa xoogga ugu habaysan oo isugu dubbaridan.

5. Waa xoog awood gaar ah leh oo aan xubnaha dawladda oo kale lahayn (Hubka).

6. Waa xoogga ugu nidaamsan, uguna asluub wacan xubnaha dawladda.

7. Waa qayb ka mid ah xoogsatada dadweynaha ee ay soo gaareysay dhibaatooyinkii badnaa ee dadweynaha saameeyey, wayna soo gaareen sidii qaybaha kale ee bulshada.

8. Waa xoog madaxdii xukumaysay ahaayeen kuwo waddaniyiina, horusocoda, kaalin weynna ka soo qaatay gobannimo u dirirkii.

Waxyaalahaas u gaarka ah iyo kuwaas kale oo ay la wadaageen dadweynaha Soomaaliyeed waxa u raacay inay madaxdii Ciidammada hoggaaminayey (Jaalle Siyaad iyo saraakiishii GSK) ay ahaayeen saraakiil horusocod ah oo si fiican ula socda oo og waajibaadka ay dadweynaha kaga aaddanaayeen, waxa kale oo iyana jirtey in Ciidammada qalabka sidaa ay ahaayeen xoog la leh xiriir toos ah ciidammada dalalka hantiwadaagga iyo dalalka horusocodka ah. Saraakiisha, Saraakiil xigeen iyo Dableyduna waxbarasho u aadi jireen.

Isla markaana waxaa jirtey in Ciidammada qalabka sida ay ku jireen 20% aqoonyahannada horusocodka ah ee Soomaaliya. Waqtigaas waxaa jirey in axsaab ku sheegyadii siyaasiga ahaa ay ahaayeen kuwo ay afka haystaan dibusocodkii dawladda gacanta ku hayey iyo danaystayaal u qabbaana dano shisheeye, dadka Soomaaliyeedna u horseedayey kala qaybin iyo iska soo horjeed ku dhisan siyaasaddii gumeystayaasha (Qaybi oo Xukun), si ay danahooda shaqsiga ah u helaan. Waqtigaas ma jirin shaqaale ama beeraley ama qayb xoogsatada ka mid ah oo tiro ahaan iyo garaad siyaasadeed ahaan intaba qaadan kartey kaalintii hoggaaminta iyo isku duwidda dadweynaha. Waxyaalahaas oo dhami waxay dhaliyeen in ciidammada qalabka sidaa noqdaan xoogga keli ah ee dhalin kara kacaan dalka Soomaaliyeed ka dhasha haystayna kalsoonidii xoogagga kale ee dadweynaha iyo madax horusocod ah, Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii sidaas ayey ciidammada qalabka sidaa ugu noqdeen hormood una dha

shay, haddana ay kaalin weyn ka qaataan ciidammadu barbaarinta Kacaanka una himileeyeen in ay barbaaraan xoogagga xoogsatadu si ay ula wareegaan hoggaamintii dalka (xaashida koowaad ee Kacaanka) ciidammaduna ay ka mid yihiin. Isla markaana waxaa madaxdii ciidammadu ee horusocodka ahaa ay noqdeen oo qaataan kaalintii hoggaaminta Kacaanka ee kaalinayey kuwii objektifka ahaa ee ay abuureen xumaantii dawladdii dibusocodka ahayd ee jirtey. Jaalle Siyaad oo arrintaas ka hadlay wuxuu yiri, **«Ciidammada qalabka sida waxay ahaayeen kuwii ku dhex noolaa ummadda dhexdooda oo maqlayey cabashadooda, dhibaatadoodana garanayey, iyagoo isla markaana xog-ogaal u ahaa khiyaamooyinkii gumeysiga»**, 3.9. 75).

## D) ISKU MID AHAANTA IYO KALA GAAR AHAANTA KACAANNADA ADDUUNKA.

Kacaan haddii uu waddan ka dhasho, inkasta oo uu khuseeyo ama qiimo u leeyahay waddankaas uu ka dhashay, misana qiimo caalami ah ayuu leeyahay, sida dhibaatooyinka hantigoosadku u gaaraan meelo badan oo adduunka ka mid ah. Sidaas daraaddeed, kacaan hantiwadaag ahi meel kasta oo uu ka dhasho wuxuu dabargoynayaa imberyaalisamka, dabayl kacaanna gelinayaa adduunka. Inkasta oo habka hantigoosadku u bislaaday isbeddel kacaannimo misana barbaarinta hantigoosadka iyo iska horimaadkiisu dalalka oo dhan isku si ma wada aha. **Lenin wuxuu gaadhay ra'yi oranaya: Kacaan hantiwadaag ahi wuxuu ka dhalan karaa bilow ahaan hal dal oo keli ah ama dhowr dal oo ka mid ah dalalka hantigoosadka** (Lenin B. 26 B. 35).

1915 Lenin wuxuu ku muujiyey qoraalkiisii (United States of Europe) in ay tahay xeerarka barbaarinta hantigoosadka in dalalka hantigoosadku aanay isku mid ka noqon karin dhinaca dhaqaalaha iyo siyaasaddaba, sidaas darteed ayuu kacaan ka dhalan karaa bilow ahaan hal dal ama dhawr dal oo ka mid ah dalalka hantigoosadka. **Kacaan wuxuu ka dhalan karaa dalal kala duwan ee ku kala duwan heerka dhaqaalaha, siyaasadda iyo dhaqanka intaba. Kala dheereyntaas iyo kala duwanaanshahaasi waxaa lagu gaari karaa in kacaan hantiwadaag ahi soo foodsaareeyo dhaqdhaqaaqyada**

**dimuqraadiga ah iyo kuwa xornimo-doonka waddaniga ah.** Dhaqdhaqaaqyadaas oo dhami waxay wadaan halgan ka soo horjeeda imberyaalisamka. Sidaas darteed kacaan kasta oo ka dhasha dal waa xubin ka mid ah kacaannada hantiwadaagga ah ee adduunka.

Kacaankii 21kii Oktoobar ee Soomaaliya waa kacaan u garab ah kacaannada hantiwadaagga ah ee adduunka, qaabkii uu u dhashay, xoogaggii dhaliyey iyo heerkii dhaqaalaha iyo siyaasadda ee dalka Soomaaliyeed marayey markaas waxay la xiriireen dabeecadda taariikhiga ah ee dalku marayey.

## 2. KACAANKII OKTOOBAR EE WEYNAA WAA GUULIHII MUUJIYEY ARAGTIDA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH.

Kacaankii Oktoobar ee Ruusiya ka curtay 1917 qayb weyn ayuu ka qaatay barbaarinta adduunka, aayaha dambe ee aadamiga iyo nolosha dadyowga adduunka oo dhan.

Wuxuu beddelay habkii dhaqanka-dhaqaalaha iyo kii siyaasadda ee Ruusiya. Wuxuu dhigay asaaskii adduunku u kala qaybsamay laba hab-bulshadeed oo iska soo horjeeda, wuxuuna ahaa kacaan ay ku guuleysteen shaqaaluhu furayna waa cusub oo noqday waa'gii dabargoynta hantigoosadka iyo dhismaha hantiwadaagga.

Lenin wuxuu yiri, «Waxaan ku faanaynaa oo noo farax ah in ay noo suuro gashay in aannu noqonno kuwii dhisay dawlad Soofiyeet ah, kuwii bilaabay waa'gan cusub ee qiimo taariikhi ah u leh adduunka oo dhan, waa'gaas oo ah mid dabaqad cusubi yeelatay gacan sarreyntii, dabaqaddaas oo dalalka hantigoosadka ah oo dhan lagu dulleysto, una horseedaysa nolol cusub iyo guul ay ka guuleystaan Burjuwaasiyada, aadamiga in laga badbaadiyo aafooyinka hantigoosadka iyo dagaallo imberyaalisamka u qabbaanaya (Lenin B. 44 B. 148).

## B) ARAGTIDA LENIN EE KACAANKU WAA RUN

Kacaankii Oktoobar ee Ruusiya si kastaba ha u dhadhashee wuxuu ahaa kacaan hantiwadaag ah oo dabaqi ah. Waxaa ku suura galay in la hirgeliyo nuxdii aragtida kacaanka hantiwadaagga ah oo dal kasta ka fuli kara, waxaa ku fulay arrimo badan oo maanta u ah dalalka aan hantiwadaagga ahayn waajib sugaya oo ay ka mid yihiin:

1. Afgembi Taliska Hantigoosadka la afgembiyo;
2. Taagitaanka Diktaatuuriyada broletaariyaadka la taago;
3. Qalabka wax soo saara oo la hantiwadaageeyo;
4. Beeraha oo loo habeeyo si danta beeraleydu ku jirto;
5. Dadka oo laga xoreeyo gumeysiga, midabtakoorka iyo duliga;
6. Asaaskii dhismaha Siyaasadda iyo dhaqaalaha ee dhismaha hantiwadaagga oo la abuuro;
7. Xoogsatada oo laga xoreeyo wixii duli iyo dul ku noolaansho ah.

Kacaankii Oktoobar ee Ruusiya wuxuu xaqiijiyey runtii Marksism - Leninism, wuxuu dhirbaaxo u geystey danaystayaashii iyo ideoloojiyooyinkii (Bidixda) iyo (Midigtaba).

Waxa rumoobey faaladii Lenin uu ku yiri ma suura geli karto in waddamada adduunka oo dhan Kacaan hantiwadaag ahi ku curto, ee imberyaalisamka waxaa laga wareemi karaa meesha uu ugu jilicsan yahay, halkaas oo noqotay Ruusiya, isla markaana waxaa jirey xaalaadkii objektifka ahaa iyo kuwii subjektifka ahaa si Kacaan u guuleysto hantiwadaagna lagu dhiso.

Xoogaggii kacaanka dhaliyey waxay ahaayeen shaqaalaha oo ay isgarabsanayaan beeraleyda, hoggaamintana shaqaaluhu lahaa.

Kacaankii Oktoobar ma noqon mid u horseedda Kacaano hantiwadaag ah oo ka curta dalalka hantigoosadka ah oo keli ah ee wuxuu noqday mid u horseeda Kacaanka xornimo doonka waddaniga ah, taas oo ay ku caddaatay isgarabsigii shaqaalaha, beeraleyda iyo dhaqdhaqaaqyadii xornimo doonka ummadihii la gumeysan jirey ee Ruusiya, dalalkaas oo ay ka suura gashay in laga dhiso hantiwadaag iyaga oo aan marin habka hantigoosadka. Intii halganka lagu jirey Kacaanka, Xisbigiihanti wadaagga ahaa ee Ruusiya wuxuu isticmaalay qaab nabadeed iyo mid xoog intaba, taas oo uu xisbigu ka badbaadayey xoog ku isticmaal ilaa iyo intii uu ka warwareegi karo. Intii ka horreysay kacaanka iyo kaddib markii uu guuleysteyba, Lenin wuxuu qorey buugaag badan oo uu ku barbaariyey oo hore ugu dhigay cilmiga Marksismka.

Waaya-aragnimadii Kacaankii Oktoobar ee Ruusiya waxaa ka faa'iideystey dalal badan. Waxaa laga faa'iideystey in haddii kacaan hantiwadaag ahi curto, ay tahay inuu awoodi karo in uu isdaafaco, waayo imberyaalisamka caalamiga ah iyo xoogagga burjuwaasiga iyo dibusocodkii la afgembiyey kama joogsanayaan in ay la dagaalamaan Kacaanka sidii qabsatay Kacaankii Ruusiya ee ay soo weerareen 14kii dawladood ee ugu xoog badnaa adduunkii hantigoosadka ahaa.

Waxaa noqotay lagama maarmaan in xoogagga horusocodka ah ee adduunku ay siiyaan gacan dalkii Kacaan ka dhasho, taas oo lagu suura geliyey Kacaankii Oktoobar ee Ruusiya ahna waajib caalami ah. Waaya-aragnimo weyn ayaa laga dhaxlay Kacaankii Oktoobar ee Ruusiya dhinac kasta, khaas ahaan tan ah, haddii xoogsatadu taliska la wareegaan waa in si joogta ah ugu feejignaadaan Kacaanka, waa in cadawga Kacaanka dagaal joogta ah lagu hayaa, lana xoojiyaa gaashaandhigga dalka.

## T) KACAANKII 21KA OKTOOBAR EE SOOMAALIYA WAA KACAAN U HORSEEDAYA HANTIWADAAG

Kacaanka Oktoobar ee Soomaaliya waa Kacaan ku xiran Kacaannada hantiwadaagga ah ee adduunka, Kacaanku noloshii ummadda Soomaaliyeed wuxuu ka ciyaaray

kaalin weyn. Wuxuu ahaa kacaan u horseedaya hantiwadaagga cilmi ah, dadyowga Afrika kii ugu horreeyey, wuxuu beddeley habkii siyaasadda, dhaqaalaha iyo kii bulshada ee Dalka Soomaaliya, wuxuu noqday Kacaan ku abuuray dadyowga Afrika niyad Kacaannimo ah, kuna guubaabiyey inay ka baxaan duliga iyo darxumada imberyaalisamku ku hayo, inay midnimada dadyowga Afrikaanku tahay wax danta Afrika ah, gumeysiga iyo midabtakoorkana u ah dabargoyn, **Jaalle Maxamed Siyaad Barre Madaxweynaha GSK ee Soomaaliya ahaana Madaxweynaha Afrika 1974-1975 wuxuu ku soo wareegey dalalka Afrikada madaxa-banaan sannadkii uu ahaa Madaxweynaha Afrika, wareegiisii wuxuu u akhriyey dadyowga Afrika khudbado uu ku guubaabinayo, xusuusinayo qiimaha Afrika ugu fadhido adduunka iyo sida ay hodan u tahay, isla markaana dadkii u dhashay uga qatan yihiin, dalkoodana loogu midabtakooro iyo inay gacmaha reer Afrika ay ku jirto sidii ay qaaradooda u hanan lahaayeen.**

Kacaankii 21kii Oktoobar wuxuu ahaa kacaan hantiwadaag u horseedaya oo halgan dabaqadeedna leh, taasna waxaa caddaysay baaqii kowaad ee Kacaanka qodobkii kowaad 1969 oo ahaa; **in la dhiso bulsho Soomaaliyeed oo ku dhisan caddaalad iyo shaqo.**

1. Wargeyska horseed oo ka hadlay arrintaas wuxuu yiri, «Waa in lala diriraa ideoloojiyada burjuwaasiyiinta ee oranaya bulshada Soomaaliyeed ma leh dabaqaad, wuxuu wargeysku yiri **«Haddii Bulshada Soomaaliyeed ahaan lahayd bulsho aan dabaqada lahayn, looma baahdeen Kacaan, loomana baahdeen adduun-arag hantiwadaag ah».** Waxaa kale oo caddaynaya Baaqii labaad ee Kacaanka 1970, baaqaas oo oranayey:

1. Hantiwadaagga Soomaaliya hirgelineysaa waa kan keliya ee jira, kaas oo ah kan cilmiga ah.

2. Dalka Soomaaliyeed waxaa laga hirgelinayaa hantiwadaagga cilmiga ah, iyada oo lala kaashanayo waxyaalaha u gaarka u ah dadka Soomaaliyeed;

3. Caqiidada dadka Soomaaliyeed waa la ixtiraamayaa, laakiinse dibusocodka raba inuu hub ka dhigto, oo dadka Soo-

maaliyeed midnimadooda iyo qaranimadooda ku dhaawaco horumarkoodana isku hotaago halgan ayaa Kacaanku ku qaadayaa aan kala go' lahayn;

4. Wixii isku dulnoolaansho iyo qof qof ku kornoolaada keenaya Kacaanku in uu joojiyo;

5. Tacab wadaag iyo tacab soo saarka oo la kordhiyaa in uu noqdo mabda'a shaqada;

6. in Midnimada Soomaaliyeed Kacaanku raadinayaa oo xoojinayaa;

7. Kacaanka waddanka Soomaaliyeed wuxuu u halgamayaa nabadgelyo, caddaalad, sinaan iyo barwaaqo bulshada Soomaaliyeed ku waarto.

Kacaankii 21kii Oktoobar wuxuu ahaa Kacaan lahaa xaalaadkiisa objektifka ah iyo kuwii subjektifka ahaa intaba.

Siyaasadihii musuqmaasuqa ahaa ee dawladihii dibusocodka ahaa, gaajadii, darxumadii iyo qaran xumadii ay ku sugnayd Soomaaliya ayaa bisleeyey dhalashadii Kacaanka, isla markaana waxaa kaalintii subjektifka ahayd ee Kacaanka ciyaaray Ciidammada qalabka sida oo ay hoggaaminayeen saraakiil horusocod ahi, madaxna uu u yahay Jaalle Maxamed Siyaad Barre, taasina waxay la xiriirtaa xaaladdii dhaqanka-siyaasadda ee Soomaaliya maraysey.

## KACAANKII OKTOOBAR EE SOOMAALIYA WUXUU RUMAYNAYAA ARAGTIDII MARKS EE AHAYD «ISDABAJOOGGA KACAANKA IYO KALA GO' LA'AANTIISA:

Xoogaggii taageerayey Kacaanka ee uu niyadoodii tarjumayey waxay ahaayeen (Shaqaalaha, Beeraleyda, aqoonyahannada iyo maalqabeenkii yar yaraa) oo ay hormood u ahaayeen Ciidammada Qalabka Sida.

Kacaankii Oktoobar wuxuu beeniyey fekradihii danaystayaasha iyo hantiwadaag xumayaashii ku doodi jirey in la soo maro hantigoosad, si hantiwadaag loo dhiso, tusayna in hantiwadaag uu dhisi karo dal aan soo marin hantigoosad, dhinaca dhaqaalahana ku dambeeya, shaqaale hanaqaad ahna aan lahayn.

Kacaankii Oktoobar wuxuu rumeeyey in Cilmiga Marksism-Leninism yahay cilmi barbaaraya ee dal kastaa waayo-aragnimadiisa kacaaneed u tahay ballaarin iyo naaxin, **taasna waxa wax aad u fiican u noqon kara khudbadihii hoggaamiyaha Kacaanka, Jaalle Siyaad.** Kacaanka Soomaaliyeed waa mid ay ku rumowday istaageerka caalaminimada ah ee xoogagga hantiwadaagga ah oo ay muujineyso isgarabsiga iyo istaageerka ka dhexeeya Soomaaliya iyo dalalka hantiwadaagga ah.

Kacaanku wuxuu u halgamayaa in Soomaaliya noqoto bulsho hantiwadaag ah, oo aan lahayn dabaqado iska soo horjeeda, heer sarena ka jooga dhaqaalaha, dhaqanka iyo siyaasadda intaba, oo uu u hayo hoggaanka xisbi hantiwadaag ahi, (Khudbaddii Jaalle Siyaad ee sannad-guuradii 5aad ee Kacaanka).

## J) WAAJIBAADKA KACAANKA HANTIWADAAGGA AH.

Nuxda kacaan hantiwadaag ahi waa in uu taago oo la suura geliyo diktaatuuriyad broletaariyaad, waayo waxay suura gelinaysaa isbeddel dhinac kasta saameeya. Kuwa loo yaqaanno toostoosiyeyaal (Reformists) waxay yiraahdaan shaqaaluhu isbeddelkaas wuxuu sameyn karaa iyaga oo aan burburin maamul dawladeedkii taliskii burjuwaasiga ahaa ee hore (Government apparatus) hantiwadaagna lagu dhisi karaa. Run ahaan taasi wax suuroobi kara ma aha. **maamul dawladeedka** burjuwaasiyadu waa hubka burjuwaasiyadu kula dagaallamayaan kacaanka hantiwadaagga ah, ee maamulkii dulmi jirey dadweynaha, danaha hantigoosadkana daafici jirey, waa kuwii run ahaantii hayey hoggaanka dalka, xiriirka madaxda maamulkaas iyo burjuwaasiyiintii ahaa (Boqorrada iyo Wasiirrada), waxaa ka dhexeeyey xiriir aad u adag oo mid kastaa danaha midka kale daafacayo, sidaas daraaddeed waa gaf weyn haddii la yiraahdo maamul dawladeedkii burjuwaasiyadu ha noqdo maamul dawladeedkii lagu dhisi lahaa hantiwadaagga, daacadna ha u noqdeen.

Waxaa lagama maarmaan ah in la burburiyo maamul dawladeedkii hore ee burjuwaasiga ahaa, marka kacaanku dhasho oo la dhiso mid cusub ee fuliya danaha dadweynaha,

sidaas la'aanteed ma suura geli karto in taliska oo dhami soo galo gacmaha xoogsatada. Micnuhu ma aha in la burburiyo xubnihii dawladdu ka koobnayd oo dhan, burburinta nafteedu waxay ku xiran tahay hadba xaaladda taariikhiga ah ee dal kastaa ku jiro. Waxaa loo baahan yahay in la burburiyo kuwii dadka cadaadin jirey, kala qaybin jirey. Intii Marks iyo Engels noolaayeen taariikhda waxaa soo maray hal mitaal kaasoo ahaa Komuunkii Baariis, mitaalkii labaad wuxuu noqday Kacaankii Oktoobar ee hantiwadaagga ahaa (Midowga Soofiyeeti), dhisayna diktaatuuriyad broletaariyaad oo leh qaab talis Soofiyeeti. Kacaankii Oktoobar, wuxuu kala caddeeyey xiriirka u dhexeeya «co-relation» waajibaadka kacaanka broletaariyaadka ee ku saabsan duminta taliska hantigoosadka iyo waajibaadkiisa dhisitaan talis hantiwadaaga.

Kacaannada burjuwaasiga ah, waajibka dadweynaha waxa ugu weyn oo kaalintoodu noqotaa in ay habkii hore dumiyaan, kacaanka hantiwadaagga ahise, wuxuu dadweynaha u horseedayaa oo siinayaa xoogsatada awood ay si firfircoon ugaga qaybqaataan in ay iyagu dhisaan bulsho cusub, arrintaas oo markii ay suuragashay burisey fikradihii cadawga xoogsatada ee dhici jirey shaqaalaha iyo beeraleydu talis way burburin karaan, laakiinse talis ma dhisi karaan.

Marka xoogsatadu taliska siyaasadda la wareegto waxaa uu suura gelinayaa:

1. In la tirtiro isku dul noolaashaha.

2. In la tirtiro sababaha keenaya dabaqadaha ee abuuraya in qof qof ku kor-noolaado.

3. In la hantiwadaageeyo giddi dhaqaalaha iyo dhaqanka bulshada.

4. In la mideeyo xoogsatada oo si wadajir ah ay u dhisaan hantiwadaagga iyo xisbigooda.

**KACAANKA SOOMAALIYEED WUXUU U HORSEEDAYAA :**

1. In dhaqaalaha dalka dadweynuhu yeesho.

2. In beeraha loo habeeyo si tacab wadaag ah oo ah danta beeraleyda Soomaaliyeed.

3. In dhulku noqdo dhul tacbatadu leeyahay.

4. In la dhiso bulsho Soomaaliyeed oo ku dhisan shaqo iyo caddaalad.

5. In shanta Soomaaliyeed la mideeyo.

6. In musuqmaasuqa, eexashada iyo qabiilka la tirtiro.

7. In gaajada, cudurka, aqoondarrida Soomaaliya laga suuliyo.

8. In dadka Soomaaliyeed nabadgelyadooda iyo xasilloonaantooda laga shaqeeyo.

9. In magaca iyo sharafta ummadda Soomaaliyeed kor loo qaado.

10. In siyaasad dibadeed dhexdhexaad ah oo xaqa aan ka gabban la raaco.

11. In gumeysiga, imberyaaliyadda, midabtakoorka iyo sahyuuniyadda lala diriro.

12. In dhaqdhaqaaqyada xornimadoonka ah gacan la siiyo.

13. In xiriir wadajir iyo iskaashi ku dhisan lala yeesho dalalka aannu walaalaha nahay, kuwa horusocodka ah iyo dalalka hantiwadaagga ah.

Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu si joogto ah uga shaqeeyaa qorshihii lagu dhisi lahaa bulsho Soomaaliyeed oo hantiwadaag ah oo ay ka mid yihiin :

1. Sidii dalka loo warshadayn lahaa, oo ah asaaskii dhaqaalaha hantiwadaagga suurana gelinaysa in daafaca dalku xoogoobo.

2. In la barbaariyo tacabwadaagga hantiwadaagnimada ah ee beeraleyda oo ku dhisan ninkii raba inuu ka qayb galo.

3. In tacabka beeraha loo abuuro warshado ku yaal meelaha beeruhu yihiin.

4. In si aan xad lahayn oo isdabajoog ah loo hirgeliyo

kacaan aqooneed oo kor u qaada garaadka siyaasadda, aqoonta iyo dhaqanka dadweynaha.

5. Hoggaaminta bulshada Soomaaliyeed oo cilmi asaas looga dhigo.

## 3. WAAGA CUSUB IYO KACAANNADA ADDUUNKA : WAXYAABAHA ASAASKA U AH ISKA HORIMAADKA WAAGA CUSUB.

Waagan cusub waxaa bilowgiisii dhigay kacaankii weynaa ee Oktoobar ee ka curtay Midowga Soofiyeeti.

Waa (casri) waxaa lagu micneeyaa waqtiyada muhiimka u ah barbaarinta guud ee aadamiga ee keena in taariikhda adduunka loo kala qaybiyo wa'a wa'a (casri-casri).

Waxa kale oo lagu isticmaalaa ereyga (waa) waqtiyo ay ku soo kordhaan adduunka waxyaalo cusub sida horumarka cilmiga, teknolojiyada, dhaqanka, fanka, waxyaalahaas oo leh ahamiyad gaar ahaaneed (specific field).

Taariikhda marka loo qaybiyo wa'a wa'a (casri-casri), waxay la xiriirtaa isbeddelka iyo barbaarinta dhaqanka, dhaqaalaha, bulshada ee dhalinaya xoogagga tacabka iyo xiriirka tacabka u dhigma iyo dhismaha dhaqanka, siyaasadda iyo ruuxa «spirit» bulshada. Isku micne ma aha dhaqanka dhaqaalaha bulshada (socio-econ. form) iyo wa'a dhinac waqti iyo dhinac jiritaan intaba, dhaqanka dhaqaalaha bulshada dadyowga adduunku wuxuu isbeddelaa waqtiyo kala duwan. Sidaas daraaddeed isla wa'a gudihiis ayaa dadyowga u dhalan karaan qaab cusub, kuwa kalena ku jiri karaan hab bulshadeedkii hore ee gabowga ahaa. Waqtigan hadda la joogo isla hal wa'a ayaa waxa jira laba hab dhaqan-dhaqaalee : Hantiwadaagga iyo hantigoosadka.

Lenin wuxuu yiri: «Wa'a kastaa wuxuu kaga duwan yahay kan kale, hadba dabaqadda ciyaaraysa kaalinta weyn ee taariikhiga ah. Haddii aynu mitaal ahaan u soo qaadanno laga soo bilaabo qarnigii XIXaad barbaarinta hantigoosadku wuxuu ahaa u dallacaankiisii uu u dallacayey heerkiisii ugu

sarreeyey imberyaalisam, kuna tilmaamnayd gacan sarreynta monobooliyada.

Kacaankii Oktoobar ee ka curtay Midowga Soofiyeeti, wuxuu taagay bilowgii waagan cusub, ee ku sifoobay ka guuritaankii min hantigoosad ilaa hantiwadaag, Lenin wuxuu qoray: «waa waagii burburinta hantigoosadka iyo wixii la xiriiray micne taariikheedka iyo nuxda uu leeyahay waqtigan cusub. Waa taagitaanka asaaska habka hantiwadaagga» (Lenin B. 41 B. 425). Xoogga kaalinta weyn ka qaadanaya waagan waa dabaqadda shaqaalaha.

Ka soo go'itaanka dalal kala duwani, ka soo go'ayaan imberyaaliisamka wuxuu qaadanayaa wa'a iska dhan, waayo dalalku isku mar kama soo wada go'ayaan. Waagan cusub ma aha waagii imberyaaliisamku gacanta sare lahaa, inkasta oo uu weli ka taagan yahay adduunka, laakiinse ma aha xoogga gacanta sare leh. Xoogga horusocodka ah ee u horseedaya dabargooyinta imberyaaliisamka iyo dhismaha hantiwadaagga ayaa leh gacanta sare.

Kacaankii Hantiwadaagga ahaa ee Ruusiya wuxuu ahaa bilowgii guusha xoogsatada adduunka oo dhan, taasoo ay dhacday Kacaankii Oktoobar kaddib in boqortooyadii iyo keli tashigii ka taagnaa dalal badan oo Yurub ah uu dhacay ama gilgilmay sidii: Boqortooyadii Jarmalka iyo Storiyo, Hangeeriya, Kacaankii shaqaalaha ee Baafaariya, Hangeeriya iyo Finlaandiya. Dhaqdhaqaaqyo kacaameed ayaa ka bilowday dalal badan. Kacaankii Oktoobar ee Ruusiya wuxuu xoojiyey oo dhiirrin u noqday dhaqdhaqaaqyadii xornimadoonka waddaniga ah ee dalalka Aasiya sida (Shiinaha, Hindiya, iyo Turkiya), Afrika sida (Morooko iyo Masar) iyo Laatiin Ameerika, waxay u muujisay dadyowgii dulmanaa jidkii ay uga bixi lahaayeen addoonnimada gumeystaha.

Dalalka hantigoosadka ah dhaqdhaqaaqyada kacaannimada, waxaa u asaas ah iska horimaadka ka taagan hantigoosadka, laakiinse Kacaankii Oktoobar wuu dedejiyey, yididdiilana u noqday ay ku dhiirri galaan, waxa kale oo kordhay axsaabtii shaqaalaha ee adduunka, 1918-1922, waxaa dhashay ilaa iyo 40 xisbi oo shaqaale.

Lenin wuxuu ka sii faallooday in diktatooriyadda broletaariyaadku ay ku guuleysanayso dalal badan noqonaysana xoog caalami ah oo socodka kacaannimada adduunka gacan ka geysanaya, taas oo ay rumowday markii dagaalkii labaad la jebiyey faashiisamkii Jarmalka iyo Jabbaankii, kacaan hantiwadaag ah ayaa dalal badan ka curtay, kacaannadii gobannimadoonka waddaniga ahaana dalal badan ayey ku guulesteen. Qaadashada hantiwadaagga dalal badan dagaalkii labaad waxaa u sabab ah, halganka shaqaalaha iyo xoogsatada ee dalalkaas.

Kacaankii Oktoobar ee Midowga Soofiyet kaddib waagaa waxaa loo qaybin karaa saddex heer (Qybood) :

1. Kan koowaad wuxuu bilaabmay dhalashadii Kacaanka Oktoobar, wuxuuna ku sifoobaa heerkii dawlad keli ah oo hantiwadaag dhiseysaa jirtey, dawlado cadow u ah oo hantigoosad ahina ku xeersanaayeen.

2. Heerka labaad wuxuu la xiriiray guuleysigii Kacaanka hantiwadaagga ahi ku guulaystay dalal badan oo Yurub iyo Aasiya ah, abuurmayna adduun hantiwadaag ahi.

3. Heerka saddexaad: Tirtiritaanka iyo dabargoynta gumeysiga, dhalashada dawlado badan oo madaxbannaan oo dalal badan oo ka mid ahi qaateen habka hantiwadaagga ku barbaaritaankiisa.

Waagan cusub, nuxdiisu waxay ku urursan tahay, waa waagii laga guurayey hantigoosadka oo loo guurayey hantiwadaag waa, waa' halgan ka dhex taagan yahay laba hab bulsho oo iska soo horjeeda, waa waa' ku sifoobay waagii kacaannada hantiwadaagga iyo kacaannada dhaqdhaqaaqyada xornimadoonka waddaniga ah, hareereynta imberyaalisamka, dabargoynta iyo baabi'inta habka gumeysiga, waagii hantiwadaaggu sameynayey adduunka oo dhan, waagan cusub waxaa gacan sarreynta iyo kaalinta halyeynimada leh dabaqadda xoogsatada adduunweynaha.

**B) WAXYAALAHA ASAASIGA U AH ISKA HORIMAADKA WAAGA CUSUB :**

Guuleysigii uu guuleystay Kacaankii Oktoobar ee ka dhashay Midowga Soofiyeeti iyo kala baxii uu adduunku u

kala baxay laba hab, wuxuu keenay isbeddel ku dhaca dabeecaddii halganka dabaqiga ahayd ee ka socday dalalka hantigoosadka ee burjuwaasiyaddu ka taliso, waxaa ku soo kordhay halgan dabaqi ah oo heer adduun-weyne oo saameeya dhinaca siyaasadda, dhinaca dhaqaalaha iyo dhinaca ideoloojiyada oo ka dhexeeya dawladaha burjuwaasiyaddu u talinayso iyo dawladaha dabaqadda shaqaaluhu abuureen.

Waa' kasta wuxuu leeyahay iska horimaad kala duwan, mitaal ahaan waagan jooga waxaa jira :

1. Iska horimaad ka taagan adduunka hantigoosadka dhexdiisa oo ka dhexeysa shaqaalaha iyo burjuwaasiyadda dalalkaas.

2. Iska horimaad ka dhexeeya dadyowga la gumeysto iyo dalalka imberyaaliyadda ee gumeysta.

3. Iska horimaadka ka dhexeeya dalalka imberyaaliyiinta dhexdooda.

4. Iska horimaadka ka dhexeeya labada hab-bulshado ee adduunka hantigwadaagga iyo hantigoosadka.

5. Iska horimaadka ka dhexeeya dalalka soo koraya iyo dalalka hantigoosadka.

Asaaska iska horimaadka hantigoosadku sidii aynu hore u sheegnay waa tacabka wadajirka lagu dhalinayo ee qof keli ahina hantiyayo (shaqaalaha wax ka tacbaya warshadda oo qof keli ah oo hantigoosadka ahi faa'iidadii qaadanayo isaga oo aan shaqadiina wax ka qaban).

Iska horimaadka ka dhex taagan hantiwadaagga iyo hantigoosadka ayaa barbaarinta adduunku la xiriiraa. Lenin wuxuu diiday kuwii «Bidixda» ahaa, Troskistiyaalkii oran jirey in loo baahan yahay in dawladaha hantiwadaagga ahi dagaal ku qaadaan dalalka hantigoosadka ah, si loo helo adduun hantiwadaag ah. Lenin wuxuu yiri si dhaqdhaqaaqa Kacaannada ee dalalka kale u barbaaraan oo u xoogeystaan, markaasna ula wareegaan taliska dawladda, marka hore waa in dalalka hantiwadaaggu muujiyaan gacan sarrayn iyo horumar ku saabsan dhismaha bulshada ee hantiwadaagga ah. Waa inay u muujiyaan adduunka gacan sarreyn dhinaca dhaqaalaha iyo

karti ay u leeyihiin inay barbaariyaan oo kor u dhigaan tacabka danta guud ee dadweynaha u faa'iido leh.

Lenin wuxuu yiri, «xoogagga xoogsatada dal keli ahi oo ka mid ah dalalka hantigoosadku ma burburin karaan imberyaalisamka, si taasi u suuragasho waxaa loo baahan yahay xoogga xoogsatada adduunka oo dhan ama intooda badan oo isla jira, laakiin burburitaanka uu hantigoosadku dal keli ah ka burburaa, waxay xoog u tahay xoogagga kacaannada ee adduunka, imberyaalisamkana liciifnimo.

Isgarabsi iyo wadajir ka dhexeeya dhaqdhaqaaqyada kacaannada adduunka iyo adduunka hantiwadaaggu waa xaalaadka ugu waaweyn ee dhaliya hantiwadaaggu inuu ka guuleysto hantigoosadka.

Guuleysi kacaan hantiwadaag ahi ku guuleysto dal ama dhowr dal, wuxuu xoojinayaa in kacaan hantiwadaag ah dalalka kale ku guuleysto. Mitaal ahaan markii ugu horreysay ayaa waxaa suurogalay in kacaanno hantiwadaag ahi ku guuleystaan dalal aad u dambeeya ama dhul ahaan u yar, horena aan awood u lahayn inay is-hortaagaan imberyaalisamka markii ugu horreysay ayey suuro gashay in dalal ku jiri jiray gacmaha gumeystayaasha markay madax bannaanaadeen ama kacaan ka curtay in ay hirgeliyaan hantiwadaagga. Markii uu abuurmay habka hantiwadaaggu ayaa xoogaggii kacaannadu yeesheen xoog u noqda tiir adag halgankooda. Waqtiga la joogo arrin kasta oo khuseysa adduunka waxaa la tixgeliyaa, qayb libaaxna ka qaataa adduunka hantiwadaagga. Shaqaalaha adduunka oo ay la duuban yihiin xoogagga horusocodka ah ee ka soo horjeeda imberyaalisamka ayaa u horseedi kara danta guud ee aadamiga, dantaas oo ah hantiwadaagga.

## T) XIRIIRKA KA DHEXEEYA XOOGAGGA KACAANNADA ADDUUNKA EE WAAGA CUSUB

Iska horimaadka waaga cusubi, kuma kala duwana dhinaca wax qabadka oo keli ah ee waxay ku kala duwan yihiin oo kale dhinaca bulshada. Qaarkood waa dhaqdhaqaaqyo kacaan hantiwadaag ah u horseedaya, qaarkoodna waa

dhaqdhaqaaqyo diimuqraadi ah, oo kacaan hantiwadaag ah u gogoldhigaya.

Kacaan hantiwadaag ahi wuxuu ka dhashaa iska horimaadka ka dhex taagan (tacabka iyo maalka) dhaqdhaqaaqyada xornimadoonka waddaniga ahina waxay ka dhashaan iska horimaadka ka dhex taagan imberyaalisamka iyo dadyowga dalalka uu gumeysanayo. Kuwa hore waxay leeyihiin waajib hantiwadaag, kuwa kalena marka hore mid diimuqraadi ah. Su'aal ayaa soo baxaysa, maxay ku noqotay in waaga u guuritaanka hantiwadaagga, dalal badan ay ugu tahay waajiinay gutaan marka hore waajib dimuqraadi ah? Waxay ku noqotay waayo, waagan cusubi ma aha waa dhalinaya hantiwadaag oo keli ah, ee waa waagii burburka hantigoosadka iyo gumeysiga.

Hantigoosadkaas sii dhimanaya iyo gumeysigaas sii dabar go'ayaa, waxay sameynayaan waxyaalo badan oo dimuqraadiyaddii dadyowgaas ku hoos nool baabi'inaysa, khaas ahaan waqtiga hantigoosadku u dallacay imberyaalisam, fikradda Lenin ee ah u dallicidda kacaanka dimuqraadiga ahi u dallacayo Kacaan hantiwadaag ah, waxaa ku sifoobay dalalka dhaqaalahoodu hooseeyo, markaasna ay tahay lagama maarmaan in xilli kala guur (transitional period) ay soo maraan dalalkaasi, taas oo isla markaasna ah hirgelinta hantiwadaagga.

Dalalka dhaqaalahoodu hooseeyo, gumeysigiina sabab u ahaa, waxay awood u leeyihiin waajibna ku ah in aanay raacin habka hantigoosadka, una gacan gelin mar labaad gumeysigii oo huwan shaati kale (Gumeysiga cusub).

Dhalashadii Kacaankii Oktoobar ee Midowga Soofiyeeti iyo abuuritaankii adduunka hantiwadaagga ayaa dhaliyey in dalalkii gumeysiga iyo danaystayaasha ka xoroobay ay suurogal noqotay inay dhisaan bulshooyin hantiwadaag ah.

Haddii waagii imberyaalisamka ay suuragashay in kacaan burjuwaasi diimuqraadi ahi u dallaco kacaan hantiwadaag ah, waagan cusub waa suuragal in kacaannada xornimadoonka waddaniga ahi u dallacaan kacaanno hantiwadaag

ah, (Kacaannadaasi waa kuwo gumeysi dal haysta ama dib-usocod dal ka taagan la diriraya). Suuragalkaas waxaa sii xoojiyey jiritaanka adduunka hantiwadaagga iyo xoogagga kacaanka adduunka ee maalin kasta sii xoogeysanaya.

Qarnigii XIXaad dhammadkiisii dhaqdhaqaaqyada xornimadoonka waddaniga ahi waxay ahaayeen dhaqdhaqaaqyo ka soo horjeeda dhulgoosadkii, waxayna u gogldhigeen barbaarintii hantigoosadka.

Waagan cusub dhaqdhaqaaqyada xornimadoonka waddaniga ahi waxay leeyihiin micne iyo qiime taariikheed oo cusub, waxay yihiin xoog ka mid ah xoogagga kacaannada adduunka, xoogaggaas oo aan ka soo horjeedin imberyaalisamka oo keli ah ee ka soo horjeeda hantigoosadka iyo gumeysiga.

Lenin wuxuu ka hadlay sidii loo heli lahaa mideynta xoogagga kacaannada, taas oo uu yiri waa in la mideeyaa halganka lagula dagaallamayo imberyaalisamka, halkankaas oo broletaariyaadka dalalka hantigoosadka ah ee hore u maray ugu jiraan kacaan hantiwadaag ah, dadyowga gumeysiga ku jiraana ku raadinayaan xornimo waddani ah. Aragtida Lenin ee kacaan hantiwadaag ah oo adduunweyne waxay tilmaamaysaa in kacaannada adduunweynuhu isku cadow keli ah la dagaallamayaan oo la halgamayaan, isla markaasna aanay isku waqtina dalalka ka wada guulaysanayn, kal noocna yihiin. Haddii halganka xoogsatada adduunka hantiwadaagga, shaqaalaha dalalka hntigoosdka iyo dhaqdhaqaaqyada xornimadoonka waddaniga ah la mideeyo waxaa hubaal ah inay suura gelinayso in dadyowga adduunka oo dhammi ka xoroobayaan imberyaalisamka caalamiga ah. Kala qaybintooda iyo iska horkeenkoodu wuxuu gacan iyo cunnri dherer u yahay imberyaalisamka caalamiga ah oo keli ah.

**XOOG KASTA OO XOOGAGGAAS SADDEXDA KA MID AH** :

1. Dadyowga dalalka hantiwadaagga.
2. Shaqaalaha dalalka hantigoosadka.

3. Dadyowga la halgamaya gumeysiga iyo gumeysiga cusub oo u halgamaya xornimo waddani ah oo buuxda.

Wuxuu ku jiraa fulintii kaalintiisii taariikhiga ahayd. Mitaal ahaan habka hantiwadaaggu waxay fuliyaan:

1. Inay tartanka dhaqaalaha kaga guuleystaan habka hantigoosadka.

2. Inay si joogto ah ula halgamaan siyaasadda imberyaalisamka ee hororнimada ah.

3. Inay ku dadaalaan nabadgelyada adduunka.

4. Inay si joogto ah u xoojiyaan oo u taageeraan barbaarinta xoogagga kale ee kacaanka ah.

Laakiin habka hantiwadaaggu ma aha, inuu xooggiisa ku tirtiro hantigoosadka dalalka kale ka taagan, arrintaasi waa waajib xoogagga kacaanka ee dalalkaas gudahooda ka taagan. Sidaas oo kale dhaqdhaqaaqyada xornimadoonka waddaniga ahi waxay liciifinayaan imberyaalisamka, taas oo u ah gacan iyo taakulo dhaqdhaqaaqyada kacaannada dalalka hantigoosadka gudahooda ka taagan, laakiin ka tirtiridda manabooliyada dalalkaas, waxaa awoodi kara oo keli ah dabaqadda shaqaalaha iyo xoogsatada dalalkaas jooga. Isla markaas shaqaalaha dalalka hantigoosadka, iyo dhaqdhaqaaqyada xornimadoonka waddaniga ahi, waxaa u ah tiir ay isku halleyn karaan gacan iyo taageero joogto ahna siinayaan dalalka hantiwadaagga ah. Horukaca iyo guulaha ay gaaraan xoogsatada dawladaha hantiwadaagga ahi ee la xiriira dhismaha ay dhisayaan bulsho cusub waxay u tahay xoogsatada adduunka kale himadgelin iyo isku kalsoonaan inay u dagaallamaan nolol cusub. Taageerada af iyo addinba ah ee dalalka hantiwadaagga ahi siinayaan xoogagga kale, waxay dedejinaysaa ku guuleysiga dadyowgaasi ku guuleysanayaan waajibaadkooda ah xorayn waddani iyo xoreyn bulsho intaba. Barbaarinta socodka kacaannada aduunku waxay ku jirtaa mideynta xoogagga xubnaha kacaannada adduunka oo dhan kuwo hantiwadaag ah iyo kuwo diimuqraadi intaba.

Aragtidaas oo waafaqsan aragtidii Marksism-Leninism, Kacaankii Oktoobar ee ka curtay Ruusiyana dhigay bilowgii,

ulajeeddada weynina tahay in adduunka oo dhammi ku noolaa-do hantiwadaag, ahna hirka weyn ee barbaarinta bulshada aadamiga adduunka.

# MADAXA VI

## KACAANKA XORNIMADOONKA WADDANIGA AH.

Dhaqdhaqaaqa xornimadoonka waddaniga ahi waa qayb ka mid ah dhaqdhaqaaqyada kacaanka adduunka, dhaqdhaqaaqa xornimadoonka waddaniga ahi wuxuu ka kooban yahay dadyowga imberyaalisamku gumeysto, halganna ugu jira sidii ay dalalkooda uga saari lahaayeen gumeysiga, xornimo siyaasi ahna u heli lahaayeen, makaasna u dhisi lahaayeen bulsho ka madaxbannaan dhinac kasta, dhinaca siyaasadda, dhinaca dhaqaalaha iyo dhinaca dhaqanka intaba.

### 1. MEESHA TAARIIKHDA AY KAGA JIRTO DHAQDHAQAAQYADA XORNIMADOONKA WADDANIGA AHI

Imberyaalisamku dhibaatooyinka uu aadamiga u geystay waxa ka mid ah inuu u qaybiyey laba qaybood :

1. Qayb ama gaashaanbuur wax gumeysata oo xaqdarro aadamiga intiisa kale ugu kor nool.

2. Iyo qayb la gumeysto oo ay qaybta hore ku kor nooshahay, xuquuqdoodiina ay qaybtaas hore duudsidey.

1919 tirada dadka adduunka ee gumeysi ku hoos jiray waxay dhammaayeen boqolkiiba 72%, dhulka ballaarkiisuna wuxuu ahaa boqolkiiba 69,4% adduunka. Gumeysi micnihiisu waa dulleyn, ku kor noolaasho, addoonsi iyo xuquuq ka qaadid dadyow aadami ah. Gumeysigii wuxuu Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika ka qaaday xornimadii siyaasiga ahayd, wuxuu dhaawac weyn u geystay dhaqaalihii, siyaasaddii iyo dhaqankii dalalkaas, waxay u noqdeen suuq monobooliyadii dalalka gumeystayaasha.

Dadyowga Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika sida

taariikhdu caddeyneyso ishortaag xoog leh oo ay ku diiddan yihiin in dalalkooda gumeysi qabsado ay ku kaceen (Fiiri madaxa afraad) kaddibna dagaallo qaraar ayey gumeystayaashii ku qaadeen, kumaankun dad ahina ku dhinteen, laakiin nasiibdarro ciidammada cadowga oo ahaa ciidammo nidaami ah iyo hubkooda oo ka heer sarreeyey hubkii dadyowga Afrika iyo Aasiya awgeed, gumeystayaashii waxa u suuragalay inay dalalkii gacanta ku dhigeen, halkaasna waxay bilaabeen gumeysigoodii.

Dhaqdhaqaaqyadii xornimadoonka waddaniga ahaa ee ay wadeen dadyowga Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ma damin, inkasta oo laga libeystey. Waxaa markii dambe tiir iyo taageero u noqday, yididdiilo weynna geliyey :

1. Dhibaatooyinkii uu gumeystuhu u geystay ee ku falay dalalkaas.

2. Guushii Kacaankii Oktoobar iyo hantiwadaagga dhismihiisii ay ku guuleysteen dadka Midowga Soofiyeeti.

3. Waaya-aragnimadii laga helay ummadihii Ruusiya ee Kacaankii Oktoobar ee Midowga Soofiyeeti ka saaray gumeysigii iyo dulmigii ay boqortooyadii Ruusiya ku haysey, (Dalalka Aasiya ee Midowga Soofiyeeti).

4. Burburkii uu burburay faashiisamkii iyo Jabbaankii dagaalkii labaad oo ay guushu raacday Midowga Soofiyeeti, khaas ahaan iyo xulafadii ay wadajireen.

5. Curashadii Kacaan hantiwadaag ahi ka curtay dalal badan oo Yurubta Bari iyo Aasiya.

Qodobbadaas kor ku qoran iyo dhirbaaxooyinkii Kacaanka xornimadoonka waddaniga ahi u geysanayey gumeystayaasha, ayaa dhaliyey in habkii gumeysiga ee adduunka ka taagnaa intiisa badani burburo.

Dagaalkii labaad kaddib waxaa gumeysigii ka xoroobay ilaa iyo 80 (siddeetan) dal.

Mufakiriinta imberyaaliyiintu waxay yiraahdeen, dalalka reer Yurubta Galbeed markii ay reer Aasiya, Afrika iyo

Laatiin Ameerika gaarsiiyeen heer ay dawladnimo dalalkaasi maamusi karaan, ayaa markaas hadiyad ahaan imberyaalisamku u siiyey dadyowgaas xornimo.

Runtuse waxay tahay in dadyowgaasi ay ka qaateen imberyaalisamka xornimadoodii dagaal dheer oo ay la galeen kaddib, oo ay ku muujiyeen geesinnimo, kacaannimo iyo waddaninnimo. Waxaa mitaal ahaan loo soo qaadan karaa Soomaaliya, Fiyatnaam, Kuuriya, Aljeeriya, Kuuba, Moosambiik, Gini Bisaw iyo Angoola.

Waxaa ilaa hadda halgan xornimadoodii ugu jira dalal badan oo adduunka ah sida Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto, Namiibiya, Koonfur Afrika, Falastiin iwm. halgankii dheeraa ee gumeysiga lagu qaaday wuxuu dhaliyey in maanta dhulka gumeysi ku jiraa ee adduunku ka yar yahay 3,5%, tirada dadka adduunka oo dhan.

Xornimada siyaasiga ah ee dadyowgaasi heleen waxay u tahay dalalkaas :

1. Furihii ay ku hagaajin lahaayeen nolosha dadweynahooda.

2. Tirtiridda dib u dhaca bulsho dhaqaaleedka dadyowgaas.

3. Waa awood ay si fiican uga faa'iideysan karaan oo ku maamulaan xoogagga dadkaas faraha badan iyo barwaaqada dhinac kasta ay dalalkaasi leeyihiin.

4. In dadka laga saaro gaajadii, cudurkii, silicii iyo aqoonarradii ay imberyaaliyiintu ku kallifeen, isla markaasna dalalkaas xoroobey waxay ka ciyaaraan arrimaha adduunweynaha kaalin fiican.

## B. KAALINTA IYO DABEECADDA KACAANNADA XORNIMADOONKA WADDANIGA AH

Marks iyo Engels waxay sheegeen xiriirka ka dhexeeya dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka waddaniga ah iyo halganka dabaqiga ah. Waxay caddeeyeen in gumeysigu yahay

wax ka dhashay oo uu keenay sababna uu u yahay hantigoosadku, yahayna danta iyo siyaasadda dabaqadaha wax ku kor nool. Marks iyo Engels waxay sheegeen in broletaariyaadku u yahay cadow wixii gumeysi, dulli iyo kornoolaansho ummadeed ah.**Ma noqon karo xor dad, dad kale gumeysanayaa,** wuxuu noqday hadalhayntii broletaariyaadka ee caalamiga ahayd.

Lenin isaga oo hore u marinaya fikraddii Marks iyo Engels ee ku saabsanayd Kacaannada waddaniga ah wuxuu yiri : «Waaga imberyaalisamka halganka xornimadoonka adduunku wuxuu leeyahay ujeeddo keli ah, taas oo ah in hantigoosadku burburo hantiwadaagguna guuleysto», (halganka broletaariyaadka iyo halganka xornimodoonka waddaniga ahi).

Jaalle Siyaad wuxuu yiri: «**Habka hantiwadaaggu waa hab u horseedaya xornimo, dimuqraadiyad run ah, caddaalad iyo sinnaan, qodobbadaas oo ah kuwa aadamigu u halgamayaan, sidaas daraaddeed waa habka keliya ee Afrika, Aasiya, iyo Laatiin Ameerika ku gaari karaan xornimo buuxda».**

Kacaankii Oktoobar ee Hantiwadaagga ahaa kaddib waxa si fiican u xoogeystey is-garabsigii shaqaalaha adduunka iyo dadyowga u halgama xornimadooda waddaniga ah.

Waxaa soo baxay hal hays oranaya: «**Broletaariyaadka adduunka iyo dadyowga dulmanow isu taga».** Lenin isaga oo sii xoojinaya halhayskaas wuxuu yiri: «**Hadda wixii ka dambeeya ma ahaanayno kuwo u dooda broletaarlyaadka oo keli ah ee waxaa kale ee aanu u doodi doonaa dadyowga dulman ee la gumeysto».** (Lenin B. 42. B. 71).

## T. Kacaanka xornimodoonka waddaniga ahi waa Kacaan ku xiran Kacaannada Hantiwadaagga sababtoo ah :

1. Waa Kacaan ka soo horjeeda imberyaalisamka, dalalka qaarkoodna wuxuu ka soo horjeedaa habka dhulgoosiga iyo hababkii dhulgoosiga ka horreeyey, «Qabiilka iyo reer reerka dalalkaasi ku nool yihiin».

2. Kacaanka xornimodoonka waddaniga ahi uma halgamayo xornimo siyaasadeed oo keli ah, ee wuxuu u horseedaya xornimo dhaqaale, ahna tan keli ee dalalkaasi ku heli karaan xornimo buuxda.

3. Waqtigan la joogo inta Kacaanka xornimodoonka waddaniga ahi socdo, waxa dadyow badani goostaan habkii ay waddammadooda ku barbaarin lahaayeen sida «Moosambiig iyo Angoola», waagii hore waxaa jirey in xornimodoonka waddaniga kaddib dalalku ku barbaari jireen habka hantigoosadka, haddase Kacaannada xornimodoonka waddaniga ahi waxay noqon karaan Kacaanno u horseeda Hantiwadaag. Hadddii hal hab keli ahi jirey oo ah hantigoosad, maanta waxaa suuragal ah laba, **Hantiwadaag ama Hantigoosad.**

## 2. GUMEYSIGA CUSUBI WAA SALDHIGGA SIYAASADDA IMBERYAALISAMKA

Imberyaalisamku wuxuu weli rabaa in Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika ahaadaan Makhaasiinkii uu ka heli lahaa qalabka qaydhiin, suuqii uu alaabta warshadihiisa ka soo baxa u iibgeyn lahaa oo ka heli lahaa malaayiin dollar oo faa'iidada. Isla markaas wuxuu rabaa in dadyowgii dalalkaas u dhashay in ay ku jiraan dhaqaale xumo, gaajo, cudur, aqoon la'aan iyo iyaga oo isugu jeesta qabiil qabiil iyo gobol gobol si ay ugu suura gasho in uu tuubo khayraadka dalalkaas weligiis ku nuugo.

Imberyaalisamku dalalka ku guuleysta xornimadooda waddaniga ah, haddii madax horusocod ahi qabtaan wuxuu kula kacaa: Afgembiyo, soo dhexgal huwan magaca gar-gaar sidii **«Koongo»** laaluush uu laaluusho madaxda, khayaano, dil uu dilo madaxda aan dantiisa wadin, dagaal uu ka dhex rido dadka gudahooda si gobol gobol iyo qabiil qabiil ah, dalalkaas oo uu inta aanay madaxbannaanida helin kala googooyo ama dawladaha ay jaarka yihiin siiyo waax ka mid ah dalka uu gumeysto si dalalkaas jiiraanka ahi colaad joogta ahi uga dhex taagnaato; sida uu ku sameeyey dadka «Soomaaliyeed» ee uu shanta qaybood u kala qaybiyey. Waxa kale oo imberyaalisamku ku dadaalaa in dalalka xooobayaa qaataan habka hantigoosadka. Habkaas, qaabkaas iyo tabtaas imberyaalisam-

ku kula isticmaalayo dadyowga Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika wuxuu ku caan baxay habka (Gumeysiga Cusub). Qaabka ugu muhimsan ee uu isticmaalaa waa dhinaca dhaqaalaha oo uu ku soo gabbado (Taageero dhaqaale), ulajeeddada uu ka leeyahayna ay tahay in dhaqaalaha dalka monobooliyada imebryaalisamku gacanta ku dhigo. Wuxuu kale oo sameeyaa in uu laaluusho madaxda oo gacanta ku hayo, maalqabeennada yar yar oo uu taageero dhaqaale siiyo wakiillana uga dhigo Shirkadaha waaweyn ee monobooliyada. Imberyaaliyiintu waxay u sameeyaan dalalkaas yar yar gaashaanbuuro mileteri oo ulajeeddo siyaasadeed leh, ahna in ay gacan siiyaan Talisyada dibusocodka ah ee ka taagan dalalkaas sida SEATO, NATO, ANZUS iyo kuwo kale.

**B. Xornimo dhaqaale waa waajibka kowaad ee dalalka xoroobay.**

Dalalka ku guuleystay xornimadoodii waddaniga ahayd waxaa la gudboon in ay u halgamaan sidii ay dhaqaalahooda uga xoreyn lahaayeen monobooliga ajnabiga, si ay uga suura gasho horukac dhaqan dhaqaale. Si taasi u suura gasho waxaa loo baahan yahay :

1. In la qaraneeyo lahaanshaha ajnebiga.

2. In la abuuro dhaqaale la yiraahdo waaxda Dawladda uuna noqdo kan ugu gacan sareeya, taas oo keenaysa dhaqaale abuurma iyo aasaas dhaqaaleedkii dalka oo bilaabma.


3. Ganacsiga dibadda oo dawladdu gacanta ku dhigto.

4. Baananka, wershadaha, xiriirka dhulka, badda iyo kan cirka oo la qarameeyo.

Xornimo dhaqaale oo dalku helo waxaa kaalin weyn ka qaata beeraha oo la tacab wadaageeyo iyo reer miyiga oo la dejiyo, taasi waxay dhalanaysaa:

1. Dhulka oo uu yeesho ninkii ka shaqaynayey.

dhaqdhaqaaqyada
xornimodoonka
adduunka.




Brcletaariyaadka adduunkow iyo dadyowga dulmanow isu taga

«V.I. Lenin».

Dhaqdhaqaaqyada xornimo doonka adduunku waa xoog ka mid ah xoogagga Kacaanada adduunka.

2. Beeraleyda oo aqoontooda, tacabkooda iyo garaadkooda siyaasiga kor loo dhigo.

3. Qalabka beeraha ee cusub oo beeraleyda la siiyo.

4. Dulliga la xiriira dhulgoosi-nimada iyo reer reerka oo laga saaro dhulka.

5. Nolosha dadka xooladhaqatada, nolosha xoolahooda iyo wax ka dheefkooda oo kor u kaca.

Beeraha oo la tacab wadaageeyaa, waxay abuurayaan sidii loogu gudbi lahaa hab hantiwadaag. Qodobadaas aan kor ku sheegnay waxay isla markaasna yihiin kuwo u gogol xaadhaya in bulsho hantiwadaag ahi dhalato, kalana baxsanaya in dalku hantigoosad ku barbaaro, madaxbannaani dhaqaale oo la helaa waxay keeneysaa qaab dhaqaaleedkii hoose ee yar yaraa ee badnaa oo tirtirma, beddelkoodiina uu ku abuurmo dhaqaale waddani ah oo waaxo waaweyn u kala baxa, isla markaasna waxaa lagama maarmaan ah in la jebiyo maamulkii laga dhaxlay gumeystaha (Colonial administrative system) oo maamulka loo dhiibo dad maskaxda madaxda horusocodka ahi ku shaqayneyso qaba, ahna dad dadka ka soo dhex baxay, ogna wixii dadku doonayo, heeganna u ah, dibusocodka oo la curyaamiyo, bulshada oo ururro loo sameeyo sida ururrada shaqaalaha, beeraleyda, dhallinyarada dumarka iwm., dadka oo dhaqaalahooda kor loo qaado, caafimaadkooda iyo tacliintooda. Waxaa kale oo ah lagama maarmaan dalalka xoroobey oo si kar karnimo (Active) halgan joogta ah imberyaalisamka ula dagaallama, siyaasad dibadeed imberyaalismka lid ku ah hirgeliyaan, gacan joogto ahna siiya dadyowga xornimadooda u halgamaya, iskaashi la yeesha xoogagga Kacaannada ee adduunka, midnimada waddaniga ahna xoojiyaan.

Qodobbadaas kor aan ku soo sheegay waxa waaya-aragnimo iyo mitaal u noqon kara Kacaanka Soomaaliyeed (akhri xaashida kowaad iyo tan labaad ee Kacaankii Oktoobar iyo Go'aannadii Golaha Sare ee Kacaanka). Midhihii Kacaankii 21ka Oktoobar waxaa ka mid ah:

1. 21kii Oktoobar 1969kii: Dhalashadii Kacaanka.

2. 7dii Maajo 1970kii: Qarameyntii Warshadaha iyo Bankiyada.

3. 27kii Maajo 1970kii: Abuuristii Wakiillada Shaqaalaha.

4. 21kii Oktoobar 1970kii: Ku dhawaaqii Hantiwadaagga.

5. 22kii Luuliyo 1971kii: La wareeggii iibinta iyo qaybinta Galleyda iyo Meseggada.

6. 7dii Agoosto 1971kii: Abuuristii Wasaaradda Shaqada iyo Cayaaraha.

7. 29kii Diisember 1917kii: Abuuristii Xariiriyayaasha Shaqaalaha ee Wasaaradda.

8. 11kii Jannaayo 1972kii: Xeerkii lagu ekeynayey laguna kormeerayey sicirka badeecadaha.

9. 2dii Maarso 1972kii: Xeerkii Shaqaalaha Dawladda ka wada dhigayey shaqaale joogta ah.

10. 21kii Oktoobar 1972kii: Qoristii Af Soomaaliga.

11. 17kii Sebtember 1972kii: 25kii Qodob.

12. 21kii Luuliyo 1973kii Sharciga Iskaashatooyinka.

13. 24kii Luuliyo 1973kii: Dhismihii Guddiyada Shaqaalaha.

14. 27kii Noofember 1973kii: Sharcigii kirada guryaha lam. 44.

15. 7dii Febraayo 1974kii: Ku biirkii Ururka Carabta.

16. 16kii Maarso 1974kii: La wareegiddii maamulka Maraakiibta.

17. 1dii Maajo 1974kii: Ballaarinta sharciga hawlgalka go'aankii waxbarashada khasabka ilaa dugsiga dhexe.

18. 1dii Agoosto 1974kii: Hirgelinta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga ururinta iyo dejinta.

19. 11kii Jannaayo 1975kii: Sinnaanta Ragga iyo Haweenka.

20. 7dii Febraayo 1975kii: Hirgelinta tirakoobka.

## T. HAB DOORASHADA DALALKA XOROOBEY

Dalalkii Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika markii ay gumeysiga ka xoroobeen waxa ka hor yimid su'aal oranaysa, habkee ayaa dalalkaas ku habboon oo gaarsiin kara xornimo buuxda dhinac kasta? Waxaa dhacday in dalalkaas intooba badan ay taliskii siyaasadda gacanta ku dhigeen dad ka mid ah dadyowgii dalka, oo aan lahayn aqoon fiican ama dhaqan, tacliin iyo fikrad hantigoosad ama gumeysigii ku abaabiyey qaba.

Waxaa kale oo dalalka qaarkood qabsaday taliskii dad dibusocod ah oo dabadhilif u ah imberyaaliyiinta, gumeystayaashiina gacanta u geliyeen taliskii dalka, si ay ugu gaadhaan danahooda, si dalalkaas, xoroobey ay u ahaadaan kuwo gacanta ugu jira monobooliyada gumeysiga oo uu halyey u yahay imberyaalisamka Ameerika (USA). Haddii ay dhacdo in dalalkaas xornimada kaddib dad horusocod ahi gacanta ku dhigaan taliska dawladda, imberyaalisamku wuxuu kula kacaa tallaabooyin uu ku suuragelinayo in dad dabadhilif u ahi dawladda qabtaan.

Imberyaalisamku wuxuu ku dadaalaa in uu u horseedo dalalka madaxbannaanaaday in ay qaataan habka hantigoosadka si uu u gaaro ulajeeddooyinkiisa markaasna ay dalalkaas ka dhacdo :

1. Dhaqaalaha oo aan hore u marin.
2. Gaajada, cudurka iyo aqoondarrida oo badata.
3. Sinnaan la'aan oo bulshadu ku barbaarto.
4. Shaqa la'aanta oo badata.
5. Maalqabeenka yar yar oo u tartama maal badsi.
6. Beeraleyda oo ku noolaata nolol hoose, laguna kor noolaado.
7. Maamulka dalka oo biiruqraadinnimo lagu maamulo.

8. Dhaqaalaha dalka oo laga tago, oo hoos u dhaca.

9. Hantida dalka oo la musumaasaqo.

10. Qarannimada dalka oo halis gasha.

11. Dadka dalka oo adduun-arag kala duwan yeesha.

12. Bulshada oo dabaqaad isku kor nool yeelata.

13. Xeerka dalka oo lagu tunto.

14. Axsaab ku sheeg badan oo dalka ka furma, badankooduna u qabaanaya ajnebi iyo daneystayaal.

Taas oo keenta in himilooyinkii dadku ka lahaa xornimadii ay u soo halgamayeen in ay waayaan, marka dadweynuhu isku dayo in uu ka gilgisho, dhibaatooyinkaasna dibusocodka taliska haystaa ay dadka ciriiri kula kacaan iyo siyaasaddii gumeystayaasha (qaybi oo xukun). Dalalkaas dhibaatooyinkaas soo maray waxaa ka mid ah Soomaaliya dalal kale oo badanina ilaa iyo maanta qaarkood ku jiraan. Waxa lagama maarmaan noqday in dadweynuhu halgan la galo dibusocodka iyo danaystayaasha taliska dalka haysta si ay u suura gasho in ay xaqiijiyaan himilooyinkii ay xornimada ka lahaayeen, dhibaatooyinkana uga baxaan, una dhisaan talis siyaasadeed oo dadku leeyahay.

Ummadda Soomaaliyeed markii waqti dheer dibusocod iyo danaystayaal u talinayeen (1960-1969), ayaa waxaa u curtay Kacaankii 21kii Oktoobar ee Hantiwadaagga u horseedayey. Habkaas oo ah kan keli ah ee suura gelin kara in bulshadu kaga baxdo gaajada, cudurka, shaqo la'aanta aqoondarrida iyo qarannimo xumida, mitaal cadna ay u tahay intii Kacaanku jirey.

Dalalkaas Soomaaliya, Koongo «Brazavil», Birma, Gini, Moosambiik, iyo Gini Bisaw ay ka mid yihiin qaarkood waxaa hantiwadaagga ay qaateen ama markii Kacaankii xornimadoonka ahaa sida «Gini» ay ku guuleysteen, ama kaddib markii Kacaan dadweynuhu ku rideen dibusocodkii iyo danaystayaashii waddanka horseedna ay u ahaayeen ciidammada qalabka sida oo ay hoggaaminayeen saraakiil horseed ahi sida (Soomaaliya iyo Koongo), taasina ay la xiriirto xaalad taarii-

kheedka iyo heerka bulshooyinkaasi marayeen waqtigaas iyo xaalaadkii objektifka iyo subjektifka ahaa ee dalalkaasi lahaayeen.

## DOORASHADA HABKA HANTIWADAAGGA.

Habka hantiwadaaggu wuxuu dadka dalalka xoroobey ka badbaadiyaa dhibaatooyinkaas faraha badan ee aan kor ku soo sheegnay suurana gelinaaya dhaqaale degdeg ah oo kor u kac ah :

Marks iyo Engels waxay tilmaameen in ay suuragal tahay in dalalka gumeysiga ka xoroobay u gudbi karaan hantiwadaag, iyagoo waqti kala guur ah mara, Lenin wuxuu hore u dhigay fikraddii Marks iyo Engels oo yiri: **Dalalkii gumeysiga ka xoroobay waxay u gudbi karaan hantiwadaag iyaga oo aan heerka hantigoosadka soo marin haddii ay gacan ka helaan dalalka hantiwadaagga»,** si run ahna waxay taasi uga hirgashay dalalkii aad u dambeeyey ee Midowga Soofiyeeti ee reer Aasiya oo maanta ah dalal hantiwadaag sanaaci iyo beeraley ah iyo dalka Mongooliya.

Hantigoosadka waxaa ka dhex bislaada gogoldhiggii dhalashada hantiwadaagga oo ku yimaada si ku tala gal aan ahayn, haddiise dalalka xoroobey ay doortaan jidka hantiwadaagga waxaa si ku tala gal iyo aqoon ku fadhiisin ah oo la qorsheeyey u abuurma inta xilliga kala guurka lagu jiro waxyaalihii gundhigga u noqonayey dhismaha hantiwadaagga sida :

1. Waxaa abuurma xoogagga tacabka oo ka abuurma Warshadaha iyo Beeraha.

2. Waxaa abuurma dhaqaale waddani ah.

3. Waxaa bata tirada shaqaalaha iyo kaalintooda bulshada ay ka cayaaraan.

4. Waxaa xoogeysma habka hantiwadaagga cilmiga ah.

5. Waxaa abuurma aqoonyahaanno dadka ka soo dhex baxa.

6. Waxaa xoogeysta, midnimada iyo qarannimada Ummadda.

7. Waxaa barbaara dhaqanka dalka.

8. Waxaa kordha garaadka siyaasiga ah ee bulshada.

Isla markaas waxaa tirtirma caadaadkii laga dhaxlay gumeystaha iyo dulligii hore; dhaqanka dhaqaalaha iyo dhaqanka bulshada cusubna waxaa ka abuurma xididdadii ummadnimada. Waxaas oo isbeddel ahi waxay u qabbaanayaan in ay dhisanto bulsho hantiwadaag ahi brograamkiisana waxaa lagu hirgeliyaa waqtiga kala guurka ee u dhexeeya xornimada siyaasiga ah iyo u gudubka dhismaha hantiwadaagga.

Doorashada jidka hantiwadaagga ee dalalkaas madaxa bannaanaaday waxaa suura gelinaya :

1. Imberyaalisamka oo ay maalinba maalinta ka dambeysa sii liciifaya iyo runtii habka hantigoosadka oo soo baxaysa.

2. Dalalka hantiwadaagga oo dhinac kasta hore uga maraya.

3. Taageero dhinac kasta ah oo dalalka hantiwadaaggu siinayaan dalalka xoroobey.

4. Dalalkii jidka hantiwadaagga doortay oo horukac deg deg ah gaadhay.

5. Isgarabsiga iyo xiriirka Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika oo xoogeystay.

6. Garaadka siyaasiga ah ee xoogsatada oo heer wacan gaaray.

7. Habka hantigoosadka oo indhihii dadweynaha hoos ugu dhacay.

Hab doorashada dalalkaas xoroobey wuxuu ku yimaadaa halgan dabaqi ah oo xoog leh; dibusocodka iyo burjuwaasiyiinta dalalkaas gudahooda ku jiraa ma oggolaadaan horukac dalalkaas ka socda; imberyaalisamkuna iyaga ayuu ku qabaantaa si uu talisyada horusocodka ah u kufiyo.

Dalal badan ayaa jidka hantiwadaagga maanta qaatay oo himleysanaya in ay dhisaan bulsho hantiwadiig ah; Soomaaliya, Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Koonfur Yaman, Birma, Koongo (Baraasafiil), Gini, Gini Bisaw, Moosambiig iyo Angoola.

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya waxaa suura galay in la tirtiro monobooligii imberyaaliisamka, waxaa la abuuray waaxdii dhaqaalaha waddanka, waxaa la tirtiray waxlahaanshihii ajnabiga, isla markaasna waxaa la barbaarinayaa wixii wax lahaansha gaar ahaaneed waddani ah, qaybna ka qaadanaya horumarinta dhaqaalaha, dhinaca beeraha, waxaa la abuuray iskaashatooyin dawladdu gacan joogto ah siiso, waxaa la sameeyey xeerar la socda heerka bulshadu marayso iyo himilooyinka ay tiigsanayso oo suura gelinaya bulsho ku dhisan caddaalad iyo shaqo. Waxaa xoogoobay oo kor u kacay garaadkii siyaasiga ee xoogsatada.

Waxaa JDS, ay hirgelinaysaa siyaasad dibadeed ka soo horjeedda imberyaalisamka, midabtakoorka iyo dagaalka, gacan iyo isgarabsina la sameyneyso dalalka hantiwadaagga ah iyo dalalka horusocodka ah, waxay gacan joogto ah, JDS, siisaa dadyowga weli ku jira gumeysiga ee Afrika iyo adduunweynaha.

Imberyaalisamka iyo dibusocodku weli kama daalin inay kufiyaan siyaasadda kacaannimada ah ee Soomaaliya iyo dalalka kale ee aan kor ku soo sheegnay, kuna soo celiyaan habkii higsanayey hantigoosadka ee Soomaaliya u bixiyey Kacaanka ka hor **«Qabrigii mucaawinada»**, waxaa waayo'aragnimadu tustay in kor u qaadidda dhaqaalaha dadka dalka iyo tirtiridda raadadkii gumeysiga ay suura gelin karaan dadka dal kastaa leeyahay, isaga oo halkaas ka hadlaya wuxuu Jaalle Siyaad yiri: **«Dalkeennu waa hodan iyo barwaaqo, wax kastaana waa ku jiraan, waa in aynu isku kalsoonaanaa oo nafteenna iyo dhulkeenna aaminnaa oo ka shaqaysannaa».**

**Buugga «Dalkayga iyo Dadkayga» Q/3.**

Horumarka Soomaaliya gaadhay intii Kacaankeedu habka hantiwadaagga hirgelinayey oo la garab dhigo sagaalkii

(9) sannadood ee jahawareerka iyo hantigoosadnimada Soomaaliya ku barbaaraysay wuxuu dalalka Afrika u yahay mitaal cad in hantigoosad ku dhaqanku yahay dembi taariikhda iyo dalka laga galayo, hantiwadaagguna yahay habka keli ah ee dalalka adduunka saddexaad gaarsiin kara qarannimo buuxda iyo midnimo.

## j) DHISMAHA DHAQAALAHA (SOCIO-ECONOMICAL STRUCTURE) DALALKA SOO KORAYA.

Xiriirka tacabka ee dalalka soo koraya aad ayuu u kala duwan yahay oo u adag yahay. Dalalka soo koraya waxaa laga heli karaa qaababkii xiriirka dhaqaalaha ee adduunku ilaa iyo imminka soo maray oo dhan, laga billaabo kii ku dhisnaa jilib-jilibka, qabiilka ilaa iyo kan cusub ee lagu yaqaanno hantigoosadka.

### 1. Dhaqaale wadaag (Communal Economy):

Xiriirkaas dhaqaale waxaa weli laga heli karaa dalalka soo koraya ee Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika, sababna uu u yahay jiritaanka gobollo ka mid ahi ay weli ku jiraan dalalkaas **noloshii bilowga bulshada aadamiga.** Wax lahaanshuhu wuxuu ku dhisan yahay wax wada lahaansho sida dhulka, si wadajir ahna loo wada xoogsado, qayb simanna wax lagu qaybsado.

### 2. Dhaqaale Beeraley dabiici ah (Natural Agricultural Economy).

Waa qaab dhaqaale kooban, oo aan xiriir wax geditaan la lahayn suuqa, wax tacabkaas waxaa u asaasa kelinnimo, qalabka wax tacabkuna waa hanti gaar ahaaneed, dhulku waa hanti uu leeyahay dhulgoosadku, dadka beeranayaana ama ka kireystaan dhulgoosadyada ama ka amaahdaan.

### 3. Dhaqaale ku dhisan waxtacab ama lahaansho yaryar (Small-scale commodity production).

Waxaa u badan beeraley iyo farsamayaqaan «handicrafts», qalabka wax tacabku yahay hanti gaar ahaaneed, wax

tacabkuna keli ahaan yahay, laakiinse waxaa uu kaga duwan yahay dhaqaalaha dabiiciga wuxuu la leeyahay suuqa xiriir ganacsi ay tacabkooda ka gataan. Waxaa dhaqaalaha jaadkaas ah ku sifoobi karaa oo kale xooladhaqatada.

**4. Hantigoosad waddani ah (National Capitalists).**

Dhaqaalaha noocaas ah waxa u asaasa wax lahaansho gaar ahaaneed iyo dad bulshada ka mid ah oo lagu kor-noolaado. Dalal badan oo dalalka soo korayaa, hantigoosadka waddaniga ahi waxaa soo dhex galay oo xiriir ka dhexeeyaa manabooliyadda caalamiga ah, iyo hantigoosatada dalalkaas oo u badan Aasiya iyo Laatiin Ameerika.

**5. Dhaqaale ajnabi (Foreign capital).**

Dawladaha hantigoosadka iyo monobooliyadda adduunku, dalal badan oo soo koraya waxay gacanta ku dhigeen furayaashii dhaqaalaha ee dalalkaas, waxay ka helaan faa'iidooyin aad u badan, sababtuna ay tahay dadyowga dalalkaas oo ay aad u dulleystaan oo u dhiig miirtaan dhinaca dhaqaalaha, arrintaasina waxay dalalkaas dhaxalsiisay in aanay madaxbannaani dhaqaale helin.

**6. Hantigoosad dawladeed (State Capitalism) ama Waaxda Dawladda ee dhaqaalaha dalalka soo koraya.**

Dhaqaalaha jaadkaas ahi wuxuu dhashaaa marka dawladdu qaranayso hantida ajnabiga, monobooliyadda komnroodooriyiinta iyo burjuwaasiyiintu lahaayeen ama iyada oo dawladdu dhaqaale ay gacanta ku hayso dhisto.

Dalalka soo koraya dhaqaalaha jaadkaas ahi haddii dalku dal horusocod ah yahay, kaalin weyn ayuu ka ciyaaraa inuu noqdo mid lagula dagaallamo imberyaaliyadda iyo dibusocodka.

Dalalka soo koraya, waxay ku kala jiraan heerar taariikheed oo kala duwan; dawlad kastaa waxay leedahay waxyaalo u gaar ah iyo qaab dhaqaale oo kala duwan. Dalalka soo koraya ee hirgelinaya hantiwadaagga waxaa asaaskooda dha-

qaaluhu yahay mid ah hanti dawladeed, iyo mid ku dhisan tacab wadaag. Dhaqaalaha dalalkaasi wuxuu la socdaa oo u dhigmaa, hadba dhismaha bulshadu sida ay tahay oo iyana aad u kala duwan, kana kooban dabaqado iyo xubno «strat» kala jaada.

Dalal badan oo dalalkaas ka mid ah, dabaqadaha shaqaaluhu weli waa wax yar, lana xiriira wax tacabka yar-yar ee kooban, badankooduna ma leh ururro siyaasi ah, tiradooda baditaankeeda iyo garaadkooda siyaasadduba wuxuu la xiriiraa hadba hore u kaca warshadaha waddanku sameeyaan, isla markaasna kama abuurmin xiriir dhaqaale oo hantigoosad, sidaas daraaddeed burjuwaasiyaddii dalalkaas kama abuurmin. Dalalkaas kaalin ballaaran waxaa ka ciyaara nolosha bulshada xubnaha dhexe «Middle Strata» sida ganacsatada yar-yar, aqoonyahannada «saraakiisha ciidammada» farsamo-yaqaannada iyo shaqaalaha xafiisyada dawladda «Civil servants», kuwaas oo dabaqo ahaan aad ay isugu dhaw yihiin dabaqadda shaqaalaha, kaalin weynna ka qaata dhaqdhaqaaqyada hore u socodnimada. Waxaa kale oo kaalin weyn dalalka soo koraya ka ciyaara ciidammada qalabka sida.

Had iyo goor ulajeeddooyinka iyo waajibaadka ciidammadu waxay la xiraaraan dabeecada dhismaha bulshada iyo dawladdu leedahay, saamigalka dabaqadaha iyo xooggagga siyaasadda ee taagan iyo heerka barbaaritaanka dhaqdhaqaaqyada xornimo-doonka waddaniga ah. Dalalka hantiwadaagga hirgelinaya ee ay taliska gacanta ku hayaan dad hore u socoda oo dimuqraadiyiin ahi, xiriir adagna la leh dabaqadaha shaqaalaha, beeraleyda, aqoon-yahannada hore-u-socodka ah iyo ganacsatada yar-yar, ciidammadu ma aha oo keli ah kuwo ku bannaan in ay daafacaan gobannimada dalkaas dhinaca dibedda oo keli ah, ee waxay kale oo noqdaan, waajibna ku ah in ay noqdaan xoog diyaar u ah inuu dagaal la galo dibusocodka dibedda iyo gudaha intaba.

Waxay noqdaan markaas, xoog lid ku ah imberyaalisamka, dhulgoosiga, hantigoosadka iyo wixii kala geynaya midnimada ummadda inkasta oo ay dhici karto in imberyaaliyiintu soo foodsaaraan dad ciidammada dalalkaas madax

u ah oo dibusocod ah, markaasna ay ku adeegtaan sidii ka dhacday dalka Jili 1973 iyo dalka Gaana ee waqtigii Kuwame Nkrume ciidammadu afgembiyeen 1966. Haddiise taliska ay gacanta ku dhigaan dad dibusocod ah, gobannimada kaddib, oo u qabbaanaya gumeysiga cusub, imberyaaliyiinta iyo monobooliyada, badanaaba dibusocodyada iyo imberyaaliyiintu waxay ku dadaalaan in ciidammadu noqdaan kuwo u adeega danta madaxda dalka ee dibusocodka ah, waxaase dhici kara in ciidammada qalabka sidaa u noqdaan dalka markaas oo kale gargaar, oo uga gargaaraan dibusocodyada, markaasna taagaan talis dimuqraadi ah oo kacaana, danta dadweynaha khaas ahaan u qabanaya. Kaalinta hore u socodnimada iyo dibusocodnimada ciidammada qalabka sida ee dalalka soo korayaa waxay la xiriirtaa:

1. Heerka waddaninimada, kacaannimada iyo bislaanshaha siyaasiga ah ee ciidammada, khaas ahaan madaxda ciidammada «Saraakiisha»;

2. Hadba dabaqadaha ay ka soo jeedaan oo ka kooban yihiin dadka ciidammada qalabka sidaa, khaas ahaan saraakiishu;

3. Sida dadka ciidammada ka tirsani xiriir ula lahaayeen xoogsatada iyo sida xiriirkaasi u adkaaday;

4. Hadba ciidammadu dalalka ay xiriir milleteri la leeyihiin, haddii ay yihiin ciidammada dalalka hantiwadaagga ama kuwa hantigoosadka;

5. Siyaabaha darxumada iyo silica dalka ka taagani u taabto run ahaan dadka ciidammada ka tirsan.

6. Xiriirka iyo saameynta axsaabta horusocodka ama dibusocodka ee dalalkaasi ku leeyihiin ciidammada.

## X) ULAJEEDDADA MIDEYNTA BULSHADA EE DALALKA SOO KORAYA.

Dalalka madaxbannaanidooda u halgamaya, gumeysiga iyo dibusocodka gudaha ee dalalkaasi, **waa waxyaalaha u ah gundhig** ee dhalinaya in halganka dadyowgaasi u horseedo horukac bulsho. Midnimo waddani ah micnaheedu waa midnima-

da xoogagga bulshada iyo siyaasada ummadda, awoodna u leh in ay ka qaataan kaalin weyn oo horusocod ah barbaarinta kacaanka.

Xaalaadka iyo heerarka halganka xornimo-doonka dalalku waa kala duwan yahay, isla markaasna waajibaadka iyo qaabka xoogaggu way kala duwan yihiin.

Inta gumeysiga lagula jiro halganka, xoogagga bulshadu dabaqad kasta ha ahaadeene way ka qeyb galaan halganka xornimo-doonka waddaniga ah, inkasta oo ay jiri karaan dad danaystayaal ah oo dano shaqsi ah iyo wax la xiriira qabiil ama goboleysi ay jiri karaan, markaasna isku daya in ay gobol gobollada ka mid ah dalka goostaan sida haddaba ka taagan Angoola. Marka dalku xoroobo ee gumeysiga laga saaro halganka xoogagga bulshada mideeyaa waa isbeddel kacaannimo oo dalka laga hirgeliyo, xoogaggaas oo ay ka mid yihiin shaqaalaha, beeraleyda, aqoonyahannada horusocodka ah, burjuwaasiyadda yar-yar ee magaalada, ciidammada qalabka sida ee waddaniga ah iyo qayb ka mid ah burjuwaasiyadda waddaniga ah. Dawladahaas xoroobey waxay ku sifoobaan, dawlado ka soo horjeeda imberyaalisamka iyo gumeysiga dabeecad dimuqraadi ah oo horusocodna leh, dawladahaas badankoodu waxay qaataan hirgelinta habka hantiwadaagga, asaaska dhaqaalaha ee dawladduna wuxuu noqdaa waaxda dawladdu ka maamuleyso dhaqaalaha dalka, tacab wadaag laga hirgeliyo magaalada (Warshadaha yar-yar) iyo miyiga (beeraha iyo xoolaha) intaba, asaaska bulshaduna waa wadajir dadweyne oo ka kooban shaqaale, beeraley, burjuwaasiyadda yar-yar, aqoon-yahannada horusocodka ah, iyo ciidammada waddaniga ah, asaaska siyaasadduna waa imberyaalisam iyo gumeysi in lala diriro iyo xoogagga waddaniga oo wadajira, diyaarna u ah in ay kacaanka ka daafacaan cadowga dibedda iyo kan gudaha intaba, si deg-deg ahna dhaqaalaha dalka loo hormariyo, si taasi u suura-gasho waa in la helaa:

1. Midnimada dadka oo heer sare joogta.

2. Maamulayaasha Xafiisyada dawladda (Civil servants) oo si joogta ah u hirgeliya kacaanka himilooyinkiisa.

3. Taageero dhinac kasta ah oo laga helo dibedda, dalalka hantiwadaagga ah, loona isticmaalo si faa'iido u ah dadka.

Waxyaalaha ugu waaweyn ee midnimada dadka kala kexeeya, dhaliyana in imberyaalisamku ka faa'iideysto oo qarannimo xumo timaado waa caddaaladdarro lagu maamulo daw ladda salkana ku haysa qabyaalad, gobol-gobol iyo nin jecleysi, markaasna ay dawladdu u ekaato oo loo nisbiyo mid daryeeleysa dano qabiil ama gobol ama dad yar danahooda. Sababahaas waxa dhalinaya waa dalalka soo koraya, oo badankooda weli si fiican dabaqad shaqaale u abuurmin, kuna jiraan dalalkaasi hababkii ka horreeyey habkii hantigoosadka iyo raadkii gumeysiga oo aan weli baabi'in.

Waxaa markaasna dhasha in dawladdu noqon weydo mid himilooyinkii dadweynuhu xornimadooda ka lahaa fulin kari weydo, midnimadii dadweynuhu lahaana lumisa, markaasna gumeysiga cusubi helo awood uu dalalkaas kaga cagataagleeyo.

Waxaa isla markaasna dhacda bacdamaa aaney jirin xoogag bulshada ka mid ah oo urursan, xisbi danahooda iyo danaha dadweynaha u horseedaana uusan jirin inay dhashaan axsaab fara badan oo ay ku shaqaysanayaan danaystayaal waddani ah, xisbi kastaana nuxda iyo murtida ka dambeysaana ay tahay mid qabiil ama mid ajnabi u qabbaanaysa.

Xoogga ugu weyn xoogsatada dalalka madax-bannaanaaday ee cabbiri kara ra'yiga iyo danaha dadweynaha kuna dhex nool bulshada, loona abuuray daryeelka qaranka ee dibedda iyo gudaha intaba, waajibkuna ku soo baxsanayaa, kana soo dhex baxay xoogsatada waa ciidammada qalabka sida, oo iyaga naftoodu yeelan karaan laba ujeeddo:

1. Mid kacaannimo, waddan u gargaarnimo horusocod ah.

2. Mid dibusocodnimo oo xukun qabsi ah.

Taasina waxay la xiriirtaa hadba dabaqadda ciidammada qalabka sidaa ay ka soo dhex baxaan, khaas ahaan sa-

raakiisha iyo bislaanshahooda siyaasiga ah ee waddaniga ah sidii aynu hore u sheegnay.

Ideoloojiyiinta imberyaalisamku waxay ku sifeeyaan ciidammada qalabka sida ee xukunka soo dhex gala, in ay sabab u tahay wargeysyo gaar ahaaneed iyo axsaab badan oo kala afkaar ah oo aan jirin dalalka Afrika. Halkaas oo ay runta diidayaan oo iska indhatirayaan iyaga oo garanaya, waayo imberyaalisamka dantiisu waxay ku jirtaa maskaxda dadka oo qaybsanta, midnimada dadka oo lunta iyo axsaab ku sheeg daneystayaal ah oo gumeysiga u qabbaana.

Dadka Soomaaliyeed markii Kacaankii 21kii Oktoobar ee ciidammada qalabka sidaa horseedka u ahaayeen ka curtay waxay doorteen hirgelinta habka hantiwadaagga, waana qaab kacaan oo waayo-aragnimo ku soo biiriyey aragtida Leninism ee kacaan hantiwadaag, saameysana adduunka saddexaad.

Waxaa hubaal ah in dadyowga Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika wada qaadan doonaan habka hantiwadaagga, haba u kala horreeyeene, doorashada hantiwadaagga sababta oo ah:

1. Dhibaatooyinkii gumeysigu u geystey dadyowgaas aawadeed oo ay ogaadeen in gumeysigu ka dhashay habka hantigoosadka.

2. Dalalkii habka hantigoosadka qaatay ee Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika oo noqday kuwa ugu dambeeya dalalkii xoroobey ee qaaradahaas.

3. Guulaha iyo isbeddelka dhinac kasta ah ee ay gaadheen dalalkii qaatay habka hantiwadaagga ee reer Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika sida (Soomaaliya, Gini iyo Kongo Braasafiil).

4. Xoogagga kacaanka ah ee dalakii reer Yurub ee gumeysan jirey reer Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika oo guulo waaweyn ka gaadhey halgankoodii ay kula jireen hantigoosadka dalalkooda ka talinaya, una halgamaya hantiwadaag dalalkoodu ku guuleystaan iyo xornimo dadyowga la gu-

meysto sida Bortuqaal oo gumeysan jirtey, Angoola, Musaambiiq, Gini Bisaw iwm).

5. Adduunka hantiwadaagga oo tartankii meelo badan kaga guuleystay adduunka hantigoosadka.

Dadyowga Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika, doorashadooda ay Hantiwadaag doortaan, waxay gacan u tahay xoogagga horusocodka ah ee dalalka hantigoosadka, suurana gelinaysa in dalalkaasi hantiwadaag ku guuleystaan, taasoo isla markaana suura gelinaysa hantiwadaagga oo adduunka oo dhan saameeya Kacaan hantiwadaag weyn u suuragalo (World Socialist revolution).

## KH) DAGAALKA IDEOLOOJIGA AH EE DALALKA XOROOBEY KA TAAGAN.

Dalalka loo yaqaanno adduunka saddexaad inta ay ku jiraan halganka gobannimo-doonka iyo marka ay ku guuleystaan gobannimada intaba, waxaa dal kasta ka dhex socda halgan ideolooji ah.

Dabaqadaha waddanka oo barbaaraya, qaabka dhaqaalaha ee dadka oo kala duwan iyo xoogagga bulshada oo kala jaada, ayaa u sabab ah inay ka dhex dhashaan bulshooyinka dalalkaas afkaar badan oo kala duwani. Inkasta oo arrintaasi jirto imberyaalisamka caalamiga ahina ku dadaalo in uu ka faa'iideysto oo kala qeybiyo dadka dalalkaas ee xornimadooda u halgamaya sida «Angoola», misana waddaninimo ayaa kulmisa dadka dalalkaas.

Markii dadyowga Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika u geysteen dhirbaaxooyin kulkulul gumeysigii imberyaaliyiintu iyaga oo aaney ka run ahayn si dhoole tusid ah ayey u aqoonsadeen (human rights) xaquuqda aadamiga waxay ku dadaalaan in ay dalalkaas xoroobey qaataan habka hantigoosadka, waxay dadyowgaas maskaxdooda ku beeraan habka nolosha reer galbeedka oo ay ku tilmaamaan in uu yahay hab reer magaalnimo, si ay markaasna ugu faafiyaan ideoloojiyadooda burjuwaasiga ah, iyaga oo la kaashanaya burjuwaasiyiinta iyo aqoonyahanada waddaniga ah ee danaystayaalka ah.

Imberyaaliyiinta hubka ugu weyn ee fikradahooda siyaasiga ah gundhigga u ahi waa «hantiwadaag la dirir» (antisocialism) iyo iyaga oo kala qaybiya dhaqdhaqaaqyada xornimada u halgamaya. Si taasi ugu suura gasho, waxay ka faa'iideystaan qabiilka iyo goboleysiga weli jira dalalka soo koraya iyo haddii ay jiraan dabadhilifyo iyo dibusocod ka taliya dalalka ay jaarka yihiin. Waxaa dalalka madax bannaanaaday ku badan fikrado kala duwan sida «Nationalism» «Africanism» «Negritude» oo salka ku haysa midab takoor oranaysa midab caddaan la dirir sababtuna ay tahay kana turujumeysa dhibaatooyinkii faraha badnaa ee gumeysigu dadyowgaas u geystey, arrintaas oo ah midabtakoor, Marksismkuna si xooga uga soo horjeedo.

Waxaa kale oo ka mid ah fikradaha oranaya waxaanu rabnaa «Hantiwadaag waddani ah», «Hantiwadaag Somali ama hantiwadaag Afrikaan ah iwm). Afkaartaas oo dhan waxaa dabada ka wada ama ku qabbaananaya gumeystayaasha, damagogyaalka iyo burjuwaasiyada Kacaan diidka ah ee imberyaalisamku ku qabbaananayo, si ay ula diriraan hantiwadaagga cilmiga ah, hantigoosadkana u hirgeliyaan.

**Jaalle Siyaad oo arrintaas ka hadlay 1972 Dugsiga Xalane wuxuu yiri «Hantiwadaaggu waa mid keli ah waana hantiwadaagga cilmiga ah, kan Soomaaliya qaadatay ee hirgelineysana waa isaga».**

Sidii aynu hore u soo sheegnay nolosha ayaa hantiwadaagga cilmiga ah sheegeysa runnimadiisa, waayo waa habka keli ah ee dadyowga gumeysigu dib u reebay horukac degdeg ah ay ku gaari karaan, hantiwadaagga cilmiga ah dalal badan ee xoroobey oo Afrika iyo Aasiya ah, ayaa qaatay oo hirgelinaya si degdeg ahna ugu gaarey guulo waaweyn, Dalalka adduunka saddexaadna ee kalena u ah mitaal ay ku daydaan. Aynu mitaal u qaadanno Soomaaliya oo isgarabdhigno Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Soomaaliya heerkii ay gaartey intii u dhexeysay 1960 ilaa iyo 1969, ay ku jirtay habkii gumeysiga cusub iyo intii u dhexeysay 1969 ilaa iyo 1975 oo Soomaaliya hantiwadaagga hirgelineysey.

**Haddii hantigoosadku** dalalka xoroobey ugu baaqayo oo u horseedayo gumeysi cusub, kala sarayn, dhaqaalaha oo dad yari yeesho, tartan caddaaladdaro ku dhisan, dhaqaalaha dalka oo aan qorshe lahayn, adduun-aragga dadka dalka oo aan isku mid ahayn, khalkhal dhaqaale oo joogta ah, dhaqaalaha dalka oo ajnebi gacanta sare yeesho, beeraleyda oo la tacab dulleysto, aqoon darrida dadka dalka oo badata, dhaqanka dalka oo hoos u dhaca oo dhaxal wareega, xasilloonaan la'aan iyo dagaallo xaq darro ah, **Hantiwadaaggu** wuxuu u horseedayaa oo dadyowga adduunka oo dhan ugu baaqayaa **imberyaalisam** iyo gumeysi oo lala diriro mid cusub iyo mid duug ah intaba, sinnaan, hantida dalka oo dadka u dhexeysa danahoodana lagu maamulo, caddaalad wax ku qaybin **«qof kastaa in uu qabto inta aqoontiisa iyo kartidiisu le'eg tahay, inta shaqadiisu le'eg tahayna wax ku helo,** dhaqaalaha dalka oo qorshe lagu dhiso si baahida dadka ee koreysa wax loogu taro, adduun-aragga dadka dalka oo la mideeyo lagana dhigo mid hantiwadaag ah, beeraha oo la tacab wadaageeyo, kacaan aqooneed oo la sameeyo, dhaqanka dadka oo kor loo soo qaado oo loo yeelo qaab waddaninimo iyo murti hantiwadaagnimo, nabadgelyada iyo xasilloonaanta dadka dalka oo loo horseedo, isla markaasna dalka hooyo iyo mabda'a hantiwadaagga oo la daafaco.

Sidaas darteed waxaa hubaal ah in Dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ay qaadan doonaan habka hantiwadaagga inkasta oo broletaariyaadka dalalkaasi yar yahay ama bilow yahay misana koriinka ay korayaan shaqaalaha dalalkaasi, waaya aragnimadii ay ka dhaxleen halgankii ay la halgamayeen gumeysiga, hantigoosadka oo ay dhibaatooyinkiisii arkeen iyo adduunka hantiwadaagga oo hore u maraya ayaa dhalinaya in hantiwadaagga cilmiga ahi noqdo habka keli ah ee dalalka xoroobey dooran karaan.

Habka hantiwadaagga oo ay reer Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika hirgeliyaan ma aha micnaheedu in dadyowgaasi barwaaqo bisil hab doorashadu markiiba siineyso, waxaa lagama maarmaan ah halgan dheer iyo dadaal weyn oo lala yimaado. Waayo aragnimada adduunka ee hirgelinta hantiwadaagga ee laga hirgeliyey dalal sidii Afrika iyo Aasiya dambeeyey dhinac dhaqaale iyo dhinaca siyaasadda iyo dhaqanka intaba oo ku jirtay hababkii ka horeeyey habka hantigoosadka

waxaa ka mid ah Mangooliya iyo dalalka Aasiya ee Midowga Soofiyeeti oo awooddooda ka sakow helay gacan weyn oo ay siiyeen shaqaalihii Jamhuuriyadda Midoowga Soofiyeeti, ee hore u marsanaa, sidaas darteed waa waajib caalami ah oo hantiwadaagnimo ah in dalalka hantiwadaagga ee adduunku gacan weyn siiyaan dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ee hirgelinaya hantiwadaagga cilmiga ah.

**Lenin** isaga oo ka hadlaya waxyaalihii suura geliyey guuleysigii hantiwadaaggu ku guuleystay Midowga Soofiyeeti wuxuu yiri **«Ruusiya waaya'aragnimadii ay ka dhalisay guushii hantiwadaagga «dhibaatooyin badan» ayey ka soo martay, sidaas oo kale waxaa hubaal ah loona baahan yahay inay ku tala galaan dalalka xoroobay ee hirgelinaya hantiwadaagga».**

Jaalle Siyaad 1970kii isaga oo dadka Soomaaliyeed u xogwarramaya wuxuu yiri **«Kacaanku idiinku ballan qaadi maayo wax diyaar ah oo aynaan u dhididin, waxan idiinku baaqayaa shaqo, isku kalsoonaan iyo in Ummadda Soomaaliyeed iyada oo isku mid ah, una guntata in ay ka gudub/o dhibaatooyinka ka sokeeya barwaaqada iyo badhaadhaha aynu u halgameyno».**

## MADAXA TODOBAAD

### 1. KHALKHALKA ADDUUNKA HANTIGOOSADKA IYO DHAQDHAQAAQYADA KACAANNIMADA DABAQADDA SHAQAALAHA

Dabaqadda Shaqaalaha ee dalalka Hantigoosadku waa xoog weyn oo ka mid ah xoogagga Kacaannada adduunka, waxa ay halgan joogta ah kul ajiraan talisyada Manabooliga ah ee dalalkaas u taliya, waxayna u horseedayaan Hantiwadaag, nabadgelyo Adduunku ku waaro iyo Diimuqraadiyad, Shaqaalaha dalalkaas hantigoosadku si joogta ah ayey u barbaariyaan oo u korayaan, una bisleynayaan xaalaadkii suuragelin lahaa in Kacaan Hantiwadaag ahi dalalkaas ku guuleysto taas oo khalkhalka ka taagan dalalkaas ay yihiin arrimaha xoojinaya ee barbaarinaya Kaalinta shaqaalaha iyo halgankooda ay u halgamayaan hantiwadaag.

Hantigoosadku wuxuu ku jiraa oo ku nool yahay khalkhal guud taas oo ka dhalatay iska horimaadka habka hantigoosadka ee waqtiga imberyaalisamka.

Khalkhalkaasi kuma koobna dal keli ah ee waa mid saameeyey bulshooyinka hantigoosadka ku nool oo dhan. Khalkhalkaas guud ee hantigoosadku ku jiraa wuxuu tilmaamayaa bilowgii baabiitaankiisa iyo dhalashadii habka hantiwadaagga ee beddeli lahaa.

**b) Heerarkii Khalkhalka Hantigoosadku soo maray**

**Heerkii koowaad khalkhalka** — Hantigoosadku wuxuu soo maray saddex heer; waxaa bilaabay dagaalkii koowaad iyo Kacaankii Hantiwadaagga ahaa ee ka curtay Ruusiya, markaasna ay dhalatay dawlad Hantiwadaag ah tii ugu horeysey oo ay dhammaatay in habka hantigoosadku ahaado habka keli ah ee adduunka jira.

**Heerkii labaad** — wuxuu ahaa dagaalkii labaad iyo guuleysigii Kacaanka Hantiwadaagga ahi ku guuleystay dalal badan oo Yurub iyo Aasiya ahi, halkaasna lagu burburiyey Faashisamkii jug xoog lehina ku dhacday imberyaalisamkii.

Waxaa abuurmay adduun hantiwadaag ah, adduunkana ku yeeshay kaalin weyn.

**Heerkii Saddexaad** — heerkaasi wuxuu bilaambmay 50aadka dhamaadkiisii kumana dhalan dagaal ee wuxuu ku yimid iyada oo labada hab ee adduunku ku wada jiraan tartan dhinac kasta ah, halkaas oo ay dhalatay:

1. Hantiwadaaggii oo si habsami ah uga dhismay oo ku guuleystay dalal dhowr ah, hantiwadaaggii oo xoogeystay, awooddii iyo kaalintii hantigoosadka ee adduunka oo yaraatay;

2. Habkii gumeysiga oo dumey, dawlado badan oo madax bannaan oo dhashay, halkaasna uu ku liciifay habkii hantigoosadku, dalal badan oo xoroobeyna ay qaateen hantiwadaagga;

3. Iska horimaadkii imberyaalisamka gudihiisa oo xoog u kordhay, khaas ahaan iska horimaadka xoogagga tacabka iyo xirriirka tacabka, taas oo dhibaatooyinkii yiiley adduunka hantigoosadka kordhiyey, halgankii kacaannimada ahaa ee xoogsatadana xoojisey.

## T) KORITAANKA, ISKA HORIMAADKA DHAQANKA-DHAQAALAHA EE BULSHOOYINKA HANTIGOOSADKA.

Monobooliyada dalalka hantigoosadku waxay qabbaansadaan horumarka laga gaadhay aqoonta teknolojiyada si ay kaalintooda u adkeystaan, tacabkana u kordhiyaan, kor ku noolaanshaha iyo dulleynta xoogsatadana u xoojiyaan. Laakiinse waxaas oo dhami wax kaalintiisa adkeynaya ma aha, tallabadii hantigoosadku qaadaaba, waxay sii kordhinaysaa iska horimaadka ka dhexeeya xoogga tacabka iyo xiriirka tacabka.

Mufakiriinta hantigoosadku waxay yiraahdaan habka hantigoosadka kuma dhaco khalkhal, taasna waxaa beeniyey in dagaalkii labaad kaddib dhaqaalaha hantigoosadku soo maray laba khalkhal oo waaweyn, 1) - 1948-49, 2) 1957-58.

Dhaqaalaha Maraykanka (USA) keligiis wuxuu soo maray afar khalkhal oo tacabka la xiriira. Mufakiriinta hantigoosadka cusubi waxay isku dayaan in ay yareeyaan iska horimaadka imberyaaliisamku ku jiro, taas oo ay dhaqaalaha milleriyeeyaan, laakiinse sida waayo-aragnimadu ina barayso dhaqaalaha oo la milliteriyeeyaa iska horimaadka wuu sii xoojinayaa.

Iska horimaadka ka taagan adduunka hantigoosadka wuxuu saameeyaa isla markiiba dhinaca bulshada dalalkaas, dalka Maraykanka (USA) oo ah dalka ugu weyn adduunka hantigoosadka, waxaa ka dhex taagan dagaal dabaqadeed iyo mid midabtakoor oo dadka madoobi u halgamayaan xaquuqdooda aadaminimada, dhallinyarada dalka Maraykanku waxay si joogta ah ula diriraan Siyaasadda Dibedda ee horornimada ah ee Maraykanku ku wadaan adduunka khaas ahaan Aasiya iyo Afrika, shaqaaluhuna wuxuu si joogta ah ugu jiraa halgan «Shaqo joojin» oo ku saabsan la dirirka monobooliyada dulleysaneysa, sidaas oo kale waxaa dadweynaha dalka Fransiiska, Talyaaniga, Ingiriiska iyo Jabbaanku ugu jiraan halgan ay ku diiddan yihiin siyaasadda foosha xun ee dibedda iyo dhaqaalaha ay dalalkaasi wadaan. Khalkhalkaas ka taagan dalalka hantigoosadka. wuxuu xoogeystey markii ay ka soo go'een imberyaalisamka dalal badan oo Afrika iyo Aasiya ahi, dhibaatooyin badan oo maanta dalalkaas haystaana ay sabab u yihiin dalalkii hantigoosadka ahaa ee gumeysan jirey:

1. Intii dalalkaasi gacanta gumeysiga ku jireen oo ay u ahaayeen dalalka hantigoosadka suuqa ay alaabta warshadahooda u iib-geeyaa, taasna ay ka dhalatay in aanay dalalkaasi yeelan warshado, dhinaca teknoloojiyadana ay aad u hooseeyaan oo weli isticmaalaan qalabkii Bilowga «Primitive» khaas ahaan beeraha.

2. Dalalka Afrika iyo Aasiya oo u ahaa dalalka hantigoosadka meel ay ka daldashaan qalabka qaydhiin.

3. Dalalkii xoroobey ee raacay jidka hantigoosadka oo imberyaalisamku ku hayo dhibaatooyinkii ay qabeen markii ay gumeysiga ku jireen isaga oo ku isticmaalaya shirkadihiisa monobooliga ah ee hirgeliya tabta «Gumeysiga Cusub».

Horumarka uu hore u maray cilmiga teknoloojiyadu wuxuu sii xoojiyey in ay dalalka hantigoosadku ku kala hormaraan heerka dhaqaalaha. Haddii tobankii sannadood ee hore dagaalkii labaad kaddib dhaqaalaha Ameerikaanku ahaa kan ugu gacan sarreeya dalalka hantigoosadka, hadda waxaa jira in dalal ka mid ah Yurubta galbeed iyo Jabbaan ay soo gaadheen ama meelaha qaarkoodba dhaafeen Ameerikaanka arrintaas oo keentay:

1. In farqigii dhaqaalaha u dhexeeyey dalalka horey u maray iyo dalalka soo korayaa uu aad u weynaado.

2. In tartan kulul oo adagi ka dhex dhaco dalalka imberyaalisamka dhinac kastaba, asaasna u yahay dhaqaaluhu.

3. In dalalka imberyaalisamku isku herdiyaan oo u tartamaan Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika.

4. In uu sii kululaado oo kordho iska horimaadka ka dhex taagan dalalka imberyaalisamka iyo dalaka dhaqaalahoodu dambeeyo.

Dagaalka dalalka hantigoosadku kula jiraan dalalka hantiwadaagga, shaqaalaha dalalkooda, dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka waddaniga ah iyo «gumeysiga cusub» oo ay kula jiraan dalalka xoroobay ee Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameeriya waxay marar badan u riixaa is-herdigooda iyo iska horimaadkooda safka labaad ama marar badanba ay isugu dul qaataan oo ka dhiga kuwo isku saf ah, laakiinse taasi ma noqon karto mid joojisa iska horimaadka foosha xun ee ka dhex taagan dalalkaas imberyaalisamka.

Imberyaaliyiintu waxay raadinayaan habab kale oo ay ku helaan suuqaq taas oo 10 - 15 sannadood ee dambe uu Ameerikaanku maalkiisii u tallaabiyey Yurub oo dhaqaalihii dalalkaas ku dhex darsaday sida baananka **«American over seas Banks**, warshadaha **Electoronics** iyo **Synthetical industries**,

taas oo dhalisay in Maraykanku culimadii reer Yurubna qaato oo ama dalkiisa u dhoofiyo ama shirkadihiisa Yurub ka dhisan ay u shaqeeyaan markaasna ay dhacday in monobooligii Ameerikaanku shiiqiyo monobooliyadii reer Yurub iyo iyada oo iska horimaadkoodii sii kordho.

Si ay uga baxaan dhibaatada suuq raadinta, imberyaaliyiintu waxay sameeyaan in ay isu geeyaan monobooliyada dalal badani kala leeyihiin oo aad u waaweyn sida «Suuqa dhaqaalaha reer Yurub» oo ay asaaseen lix ka mid ahi. Inkasta oo «Suuqa dhaqaalaha reer Yurub» kordhiyey tacabkii misana iska horimaadkii ka dhexeeyey imberyaaliyiinta ma joogsan, waxaa xoogeystay iska horimaadkii ka dhexeeyey Maraykanka iyo «Suuqa reer Yurub», Ingiriiska iyo monobooliyada Jarmalka Galbeed oo rabta in ay gacanta ku dhigto «Yurubta yaryar» iyo Fransiiska oo si xoog leh isu hortaagaya.

Waxaa kale oo khalkhal ku dhacay gaashaanbuurtii Ciidammada ee imberyaalisamka sida «NATO» oo Maraykanku hoggaamiyo, kuna yiraahdo reer Yurub, waxaan idinkaga ilaalinayaa shuuciyiinta, khaas ahaan Midowga Soofiyeeti, dalal badan oo reer Yurub ahina arkeen in aaney dantooda ahayn gaashaanbuurtaasi sida Fransiiska. Khalkhalkaas ku dhacay gaashaanbuurta milleteriga ah waxa sabab waaweyn u noqday:

1. Siyaasadda dibedda ee nabadda u horseedeysa ee dalalka hantiwadaagga.

2. Awoodda milleterinimo ee dalalka hantiwadaagga jiritaankeeda.

3. Dalalka reer Yurub oo gartay ulajeeddada Maraykanka ka leeyahay gaashaanbuurtaas in aaney dantooda ahayn.

4. Imberyaalisamka Maraykanka oo si joogta ah nabadgelyada adduunka khatar geliya, iyada oo aaney ogeyn reer Yurub dagaallana iska ooga sidii dagaalladii Bariga Dhexe iyo Koonfur Aasiya.

## J) DIIMUQRAADIYADA IYO BURJUWAASIYADA

Iska horimaadka dhaqanka, dhaqaalaha iyo bulshada ee imberyaalisamku wuxuu keenay dimuqraadiyadii burjuwaasiyadda oo noqotay mid dibusocodnimo heer sare ah gaartay. Ururrada Siyaasiga ee Burjuwaasiyaddu waxay ku hayaan shaqaalaha dalalkaas iyo xoogsatada guud ahaan dagaal dabaqi ah oo kulul, dibusocodnimadaas heerka sare ahi waxay keentay in sansaan faashisam uu yeesho imberyaalisamku.

1969, Shirkii Axsaabaha shaqaalaha iyo shuuciyiinta ee adduunku ku shireen magaalada Mooska markii ay falanqeeyeen arrimaha diimuqraadinimo dhaawaca ah ee uu ka wado imberyaalisamku dalalka hantigoosadka, waxay ku gabagabeeyeen:

**(Imberiyaalisamkii wuxuu u dhalay Faashisam, talisyo siyaasadeed oo argagixiso iyo aadami xumo ah ayuu ka wadaa meel kas*t*a, imberyaalisamkii wuxuu weerar iyo cadaadis ku hayaa xaquuqda aadamiga, dimuqraadiyada iyo xorriyadda intaba wuxuu qiimo tirayaa aadamiga, midabtakoorkna wuu beerayaa).**

Imberyaalisamku waxaas oo aadamiga dhibaatadiisa ah ee uu wado, wuxuu isku dayaa in uu u qariyo oo u maldaho si damagoognimo ah, fashisamka ka socda dalalka hantigoosadka waxaa ka mid ah:

1. Burjuwaasiyiinta waaweyn oo ka mudnaaday dawladda nafteeda.

2. Dawladaha burjuwaasiga ah oo la biruqraadiyeeyey lana milleteriyeeyey.

3. Cadaadinta iyo ciriiriga dadweynaha lagu hayo oo heer sare gaarey khaas ahaan kuwa horusocodka ah.

4. Talisyada dawladaha hantigoosadka ah badankooda waxaa gacanta ku dhigay maalqabeennada waaweyn ee burjuwaasiyiinta.

5. Madaxda ciidammada oo si aan toos ahayn siyaasadda hoggaamiya sida (Pentagon).

6. Kaalinta fuliska dawladda oo ka xoog bata sharciga.

7. Kaalinta iyo qiimaha baarlamaannadu siyaasadda ka qaataan oo yaraata.

8. Ururrada kacaannada ah iyo kuwa dimuqraadiga ah oo awooddooda la koobo lana ciriiriyo.

9. Kooxaha faashisamka wada oo la buunbuuniyo gacanna la siiyo.

10. Xeerar shaqaalaha dulmaya oo la guddoomiyo.

11. Ciidammo calooshooda u shaqaystayaal badan oo la abaabulo, imberyaalisamkuna ku isticmaalo in ay farageliyaan oo dagaallo ka oogaan dalalka Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika, mararka qaarkood ay madaxda dalalkaas ee aan danaha imberyaalisamka wadin dila.

12. Ururro hub leh oo ay burjuwaasiyiintu sameystaan uguna adeegtaan inay dilaan madaxda dalalka hantigoosadka ee aan danahooda wadin, una soo dhaca baananka.

13. Qiimaha aadamiga oo la yaso sida siyaasadda midabtakoorka.

Inkasta oo ay waxyaalahaasi ka socdaan dalalka hantigoosadka, misana dadweynaha oo ay horseed u yihiin shaqaalaha dalalkaasi, dagaal ayey kula jiraan, waxayna ku kallifeen burjuwaasiyadii in ay oggolaadaan arrimo dimuqraadi ah, oo ay maanta burjuwaasiyiintu isku faaniyaan oo yiraahdaan waxaanu nahay (Adduun xorriyadda daryeela) (Free world). Hannaanka imberyaalisamku raacaan ee siyaasad maldaha iyo jahawareerinta ah waxaa ka mid ah in ay furaan axsaab badan oo isla markiibana isku ujeeddo ah, mid kastaana u qabbaanayo danaha imberyaalisamka, madaxna ay u yihiin sida labada xisbi ee dalka Maraykanka ugu waaweyn:

1. Xisbiga Jamhuuriga.

2. Xisbiga Dimuqraadiga.

Taas oo ay dadweynuhu garan karaan marka ay xukunka iska beddelaan waxbana ayna iska beddelin siyaasaddii in kasta ba ha so-socotee, tallaabooyinkaas ay burjuwaasiyiintu wadaan ee ay ku tirtiriyaan dimuqraadiyada, waxay sii weyneyneysaa sika horimaadka ka dhex taagan monobooliyada iyo dadweynaha, waxay ballaarineysaa oo xoojineysaa halganka xoogsa-

tada dalalkaasi ku raadinayaan dimuqraadiyada iyo hantiwadaagga.

## X) KHALKHALKA IDEOLOOJIYADA BURJUWAASIYADA

Khalkhalka guud ee ka taagan adduunka hantigoosadku wuxuu caddeeyey in ideoloojiyada uu ku fadhiyaa ayna sax ahayn, iyana khalkhal ku jirto.

Ideoloojiyiinta burjuwaasiyiintu waxay aad isugu dayaan oo ku doodeen in hantigoosadku yahay hab weligii taagnaanaya oo aan ahayn mid aadamigu ka gudbayo, sababna uga dhigaan:

1. In bulsho aadami ahi noolaan karin wax lahaansho gaar ahaaneed haddii aanu jirin.

2. In isku dul noolaanshaha qof qof ku dul nool yahay ay tahay wax dabiici ah oo bulsho kastaa leedahay.

3. In gumeysiga burjuwaasiyiintu gumeysan jireen qaarado badan oo adduunka ah ay tahay wax caadi ah oo weligii jiraya, waajibna ah.

Laakiinse taariikhdii ayaa caddeysay in aanay sax ahayn ideoloojiyada burjuwaasiyiintu, khalkhalka ay ku jiraanna saameeyo dhinac kasta oo bulshada hantigoosadka ah, taasna waxaa marag u ah:

1. In qayb weyn oo aadamiga adduunka ahi burburiyeen waxlahaanshihii gaar ahaaneed iyo isku kornoolaanshihii.

2. Burjuwaasiyiinta ideoloojiyiintoodu waxay oran jireen hantiwadaaggu waa riyo maantana waxa ku dhaqma oo uu ka hirgalay dalal badan, dalal badanina hirgelinayaan.

3. Gumeysigii ay ideoloojiyiinta burjuwaasiyiintu aamminsanaayeen inuu weligii jirayo, wuu burburay, dadyowgii Aasiya iyo Afrika ee ay u qabeen dad aadaminimadoodu aanay dhammeyn maanta waa dalal madax-bannaan oo horusocodka taariikhda kacaannada adduunka qayb weyn ka qaata.

1919 ilaa iyo maanta waxaa xoroobey ilaa iyo 80 dal oo Aasiya iyo Afrika ah, haddii 1919 dhulka gumeysi haystaa ee adduunku ahaa 72% oo ay ku nool yihiin 69% dadka adduunku, maanta waxaa gumeysi haystaa dhul ka yar 3,5% dhulka adduunka oo ay ku nool yihiin 35,8 Malyuun oo qof ah 1% dadka ku nool adduunka. Arrimaha jaadkaas ahi waxay noqdeen kuwo muujiyey isla socod la'aanta ideoloojiyada buurjuwaasiyiinta iyo nolosha runta ah ee adduunka iyo socodkeeda taariikhdu, waxaa halkaas ka muuqday run la'aanta ideoloojiyiinta hantigoosadka, iyo iyaga oo aan u heli karin jawaab su'aalaha duruufta mawduuciga ahi waddo ee ku saabsan aayatiinka dambe ee bulshooyinka, jawaabahaas oo laga heli karo aqoonta hantiwadaagga cilmiga ah oo keli ah.

Si ay arrimaha jaadkaas ah isaga indhatiraan waxay yiraahdaan ideoloojiyiinta burjuwaasiyaddu, waxaa loo baahan yahay in la helo xornimo xagga fikradda ahi oo ay dhiirriyaan (Individualism) in qof kastaa sidii uu doono u fekero oo wixii uu doono ku hadlo oo sameeyo, wax badanna ay ku xadaan maskaxda dadka aan iska hubsan.

Arrintaasi waxay u tahay nolosha bulshada halis, nafjecleysi waa arrin ku saabsan in qof kasta naftiisa, raaxadiisa iyo horumarkiisa ka fekero tan guudna la ilaawo kuna badan madaxda siyaasadda maamusha dalalka hantigoosadka oo gayeysiisa bulshada aaya xun iyo sharaf darro.

Siyaasadda burjuwaasiyiinta ee ugu weyn waa hantiwadaag ia dirir oo ah in ay la diriraan dalalka hantiwadaagga ah, in ay dalalka soo koraya kala diriraan in ay dadyowgaasi dalalkooda ka hirgeliyaan mabda'a hantiwadaagga, dalkii hirgeliyana ay dhinac kasta kala diriraan.

Dadka adduunku maalinba maalinta ka dambeysa wuxuu nacayaa oo dulucdeeda ogaanayaa ideoloojiyada hantigoosadka iyo qaabka nolosha hantigoosadka, oo ay xataa kuwa hantiwadaagga la dirirayaa aqoonsan yihiin.

Bacdamaa uu habka hantigoosadku yahay hab sii dhimanaya oo adduunku ka gudbayo, ma yeelan karo ideoloojiyad cilmi ah, waayo ma leh mana keeni karaan ideoloojiyiinta da-

baqada burjuwaasiyiintu afkaar himilooyin iyo rajo fiican leh waana wax objektif ah.

Dadweynuhu si joogta ah ayuu uga xuub siibanayaa dhinac kastaba afkaartii iyo afcaashii dabaqadihii aadamiga dulleysan jirey, waxaa xoogeysanaya ku qanacii hantiwadaagga cilmiga ah ee dadyowga adduunka, aragtida waagan cusubi waa aragtida shaqaalaha adduunka oo dhan. Markisism — Leninsm, ahna tan dalal badan ka hirgashay, dalal badanina hirgelinayaan, aayatiinka dambena adduunka oo dhan ka hirgeli doonta si loo helo sinaan, caddaalad, xorriyad, Dimuqraadiyad, nabadgelyo iyo hantiwadaag.

## KACAANIMADA IYO GARAADKA SIYAASIGA SHAQAALAHA OO KORAYA

Dhaqdhaqaaqyada kacaannimo ee shaqaalaha adduunku aad ayey u xoogeysteen, khaas ahaan waxaa kaalintiisii sii xoogsatey yididiilona ku dhalatay curashadii Kacaankii Oktoobar ee Midowga Soofiyeeti, iyo jabkii faashiisamka iyo guuleysigii hantiwadaag ku guuleysteen xoogsatadii dalal badan oo Yurub iyo Aasiya ahi tirada shaqaalahooduna yahay 30% shaqaalaha adduunka, qayb weynna ka qaata socodka kacaannada adduunka. Shaqaalaha dalalka hantigoosadkuna waa 40% shaqaalaha adduunka oo ah xoogga dalalkaas talisyada burjuwaasiga ah ee ka talinaya kula jira halgan.

Waxaa kale oo kaalin weyn kaga jira taariikhda adduunka shaqaalaha ugu da'da yar si joogta ahna u koraya oo ah shaqaalaha dalalka soo koraya ee Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika. Ideoloojiyiinta hantigoosadku waxay yiraahdaan, qiimihii iyo tirada shaqaaluhu way soo yaraanayaan, Broletaariyad qiime dabaqi ah ku fadhiyaa ma jiro, kacaannadii iyo dabaqadihii waqtigii hore jiri jirey maanta ma jiraan iwm, arin taas waxaa beeninaya:

1. Dalalka hantigoosadka ah oo dhan waxaa si xoog leh u kordhaya tirada dadka shaqada la'.

2. Tirada dadka dalalka hantigoosadka ku nooli waxay

u badan yihiin dad aan wax ku lahayn qalabka wax soo saarka kuna nool xoogooda oo ay iibsadaan.

3. Tirada dabaqadda shaqaalaha (Broletaariyaatka Warshad) ee Maraykanku (1850 — 1860) ilaa iyo 1950 — 1960) wuxuu batay min 1,4 Malyuun ilaa iyo 24,1 Malyuun oo qof. Ingriiska min 4,1 Malyuun ilaa iyo 12,2 Malyuun oo qof, Fransiiska min 2,5 Malyuun ilaa iyo 7,2 Malyuun oo qof».

Marks oo falanqeeyey noocyada shaqaaluhu wuxuu u kala saaray:

1. Broletaariyaadka Wershadaha waaweyn ahna Broletaariyaatka lafdhabarka shaqaalaha (Back bone proletariat).

2. Broletaariyaadka beeraha iyo miyiga.

3. Broletaariyaatka ka shaqeeya ganacsiga iyo xafiisyada dawladda.

Waa intaas noocyada ay u qaybsamaan broletaariyaadka maantana jiraa, inkasta oo saami-galkoodu isbeddelay, si joogto ahna isu beddelo, dhismaha broletaariyaadka ee isbeddelayaa wuxuu xoojinayaa kaalinta, Urursanaanta, garaadka iyo horseednimada shaqaalaha iyo xoogsatada oo dhan. Dalalka hantigoosadka waxaa si xoog leh u koray tobanaankii sanadood ee dambe shaqaalaha ka shaqeeya gaadiidka, dhismaha iyo war-isgaarsiinta iyo shaqaalaha ka shaqeeya shaqooyinka aan tacabka dhalin (xamaalnimada, darewalnimada, farsamayaqaannada kabaha iwm) iyo dadka noloshoodu iyo shaqadoodu u dhowdahay tan shaqaalaha. Halkaas waxaa ka muuqata dhismaha isbeddelaya ee dabaqada shaqaalaha dalalka hantigoosadku wuxuu caddeynayaa sida tiradiisa, xooggiisa iyo kartidiisuba u koreyso maalinba maalinta ka dambeysa. Kacaanka teknooloojiyada ee bedeley dhismaha dabaqada shaqaalahu, wuxuu kale oo keenay in tacliintoodii iyo farsamayaqaninimadoodii kor u kacaan, oo dhaxalsiisay in urursanaantoodii iyo garaadkoodii siyaasiga ahaa intuba kor u kacaan. Burjuwaasiyaddu wixii ay awood lahayd waxay isugu geysey in ay joojiso oo hoos u dhigto ruuxa iyo garaadka siyaasadda broletaariyaadka ee koraya, taas oo ay isku daydo in ay iska hortaagto Broletaariyaadka tacliinta. Waxaa dhinaca

shaqaalaha maalin kasta ay isku soo dhawaanayaan Injineerada iyo farsamayaqaannada oo iyana burjuwaasiyaddu ku hayso dulleyn, iskuna dayaan inay aqoonyahannada kala saaraan oo qaarkood siiyaan jagooyin sare iyo nolol ustuqraadinimo. Waxaase jira in aqoonyahanno badani aanay ka habeyn sokeyn shaqaalaha xagga nolosha, taas oo keenta inay meel uga soo wada jeestaan dulliga iyo darxumada ay burjuwaasiyiintu ku hayaan bulshada.

## d) WAXYAALAHA GAARKA AH EE ASAASKA U AH HALGANKA BROLETAARIYAADKA.

Waagan cusub shaqaalaha kaalintiisii kacaannimadu aad ayey u xoogeysanaysaa. Nolosha shaqaalaha dalalka hantigoosadka oo wax yar kor u kacdaa ma doorinayso jagada uu kaga jiro shaqaaluhu bulshada hantigoosadka, shaqaaluhu addoonsiga ay burjuwaasiyiintu ku hayaan waxaa weli shaqaaluhu yahay :

— Kuwo weli arrimaha dhaqaalaha iyo siyaasadda dalka aan ka qayb qaadan go'aannadooda.

— Baahida shaqaalaha oo si joogto ah u koraysa.

— Cadaadiska burjuwaasiyiintu ku hayaan oo soo kordhaysa iyo sababihii halganka shaqaalaha xoojinayey oo soo xoogeysanaya, ayna dhalinayaan qaabab iyo habab halgan oo cusub, una qalma hababka iyo qaababka cusub, ee burjuwaasiyiintu shaqaalaha ku dulleysanayaan, halgannadaas shaqaalaha waxaa hoggaaminaya axsaabta shuuciyiinta ee dalalkaas iyo ururrada kale ee horusocodka ah iyo axsaabta diimuqraadiga ah oo la sameeya iskaashi iyo wadajir axsaabta shuuciga ah.

Waxaa halgannadaas shaqaalaha ka mid ah :

1. Shaqo joojin.

2. Bannaanbaxyo.

3. Shaqaalaha oo ku dooda xuquuq dhaqaale iyo siyaasi sare.

4. Shaqaalaha oo u halgama in ururradooda shaqaaluhu ka qayb galaan, talooyinka warshadaha.

5. Shaqaalaha oo u dooda daryeelka caafimaadka shaqaalaha iyo aqoon kordhintooda.

6. Tallaabooyinka faashiisamka xoojinaya ee dalalka hantigoosadku wadaan oo ay la dagaallamaan.

7. Hurornimada siyaasadaha imberyaalisamka oo ay la dagaallamaan.

8. Nabadgelyada adduunka oo ay taageeraan.

9. Gumeysiga imberyaalisamku ku hayo dalalka adduunka saddexaad oo ay cambaareeyaan iyo dagaallada xaqdarrada ah ee imberyaalisamku adduunka ka wado sidii dagaalladii Fiyetnaam, Kamboodiya, Aljeeriya iyo Bariga Dhexe, dagaalladii Boortuqiisku ka waday Angoola, Moosambiik iyo Gini Bisaw iyo kuwa imberyaalisamku ka wado Angoola.

Tallaabooyinkaas badan ee shaqaalaha dalalka hantigoosadku kula jiro imberyaalisamka siyaasadihiisa dibedda iyo gudaha dalalkaas intaba, waxay beenineysaa doodaha ideoloojiyiinta hantigoosadku ay yiraahdaan shaqaalihii dalalkaas, kacaannimadoodii dabaqiga ahayd way yaraatay, firfircoonidii shaqaalaha iyo kaalintoodii horseednimada ee u halgamaysay horumar bulshannimana way joogsatay.

**r) WADAJIRKA IYO ISBAHAYSIGA HALGANKA XOOGAGGA LIDKA KU AH MONOBOOLIYADDA DALALKA HANTIGOOSADKA.**

Lenin wuxuu wax kaban yiri dalalka hantigoosadka ee hore u maray, dagaallada kacaannimada ah ee ka socda yaan la moodin dagaallo ku kooban oo keli ah «Broletaariyaadka iyo burjiwaasiyadda», waxaa dagaalladaas ka qayb qaata dadweyne badan oo aan boroletaariyaad ahayn, waayo danaha dabaqadahaas kale ee bulshadu waxay isku mid yihiin danaha broletaariyaadka oo ah inay gumeysiga monobooliyada ka baxaan, marka dambena hantigoosadka gebi ahaantiisa burburiyaan.

Xoogaggaas kale waxay ka tirsan yihiin xoogsatada, isla markaana waa dad hanti leh oo meel dhexaad taagan Leninna ku tilmaamay (dad laba niyadood leh, niyad hantigoosadnimo iyo niyad xoogsato).

Isgarabsi iyo iskaashi ayaa dhex mari kara dabaqadda shaqaalaha iyo xoogsatada kale ee bulshada ee aan ahayn broletaariyaadka, taasina waxay la xiriirtaa waxyaalaha ka dhasha habka hantigoosadka ee waqtigan cusub. Muddooyinkii dambe ee teknooloojiyada isbeddelka weyn ee horumarka ahi ku dhacay waxa dhalatay in monobooliyaddu, cilmigii teknooloojiyada laga gaaray ay ku isticmaashay tacabka beeraha oo keentay inay aad u yaraadaan oo broletaariyoobaan beeraleydii hantida meel dhexaadka ah lahaa iyo kuwii beeraha lahaa intuba.

Mitaal ahaan dalalka hantigoosadka ah tirada beeraleydu haddii ay ahaayeen 1920—84,7 malyuun oo qof, 1968 waxay noqdeen 42 malyuun oo qof, taas oo dhalisay in beeraleydu halganno firfircoon la galaan burjuwaasiyadda sidii beeraleydii Faransiiska, Talyaaniga, Beljinka, Nedarland iyo dalal kale oo badan, halgankaas oo ahaa halgan lid ku ah, monobooliyada, diiddanna siyaasadda beeraha ee dalalkaas.

Waxaa kale oo iskaashi iyo isgarabsi monobooli la halgan iyo meel uga soo wada jeeda ah ay yeelan karaan Broletaariyaadka: ganacsatada yaryar iyo farsamoyaqaannada, isla markaas waxaa jira xubin bulshada ka mid ah oo ay monobooliyadu dulli ku hayso, sida aqoonyahannada maamulayaasha Xafiisyada iwm, oo run ahaantii aan ahayn maalqabeenno, ee ah dad maskaxdooda iyo muruqooda burjuwaasiyaddu maasho, xoogaggaasina waa xoogag lid ku ah dhiigmiiradnimada iyo gumeysiga monobooliyada, ayna isbahaysan karaan shaqaalaha. Sidaas darteed axsaabta shuuciga ee dalalkaasi waxay ku dadaaleen inay adkeeyaan xiriirka shaqaalaha iyo aqoonyahannada teknikada, dhaqanka iyo culimada cilmiga intaba.

Waxaa iyana qayb weyn ka qaata halganka broletaariyaadku kula jiro burjuwaasiyadda, fiiro gaar ahna ay siiyaan axsaabta shuuciga ee dalalka hantigoosadku ururrada dhallinyarada khaas ahaan ardayda.

Waqtigan cusub waxaa aad u kordhay tirada haweenka dalalka hantigoosadka ee ka qayb qaata tacabka, waxay ka qayb galaan halgannada dabaqiga ah ee shaqaalaha, iyaga oo u halgamaya isla markaana xuquuqdooda ah :

— In la tirtiro xaqdarrada ku saabsan mushahaarka.

— In hooyonimada la xaq dhawro (maternity rights).

— In ay helaan haweenku sinnaan ay kala sinmaan ragga xagga xuquuqda waddanka iyo bulshada.

Haddii 1913kii ururrada shaqaalaha adduunka ay ku jireen 60 malyuun oo qof, 1970kii waxay noqdeen 232 malyuun oo qof. Ururka Caalamiga ah ee dumarka adduunku waxaa ku jira 200 malyuun oo qof, ururrada dhallinyarada adduunka waxaa ku jira 100 malyuun oo wiil iyo gabdhaba ah. Ururradaas oo dhami waxay la jaal yihiin shaqaalaha adduunka si ay ula wada diriraan monobooliyada.

Halgannadaas ay dabaqadaha iyo xubnaha bulshada hantigoosadku kula jiraan monobooliyada ulajeedadoodu waa :

— In isbeddel dimuqraadi ahi uu ka dhaco dalalkaas.

— In la koobo awoodda monobooliyada.

— In la xoojiyo qaybta xoogsatadu ka qaadato siyaasadda dibedda iyo gudaha ee dawladda, si loo daryeelo danaha dadweynaha.

— In la liciifiyo imberyaalisamka.

Arrimahaas aan kor ku soo sheegnay iyo jiritaanka dalalka hantiwadaagga iyo dawladaha hore u socodka ee kale, hantigoosadka oo soo liciifiya, iskaashiga iyo wadajirka shaqaalaha iyo xoogagga kale ee xoogsatada bulshooyinka hantigoosadka ah oo kordhaya, garaadka siyaasiga ee shaqaalaha oo kor u kacaya, xoogsatada shaqaalaha dalalka Aasiya, Afrika, Laatiin Ameerika iyo kuwa dalalka hantigoosadka oo xoogeysanaya iyo asxaabta shuuciga ee dalalka hantigoosadka oo xoogeysanayaa, waxay suura gelinayaan oo abuurayaan awood xoogsatadu ku guulaystaan kacaan hantiwadaag ah oo dalalka hantigoosadka ka curta.

# MADAXA 8AAD

## ARAGTIDA DAGAALKA IYO NABADDA EE MARKSISAMKA

**1. Imberyaalisamku waa huriyaha iyo oogaha dagaallada adduunka,** dagaal oo la waayo waxa gundhig u ah iyada oo hantiwadaag adduunka oo dhan ka hirgalo oo ku barbaaro.

Dagaallo dawladaha adduunka, wax badan ayuu ka dhex dhacay, dagaal kastana wuxuu burburiyey tacab iyo dhaqan ummado kumaankun sannadood soo dhisayeen.

Caalin dalka «Sweden» ahi, «Beebel» wuxuu qoray in 5559-kii sannadood ee ugu dambeeyey taariikhda jiritaanka adduunka ay dhaceen 14513 dagaal, waxaana dagaalladaas ku dhintay «3 mlr» saddex milyaardi iyo «640.000» lix boqol iyo afartan kun oo qof, wuxuu caalinkaasi yiri, haddii la qiimeeyo maalkii jaad kastaba ha ahaadeene ku baaba'ay oo ku burburay dagaalladaas waxa ay la qiima yihiin oo goyn lahaayeen suun dahab ah oo «8» mitir dhumiciisu yahay, ballarkiisuna «10» toban kiiloomitir yahay oo adduunka ku wareegsan.

**Dagaalkii koowaad** — waxa ka qayb galay 36 dawladood, tirada dadka dalalkaasina waxay ahaayeen hal milyaardi iyo konton malyuun oo qof, ciidammadii qalabka siday waxay gaareen «70» malyuun oo askari iyo sarkaal, waxaa ku dhintay «10» toban malyuun oo qof, waxaa ku dhaawacmay ama ku curyaamay «20» labaatan malyuun oo qof.

**Dagaalkii labaad** — waxaa ka qayb qaatay «61» lixdan iyo kow dawladood, tirada dadka dalalkaasina waxay ahaayeen hal milyaardi iyo «700» oo malyuun ooqof, ciidammadii qalabka siday waxay gaareen «110» boqol iyo toban malyuun oo askari iyo sarkaal, waxaa ku dhintay «32» soddon iyo labo malyuun oo qof, waxaa ku dhaawacmay ama ku cur-

yaamay «35» soddon iyo shan malyuun oo qof. Midowga Soofiyeeti keligiis waxaa kaga dhintay «20» labaatan malyuun oo qof, waxaa kaga baaba'ay «1710» magaalo, 70 kun oo tuulo iyo 1/3 hantidii ummadda Midowga Soofiyeeti. Haddii waqtiyaalkii hore dagaalladu saameyn jireen waax ka mid ah adduunka, waqtigan aynu joogno waa mid adduunka oo dhan saameenaya, iska hor imaadka iyo antagonisamka bulshooyinka adduunka ka dhex taagani wuxuu hore u mariyey cilmiga, teknikada iyo hubka ciidammada oo ay jiraan maanta adduunka hub khatar ah oo adduunka oo dhan daqiiqado ku baabi'in kara. **Abwaannadii hantiwadaagga cilmiga ahi waxay caddeeyeen in wadajirka iyo midnimada shaqaalaha adduunku ay tahay tan keli ah ee adduunku kaga badbaadi karo dagaallo.** (K. Marks iyo F. Engels B. 17 B. 5) hantiwadaaggu wuxuu ka soo harjeedaa isku dul noolaanshaha, dhaca iyo aasaaska dagaalka oo ah wax lahaanshaha gaarka ah.

Isaga oo arrintaas ka hadlaya Lenin wuxuu yiri : **«Dadka Hantiwadaagga ahi weligood dagaallada ka dhex dhaca dadyowga adduunka way cambaareeyaan — waayo waa arrin dugaagnimo, «Barbarism» naxariis darro iyo aadami la'aan ah** (Lenin B. 26. 311).

Jaalle Siyaad oo ka hadlay dalalka Soomaaliyeed ee maqan wuxuu yiri: **«Doonimayno dhiig dad Afrikaan ah oo isku daata, waxaan doonaynaa in arrimaha ka dhexeeya reer Afrika ay ku dhammaadaan si nabadgelyo ah oo wada hadal iyo iskaashi u asal yahay, waana sidaas sida dalalka Soomaaliyeed ee maqan aanu ku raadinaynaa».**

**B. Sababaha iyo waxyaalaha dhaliya dagaalka.**

Dagaal ma aha wax weligiiba jirey (age-long), mana aha wax dabeecadduu aadamiga waajib kaga dhigtay sida muafkiriinta imberyaalisamku yiraahdaan.

Dagaalka waxaa keenaa oo dhaliya qaab dhaqan dhaqaale bulsho ku dhisan waxlahaanshaha gaarka ah (Private Ownership) iyo bulshada oo u kala baxda dabaqad dabaqad iska soo horjeeda oo aan isku maslaxad ahayn. Weligeedba dabaqada wax ku kor nool ee wax gumeysata dagaal ayaa u

ahaa qaab iyo tab ay ku fushadaan siyaasaddooda gumeysiga ah (Mitaal sidii imberyaaliyiintu u qabsadeen Afrika).

Bulshadii u qaybsan dabaqado iska soo horjeeda, dabaqadda taliska dawladda haysataa weligeed waxay dagaalka ka dhigan jirtey hub ay ulajeeddadeeda siyaasadeed ku gaadho. Lenin wuxuu yiri: **«Dagaalku waa fulin iyo sii wadid siyaasadeed oo qalab kale la adeegsado. Dagaal kastaa kama baxsana habka siyaasadda ee uu ka dhex dhasho, siyaasaddaas oo dabaqadi fulinaysey dagaalka ka hore»**. Lenin B. 32 B« 79).

Taariikhdu waxay caddeysay in dagaalladii ka dhex dhici jirey dawladaha ay sabab u ahaayeen dhul, dhaqaale iyo siyaasad salka ku haysa ku xadgudub xornimo, dabadana ay ka wado dabaqada dalkaas u talinaysa oo dooneysa hanti badsi.

Qarnigii XXaad Monobooliyada oo dooneysa adduunka in ay u taliso ayaa u sabab ah dagaallada socda, culimo si fiican dagaallada iyo sababaha ay ku dhashaan xaaleeyaa waxay yiraahdeen 70kii sannadood ee ugu dambeeyey (1898-1968) imberyaalisamku wuxuu adduunka ka riday 128 dagaal oo ay ka mid yihiin labadii dagaal ee adduunka. Imberyaalisamku wuxuu sameystay ciidammo, gaashaanbuuro fara badan iyo saldhigyo militeri oo badan, ulajeeddadiisuna ay tahay in uu dagaal ku qaado dalalka hantiwadaagga ah, in uu ceejiyo dhaqdhaqaaqa xornimodoonka ee adduunka iyo in uu dalalka xoroobay cadaadiyo oo gumeysto sida (Nato, Sento, Seato iyo Anzuc) sida saldhigyada uu ku leeyahay (Jarmalka Galbeed, dalka Talyaaniga, Isbaanishka, Turkiya, Jasiiradaha Badda Hindiya iwm).

Imberyaalisamka Gaashaanbuurta NATO dagaallada xaqdarrada ah ee ay ku kaceen waxaa ka mid ah: 1901 ilaa iyo 1920 ciidammada Ingiriisku waxay dagaal xaqdarro ah oo dhul qabsi ah ku hayeen Kacaankii waddaniga ahaa ee dadka Soomaaliyeed. 1945 ilaa 1949 ciidammada Maraykanku waxay si xaqdarro ah ugu duuleen dadka Shiinaha si ay ula dagaallamaan Kacaankii dadka Shiinaha, 1945 ciidammada Ingiriisku waxay ku duuleen dalka Indooniisiya iyo Malaaya

si ay ula dagaallamaan dhaqdhaqaaqyadii xornimodoonka ahaa ee dadyowgaas.

1947 markii uu Ingiriisku ka baxay dalkii Indoniisiya waxaa ku duulay Holand oo Maraykanku gacan siinayo, 1946 ilaa iyo 1954 gumeysigii Faransiisku wuxuu ku hayey dadka reer Fiyatnaam dagaallo, markii Fransiisku ku ceeboobayna waxaa beddelay Maraykanka oo fadeexadii iyo jabkii ugu weynaa ka gaadhey. Dagaalkii labaad kaddib Maraykanku dalalka Laatiin Ameerika iyo Afrika badankooda wuxuu ka ridey afgembi dibusocod ah oo uu xukunkii u dhiibay dawlado Militeri u badan oo dabadhilif u ah.

1961 Maraykanku wuxuu ku duuley dalka Kuuba, 1962 wuxuu ku sameeyey Kuuba cunaqabateyn uu u diidey wax u soo gala iyo wax ka soo baxa. 1964 ciidammada lugta ee Maraykanku waxay toogteen dad reer Banama ah oo bannaanbaxyo sameynayey, 1965 waxay ku degeen Jamhuuriyadda Domeniko, 1950 ilaa iyo 1953 ciidammada Maraykanku iyo kuwa Gaashaanbuurta la ahi waxay ku qaadeen dagaal dalka Kuuriya, dagaalkaas waxaa Maraykanku geeyey ilaa iyo hal Milyan oo askari iyo sarkaal.

1954 ilaa 1962, Faransiisku wuxuu ku hayey dadka reer Aljeeriya dagaal fool xun, 1956 Faransiiska, Ingiriiska iyo Yuhuudda ayaa dagaal ku qaaday dalka Masar. 1958 Maraykanku wuxuu xaqdarro u galay Libnaan, Ingiriiskuna Urdun, 1960 Gaashaanbuurta NATO waxay xaqdarro u farageliyeen dalka Koongo, muddo ilaa iyo 500 sannadood ah dadyowga Angoola iyo Moosambiik waxay gumeysiga Boortuqaaiiska kula jireen dagaallo gobannimodoon. 1965 Maraykanku wuxuu weerar ballaaran ku qaaday dalka Fiyatnaam ilaa uu gaadhsiiyey Hindo-shiinaha oo dhan.

1967 Israa'iil oo Maraykan ku tiirsan ayaa dagaal dhul qabsi ah ku qaadday Masar, Suuriya iyo Urdun oo ilaa maanta dal fara badan ka haysata.

Ilaa maanta gumeysiga Faransiisku wuxuu ku hayaa dil iyo dhac iyo dal ka musaafuris dadka Soomaaliyeed ee Xeebta Soomaaliyeed «Jibuuti».

Waxaas oo dagaal iyo dil ah, waxaa waday haddana wada Gaashaanbuurta NATO. Waqtigan aynu joogno si imberyaaliyiintu u burburiyaan talisyada dadka ee ka dhisan qorrax ka soo baxa Afrika, badda Hindiyana qalaanqal u geliyo, Maraykanku wuxuu ka dhisanayaa Jasiiradaha badda Hindiya saldhigyo militeri.

Culimada hantigoosadku waxay faafiyaan fikrad khalad ah oo ay yiraahdaan dagaalku waa wax loo baahan yahay in uu dhasho kana dhasha ciriiriga dadku isku ciriiriyayaan dhulka iwm. Culimada hantiwadaaggu dagaal ayey kula jiraan sababahaas ay imberyaaliyiintu marmarsiiyo ka dhiganayaan. Waxaa dadka u caddaanaysa maalinba baalinta ka dambeysa in dhalashada dagaalku la xiriiro habka hantigoosiga.

## T. DAGAALLADA XAQA AH IYO KUWA XAQDARRADA AH.

Inkastoo oo dagaalka ay had iyo goor oogaan dabaqadaha wax gumeystaa, misana dabeecadda iyo ulajeeddooyinka dagaalladu aad ayey u kala duwan yihiin.

**Dagaalka Xaqa ahi** — waa dagaal u horseedaya ummad laga xoreynayo gumeysi ama xoogsato laga xoreynayo isku kor noolaansho iyo dulli, dagaallada noocaas ahi waxay dedejiyaan barbaarinta iyo hore u dhigga bulshada, sidii Kacaankii addoonta ee qarniyadii hore, dagaalladii beeraleyda ee qarniyadii dhexe, dagaalladii ahaa waqtigii Kacaankii burjuwaasiga ahaa, dagaalladii Kacaannadii u horseedayey Hantiwadaagga. Dagaalkii xaqa ahaa ee dadyowga Fiyatnaam, Kaamboodiya, Angoola iyo Kuuriya ay ku xorooyeen dalalkooda.

Xaalka maanta ka taagan adduunweynaha haddii aynu sifeyno dagaallada waxaa jirta in dagaallada xaqa ahi yihiin :

1. Dagaallada lagu daafacayo dalka hooyo (haddii ay dalkaas xukumaan in yar oo hantigoosad ahi dagaallada ay huriyaan oo danahooda u qabaanaya, ma aha dagaal xaq ah, Broletaariyaatkuna waa in ay iyaga dagaal ku qaadaan si ay xukunka uga qabsadaan ee ma aha in ay broletaariyaadku

galaan dagaalka siyaasadda hantigoosadka u qabaanaya) qoraalkii Lenin «Military Program of the proletariat».

2. Dagaallada dabaqiga ah ee la halgamaya isku dulnoolaanshaha iyo dhiig-miiradka.

3. Dagaallada u qabaanaya xornimodoonka waddani ah ee la halgamaya gumeysiga iyo dibusocodka.

Imberyaaliistayaashu ma aqoonsana dagaallada xaqa ah, su'aashu waxay tahay ma waxaa la diidi karaa, la iska indhatiri karaa dad u halgamaya waddaninnimadooda iyo madaxbannaanaantooda iyo xornimadooda? Waa waxyaalaha ina tusaya aadami-xumada iyo dhiig dad cabnimada imberyaalisamka. Imberyaaliyiintu markii ay ogaadeen in haddii ay oogaan dagaal saddexaad in habka hantigoosadku tirtirmayo, waxay ku kacaan dagaallo ay ka ridaan goobo adduunka ka mid ah oo xaqdarro ah, ulajeeddadiisuna ay tahay :

1. Dhul qabsi.

2. Qalab ceydhiin u raadsi wershadihiisa.

3. Saldhig ujeeddo dhaqaale iyo militeri (strategy) raadis.

Dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika imberyaalisamku sidii aynu hore ugu soo sheegnay wuxuu kula kacaa gumeysiga cusub, ulajeeddadiisuna tahay:

1. In dalalkaasi aanay yeelan madaxbannaani buuxda (Dhaqaale).

2. In ayna weligood yeelan wershado iyo beero qiimo leh oo isku filnaan, si ay u ahaadaan dalalkaasi suuq alaabta wershadaha hantikoobadku soo saaraan.

3. In ayna dhinaca aqoonta ka xoroobin dalalkaasi oo dhaqankoodu hore u marin, si ay gacanta ugu hayaan dalalkaas oo aanay u yeelan aqoonyahan waddani ah.

Haddii imberiyaalisamku si toos aan ahayn waxyaalahaas uu kaga waayo dalalka soo koraya, marka si caddaan ah oo dagaal ah ayuu kulakacaa dalalkaas sidii aynu mitaalo badan kor ugu tilmaannay.

Intii dadyowgaas Reer Afrika iyo Aasiya, gumeysigu uu gumeysanayey wuxuu ku falay dhibaatooyin uu u qorsheeyey in ay dalalkaas ka dhex taagnaadaan, taas oo uu dal iyaga ka mid ah qaybiyo oo gobollo ka mid ah iyo dadkii deggenaa u wareejiyo dal kale oo ay jiiraan yihiin, markaasna uu ka talinayey dabadhilif imberyaalisamka la jaal ahi. Mitaal fiican waxaa ah sidii gumeysigu laba qaybood oo dalka Soomaaliyeed oo xoolo dhaqato iyo beeraley ahi ku nool yihiin uu u siiyey Itoobiya (Gobolka Soomaali Galbeed) iyo Keenya oo uu siiyey (Gobolka loo yaqaan N.F.D.) maantana ku jira gumeysi, arrintaas oo ah mid nasiibdarro ah in ummad Afrikaan ah oo ogsoon xuquuq aqoonsi la'aanta aadamigu waxay tahay, shalayna iyaga lagu hayey, maantana lala daba joogo in qoolkii gumeystayaashu Afrika u qooleen ee ahaa (kala qaybi oo xukun) oo dhibaato ku kala dhex beer ku dhacaan oo dadkaas Soomaaliyeed loo diido xuquuqdooda oo loo diido aftin xaq ah in loo sameeyo.

## 2. MABAADI'DA HANTIWADAAGGA EE SIYAASADDA DIBADDA.

Mabaadi'da hantiwadaagga ee siyaasadda dibaddu waa siyaasad caalami ah (International) oo u horseedaysa in dadyowga adduunku ku wada noolaadaan nabadgelyo iyo saaxiibtinnimo. Lenin ayaa dawladdii hantiwadaagga noqotay ee ugu horreysey u jaangooyey siyaasaddeedii dibedda oo ah :

1. In nabadgelyo waarta loo halgamo.

2. In lala diriro dagaal in uu adduunka ka dhaco.

3. In wadajirka walaaltinnimada ah ee xoogsatada adduunka la adkeeyo.

4. In xoogagga Kacaannada ee adduunka la mideeyo si imberyaalisamka iyo gumeysiga loola diriro.

5. In dadweynaha loo bandhigo oo ay ra'yi ka geystaan arrimaha siyaasadda dibedda.

Isaga oo ka hadlaya heshiisyadii dawladihii Boqortooyada iyo hantigoosadku la galeen dawladaha shisheeyaha. Lenin wuxuu yiri :«**Ma oggolin, kuma jiro, waanuna diiday-**

**naa qodobbadii ku jirey heshiisyadii dawladaha imberyaalisamku la qorteen dawladdii Boqortooyada ahayd ee Ruusiya, una horseedayey dhaca, xoogga iyo xaqdarrada, laakiinse qodobbada u horseedaya jaarnimo fiican iyo heshiis dhaqaale oo sinnaan iyo iskaashi ku dhisan waannu soo dhaweyneynaa, waannu aqbalaynaa diidina meyno». (Lenin B. 35 B. 20). Lenin wuxuu yiri: «Siyaasadda nabad ku wada noolaanshaha dawladaha adduunku waxay u qabaneysaa dhismaha hantiwadaagga», sababaha suuragelinaya nabad ku wada noolaanshaha waxa ka mid ah :**

1. Dabeecadda habka hantiwadaagga oo aaney dhexdiisa jirin dabaqado bulshada ka mid ah oo ay dan u tahay dagaal.

2. Dhaqaalaha, siyaasadda iyo xoogga milliteriga dalalka hantiwadaagga oo maalinba maalinta ka dambeysa koraya oo aaney jirin arrin adduunweynaha dantiisa saameysa oo aan dalalka hantiwadaaggu kaalin weyn ka qaadan.

3. Dawladaha hantiwadaagga ah iyo dawladaha gumeysiga ka xoroobey ee jidka hantiwadaagga qaatay oo ku shaqeeya siyaasad dibadeed ku dhisan nabadgelyo ku wada noolaansho dalalka adduunka oo dhan.

4. Dadyowga la gumeysan jirey ee adduunka oo badankoodu xoroobey, halkaasna ay ka dhalatay in imberyaalisamkii liciifo iyo dadyowgaas oo u halgamaya nabadgelyo, sinnaan dimuqraadiyad iyo hantiwadaag.

5. Xoogsatada dalalka hantigoosadka oo garaadkoodii siyaasiga ahaa koray.

6. Burjuwaasiyada qaarkood oo ay dani ugu jirto in ay la leeyihiin xiriir dalalka hantiwadaagga ah.

7. Ururro badan oo caalami ah oo abuurmay oo ay u badan yihiin dalalka soo koraya iyo dalalka hantiwadaaggu oo u horseeda, nabadgelyo, xornimo, barbaarin dhaqaale iyo hantiwadaag, qayb weynna ka qaata arrimaha adduunweynaha sida «Ururka Midowga Afrika (UMA)», «Ururka Jaamacadda Carabta (UJC)», «Ururka Nabadda Adduunka

(UNA)», wadajirka dalalka siyaasaddoodu dhexdhexaadka tahay, Adduunka hantiwadaagga ah iyo «Ururka Ummadaha Midoobey», oo maanta kaalinta ugu weyn ka ciyaaraan dawladaha hantiwadaagga ahi iyo dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ee madaxbannaani.

Kacaanka ummadda Soomaaliyeed xaashidiisa koowaad ayey ku caddahay mabaadi'da Siyaasadda dibedda ee J.D.S., kuwaas oo ah sawirkii dibedda ee Siyaasadda gudaha ee J.D.S., kuna fadhiya mabaadi'da hantiwadaagga ee ku qoran isla xaashida koowaad ee oranaya:**«in la dhiso bulsho Soomaaliyeed oo ku dhisan shaqo iyo caddaalad».**

## B) MABAADI'DA SIYAASADDA DIBEDDA EE J.D.S.

1. In la taageero wadajirka iyo isgarabsiga adduunweynaha iyo dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka waddaniga ah.

2. In lala diriro gumeysiga iyo gumeysiga cusub qaab kasta oo uu leeyahay.

3. In loo halgamo, lana suuregeliyo midnimada ummadda Soomaaliyeed.

4. In la wado, lana hirgeliyo oo la ilaaliyo Siyaasad dhexdhexaad xaqaani ah (Positive Neutrality).

5. In si adag loo aqoonsado mabaadi'da nabad ku wada noolaanshaha dadyowga adduunka oo dhan.

6. In la ixtiraamo, lana aqoonsado wixii heshiisyo iyo sharciyo caalami ah ee Soomaaliya hore u gashay.

J.D.S. laga bilaabo 1969, 21kii Oktoobar waxay hirgelinaysey mabaadi'daas kor ku qoran guulo waaweynna ay ka soo hoysey, khaas ahaan halganka joogtada ah ee ay Soomaaliya kula jirto imberyaalisamka, gumeysiga iyo gumeysiga cusub, adduunkana looga aqoonsan yahay, taasna waxaa caddeynaya:

1. Sannadkii (1974 - 1975) ee Madaxweynaha GSK, Jaalle Siyaad ahaa Madaxweynaha Afrika, Soomaaliya waxay ciyaartay kaalin Afrika waxtar u noqotay.

2. Shirkii 11aad ee dalalka Afrika ee lagu qabtay ma-

gaalo-madaxda Soomaaliya, Muqdisho oo laga gaarey guulo waaweyn oo dan u ah Afrika iyo adduunweynaha.

3. Shirkii 9aad ee Afrikada Bari iyo Afrikada Dhexe oo lagu qabtay Muqdisho, uuna kana soo baxay baaqii ku magac baxay «Baaqii Muqdisho».

4. Ururka Dhallinyarada Adduunka oo billad dahab ah ugu deeqay Madaxweynaha GSK, Jaalle Siyaad, iyada oo urukaasi u aqoonsaday Siyaasadda dibadda ee J.D.S. in ay tahay mid horusocod ah oo u horseedeysa nabadgelyo, sinnaan, xorriyad iyo hantiwadaag adduunka saameeya.

5. Shirkii Cab-so oo lagu qabtay 1971kii magaalada Muqdisho.

6. Soomaaliya oo loo doortay in ay ka noqoto Guddoomiye guddiga «UMA» u qaabbilsan xoreynta, gumeysi iyo midabtakoor la dirirka 1973 - 1974tii.

7. Shirkii Ururka Haweenka ee Afrika oo 1975 lagu qabtay Muqdisho.

8. Soomaaliya oo Tansaaniya iyo Yugaandha markii ay aad isugu xumaadeen 1974, kaalin nabadgleyo raadis ka ciyaartay.

9. Soomaaliya oo dalalka Soomaaliyeed ee maqan caddaysay in ay nabadgelyo iyo wada hadal uga dhigayso tallaabada asaaska u ah doonistooda.

10. Soomaaliya oo si joogta ah u xoojisa gacanna siisa dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka Afrika, taasna ay marag u tahay in xafladdii dadka reer Moosambiig ugu dabbaaldegayeen xornimadooda uu Jaalle Samoora Masheel ka caddeeyey oo ku ammaanay Jaalle Siyaad iyo ummadda Soomaaliyeed kaalintii ay ka geysteen xornimo u dirirkoodii.

11. Soomaaliya oo muddo dheer ahayd Madaxda guddiga midabtakoorka la dirirka ee Ururka Ummadaha Midoobey, guulo waaweynna ka soo hoysey.

12. Soomaaliya oo si dhab ah ula dirirta Sahyuuniyada oo ka mid ah ahayd dawladihii dhaliyey in madaxa «PLO» ka jeediyo khudbad arrimaha Falastiin, Ururka Ummadaha

Midoobey isla markaasna u horseedday in Yuhuudda dawladaha reer Afrika xiriirka u jaraan.

13. Soomaaliya oo si joogta ah u cambaareysa dagaallada xaqdarrada ah ee imberyaalisamku adduunka ka hurinayo, sidii dagaalkii Fiyetnaam, Komboodiya, Angoola iwm, isla markaasna is-hortaagta talisyada dibusocodka sida Taliska fashiistiga ah ee Jili ka taagan.

14. Soomaaliya oo xiriir jaallanimo iyo walaalnimo ah la leh dalalka hantiwadaagga ah ee ay isku mabda'a yihiin kuna dhisan sinnaan, iskaashi iyo istaageer siman.

Waxyaalahaas oo dhan iyo kuwo kale oo badani waxay yihiin oo caddeynayaan mabaadi'da Siyaasadda dibedda ee J.D.S. gundhigga ay u tahay Siyaasadda Hantiwadaagga ee Soomaaliya hirgelineyso.

Soomaaliya iyada oo aqoonsan hirgelineysana siyaasadda nabad ku wada noolaanshaha, misana waxay aqoonsan tahay in sida keli ah ee dadyowga la gumeystaa isku xoreyn karaan ay tahay dagaal ay ku qaadaan gumeystayaasha, taas oo cuskan baaqii Muqdisho ee ka soo baxay fadhigii Dawladaha Afrikada Bari iyo Afrikada Dhexe.

## T) WAXYAABAHA SUURA GELINAYA IN DAGAAL ADDUUNEED AANU DHICIN.

Markii ay dhalatay dawladdii hantiwadaagga ahayd ee ugu horreysay adduunka, waqtiyadii hore intii ay ka barbaareysey gacanta sare dunida waxaa lahaa habka hantigoosadka dhinaca dhaqaalaha iyo dhinaca milliteriga intaba, inkasta oo dawladdii hantiwadaagga ahayd ee markaas jirtey (Midowga Soofiyeeti) iyo shaqaalihii dalalka hantigoosadka ay wax kasta isku dayeen in dagaal labaad aanu adduunka ka dhicin, misana imberyaaliyiintii waxay rideen dagaalkii labaad oo ka dhexdhashay iska horimaadkii dalalka hantigoosadka ujeeddadooduna ahayd in ay adduunka qabsadaan dawladdii keli ahayd ee hantiwadaagga ahayd ee adduunkana burburiyaan.

Markii ay abuurmeen dawlado badan oo hantiwadaag ahi, kacaannimadii shaqaalaha dalalka hantigoosadka iyo

dhaqdhaqaaqyadii xornimodoonka waddaniga ahaa xoogeysteen, waxaa abuurmay xaalad cusub oo beddeley gacan sarreyntii habka hantigoosadka, waxaa dhacday in aaney u suurogal ahayn imberyaaliyiinta in ay waxay doonayaan adduunka ka sameeyaan. Hantiwadaaggii wuxuu yeeshay awood uu adduunweynaha kaga qaato kaalin weyn oo waxtar ah. Waxaa suuragal noqotay in la is-hortaagi karo dagaal adduunweyne oo dhaca.

Ma aha micnuhu in ay isbeddeshey dabeecaddii uu lahaa imberyaalisamku, maya imberyaalisamku waa imberyaalisam ee waxaa dhashay oo jira xoogag iyo awood intaba awoodi kara in ay dagaal ka badbaadiyaan adduunka, milieterisimka iyo imberyaalisamkana dhaawac halis ah u geysan kara haddii ay dagaallo huriyaan.

Xoogaggaas oo ah:

1. Awoodda dhaqaalaha iyo milleteriga dalalka hanwadaagga.

2. Garaadkii siyaasiga ahaa ee shaqaalaha iyo beeraleyda dalalka hantigoosadka oo kordhay, gaarteyna murtida ka dambeysa dagaal adduunweyne iyo waxa imberyaalisamku uga jeedo dagaalladaa uu ridayo.

3. Dalal badan oo adduunka ah oo xornimadoodii helay kana soo go'ay imberyaalisamka, maantana hirgelinaya siyaasad lid ku ah imberyaalisamka, gumeysiga, gumeysiga cusub iyo dagaallada.

4. Xornimada dalalka Aasiya iyo Afrika oo u noqotay imberyaalisamka liciifnimo uu liciifo, awooddiisiina ay aad u yaraato dhinac kastaba; taas oo yarayneysa kartidiisii adduunka uu kaga ridi lahaa dagaal.

5. Ra'yiga dadweynaha adduunka oo ka soo horjeeda dagaal adduunweyne iyo wixii dhalinayaayaba. sababta oo ay ogyihiin hubka maanta adduunka jira iyo dhibaatada uu u keeni karo aadaminimada.

Halgankaas lagula jiro in aan dagaal ka dhicin adduunka waxaa horseed u ah dadka hantiwadaagga aamminsan. Intii ka dambeysay dagaalkii labaad wax badan ayaa imberyaalisamku isku dayey in uu rido dagaal, laakiinse wa-

xaa is-hortaagay dalalka hantiwadaagga ah iyo xoogagga nabadda jecel ee adduunka. Burjuwaasiyiintu waxay yiraahdeen dagaal ka dhaca adduunka lama joojin karo, dadka hantiwadaagga ah aad ayey isku hortaagaan afkaarta jaadkaas ah ee imberyaalisamku dadka maskaxda kaga xadayo. Burjuwaasiyiintu waxay si joogta ah isugu diyaariyaan dagaal, taasna waxaa caddeynaya iyaga oo adduunka ku leh Saldhigyo Milleteri oo badan iyo gaashaanbuuro milleteri sida Nato, Seato, iwm., miitaal ahaan miisaaniyadda gaashaadhigga Maraykanka oo si joogta ah u kordheysa:

1937 - 38: Hal milyaard oo doolar.

1940 - 41: Lix milyaard iyo shan boqol oo malyuun oo doolar.

1950 - 51: Saddex iyo soddon milyaard iyo afar boqol oo malyuun oo doolar.

1962 - 63: Konton iyo laba milyaard iyo lix boqol oo malyuun oo doolar.

1968 - 69: Siddeetan milyaard oo doolar.

1972 - 73: Siddeetan iyo saddex milyaard oo doolar.

Dalalka «NATO» 1970 oo keli ah waxay ugu tala galeen gaashaandhiggooda boqol iyo saddex milyaard oo doolar. Ulajeeddada imberyaalisamku ka leeyahay ciidammadaas xoogga iyo faraha badan:

1. Inuu tirtiro oo ceejiyo dhaqdhaqaaqa kacaannimo ee xornimodoonka ah ee Aasiya iyo Afrika.

2. In uu tirtiro habka hantiwadaagga adduunka.

3. Inay suuro gasho in uu adduunka gacanta ku dhigo.

4. In uu ka baabi'iyo dhaqdhaqaaqyada iyo ururrada shaqaalaha ee dalalka hantigoosadka ah.

5. In uu dalalka xoroobey ka hirgeliyo gumeysiga cusub.

Sidaas daraaddeed waxaa lagama maarmaan ah:

1. In lagu baraarujiyo dadweynaha arrimaha caynkaas ah.

2. In dalalka hantiwadaagga ah iyo dalalka soo korayaa fiiro weyn siiyaan gaashaandhiggooda.

3. In xoogagga horusocodka ah ee nabadda jecel xooggooda isu geeyaan si ay ula diriraan in aan dagaal ka dhicin adduunka.

Lenin wuxuu yiri: «**Kacaan kastaa wuxuu qiimo yeelan karaa markuu isdaafici karo (B. 42, B. 173).**

Jaalle Siyaad sannadguuradii laba iyo tobnaad ee Ciidammada Qalabka Sida ee Soomaaliya wuxuu yiri: **Jaallayaal, carruurtii iyo shaqaalihii dalkow, ilaaliya Kacaanka Hantiwadaagga ah idinkoo la jira dadweyneheena ku socda waddada sinnaanta, caddaaladda, horumarka iyo midnimada, idindoo dhisaya dalka ilaa aad gaartaan gobannimadiinna buuxda ee siyaasadeed, dhaqaale iyo bulshonimadaba».**

Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu si joogto ah uga fekeraa sidii loo xoojin lahaa Ciidammada Qalabka Sida ee Soomaaliya, kuwaas oo maanta ah ciidammo awood milleterinimo iyo garaad siyaasadeed intaba leh, kuwo u diyaar ah in ay ilaaliyaan Kacaanka, xaqiijiyaan himilooyinka Kacaanka ee ku qoran xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka, kana qayb qaataan dhismaha iyo isbeddelka dhinac kasta ah ee ay ku jirto ummadda Soomaaliyeed iyaga oo ahaa kuwii qaatay kaalintii horseednimada xoogstada Soomaaliyeed ee curiyey Kacaankii 21kii Oktoobar.

J.D.S. waxay aqoonsan tahay in arrimaha adduunka lagu dhammeeyo si nabadgelyo ah, mabda'aasna asaas uga dhigtay sidii xornimada dalalka Soomaaliyeed ee gacanta dalalka ay jiiraanka yihiin (Itoobiya iyo Keenya) ku jira loo heli lahaa. Culimo badani waxay isku raaceen in jugta hore ee hubka haliska ah ku isticmaalistiisu dilayo malaayiin dad ah, kumaankun magaalo iyo tuulona baabi'iyaan hawada sare ee adduunkuna xumaanayso, sidaas daraaddeed waxaa lagama

maarmaan ah in lala diriro in dagaal ka dhaco adduunka oo la burburiyo hubka halista ah.

J.D.S. iyo dalalka hantiwadaagga ah iyo kuwa horusocodka ahi waxay u arkaan burburinta hubka halista ah waajib dawladaha adduunka oo dhan saaran, laakiinse imberyaalisamku iyo gumeystayaashu ma oggola, waayo waxay u arkaan dagaalka sallaan ay ku gaari karaan adduunka oo ay ka taliyaan, waxay u arkaan in hubka oo lagu tartamaa ay tahay faa'iido dhaqaale oo ay helaan sharikadahooda monobooliga ahi.

Si nabadgelyo loo helo waxaa loo baahan yahay:

1. In la tirtiro gumeysiga.

2. In la hirgeliyo mabda' afti xaqaani ah oo dadyowga loo oggolaado (Self determination of people).

3. In si xaq ah oo nabadgelyo ah lagu dhammeeyo dhulalkii Afrika iyo Aasiya gumeysiga intii dalalkaasi gacantiisa ku jireen uu u kala qaaday, ujeeddadiisuna ahayd in colaad joogto ahi dhextaallo marka ay madaxbannaani helaan dalalkaasi isaguna ka dhex faa'iideysto, «gumeysiga cusub».

4. In dadyowga Afrika, «Koonfur Afrika, Roodiisiya iyo Namiibiya) u dhashay la aqoonsado xuquuqdooda, taliska dalkana gacanta iyagu ku hayaan.

5. In xiriirka dhaqaalaha adduunka ee ku dhisan xaq duudsiga dalalka soo koraya la joojiyo oo dib loo habeeyo.

6. In la yareeyo miisaaniyadda gaashaandhigga ee dawladaha, khaas ahaan tan dalalka waaweyn.

7. In Falastiin dawlad dimuqraadi ah oo dadka reer Falastiin leeyihiin laga dhiso, Israa'iilna ka kacdo dalalka Carabta ay ka haysato, shuruud la'aan.

8. In laga tirtiro adduunka saldhigyada milleteriga ah ee dalalka shisheeyaha ka dhisan.

9. In la burburiyo hubka halista ah lana mamnuuco sameyskiisa dambe.

## X) NABAD U HALGANKA IYO KACANNADA XORNIMODOONKA.

Imberyaaliyiintu waxay yiraahdaan ma suura geli karto in la hirgeliyo mabaadi'da nabad ku wada noolaanshaha, taas oo ay sabab uga dhigaan:

1. Dalalka hantiwadaaggu waxay ugu baaqayaan dadyowga adduunka oo dhan hantiwadaag iyo in la burburiyo hantigoosadka.

2. Hanlganka siyaasadda, kan dhaqaalaha iyo kan ideoloojiga ah ee dalalka hantiwadaagga ah iyo dalalka soo koraya wadaan iyo mabda'a nabad ku wada noolaanshuhu iskuma geli karaan.

3. Dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka waddaniga ah ee dadyowga Aasiya iyo Afrika wadaan iyo taageerada dalalka hantiwadaaggu siiyaan waxay khatar gelineysaa mabda'a nabad ku wada noolaanshaha.

4. Dagaallada xornimada u horseedaya sida kuwii (Fiyatnaam, Falastiin, Moosambiik iyo Angoola) mabda'a nabad ku wada noolaanshaha way dhaawacayaan.

Imberyaaliyiintu waxay gaareen gabagabeyn dhahaysa: Halganka kacaannada ahi wuxuu dhaawacayaa mabda'a nabad ku wada noolaanshaha ee dawladaha adduunka, waxay soo jeedinayaan oo yiraahdaan si mabda'aasi u hirgalo:

— In la joojiyo dhaqdhaqaaqyada kacaannimada ah ee adduunka.

— In dadyowga iyo xoogagga kacaanku u hoggaansamaan dibusocodka imberyaaliyiinta.

— In hantigoosadku noqdo habka keli ah ee ka hirgala adduunka, taasoo ka soo horjeedda ujeeddada dadyowga horusocodka ah ee adduunka oo ah: in laga tirtiro adduunka imberyaalisamka iyo gumeysiga si loo helo nabad waarta.

Runta iyo ulajeeddooyinka mabda'a nabad ku wada noolaanshaha micnihiisu waxay tahay uuna u horseedayaa:

1. In la aqoonsado in dagaal aanu ahayn habka lagu xalin karo arrimaha ka dhextaagan dawladaha.

2. In arrimaha dawladaha ka dhexeeya lagu dhammeeyo wada hadal nabadgelyonimo.

3. Sinnaan, is-afgarasho iyo is-aammin dhexmara dawladaha.

4. In dawlad kasta aqoonsato xaquuqda iyo danaha dawladaha kale.

5. In aan dawladina dawladda kale arrimaheeda gudaha soo fara gelin.

6. In la aqoonsado in dal kastaa xor u yahay sidii uu arrimaha dalkiisa u dhammeysan lahaa.

7. In dadyowga la gumeysto loo oggolaado afti qaadid, ay ku doortaan, sida ay rabaan in aayahoodu ku dambeeyo.

8. In qarannimada dawladaha iyo xornimadooda la aqoonsado.

9. In iskaashiga dhaqaalaha iyo dhaqanka dawladaha la barbaariyo, asaasna looga dhigo sinnaan iyo ka wada faa'iideysi siman (mutual benefit).

10. In dawladuhu meel uga soo wada jeedaan wixii aadamiga xaquuqdiisa, xornimadiisa iyo aadaminimadiisa wax yeeleysa sida gumeysiga iyo midabtakoorka.

Burjuwaasiyiintu waxay yiraahdaan si uu u hirgalo mabda'a nabad ku noolaanshuhu, waxaa lagama maarmaan ah in laga nabdo dhinaca ideoloojiyada oo dalalka hantiwadaaggu iska dhaafaan halganka ideoloojiga ah ee ay ugu horseedayaan in hantigoosadku baaba'o.

Halganka Ideoloojiga ahi ma dhex maro dadyowga ee wuxuu ka dhex dhacaa dabaqadaha ku dhexnool dadka, isla markaasna wuxuu leeyahay heer adduunweyne (adduunka hantigoosadka iyo adduunka hantiwadaagga).

Inta adduunka ay jiraan dabaqado waa jirayaa halgan

ideolooji ahi ama ha ahaado mid heer adduunweyne ah ama mid ka taagan dad isku dal gudahooda.

Xoogagga Kacaanka ee adduunku ma oggola ideoloojiyada u horseedeysa gumeysiga, ku dulnoolaansho iyo dagaal, ideoloojiyadaas oo ah tan imberyaalisamka, waxay aaminsan yihiin ideoloojiyada u horseedeysa hantiwadaagga, nabadda iyo iskaashi dhexmara dadyowga adduunka ku nool oo dhan.

Dagaal kama dhasho, weligiisna sabab uma noqon ideoloojiyada dawladaha adduunka ee kala jaadka ah, waxaa mitaal cad u ah labadii dagaal ee adduunka ka dhacay oo labadaba ay rideen hantigoosadku kana dhex dhacay dalalkii isku ideoloojiyada ahaa ee hantigoosadka. Suuragalka iyo guuleysiga hantiwadaaggu kuma xirra dagaal dhaca sida Burjuwaasiyiintu yiraahdaan. Marka Hantiwadaaggu noqdo mid ka gacan sareeya dhinac kastaba habka hantigoosadka, marka gumeysigu adduunka ka baaba'o oo Kacaannada xornimo doonku guul buuxda helaan, marka shaqaalaha adduunka kaalintiisu adkaato, waxaa hubaal ah in kacaan hantiwadaag ahi ku guuleysanayo adduunka oo dhan iyada oo aan dagaal adduunweynaha ka dhicin.

Siyaasadda nabad ku wada noolaanshahu waxay suuralineysaa:

1. Dalalka hantiwadaagga oo si habsami ah u dhisa hantiwadaagga, tartan dhaqaaleedkana kaga guuleystaan habka hantigoosadka.

2. Dalalka xoroobey oo ay u suuragasho in ay hirgeliyaan isbeddel Siyaasadeed, dhaqaale iyo bulshanimo intaba.

3. Dhaqdhaqaaqyada xornimo doonka oo ku guuleysta halgankooda waddaniga ah, gacan iyo taageerana ka hela dalalka hantiwadaagga ah.

4. Inaaney usuurgelin in imberyaalisamku farageliyo dalalka xoroobey.

5. Aadamiga oo lagala baxsado dagaal ciribtira iyaga iyo tacabkoodaba.

6. Iskaashi iyo wax isla qabsi dhexmara dadyowga adduunka oo dhan hab kasta ha ku dhaqmeene, sida iskaashiga dhaqaalaha, cilmiga teknoloojiyada iyo dhaqanka;

In dadyowga adduunka oo dhami iska kaashadaan oo gacan iska siiyaan arrimaha:

— Deegaanta «environment» ilaalinteeda;

— Barbaarinta gaadiidka iyo wargaarsiinta ee adduunweynaha ka dhexeeya.

— Isaga digitaanka, la dirirka, ka hortagga iyo baabi'inta cudurada halista u ah aadamiga.

— Gacan iska siinta dhibaatooyinka waaweyn ee la xiriira dabeecadda sida dhulgariirka, abaaraha waaweyn iyo daadadka.

— Hore u marinta aqoonta badaha waaweyn iyo hawada sare.

— Dalalka saboolka ah iyo kuwa soo koraya oo gacan laga siiyo xagga teknoloojiyada.

Qodobadaas aan kor ku soo qoray waxay taageero iyo hirgelin ka helaan dalalka hantiwadaagga ah iyo dalalka soo koraya ee hantiwadaagga hirgelinaya, siyaasadooda dibedduna qodobbadaas ku dhisan tahay.

Inkasta oo xoogagga horusocodka ah ee adduunku u horseedayaan nabadgelyo adduunku ku waaro, misana waxaa la ogsoon yahay inta imberyaalisam jiro adduunka in balanqaad nabadeed oo aadamigu ku waaraa ay halis ku jirto.

## MADAXA IX

## HABKA HANTIWADAAGGA ADDUUNKA

1. Habka hantiwadaagga adduunku, waa xoogga ugu weyn xoogagga kacaannada adduunka, lidna ku ah imberyaalisamka. Danaha iyo siyaasadda adduunka hantiwadaaggu waxay isku mid yihiin danaha aadamiga intiisa badan. Guulaha ay gaaraan dadyowga dalalka hantiwadaaggu, ayna ka gaareen dhinaca dhismaha hantiwadaagga waxay suura gelinaysaa :

— Barbaarinta socodka kacaannada adduunka.

— Xoojinta nabadda adduunka.

— Diimuqraadinimada.

— Xornimo waddani ah oo dadyowga la gumeystaa gaaraan.

— Xornimo halganka adduunku ugu jiro in hantiwadaag adduunka ku guuleysto oo saameeyo.

**b) Abuuritaankii adduunka hantiwadaagga :**

Adduunka hantiwadaaggu, waa isbahaysi ay isbahaysteen dalal madaxbannaan oo ay iska bahaysteen dhinaca bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda kuna socda jidka hantiwadaagga, ayna mideysay dan iyo ujeeddo keli ahi, istaageersiga iyo iskaashiga caalamiga ee hantiwadaagga. Dalalka hantiwadaagga dhisay ee ilaa iyo hadda ku guulaystay waxay ka kooban yihiin ilaa iyo 14 dawladood :

1. Jamhuuriyadda Dadka ee Bolgaariya.
2. Jamhuuriyadda Dadka ee Albaaniya.
3. Jamhuuriyadda Dadka ee ee Hangeeriya.
5. Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Jarmalka.

6. Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha.
7. Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Dadka Kuuriya.
8. Jahmuuriyadda Kuuba.
9. Jamhuuriyadda Dadka ee Mongooliya.
10. Jamhuuriyadda Dadka ee Booland.
11. Jamhuuriyadda Hantiwadaagga ee M. Soofiyeeti.
12. Jamhuuriyadda Hantiwadaagga ee Roomeeniya.
13. Jamhuuriyadda Hantiwadaagga ee Jekoslafaakiya.
14. Jamhuuriyadda F. Hantiwadaagga ee Yugoslaafiya.

Dagaalkii labaad ee adduunka ka hor dalalka hantiwadaaggu waxay ku fadhiyeen 17% dhulka adduunka haddana 26%, tirada dadkuna 7% tirada tirada dadka adduuunka, haddana in ka badan 1/3 (1,2 milyaard oo qof), tacabka warshadaha aduunkana 10%, haddana 39%. Dagaalkii labaad dhammaadkiisii ka hor, waxaa jirey laba dal oo hantiwadaag ah, Midowga Soofiyeeti iyo Jamhuuriyadda Mongooliya, adduunka hantiwadaag ahi wuxuu abuurmay dagaalkii labaad ka dib, markii Kacaan hantiwadaag ahi ka curtay dalal badan oo Yurub iyo Aasiya ah. Waxaa kacaannadaasi ka dhasheen halgan dabaqi ah iyo xornimo u dirir ay la dirirayeen faashiisamkii dalkooda qabsaday, waxaa xoojiyey bislaanshihii kacaannada ee dalalkaas jebitaankii la jebiyey faashiisamkii Jarmalka, Jabbaanka iyo Talyaaniga. Kacaannadii hantiwadaagga ahaa waxay ka curteen dalalkaas adduunka oo heer taariikheed cusub maraya :

1. Hantigoosadkii oo laciifay.

2. Habkii gumeysiga oo bilaabmay in uu adduunka ka baaba'o.

Haddii markii Kacaan hantiwadaag ahi ka curtay Midowga Soofiyeeti aanay jirin dawlad kale oo hantiwadaag ah oo gacan siisa, aan ka ahayn ra'yiga guud ee dadweynaha horusocodka ah ee adduunka, markii Kacaannadu ka curteen dalalkaas, waxaa jiray Midowga Soofiyeeti oo dawlad xoog leh

ahaa, gacan weynna siiyey dalalkaas, waxaa fashilay cunaqabateyntii ay is yiraahdeen dalalka hantigoosadku ku sameeya dalalkii hantiwadaaggu ka curtay.

Midowga Soofiyeeti wuxuu dalalkaas siiyey kaalmo weyn dhinac kastaba, dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha iyo isaga oo ka taageeray Golayaasha adduunweynaha. Markii dalalkaasi xornimadoodii ay u dagaallamayeen ee la dagaallamayeen faashiisamkii Jarmalka iyo Jabbaanka ee dalalkooda haystay, ama ay la dagaallamayeen dabadhilifyadii iyo burjuwaasiyaddii dalalkooda, badankoodu waxay isticmaaleen qaab dagaal, qaarkoodna intii dagaalkii labaad socday ayey u suuragashay inay kacaan hantiwadaag ah ka curiyaan si nabadgelyo ah. Miitaal ahaan, xisbigii shuuciga ahaa ee Jekoslafaakiya, isaga oo ku tiirsanaya kalsoonida dadweynaha wuxuu ku guulaystay in Baarlamaankii markaas jiray go'aan qaato in la sameeyo isbeddel diimuqraadi ah iyo mid hantiwadaag ah intaba, 1948 markii burjuwaasiyiintu Jokoslafaakiya isku dayeen inay afgembi ka sameeyaan oo ay xukunka ku qabsadaan, shaqaalihii dalka oo uu Xisbiga Shuuciga ee Jokoslafaakiya hoggaaminaya ayaa barriijiyey oo burburiyey. Shiinaha, Kuuriyada Waqooyi, Kuuba iyo Fiyatnaamta Waqooyi, heerkii diimuqraadiga ahaa ee Kacaankooda waxay ku fuliyeen halgan qaab dagaal ah oo ay la dagaallameen imberyaaliyiintii, gumeystayaashii, dabadhilifyadoodii iyo xoogaggii dibusocodka ahaa ee dalalkaas gudahooda. Ka gudubkoodii min heerkii diimuqraadiga ahaa ilaa kacaan hantiwadaag ahise wuxuu kaga fuley si nabadgeliyo ah waayo talisyadii biiruqraadiga milleteriga ahaa ee dalalkaas ka taagnaa, intii dagaalku socday ayaa la burburiyey ama xilligii kacaanka diimuqraadiga. Dalalkaas waxaa lagu sifeeyaa kacaannadoodii inay ahaayeen qaabkoodu «**Kacaannadii dadka ee diimuqdaadiga ahaa**», (Peoople's Democratic Revolution). Dalalkaas 1948-1949, waxaa baaba'ay oo laga tirtiray bulshadii dabaqadihii burjuwaasiga ahaa, waxaana gundhig u noqday tallaabooyinka ay ka mid ahaayeen :

1. Warshadihii Dalka oo la qaraneeyey dhirbaaxo weynna u noqotay Burjuwaasiyadii Dalka iyo kuwii ajnebiga ahaa ee Dalka maalka ku lahaa intaba.

2. Habkii dadka ee Dimuqraadiga ahaa wuxuu helay gundhigii qalabka wax soo saarka ee uu u baahnaa.

3. Waxa dhalatay awood lagu qorsheeyo dhaqaalaha dalka oo loo qorsheeyo si hantiwadaagnimo ah.

4. Waxaa la hirgeliyey isbeddel weyn oo xagga beeraha ah (Agricultural reform) oo dhaliyey bulshada inay ka dhex baaba'aan dabaqadihii Burjuwaasiyadda beeraha.

5. Waxa dhulkii la siiyey beeraleydii (qofkii beeranayey).

6. Waxaa beeraleydii ka xoroowdey shaqadii ahayd midiidinimada ((Serf Labour).

Waqtigaas waxaa kacaan hantiwadaag ahi ka curtay oo ku guuleystay dadkii Shiinaha.

Sidaas darteed habka hantiwadaagga adduunku wuxuu si buuxda u abuurmay Sannadkii 1950.

## T. HORUMARINTA HABKA HANTIWADAAGGA

Horumarinta habka hantiwadaagga adduunku wuxuu ku saabsan yahay laba dhinac oo asaasi ah:

1. Dal kasta oo dalalka hantiwadaagga ka mid ah oo hantiwadaaggu si buuxda uga dhismo.

2. Xiriir nooc cusub ah mid dhaqaale iyo mid siyaasadeed intaba oo ka dhex dhasha dalalka hantiwadaagga ah.

Xiriir iyo iskaashi adag oo dhex mara dalalka hantiwadaagga, waxay u tahay gacan weyn dhismaha hantiwadaagga ee dal kasta oo dalalkaas ka mid ah. Dagaalkii labaad kaddib dalalka hantiwadaaggu waxay fuliyeen hawl aad iyo aad u sarreysa si ay u xoojiyaan habka hantiwadaagga ee adduunka dhinaca dhaqaalaha, siyaasadda, cilmiga iyo dhaqanka intaba. Dalalkaas badankooda waxa ka suura galay sida soo socota :

1. Waxa isbeddelay dhismihii dabaqiga ahaa ee bulshada.

2. Waxa baab'ay dhaqaalihii kala nooca ahaa.

3. Qofkii wax gumeysan jiray waxaa laga qaaday asaaskii dhaqaalaha ee bulshada iyo taliska.

4. Tacabkii beeraha waxaa laga saaray isku dul-noolaanshihii, waxaana la hirgeliyey tacab wadaag.

Dalalka hantiwadaagga ah waxaa badanaya tirada dabaqada shaqaalaha iyo kaalintooda ay ka qaataan nolosha bulshada, mitaal ahaan Hangeeriya tirada shaqaalaheedu wuxuu kordhay saddex laab haddii la garab dhigo intii uu ahaa 1938.

Axsaabta shuuciga iyo kuwa shaqaalaha ee dalalka hantiwadaaggu waxay fulinayaan waajibaadkii ahaa in ay dhisaan bulshooyin hantiwadaag ah oo ay ugu muhiimsan tahay dhaqaalaha hantiwadaagga oo la barbaariyo sida :

1. Wax tacabka (Productivity of Labour) bulshada oo la badiyo.

2. Qalab cusub oo wax lagu tacbo loo sameeyo laguna isticmaalo.

3. Maal-gelinta wax tacabka (Capital Investment) oo si habsami ah loo qorsheeyo.

4. Faa'iidada oo la badiyo oo oolitaanka alaabtana la yareeyo.

5. Kharashka aan galeyn wax tacabka oo la joojiyo.

6. Faa'iidooyinka iyo dulucda hantiwadaagnimada oo ilaa halka ugu sarreysa laga faa'iideysto.

7. Dhaqaale heer sare ah oo loo halgamo.

8. Horukaca oo ka muuqata nolosha bulshada, markaasna garab u noqon karta dadyowga adduunka kale.

Dalalka hantiwadaaggu waxay soo mareen ama haddana dagaal kula jiraan dhibaatooyin badan oo ay ka mid yihiin:

1. Dalal badan oo ka mid ah dalalkaas waqti dheer waxay ku hoos jireen Monobooliyada imberyaalisamka, taas

oo keentay inay dhinaca dhaqaale dhib kala kulmaan.

2. Dhinaca horumarka dhaqaalaha dalalkaasi isku mid ma aha, taas oo la xiriirta in ay dalalka qaarkood ku yar yihiin alaabta qaydhiini, oo dhalisa inay xubno warshadaha ka mid ahi dambeeyaan.

3. Waxay ku dhacaan qaladaad ku saabsan dhinaca qorshaha dhaqaalaha dalka iyo hoggaamintaba, laakiinse bacdamaa habka hantiwadaaggu tilmaamayo hoggaamin wadajir ah oo guddoomin dhexe leh, way ka gudbaan.

4. Dalalka qaarkood horumarka beeruhu wuu ka hooseeyaa horumarka warshadaha arrintaas oo ceejisa horumarka dhaqaalaha guud ahaan.

5. Waxay dalalkaasi soo mareen haddana ku jiraan halgan dabaqi ah oo heer adduunwyene ah, lidna ku ah imberyaalisamka iyo mid gudaha ah oo ay weli sii jiraan dibusocodyo doonaya in ay dalalkaas hantigoosadkii ku soo celiyaan.

Wanaagga habka hantiwadaaggu leeyahay iyo iskaashiga ka dhexeeya dalalka hantiwadaagga ee ku dhisan in bulsho hantiwadaag ah la dhiso ayaa suuragelinaya in dalalkaasi si wadajir ah isaga kaashadaan dhibaatooyinka ay la kulmaan kana gudbaan, arrinta kale ee suuragelisa wadajirkooda waa hoggaaminta ay hoggaaminayaan siyaasadda dalalkaas axsaab shuuci ah iyo axsaab shaqaale oo ku shaqaynaya siyaasad hantiwadaag ee caalaminimo iyo mabda'a wadaijrka broletaariyaadka adduunka.

Imberyaalisamku si joogta ah ayuu ugu taamayaa inuu burburiyo habka hantiwadaagga ee adduunka, taas oo uu isticmaalo tabo badan oo kala geddisan, wuxuu ku isticmaalay cadaadis xagga dhaqaalaha, xiriirka baayacmushtarka oo uusan la sameysan, dicaayado been ah oo uu ku sameeyo iyo isaga oo xataa dagaallo kula kaco. Xoogeysiga dalalka hantiwadaaggu ay ka xoogeysteen dhinaca dhaqaalaha, Siyaasadda iyo gaashaandhigga intaba ayaa dhalisay in aannu Imberyaalisamku ka sameyn adduunka wuxuu doono. Haddii Imberyaaliyiintu ay shalay diidi jireen in ay aqoonsadaan dalalka hantiwadaag-

ga ama in aanay xiriir dhaqaale la yeelan, maanta ma jirto arrin qiimo adduunweyne leh oo dhammaan karta, haddii ayna da lalka hantiwadaaggu qayb ka qaadan.

## J) DALALKA ADDUUNKA EE XOROOBEY IYO DAWLADAHA HANTIWADAAGGA ADDUNKA.

Bilowgii Kontonaadkii qarnigan waxaa bilaabmay burburkii gumeysiga ee adduunka, waxaa dhashay dalal badan oo Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ah oo gobannimadoodii ku guuleystey, kaddib markii ay dhiig badan u daadiyeen, Kacaankii weynaa ee hantiwadaagga ahaa ee Oktoobar ayaa dhigay asaaskii bilowga burburka habka hantigoosadka. Helitaankii ay dalalkaasi heleen gobannimadoodii waxay u noqotay imberyaalisamka dhirbaaxo iyo liciifnimo weyn. Abwaanadii hantiwadaagga cilmigu waxay caddeeyeen in halganka gobanimo doonka ee dadyowga la gumeystaa ay u halgamayaan xornimadooda iyo halganka dabaqada shaqaaluhu u halgamayaan hantiwadaag ay aad isugu xiran yihiin. Dalalka hantiwadaaggu iyaga oo fulinaya mabda'a Hantiwadaagga waxay taageero af iyo gacanba ah siin jireen intii Dalalka Afrika iyo Aasiya ay ku jireen gacanta gumeysiga.

14 Disember 1960 Shirkii XV ee Ururka Ummadaha Midoobey dalalka hantiwadaaggu waxay soo jeediyeen kuna guuleysteen arar oraneysa in dalalka la gumeysto oo dhan la siiyo Madaxbannaanidooda. Dalalka madax bannaan ee Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika, dalalka hantiwadaaggu waxay siiyaan taageero dhinac kasta ah si ay dalalkaasi kor ugu soo qaadaan nolosha dadkooda ee imberyaalisamku gayeysiiyey darxumo iyo silic.

Taageerada iyo iskaashiga ka dhexeeya dalalka soo koraya iyo dalalka hantiwadaagga waxaa mitaal fiican u ah saaxiibtinimada iyo iskaashiga ka dhexeeya J.D.S. iyo dalalka hantiwadaagga ah. Markii dhibaatooyin xagga abaaraha ahi la soo gudboonaadeen Ummadda Soomaaliyeed, Midowga Soofiyeeti gacan weyn ka geystay, Jaalle Siyaad oo arrintaa ka hadlay wuxuu yiri: «**Ummadda Soomaaliyeed marnaba ma ilaabi doonto gargaarka taariikhiga ah ee Ummadda Midowga Soofiyeeti u**

**geysatey Soomaaliya sida aanay u ilaawi karin Cadowgeeda»** (Xiddigta Oktoobar, 21.8.1975).

Iskaashiga ka dhexeeya dolalka hantiwadaagga iyo dalalka soo koraya wuxuu suuragelinayaa:

1. In imberyaalisamku liciifo.

2. In xoogagga Kacaannadu xoogeystaan.

3. In gumeysigu ka baaba'a adduunka.

4. In nabadgelyada adduunku adkaato.

5. In dhaqdhaqaaqyada gobanimo doonku ku guuleystaan halgankooda.

6. In dalalka hantiwadaaggu si habsami ah u dhisaan hantiwadaag.

7. In dalalka soo korayaa dhisaan dhaqaaladoodii gumeystayaashu dib u dhigeen.

8. Wuxuu suuragelinayaa in aannu gumeysiga cusubi ka fushaan dalalka soo koraya siyaasadiihiisa, dalalkaasina doortaan habka hantiwadaagga in ay qaataan hirgelintiisa.

9. Wuxuu suuragelinayaa in adduunka ay ka hirgalaan, Dimuqraadinimo, nabadgelyo iyo hantiwadaag.

Iskaashiga dalalka hantiwadaagga, dalalka soo koraya iyo dhaqdhaqaaqyada xornimo doonk ee adduunku wuxuu ku dhisan yahay sinaan iyo is xaq dhawr. Iskaashigaasi wuxuu dalalka soo koraya gayeysiinayaa in ay gaaraan Madaxbannaani dhinaca dhaqaalaha, in ay ka gudbaan dibudhici dhinaca aqoonta iyo dhaqanka iyo in ay jidka hantiwadaagga raacaan. Guulaha waaweyn ee dalalka hantiwadaaggu ka gaareen dhinaca dhaqaalaha waxay suuragelinaysaa in ay gacan siiyaan dalalka soo koraya si ay dalalkaasi uga baxsadaan addoonnimo jaad cusub ah oo imberyaaliisamku kula kaco, horumar degdeg ahna u gaaraan. Dalalka hantiwadaaggu waxay siiyaan dalalka soo koraya qalabka Warshadaynta, waxay wada sameystaan heshiisyo baayacmushtar oo u dan ah labada dhinac iyo awoodda dhaqaalaha ee dalalka soo koraya. Dalalka hantiwadaaggu waxay siiyaan dalalka soo koraya amaaho muddo

dheer ah oo aanay ka dambeyn ka faa'iideysi sida monobooliyada adduunku ka doonto dalalka soo koraya.

Waxa kale oo dalalka hantiwadaaggu ka kaaliyaan dalalkaas qiimo weynna u leh dhaqaalahooda cilmiga teknoloojiyada sida xoogga dabka, mashiinnada, teknoloojiyada cusub, warshadaha dhismaha iyo kiimikada, taas oo u suura gelinaysa in dalalka soo korayaa ay yeeshaan warshado ku socda wixii adduunku ka gaaray teknoloojiyada cusub, waayo uma baahna dalalkaasi inay soo maraan heerarkii badnaa ee kacaanka teknoloojiyadu soo maray. Taageeradaas dalalka soo korayaa ka helaan dalalka hantiwadaagga waxay suura gelinaysaa in dalalkaasi ay si degdeg ah kor ugu qaadaan dhaqaalahooda.

Haddii la qiyaaso taageeradaas dalalka hantiwadaaggu ilaa iyo 60 dawladood oo Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika ah waxay ka wadaan dhismo warshado, biya-xireen iwm. iyo mashruucyo fara badan oo kale, waxay kale oo dlalaka soo korayaa ka helaan dalalka hantiwadaagga waayo-aragnimada wax tacabka, diyaargaraynta aqoonyahannada, farsamayaqaannada iyo shaqaalaha si ay dalalkaasi hore uga maraan dhinaca cilmiga iyo dhaqankaba.

### x) TARTANKA LABADA HAB ADDUUNYO.

Tartanka ka dhex taagan labada hab bulshadeed ee adduunyada waxaa ugu weyn tartanka dhinaca dhaqaalaha. Dalalka hantiwadaaggu waxay fiiro gaar ah siiyaan horumarinta xoogagga tacabka iyo kor-u-qaadidda heerka nolosha ee xoogsatada.

Dagaalkii kowaad bilowgiisii Ruusiya waxay ka dambeysay Marykanka 8 goor, dagaalkii badnaa ee Midowga Soofiyeeti la galay imberyaaliisamka aad ayuu u sii dhaawacay dhaqaalihii dalka. Waqtigaasna waxaa jiray dal hantiwadaag ah, dalka Midowga Soofiyeeti oo keli ah, dadka Midowga Soofiyeeti xilkasnimadooda iyo hoggaamintii fiicnayd ee uu hoggaaminayey Xisbiga Shuuciga, ayaa gaarsiiyey inay waqti gaaban kor noloshoodii u soo qaadaan dhaqsihii horumarka Midowga Soofiyeeti uu hore ugu maray, waxay tusaysaa awoodda habka hantiwadaaggu leeyahay in ummaddii ku

dhaqmaysaa ka hor marayso ummaddii habka hantigoosadka ku dhaqmaysa.

Haddii Ameerika, Jarmalka iyo Ingiriisku 80 ilaa 150 sannadood gudahood tacabka warshaduhu 30 goor kor u kacay Midowga Soofiyeeti intaas oo kale wuxuu ku gaaray 40 sano gudahooda, iyada oo weliba saddex dagaal Midowga Soofiyeeti muddadaas soo galay oo mid waliba waqti dheer socday, dhaqaalihii dalkana dhaawac u geystay.

Dalalka hantiwadaagga ee ku bahoobey suuqa loo yaqaanno «Suuqa Dhaqaalaha Hantiwadaagga», tacabka warshadaha ee dalalkaasi 1969 wuxuu kor u kacay 6,7 goor marka loo eego 1950, dalalka hantigoosadkuna 2,7 goor oo keli ah. Haddii dalalka hantigoosadka ah, dadka wax tacbayaa ay ka dhibaatoodaan wixii ay tacbeen, laguna dhibo iyaga, dalalka hantiwadaaggu horumarka ay ka gaareen dhaqaalaha wuxuu u qabanayaa danahooda iyo nolol wanaajintooda. Waxaa maalinba maalinta ka dambeysa kor u kacaya nolosha dadyoga dalalka hantiwadaagga dhinac kastaba, guulahaas waaweyn ee dalalka hantiwadaaggu gaareen una halgamayaan, waxay u tahay garab giddi dadyowga adduunka khaas ahaan xoogagga kacaannada ee adduunka, isla markaasna waxay u tahay dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika tusaale cad oo ay ku soo hirsadaan, kuna qanciya in habka hantiwadaaggu yahay kan keli ah ee gaarsiin kara inay ka gudbaan dibudhicii qarniyada gumeysigu ku hayey ee gaarsiiyey.

Jaalle Siyaad wuxuu yiri, markii uu ka hadlayey Ololihii Hantiwadaagga ee Soomaaliya: **«Hantiwadaagga Cilmiga ahi waa kan qudha ee saxa ah, wuxuuna ballan qaadayaa nolol aadaminimo oo qof waliba helayo, xaqiisa iyo inuu horumariyo oo uu gaarsiiyo heerka ugu sarreeya awooddiisa iyo fikraddiisa», (Dadkayaga iyo Dalkayaga) 1969-74 bog. 101.**

## QAYBTA III

## DHISMAHA HANTIWADAAGGA
## — MADAXA X —

### 1. MURTIDA XILLIGA KALA GUURKA

Xilliga kala guurka min hantigoosad ilaa hantiwadaag waa xilli in la soo maro, lama huraan u ah dalalka hantiwadaagga dhisaya oo dhan.

Marks qoraalkiisii **«critics to the gotha programme», wuxuu ku yiri: «Hantigoosad ilaa hantiwadaag waxaa u dhexeeya muddo, muddadaas oo si kacaannimo ah kan hore kan dambe loogu beddelayo».**

(K. Marks iyo F. Engels B. 19 B. 27).

### ASTAANKA LAGU GARTO HANTIGOOSADKA :

1. Qalabka wax soo saarka oo ku dhisan wax lahaansho gaar ahaaneed.
2. Shaqo la'aan iyo shaqaalaha oo xooggooda iibiya.
3. Qof qof ku kor nool.
4. Taliska oo burjuwaasiyaddu haysato.

### ASTAANKA LAGU GARTO HANTIWADAAGGA :

1. Qalabka tacabka (wax soo saarka) oo ku dhisan wada lahaansho bulshadu wada leedahay.
2. Taliska oo dabaqadda shaqaaluhu haystaan.
3. Isku kor noolaansho oo aan jirin.

**b) Maxaa looga baahan yahay xilliga kala guurka ?**

Waxa looga baahan yahay waayo, hantiwadaagga waxaa u asaas ah qalabka tacabku (wax soo saarka) inuu bulshada u dhexeeyo, taasina ma suura gasho inay dhalato inta habka hantigoosadku taagan yahay, sidaas daraaddeed dabaqadda shaqaaluhu waa in ay burburiyaan taliska burjuwaasiyiinta taagaanna diktaatooriyad ay leeyihiin, markaasna ay iyada adeegsadaan si ay u tirtiraan wax lahaanshaha gaar ahaaneed (hantigoosadka una dhisaan hantiwadaag).

Ma dhici karto in hantiwadaag markiiba la taago oo la dhiso, waxaa loo baahan yahay waqti, waxaa loo baahan yahay in la sameeyo isbeddel fara badan oo saameeya dhinaca dhaqaalaha, bulshada iyo ruuxa intaba.

Xilliga kala guurku wuxuu ku tilmaaman yahay xilii ay jiraan **hantigoosad iyo hantiwadaag labaduba.**

Dalalka soo koraya ee Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika waa dalal wax badan isaga mid ah, taas oo ah dhaqaalahooda oo hooseeya, tirada broletaariyaadka oo yar iyo dhibaatooyin uu gumeysigu ku abuuray.

Waxay ku kala duwan yihiin : Heerka dhaqaalaha ee dalalkaas oo kala sarreeya oo ay qaarkood ku dhaqmaan hantigoosad sida dalalka Laatiin Ameerika oo ay jiraan calaamadihii lagu yiqiin, qaarkood oo Afrika u badanina ay weli ku jiraan hababkii ka horreeyey hantigoosadka.

Hase ahaatee, marka dalalkaas dal ka mid ah kacaan u horseedaya hantiwadaag ka curto qaab kasta ha ku dhashee, waxaa lagama maarmaan ah in ay soo maraan xilliga kala guurka, waqtigaas oo isugu jira laba heer :

1. Tallaabooyin ama heer kacaan diimuqraadi ah.

2. Tallaabada labaad oo ah in Kacaanka diimuqraadiga ahi uu dallaco Kacaan hantiwadaag ah.

Tallaabooyinkaas diimuqraadiga ahi waxay u horseedayaan tirtiritaanka raadkii gumeysiga, dhulgoosiga, qabiil

qabiilka iwm. la dagaallanka dibudhacii dhaqaalaha dalka, kor u qaadidda qalabka tacabka, kicinta, baraarujinta iyo mideynta ummadda, tallaabooyinkaas oo u qabbaanaya hantiwadaagga.

Sidaas daraaddeed waqtiga kala guurku waa muddo ay tahay lagama maarmaan in dalalka xoroobay ee doortay jidka hantiwadaagga ay soo maraan, iyada oo ay dhici karto inay muddadu ka badato intii dalalka hantiwadaagga ee Yurubta Bari ugu gudbeen hantiwadaagga, mitaal fiican waxaa dalalka Aasiya, iyo Afrika u ah Jamhuuriyadda Dadka ee Mongooliya oo noqotay dalkii ugu horreeyey ee dhisa bulsho hantiwadaag ah, iyaga oo aan soo marin habka hantigoosadka.

Dhismaha hantiwadaagga ee dalka Mongooliya ma dhici karin in isla markiiba Kacaankii ka bacdi la taago, waxay ahayd lagama maarmaan in Kacaanku qaado tallaabooyin diimuqraadi ah (people's democratic revolution), tallaabooyinkaas ama kacaankaas diimuqraadiga ah oo abuuray xaaladihii suurageliyey in loo gudbo dhismihii hantiwadaagga.

Muddadaasi dalka Mongooliya waxay ku qaadatay waqti dheer min 1921 ilaa 1940, min 1940 ilaa 1960, dadka Mongooliya waxay ku hirgeliyeen dhismihii hantiwadaagga.
Waxaa kale oo tusaale fiican u ah dalalka soo koraya ee hirgelinaya hantiwadaagga waayo'aragnimadii kacaanka Soomaaliyeed ee 1969 ilaa iyo 1975.

Xilliga kala guurka waxaa jiri kara dalka dhisme dhaqaale oo kala duwan, Lenin wuxuu, «Ruusiya waqtigeedii kala guurka waxay lahayd»:

1. Dhaqaale Hantiwadaag.
2. Dhaqaale hantigoosad.
3. Dhaqaale hantigoosad dawladeed.
4. Dhaqaale dabiici ah.
5. Dhaqaale ku dhisan wax soo saarka qalabka yaryar.

Wuxuu yiri si hantiwadaag loo dhiso, waxaa loo baahan yahay in la tirtiro qaab dhaqaaleedka kala duwan oo dhan iyada oo la qabbaansanayo ama qaranayn ama canshuur xoog leh oo la saaro, lagana soo reebo kan hantiwadaagga ah.

Waqtiga kala guurka min hantigoosad ilaa hantiwadaag, dabaqadda shaqaaluhu waa inay noqotaa tan hoggaaminta leh, madaxna uu ugu yahay xisbigoodu, xisbigaas oo ah xisbi Marksi-Lenini ah.

**t) WAAJIBAADKA WAQTIGA KALA GUURKA : DHINACA SIYAASADDA :**

1. In la xoojiyo horena loo dhigo dikaatooriyadda broletaariyaadka.

2. Shaqaalaha oo bahaysta xoogagga kale oo xoogsatada.

3. Midnimada iyo walaalnimada dadka oo la adkeeyo.

4. Dadweynaha oo si ballaaran looga qayb geliyo dhismaha hantiwadaagga iyo hoggaaminta, dawladda iyo nolosha bulshada.

**DHINACA DHAQAALAHA :**

1. Qalabka tacabka (wax soo saarka) oo laga dhigo hanti dadweyne.

2. Xiriirka tacabka oo laga dhigo xiriir ku dhisan hantiwadaagnimo dhinc kastaba, gundhigna uu yahay :

— Wax wada lahaanshaha dadweynaha ka dhexeeya.

— Tacabwadaag.

**DHINACA IDEOLOOJIYADA IYO DHAQANKA :**

1. In la sameeyo Kacaan dhaqan, cilmiga iyo dhaqanka dadka kor u qaada.

2. In la abuuro aqoonyahanno dadku leeyahay.

3. Ideoloojiyada hantiwadaagga oo noqota tan keli ah lana hirgeliyo.

**DHINACA BULSHADA :**

1. Dhismaha bulshada oo la beddelo.

2. dabaqadaha wax ku kor nool ee wax dulleysta oo la tirtiro.

3. Niyada iyo kaalinta shaqaalaha oo la beddelo.

4. Dabeecadda bulshada iyo sikoloojiyada beeraleyda iyo aqoonyahanka oo la beddelo.

5. Ummadda oo dhinaca Siyaasadda iyo bulshada ka sinnaata.

6. Farqiga u dhexeeya miyiga, tuulooyinka iyo magaalooyinka in la tirtiro loona hawl galo.

7. Tirtiritaanka farqiga shaqada maskaxda iyo tan gacanta oo loo hawl galo.

Si arrimahaasi u hirgalaan waxaa lagama maarmaan ah :

1. In shaqaalaha ay gacanta ugu jiraan taliska siyaasadda iyo kan dhaqaalaha intuba.

2. Dawladduna dhaqaalaha dalka u habayso si hantiwadaag ah, taas oo keeneysa :

— In la yareeyo kaalinta qofka hantigoosadka ahi ka ciyaaro magaalada iyo miyigaba lana tirtiro.

— In tuulooyinka, beeraha iyo miyiga laga hirgeliyo tacab hantiwadaag ah.

— In la warshadeeyo dalka.

Waqtiga kala guurku wuxuu socdaa min bilowga kacaan hantiwadaag ah ilaa iyo dhismaha hantiwadaagga( abuuritaanka dhaqaale hantiwadaag iyo dabaqadda dadka ku kor nool oo la burburiyo).

Muddada waqtiga kala guurku dal kasta inta ay ku qaadanayso waxay ku xiran tahay :

— Heerka xoogagga tacabka.

— Saamigalka (proportion) dabaqadaha dalka iyo arrimo kale oo badan, lana xiriira xaalaadka dalka gudihiisa iyo dibedda.

Waxaa la ogsoon yahay in haddii hereka hore u kaca xoogagga tacabka ee dalku hooseeyo inay adkeyneyso hirgelinta hantiwadaagga, isla markaasna ay dheeraaneyso muddada lagu jirayo xilliga kala guurka.

Muddada xilliga kala guurka iyo dabeecaddiisu waxa gacan weyn ku leh xaaladda dalka gudihiisa ka taagan, tan adduunweynaha, siyaasadda dalku ku socdo. Midowga Soofiyeeti xilliga kala guurku wuxuu dhammaaday 1936, waxay dalka Midowga Soofiyeeti dhiseen hantiwadaag iyaga oo dhibaatooyin badani la soo gudboonaadeen sida: Cadowyo hantigoosad ah oo ku xeeraa dagaakii koowaad, oo dhaqaalihii hoos u riday iyo iyada oo Kacaankii ka dhaxlay boqortooyadii Ruusiya dhaqaale markiisii horeba aad u hooseeyey.

Bulgaariya, Jarmalka Diimuqraadiga ah «GDR», Ruumeeniya, Kuuriya iyo dalalka kale ee hantiwadaagga ah, muddadii ay ku qaadatay xilliga kala guurku aad ayey u yarayd taas oo ay ka faa'iideysteen waayo'aragnimadii Midowga Soofiyeeti, gacanna ka helay. Xaalaadka adduunweynuhu wuu fiicnaa waqtigaas oo waxaa jirey dal hantiwadaag ah oo iyaga garab taagan. Arrimahaas oo dhami waxay suura geliyeen in xilliga kala guurka ee dalalkaasi aad u yaraado.

Waqtigan la joogo dalalka xornimadoodii qaatay, kuna jira hababkii ka horreeyey habka hantigoosadka, waxaa u suuragal ah inay u gudbaan hantiwadaag iyaga oo aan marin habka hantigoosadka, waqtigooda kala guurkuna wuxuu noqon doonaa laba tallaabo ama laba heer :

1. Mid guud oo diimuqraadi ah oo u gogoldhigaya xaalaadkii suura gelin lahaa hirgelinta hantiwadaagga.

2. Mid hantiwadaag dhisid ah oo ka bilaabmaya min marka dabaqadda shaqaaluhu hanato taliska dawladda ilaa iyo dhismaha hantiwadaagga, markaas oo ah marka laga baxayo xilliga kala guurka.

Lenin wuxuu yiri: **«Xilliga kala guurka min hantigoosad ilaa hantiwadaag waa waa' (casri) taariikhi ah oo dhan, inta lagu jirana dad ku kor noolayaashii waxay ku nool yihiin rajo, rajadaas oo u beddelmaysa inay isku dayaan inay soo ceshadaan taliska». Lenin B. 37 B. 264).**

Iska horimaadka xilliga kala guurku wuxuu ku sifoobaa : «Yaa adkaan doona ma hantigoosad mise hantiwadaag»?. Sidaas daraaddeed xilliga kala guurka ahi waa lagama maarmaan in dal kasta oo dhisaya hantiwadaag soo maro, ama ha ahaado dal hantigoosad ku dhaqmi jiray ama hababkii hantigoosadka ka horreeyey, si loo sameeyo gundhiggii dhismaha hantiwadaagga oo isbeddel laga gaadho dhinaca dhaqaalaha, dhaqanka, bulshada, ruuxa iyo niyad hantiwadaag oo dadka lagu abuuro, markaasna diishiibliin adag oo nooc cusub ah la hirgeliyo.

## j) XEERARAKA GUUD EE DHISMAHA HANTIWADAAGGA IYO KALA GAAR AHAANTA DALALKA.

Xaalaadka dhaqanka-dhaqaalaha dalalka badankoodu xilliga kala guurka min hantigoosad ilaa hantiwadaag waa isku mid, sidaas daraaddeed dhismaha hantiwadaagga dalalkuna wuxuu leeyahay xeerar guud oo isku mid ah iyo kuwo gaar ahaaneed. Xeerarkaasi waxay sameeyaan nolosha bulshada dhinac kasta. Dhismaha hantiwadaagguna wuxuu suura geli karaa markii si habsami ah loo qabbaansado oo loogu isticmaalo qawaaniintaas :

## DHINACA DHAQANKA-SIYAASADDA :

1. Kacaan broletaariyaad oo dhasha, diktaatooriyad broletaariyaad oo la taago qaab kastaba ha ku timaaddee.

2. Dadweynaha oo dabaqadda shaqaaluhu hoggaanka u qabto horseedna uu u yahay Xisbi Marksi-Lenini ah.

3. Dabaqadda shaqaalaha iyo beeraleyda iyo dabaqadaha kale ee xoogsatada, oo iskaashi iyo wadajir ka dhex abuurmo.

4. Dadka xiriirka ka dhexeeya ee isnacaybka ah oo la beddelo lana tirtiro is-cadaadinta ummadaha, qabiilka iwm, loona abuuro xiriir ku dhisan sinnaan, jaallennimo iyo walaalnimo.

5. Hantiwadaagga oo laga ilaaliyo cadowga dibedda iyo kan gudahaba.

6. Shaqaalaha dalka oo la yeesha shaqaalaha adduunweynaha iskaashi iyo isgarabsi ku dhisan, broletaariyaadnimo caalami ah.

## DHINACA DHAQAALAHA :

1. Waxlahaanshaha ku dhisan hantigoosadnimo oo la tirtiro, lana taago waxlahaansho ku dhisan hantiwadaagnimo, khaas ahaan qalabka wax lagu tacbo (wax soo saarka).

2. Beeraha iyo miyiga oo la hantiwadaageeyo (tacabwadaag).

3. Dhaqaalaha dalka oo la qorsheeyo, ulajeeddadiisuna tahay in heerka nolosha xoogsatada kor loo qaado.

## DHINACA RUUXA UMMADDA :

1. Kacaan dhaqan oo la sameeyo.

2. Waxbarashada oo khasab laga dhigo.

3. Aqoonyahanno hantiwadaag ah oo la abuuro, diyaarna u ah inay u halgamaan, hirgeliyaanna hantiwadaagga.

Hantiwadaaggu ilaa iyo waqtigan wuxuu ka hirgalay dalalka hantiwadaagga ah ee adduunka, waayo-aragnimadoodu waxay u tahay dalalka kale nasiib wanaagsan iyo miitaal ay ku dayan karaan, iyada oo dal kastaa lala kaashanayo wixii u gaar ah.

Lenin wuxuu yiri : «**Ummadaha adduunka oo dhami**

**waxay noqon doonaan hantiwadaag, arrintaasna wax shaki ku jiro ma aha.**

**Laakiinse geddigood isku mar iyo isku si uma wada qaadan doonaan, ummad kasta waxay soo kordhineysaa qaab dimuqraadinnimo, diktaatuuriyad broletaariyaad jaad gooni ah iyo xaawli isbeddel hantiwadaag oo nolosha bulshada ah.** (V/Lenin B. 30. B. 123).

Xaalaadka ugu waaweyn ee dhalinaya kala gaar ahaanta dalalka u gudubkooda hantiwadaaggu waxa loola jeedaa :

1. Heerka dhaqaalaha ee dalka, khaas ahaan teknoloojiyada.

2. Saamigalka xoogagga dabaqadaha.

3. Qaababka iyo heerka halgammada dabaqadaha.

4. Heerka garaadka iyo abaabulka xoogsatada dadweynaha.

5. Haddii ummado kala gaar ahi dalka ku wada nool yihiin.

6. Heerka aqoonta dadka.

7. Caadaadka dadka.

8. Midnimada dadku sida ay tahay iyo waxyaalaha dhibaya.

Waxaa kale oo u gudubka hantiwadaagga dalalka kaalin ka ciyaara saamigalka xoogagga hantiwadaagga iyo hantigoosadka ee adduunka.

Iskaashiga u dhexeeya dawladaha hantiwadaagga, ku jiritaanka ama ku jiritaan la'aanta in dalka hantiwadaagga dhisayaa dagaal kula jiro dawlado kale ama u saro joogo iyo in kale.

Xeerarkaas guud ee dhismaha hantiwadaaggu waxay si fiican u hirgeli karaan marka lala kaashado xaalaadka taariikhiga ah dal kasta marayo.

Iska indhatir la iska indha tiro waxyaabaha u khaaska ah dal kasta waxay keenayaan dhibaato, ama in aanay suuragelin in hantiwadaag dhismo, sidaas daraaddeed, Lenin isaga oo ka hadlaya waaya-aragnimada Midowga Soofiyeeti iyo qiimaha ay u yeelan karto dalalka kale, wuxuu yiri: **«Waajibka ugu weyn dadka hantiwadaagga ah waxaa weeye, in ay ka fekeraan raadiyaan in ay gartaan, bartaan, isku dayaan in ay gartaan oo helaan waxyaabaha gaarka u ah ummad kasta iyo dal kasta, si ay u suuragasho in waajibkaas caalamiga ahi hirgalo, waajibkaas oo ah dhismaha hantiwadaagga»**, (Lenin 41 B. 77).

Jaalle siyaad oo isagu ka hadlay hirgelinta hantiwadaagga ee Soomaaliya iyo waxyaabaha u gaarka ah Soomaaliya, isaga oo la yeeshay wareysi war tebiyeyaal ka yimid dalka Yugoslaafiya wuxuu yiri: **«Soomaaliya hantiwadaagga ay qaadatay waa midka cilmiga ku fadhiya, docna uga weecan mayno shuruudda habkaas siyaasiga ahi leeyahay. Isla markaas waxaannu mar kasta fiiro gaar ah u yeelaneynaa heerka nolosha taalla dalkayaga iyo sida habboon oo aannu u hirgelin karno hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, waakaas hantiwadaagga aannu doorannay, maxaa yeelay waxaannu og nahay inuu yahay habka keliya ee dadkayagu ku gaari karo horukac, sinnaan iyo xaqa insaaninnimada»**. (Dalkayaga iyo dadkayaga 1971-1972 qaybta 3/B Bogga 59).

Marksism-Leninism, wuxuu u arkaa xeerarkaa guud iyo qaababka loogu gudbo hantiwadaag, qodobbo aan kala go'i karin oo isugu xiran si Diyaaletiko ah. Dibusocodyada midigtu (Revensionists) waxay aad u xoojiyaan, waxyaalaha gaarka u ah ummad kasta, taasoo ay ku dhawaaqaan «Hantiwadaag waddani ah» iwm. Fikradaha jaadkaas ahi waxay lid ku yihiin xeerarka guud ee dhismaha hantiwadaagga, cilmiga Marksism-Leninism iyo waaya-aragnimada adduunku ka gaarey dhismaha hantiwadaagga.

Waxa kale oo jira dad qaba afkaar diideysa in dal kasta iyo ummad kasta laga tixgeliyo waxyaabaha u gaarka ah kuwaas oo loo yaqaan dogmada (Degmatists), waxay diidaan kala duwaanshaha ay kala duwan yihiin qaababka kala duwan ee loogu gudbo hantiwadaagga, waxay u baaqaan in

## Xeerarka guud ee dhismaha hantiwadaagga

### Dhinaca dhaqanka Siyaasadda

- Kancaan hantiwadaagga oo dhasha lana taago diktaatuuriyad broletaariyaadku leeyahay qaab kasta ha lahaatee
- Dhabaqadda shaqaalaha oo hoggaamisa xoogsatada horseedna uu u yahay Xisbi Marksi-Leniini ahi.
- Shaqaalaha oo la yeesha Beeraleyda iyo xoogsatada inteeda kale iskaashi iyo wadajir.
- Dadaka oo laga dhex abuuro sinaan walaalnimo iyo jaallenimo
- Kacaanka oo laga daafaco cadowga dibadda iyo kan gudaha
- Xiriir jaaallenimo oo broletaariyaadka adduunka lala yeesho

### Dhinaca Dhaqaalaha

- In la tirtiro waxlahaanshaha ku dhisan hantigoosadnimada, lana taago waxlahaansho ku dhisan hantiwadaag iyo tacab wadaag.
- Dhaqaalaha dalka oo taallaabo, tallaabo loo hantiwadaageeyo
- Dhaqaalaha dalka oo lagu wado qorshe, ulajeedaduna tahay in nolosha dadweynaha kor loo qaado

### Dhinaca niyadda dadka

- In la qaado kacaan hantiwadaag dhinaca ideoloojiyada dhaqanka, lana abuuro aqoonyahano hantiwadaag aaminsan.

Xilka ugu weyn ee dadka hantiwadaagga la gudbooni waxa weeye, in ay ka fekeraan, raadiyaan in gartaan, bartaan, isku dayaan inay gartaan oo helaan waxyaalaha gaarka u ah ummad kasta iyo dal kasta, si ay u suuragasho in xilkaas caalamiga ahi hirgalo, xilkaas oo ah dhismaha hantiwadaagga.

«Lenin B. 41 B. 77»

dal sawir ahaan u qaato waaya-aragnimadii dal kale, taas oo dhalineysa in la duudsiyo awoodda xoogsatada dadweynaha. Sidaas daraaddeed waxaa lagama maarmaan ah in la tixgeliyo xilliga kala guurka iyo xilliga dhismaha hantiwadaagga intaba. Diyaaletikada xeerarka guud ee dhismaha hantiwadaagga dal kasta iyo ummad kasta wixii u gaar ah.

1970kii xuskii sannadguuradii ee koowaad ee Kacaanka ayaa Jaalle Siyaad ku dhawaaqay in Jamhuuriyadda Diimuqraadiga ee Soomaaliya dhisayso oo hirgelineyso Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ah, si uu u rumoobo qodobkii koowaad ee Xaashida Kacaanka kuna dhawaaqayey in la dhiso bulsho Soomaaliyeed oo ku dhisan sinnaan, caddaalad iyo shaqo. Soomaaliya waxay la wadaagtaa ummadaha kale ee Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerik dhibaatooyinkii gumeystayaashu soo gaarsiiyeen iyo kuwo u gaar ah oo ay gumeystayaashu u geysteen.

Iyada oo ku socota Mabda'a Marksism-Leninism misana Soomaaliya waxay tixgelineysaa waxyaabaha u gaarka ah ee la xiriira :

1. Heerk horukac xoogagga tacabka dalka.
2. Noocyada dhaqaalaha ee dalka jira.
3. Dhismaha dabaqadaha dalka.
4. Garaadka siyaasiga ee dadka, khaas ahaan xoogsatada.
5. Xaalaadka dalalka Soomaaliyeed ee weli ku jira gacanta ajnebi.
6. Xaaladda siyaasadda ee adduunweynaha iyo taageerada ay Soomaaliya filan karto.

Xilliga kala guurka ee Soomaaliya ku jirtaana waxa dhererkiisu ku xiran yahay qodobbadaas aan kor ku soo sheegay, lixdi sannadood ee Kacaanku jirey Soomaaliya waxay si weyn ugu guuleysatay dhinac kasta, dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada intaba.

Khaas ahaan waxaa guulo waaweyn laga gaarey kor-udhigidda dhaqaalaha dalka iyo garaadka siyaasiga ah ee dalka sida midnimada iyo qarannimada Soomaalida. Waxaa si tifaftiran looga heli karaa horukaca lagu gaarey dhinac kasta ama heerka la himileysanayso qorshaha 5ta sano 1971-1978 iyo kii saddexda sano 1971-1973.

Guulaha Soomaaliya ka gaartay ilaa iyo imminka hirgelinta hantiwadaagga iyo waaya-aragnimadeedu waxay u tahay dalalka adduunka faa'iido ay tixraaci karaan.

## 2. DIKTAATUURIYADA BROLETAARIYAATKA

Diktaatuuriyada Broleetaariyaadku, waa awoodda ugu weyn ee suuragelineysa in la tirtiro habka hantigoosadka iyo in la dhiso bulsho cusub oo hantiwadaag ah. Waxay taagnaaneysaa xilliga kala guurka oo dhan ilaa iyo inta si buuxda dhismaha hantiwadaaggu u guuleysto.

Dalalka Afrika waxay u kala baxaan ama dal sida J.D.S. doortay in uu dhiso bulsho hantiwadaag ah Kacaan kaddib, hormood ciidammada qalabka sida u ahaayeen xoogsatada ama dal sida Moosambiik doortay hirgelinta hantiwadaagga intii halganka xornimodoonka waddaniga ay ku jireen; labada siyoodba ma jiraan borletaariyaad tiro ahaan iyo garaad ahaan intaba hanan kara diktaatuuriyad ay leeyihiin, sidaas daraaddeed inta dalalkaasi ku jiraan xilliga kala guurka ayey tahay waajib in la barbaariyo oo la habeeyo shaqaalaha. Marka gundhiggii loogu gudbi lahaa dhismaha hantiwadaagga la sameeyo, ayaa diktaatuuriyad broletaariyaad ahi dhalan kartaa si loo dhiso bulsho hantiwadaag ah.

### Murtida Diktaatuuriyada Broletaariyaadka

Talis kasta oo bulsho ka dhex dhashaa murtidiisu waxay ku sifowdaa hadba dabaqada gacanta sare leh iyo waajibaadka aasaasiga ah ee ay fulineyso.

**Lenin wuxuu yiri: «Talis dawladeed waa in uu ku dhisan yahay ama diktaatuuriyad broletaariyaad ama diktaatuuriyad burjuwaasi, mid saddexaad ma jirto mana jiri karto».**

**Diktaatuuriyada Broletaariyaadku — waa Talis Shaqaale oo la leh wadajir xoogsatada inteeda kale, ujeeddadeeduna tahay dhisme Hantiwadaag.**

Waa maxay waajibaadka aasaasiga ah ee ay fulineysaa diktaatuuriyada broletaariyaadku?

**I**

1. In ay burburiso dabaqada wax addoonsata ee wax ku kor nool.

2. In ay ka daafacdo dawladda hantiwadaagga cadowga imberyaaliyadda ee dibedda.

3. In ay xiriirka caalamiga ah ee shaqaalaha adduunka adkeyso.

4. In ay taageero siiso dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka ee dalalka kale.

**II**

1. In la sameeyo isbeddel hantiwadaag dhinaca dhaqaalaha, siyaasadda iyo dhaqanka intaba.

**III**

1. In shaqaaluhu hoggaamiyo xoogsatada dadweynaha intooda kale khaas ahaan beeraleyda, ulajeeddada oo ah in si buuxda ay uga soo go'aan burjuwaasiyada, hantiwadaaggana wax ka dhisaan.

Inta lagu jiro dhismaha hantiwadaagga saamigalka xoogga dabaqiga ahi, wuxuu u badanayaa xagga xoogsatada, taasna micnaheedu ma aha in aaney jirin dad dhismaha hantiwadaagga ka soo horjeeda, waa jirayaan, waana in feejignaan weyn la siiyo arrintaas, mitaal fiican waxa adduunka u ah Kacaan-diidnimadii ka dhacay 1956 Hangeeriya. Dalalka soo koraya ee hirgelinaya hantiwadaagga, sidaas oo kale waxa loo baahan yahay in laga feejignaado Kacaan-diidyada doonaya in ay kufiyaan Kacaanka ama ku soo celiyaan dalka habkii

hantigoosadka, gumeysiga cusub iyo darxumadii, waxaa kale oo loo baahan yahay in shaqaaluhu iska jiraan cadowga dibedda ee imberyaaliisamka had iyo goorna gacanta siiya dabadhilifka gudaha kuna adeegta.

Cadaadis dhaqaale, xisaar, been ay ka faafiyaan Kacaanka, iya isaga oo ku soo qaada dalka dagaal ama soo qabaansada talisyo dibusocod ah oo dalka hantiwadaagga dhisaya ay jiraan yihiin haddii uu jiro. Sidaa daraaddeed dawladda diktaatuuriyada broletaariyaadka waxaa ku waajib ah inay adkeyso gaashaandhiggeeda.

Dalalka soo koraya ee ku socda hirgelinta hantiwadaagga, dalalka hantiwadaagga waxa waajib caalami oo broletaariyad ku ah inay gacan xoog leh siiyaan si dalalkaasi dhakhso uga horumaraan dhinac kasta. Diktaatuuriyada Broletaariyaadka micnaheedu waa talis shaqaale, oo la leh iskaashi iyo wadajir xoogstada kale (Burjuwaasiyada yar yar, xoola-dhaqatada beeraleyda iyo aqoonyahanka horusocodka ah).

## T. WAAJIBAADKA DIKTAATUURIYADA BROLETAARIYAADKA EE GUDAHA

1. In ay baabi'iso dabaqadaha wax dulleysta.

2. In ay dhaqaalaha dalka habeyso.

3. In ay xoogsatada dishibiliin hantiwadaag ku abuurto.

4. In shaqada la kormeero oo dishibiliin hantiwadaag lagu guto.

5. In hantida dawladda la dhowro.

6. In xeerarka bulshada u degsan la dhowro iyo xuquuqda dadka dalka.

7. In qof kasta kartidiisa iyo tacliintiisa uu wax ku helo.

## WAAJIBAADKA DIBEDDA

1. In la daafaco dalka, imberyaalisamkana laga ilaaliyo.

2. In taageero la siiyo dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka ah.

3. In dalalka hantiwadaagga ee adduunka la istaageersado.

4. In dalalka xoroobey taageero la siiyo.

5. In nabadda adduunka loo halgamo.

6. In gumeysiga, midabtakoorka iyo gumeysiga cusub lala diriro.

7. In Ururrada iyo Axsaabta shaqaalaha ee dalalka hantigoosadka lala yeesho xiriir adag oo isbahaysi ah.

## DIKTAATUURIYADA BROLETAARIYAADKU WAA DIMUQRAADIYAD NOOC CUSUB AH

Marka Diktaatuuriyada Broletaariyaadku dhalato ama ha ka dhalato dal hantigoosad lagu maamuli jirey oo Kacaan hantiwadaag ahi ka curtay, ama ha ka dhalato dal ku hoos noolaa gumeysi iyo hababkii ka horreeyey habka hantigoosadka, ayna Diktaatuuriyada Broletaariyaadku ka suuragashay dalalkaas dambe kaddib markii la sameeyey tallaabooyinkii gundhigga u noqonayey dhismaha hantiwadaagga iyo barbaarinta dabaqada shaqaalaha, tiro ahaan iyo garaad ahaan intaba, waxay caddeyneysaa in waagii dabaqadihii wax ku kor noolaan jirey dhammaaday, waa cusub oo taliska dadku leeyahayna bilowday. Taliskaas oo lagu maamulayo **Dimoqraadiyad Broletaariyadeed.**

**Lenin wuxuu yiri: «Dimuqraadiyadda Broletaariyaadku malyuun jeer ka Dimuqraadiyeysan Dimuqraadiyaddii Burjuwaasiyiinta».** (Lenin B. 37 B. 257).

## MAXAY SUURA-GELINAYSAA DIMUQRAADIYADDA DIKTAATUURIYADA BROLETAARIYAADKU?

Waxay suuragelinaysaa :

1. Waxay siinaysaa xoogsatada xorriyad buuxda, dhinaca siyaasadda iyo bulshada intaba.

2. Waxay u furaysaa dadweynaha awood ballaaran inay ka qayb qaataan dhismaha dawladda, hoggaaminta iyo qorshaynta dhaqaalaha dalka iyo wixii saameynaya nolosha bulshada.

3. In qalabka tacabka la hantiwadaageeyo.

4. In tacliinta iyo dhaqanka dalku noqdaan kuwo dadku leeyahay.

5. In qalabka warfaafinta, wargeysyada, raadiyaha iyo raadiyaha la iska arkaa soo galaan gacanta dadweynaha.

Diktaatuuriyada Broletaariyaadku iyada oo ballaarinaysa Dimuqraadiyadda xoogsatada iyo tan dadweynaha guud ahaan, misana waxay ciriiri gelinaysaa oo yaraynaysaa Dimuqraadiyadda dabaqadihii wax ku kor noolaan jirey.

Taliska Broletaariyaadku xorriyada hadalka, wargeyska iyo shirka wuxuu u oggol yahay oo keli ah xoogsatada, haddii intaas oo kale loo oggolaado Kacaan-diidka iyo Burjuwaasiyiinta, taasi waxay keenaysaa in Dimuqraadiyadda Broletaariyaadka ay beddesho mid Burjuwaasi ahi.

Cadowyada Hantiwadaaggu, waxay yiraahdaan, Dal Diktaatuuriyadi ka talinaysaa ma yeelan karo Dimuqraadiyad, waa in qof kasta iyo urur kasta la siiyaa xorriyad uu mabda'iisa ku sheego ama ha noqdo Burjuwaasiyadda ama Broletaariyaad, taas oo ay u yaqaanniin «Dimuqraadiyad Buuxda».

Arrintaasi waa tab hantiwadaag diidayaalku ku adeegtaan si ay iyaga oo ku soo gabanay Dimuqraadiyad buuxda raba inay afgembiyaan taliska xoogsatada.

F. Engels warqaddisii uu u qoray Afgost Bebel wuxuu ku yiir: «**Cadowgeenna keli ahi waa dibusocodyada ay kulmiso waxaa ay yiraahdaan Dimuqraadiyadda buuxda ama Dimuqraadiyad nadiif ah, sidaas daraaddeed waa in fiiro dheer loo yeeshaa**». (K. Marks iyo F. Engels B. 36 B. 28).

Bulsho dabaqaad leh, Diktaatuuriyadda iyo Dimuqraadiyaduba waxay leeyihiin micne dabaqi. Dimuqraadiyad aan ahayn dabaqi ama sida Burjuwaasiyiintu yiraahdaan, ma jirto kamana dhex dhalan karto bulsho leh dabaqado, kala dan ah oo kala ujeeddo ah, sida ayna u suurageli karin inay sinmaan qof qof addoonsada ama ku kor nool iyo qofka lagu kor nool yahay.

**V. I. Lenin wuxuu yiri: «Dimuqraadiyad oo laga hadlaa micnaheedu waa in la ilaaliyo halganka dabaqiga ah».** Micnaha oo dhammi wuxuu isugu soo uruurayaa: Dabaqadee ayaa Dimuqraadiyaddu u jirtaa ama leh? Dabaqadee ayaa leh, dabaqadeenna ayey Diktaatuuriyaddu lid ku tahay? Taasoo micnaheedu yahay dabaqadee ayaa talisku gacanta ugu jiraa, waana dantee danta uu daafacayaa?

**Isaga oo ka faalloonaya dawladda xilliga kala guurka wuxuu qoray: Dawladdu waa inay noqotaa dawlad Dimuqraadiyad cusub leh (Dimuqraadiyad Broletaariyaadku leeyihiin, kuwaas oo aan weligood arag Dimuqraadiyad ay leeyihiin), iyo Diktaatuuriyad cusub (oo lid ku ah Burjuwaasiyadda). (V. I. Lenin B. 33 B. 35).**

## J. KALA GAAR AHAANTA QAABABKA DIKTAATUURIYADA BROLETAARIYAADKA

Diktaatuuriyadda Broletaariyaadku waxay kaga duwan tahay Diktaatuuriyadda Burjuwaasiyadda murti ahaan iyo nux ahaan intaba.

Adduunku ilaa iyo imminka inta talisyo dabaqada shaqaale dhaliyeen waxaa weeye :

1. Komunkii Baariis (1871).
2. Soofiyeet (Soviest) «1917».
3. Dimuqraadiyadda dadka (Peoples Democratics) «1948».

Diktaatuuriyadda Broletaariyaadku si ay u hirgasho waxaa lagama maarmaan ah urur suurageliya in dabaqada shaqaalaha iyo xoogsatada intooda kaleba ay si firfircooni ah uga qayb qaataan hoggaanka dawladda. Xubnaha taliska Broletaariyaadku waxay ku dhisan yihiin oo aasaas u ah doorasho iyo beddelaad, dadka ka mid noqonayaana waa ina ahaadaan dadka xoogsatada u karti iyo qofnimo fiican. Xoogsatadu way doortaan xubnaha taliska waana kormeeraan, haddii ay noqoto lagama maarmaan way beddelaan.

Diktaatuuriyadda Broletaariyaadku waxay mideysaa taliska fulinta iyo xeerarka, dawladda xunbaheedu xeerarka ayaga dejiyaa isla markiibana fuliya.

Dhismaha iyo qaabka xubnaha dawladdu waxay ku wada shaqeeyaan oo isku xira xubnaha dhexe iyo kuwa hoose mabda'a **Dimuqraadiyadda guddoominta dhexda.** Mabda'aasi ma oggola «Anarachism» mana oggola «Beauracratism». Dimuqraadiyadda guddoominta dhexdu waxay koobeysaa danta guud ee bulshada oo dhan, iyada oo isla markaasna barbaarinaysa awoodda xubnaha dawladda ee hoose khaas ahaan kuwa Gobollada iyo iyo Degmooyinka, taas oo suuragelinaysa in la daryeelo in xoogsatadu noqdaan kuwa ka taliya arrimaha guud ee dawladda iyo kuwa hoose ee Gobollada iyo Degmooyinka intaba.

Inkasta oo Diktaatuuriyadda Broletaariyaadka ee dalalku leeyihiin wax ka dhexeeya oo ay isku ujeeddo yihiin misana mid kastaa waxay leedahay wax u khaas ah oo la xiriira xaalaadka dalka gudihiisa iyo xaalaadka adduunweynaha.

Diktaatuuriyaddii Broletaariyaadka ee Ruusiya waxay la kulantay oo khaas u ahaa :

1. Halgan dabaqi oo ay Diktaatuuriyaddii Broletaariyaadku iyo xisbigeedii la galeen dibusocodyadii gudaha iyo dibadda.

2. Ma ayna jirin dalal kale oo hantiwadaag ahi.

Xilligii kala guurka min hantigoosad ilaa hantiwadaag ee dalka Midowga Soofiyeeti dabaqadihii wax ku kor noolaan jirey waa loo diidey in ay siyaasaddii ka qayb qaataan, doora-

Diktaatuuriyada broletaariyaatku waa hubka ugu weyn ee dhismaha bulsho hantiwadaagga.

Waajibaadka diktaatuuriyada broletaariyaadka

In ay burburiso shirqoolada dabaqadihii dulkunoolaanshaha u bartay, dalkana ay ka daafacdo dawladaha cadowga u ah

In ay adkeyso xiriirka caalamiga ah ee ka dhexeeya xoogagga horusocodka adduunka, khaas ahaan daqdhaqaaqyada xornimo d oonka waddaniga

In ay sameyso isbeddel hantiwadaagga dhinaca dhaqaalaha siyaasadda iyo dhaqanka intaba.

In xoogsatada iyo dadweynaha oo dhan ku baraarujiso ka qayb galka dhismaha hantiwadaagga, kana soo goyso burjuwaasiyada iskaashina ka dhex abuurto, hanuunisana.

Diimuqraadiyada Broletaariyaadka

Diimuqraadiyad nooc cusub ah oo ay leedahay xoogsatadu

In la suurageliyo in xoogsatadu ka qayb gasho hoggaaminta arimaha dalka.

Diktaatuuriyada broletaariyaadku waa talis dabaqada shaqaaluhu leedahay, wadajir iyo iskaashina la leh xoogsatada oo dhan, si loo dhiso hantiwadaag.

shadii xubnihii dawladda hoggaamin lahaa inkasta oo beeraleydu ka tiro badneyd shaqaalaha, misana shaqaalihii ayaa qayb libaax la siiyey.

Waxaa dalka hoggaaminayey hal Xisbi oo keli ah, taasoo ku timid in markii hore xisbigii shuuciga ee Midowga isku dayey in ay iskaashadaan axsaabtii kale ee dalka jirtey ee u badneyd Burjuwaasiyadda yar yar, si taliska Soofiyeetiga loo xoojiyo, laakiinse axsaabtaasi waqtigii dagaalkii ahliga ahaa ka socday dalka, ayey meel kala soo jeesteen Kacaan diidyadii, sidaas darteed ayey noqontay lagama maarmaan in xisbigii shaqaalaha oo keli ahi jiro.

Diktaatuuriyaddii Broletaariyaadka ee dalalka kale ee hantiwadaagga ee Yurub iyo Aasiya loona yaqaan habkooda (People's Democratics) waxa dhalatay :

1. Waqtigaas imberyaalisamku wuu liciifay, gacanta sarena waxaa lahaa habka hantiwadaagga.

2. Haddii loo eego Kacaannadii Midowga Soofiyeeti, waxay ahaayeen Kacaanno ku barbaaray si nabadgelyo ah.

3. Waxay gacan weyn ka heleen Midowga Soofiyeeti.

Waxa gaar ahaaneed ee dalalkaasi ku sifoobeen, waxay ahayd **inay jirtya Jabhad Siyaasi ah oo kulmisa dadka oo dhan kana koobanaa xoogaggii dimuqraadiga ahaa ee kala duwanaa, madaxna ay u ahaayeen Axsaabtii Marksiyiinta ahaa.** Intii lagu jirey halgannadii ku saabsanaa xornimada waddaniga iyo hantiwadaagga, saamigalkii xoogagga dabaqaduhu way isbeddeleen, taasoo dhalisay in dhismihii Jabhaddu isbeddelo. Waxaa kale oo gaar u ahaa dalalkaas inay jireen axsaab badani, oo la sameeyey axsaabtii shaqaalaha wadajir ku saabsan meel uga soo wadajeed iyo dagaal lagu qaado imberyaalisamka, taasoo u ahayd aasaaskii dhaliyey Jabhad shacbi ah, madaxtinnimadana ay lahaayeen Axsaabtii shaqaalaha ee Marksiyiinta ahaa. Markii ay u gudbeen inay dhisaan hantiwadaag dalalkaasi, Axsaabtii oo dhammi waxay u wada halgameen dhismihii hantiwadaagga, kuwii diidey ee doonayey in hantigoosad dalalkaasi ahaadaanna waxa laga saaray Jabhaddii waddaniga ahayd.

Wadajirkii iyo is-afgarashadii Axsaabtii Shuuciga iyo Axsaabtii Hantiwadaagga (Social Democrats) ay ku heshiiyeen in hantiwadaagga dalkaas laga dhisaa waxay keentay in aan shaqaalihii kala jabin, dhismihii hantiwadaagguna si habsami ah u fulo sida dalka (Hangeeriya, GDR, Jekoslofaakiya iyo Boolaand).

Waqtigan la joogo dalal badan oo dalalka hantiwadaagga ah, waxa jira axsaab badan oo aan broletaariyaad ahayn oo ah axsaab dimuqraadi ah, iskaashi fiicanna ka dhexeeyo axsaabta shuuciga ah ee dalalkaas.

**MITAAL :**

Jabhadda waddaniga ee GDR waxa weli ay ka kooban tahay afar xisbi oo dimuqraadi ah :

1. Xisbiga waddaniga ee Dimuqraadiga ah (National Democratic Party).

2. Xisbiga Dimuqraadiga ee Xorta ah (Liberation Democratic Party).

3. Midowga Masiixiga Dimuqraadiga ah (Christian Democratic Union).

4. Xisbiga Dimuqraadiga ah ee Beeraleyda Jarmalka (German Democratic Peasants Party).

**BOOLAND.**

1. Xisbiga Shaqaalaha Booland ee Midoobay.
2. Xisbiga Beeraleyda.
3. Xisbiga Dimuqraadiga.

**BOLGAARIYA.**

Xisbiga Shuuciga.

2. Xisbiga Dadka ee Beera-falatada Midoobay.

Hangeeriya iyo Ruumeeniya waxay u gudbeen habka Xisbiga keliga ah.

Axsaabta Dimuqraadiga ah ee dalalkaasi waxay ka qayb qaataan xubnaha dawladda iyo dhismaha hantiwadaagga, waxay kale oo kaga duwan yihiin Midowga Soofiyeeti dabaqadihii wax ku kor noolaan jirey looma diidin xuquuqdii doorashada, dad tirsan oo intii dagaalka lagula jiray fashiisamka gacan siiyey cadowga mooyaane.

Dhinaca burburinta dawladihii hore, Militeriga iyo Booliiskaba waxa la burburiyey intii dalalkaas ku jireen Kacaannadii Dimuqraadiga ahaa, dawladda inteedii kalese waxa loo beddelay si isdaba joog ah. Waaya-aragnimada dalalka Hantiwadaaggu, waxay qiimo weyn u leeyihiin shaqaalaha adduunka, dhaqdhaqaaqyada xornimodoonka waddaniga ah iyo dalalka madaxbannaan ee Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika. Mustaqbalka Kacaannadu waxay la imaan karaan xilliga kala guurka qaab siyaasadeed cusub, laakiinse sidii Lenin u sheegay inkastaba ha kala duwanaadeen, murtidoodu waa isku mid taas oo ah Diktaatuuriyadda Broletaariyaadka.

## X. KAALINTA XISBIGA SHAQAALUHU KA QAATO DIKTAATUURIYADDA BROLETAARIYAADKA

Halganka shaqaaluhu ugu jiro dhismaha hantiwadaagga wuxuu ugu guuleysan karaa si buuxda, haddii uu hoggaaminayo xisbi horusocod ahi, oo si fiican u dhisan. Jiritaanka xisbi shaqaale iyo hoggaamintiisa uu shaqaalaha hoggaaminayaa waa xeer ka mid ah xeerarka guud ee Kacaanka Hantiwadaagga iyo dhismaha Hantiwadaagga.

Lenin wuxuu yiri :«**Diktaatuuriyad Broletaariyaad ma hirgeli karto haddii aan Xisbi Marksi ahi hoggaamineyn**», (Lenin B. 43, B. 42).

### WAAJIBAADKA XISBIGA :

1. Wuxuu hore u marinayaa aragtida hantiwadaagga cilmiga ah.

2. Wuxuu tilmaamaa jidka iyo habka ugu fiican ee loo maro dhismaha hantiwadaagga.

3. Wuxuu dhigaa brograamka, himilooyinka iyo tabta Kacaanka xoogsatada ee dhismaha hantiwadaagga.

4. Wuxuu tilmaamaa mabaadi'da iyo waajibaadka Dawladda Broletaariyaadka.

5. Wuxuu dadweynaha u micneeyaa siyaasaddiisa, kuna kiciyaa oo ku abaabulaa in siyaasaddaas la hirgeliyo oo si cad ay nolosha uga muuqato.

6. Wuxuu hoggaamiyaa nolosha bulshada ee hantiwadaagga dhinac kastaba, dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada.

Adkaanta Taliska Dabaqada Shaqaaluhu waxay aad ugu xiran tahay bislaanshaha xisbiga iyo midnimada waaxyihiisa iyo dadka hoggaanka haya, haddii midnimada, wadajirka, meel wax ka wada aragga iyo dhiisibliinka xisbigu xumaado oo ah tan dibusocodka gudaha iyo kan dibedduba raadinayaan, waxa hubaal ah in dawladduna jilcayso, hantiwadaagguna aanu dhismeyn. Waxa taas mitaal fiican u ah Kacaan-diidnimadii ka dhacday Hangeeriya 1956 iyo Jekoslofaakiya 1967.

Hoggaaminta Xisbigu uu ka hoggaaminayo Ummadda dhinac kasta, ma aha micnaheedu in Xisbigu Diktaatuuriyad ku adeeganayo mana aha in ay isku qasmaan Dawladda iyo Xisbiga shaqadiisu, sida ay sameeyaan Burjuwaasiyiintu.

Diktaatuuriyadda Broletaariyaadka waajibkeeda wuxuu ku fulayaa iyada oo taliska dawladda iyo ururrada bulshadu isla wada jiraan, hoggaankana uu u hayo Xisbi Marksi ahi.

Xisbigu wuxuu xiriirinayaa ururrada xoogsatada, bulshada iyo xubnaha dawladda, wuxuuna u horseedaa in shaqadoodu ku fusho danta iyo ulajeeddada guud.

Xisbigu wuxuu xiriir joogta ah la leeyahay shaqaalaha iyo xoogsatada oo dhan isaga oo u soo maraya (through) ururrada bulshadu ay leedahay, sida ururrada shaqaalaha, ururrada dhallinyarda, ururrada haweenka ,ururrada beeraleyda iwm.

Sida waaya-aragnimada dalalka hantiwadaaggu ina bareyso habka Diktaatuuriyadda Broletaariyaadka waxaa ka soo qayb geli kara Axsaabta aan ahayn Broletaariyaadka ee Dimuqraadiga ah, iyada oo madaxtinnimada hoggaanka uu u hayo Xisbiga Shaqaaluhu.

Wadajirka axsaabtaasi waa in uu ku yimaadaa si raallinimo ah ujeeddadiisuna tahay danta guud iyo cadowga oo meel looga soo wada jeedo. Xisbigu waa in uu dadweynaha ku qanciyaa siyaasaddiisa si uu u hoggaamiyo.

Ideoloojiyiinta Burjuwaasiyiintu waxay yiraahdaan si Dimuqraadiyadi u jirto, waa in ay jiraan axsaab badan oo kala geddisani.

Haddii runta la eego dalalka hantigoosadka ah xorriyad iyo Dimuqraadiyad waxa leh axsaabta u horseedeysa hantigoosadnimada. Isbeddelka axsaabtaasi taliska iska beddelaan, ma beddesho habka hantigoosadka, waxa si joogta ah cadaadis iyo xaqdarro loogu hayaa shaqaalaha.

Axsaabta oo tira badataa ma keeneyso Dimuqraadiyad iyo xornimo kumana xirna, ee waxa muhiim ah murtida xisbiga, ulajeeddadiisa iyo hadba danta dabaqada xisbigu ilaalinayo ee daafacayo una horseedayo.

inta lagu jiro dhismaha hantiwadaagga kaalinta xisbigu waa weynaaneysaa waana koreysaa, waxaana lagama maarmaan ah :

1. In Xisbigu si joogta ah u barbaariyo garaadka siyaasiga dadka hantiwadaagga ah.

2. In Xubnaha Xisbigu ahaadaan kuwa firfircoon.

3. In la xoojiyo midnimada iyo wadajirka dadka Xisbiga ku jira.

## MADAXA XI

## ARRIMAHA ASAASIGA U AH DHISMAHA HANTIWADAAGGA

Inta lagu jiro xilliga kala guurka, waxa lagama maarmaan ah in uu isbeddelo xirriirka ka dhexeeya bulshada oo dhammi, xirrirka tacabka, dabaqadaha bulshada, Siyaasadda, ruuxa iyo kuwa kale oo dhammi.

### 1. ABUURITAANKA ASAASKA DHAQAALAHA HANTIWADAAGGA.

Waajibka ugu weyn diktaatuuriyadda broletaariyaadku waa abuuritaanka hab wax tacab hantiwadaag ah oo ka kooban:

1. Wax lahaanshaha ku dhisan hantigoosadnimada ee qalabka wax soo saarka oo loo beddelo mid dawladeed oo ku dhisan hanti dadweynaha u dhexeysa, iyada oo la hirgelinayo siyaasadda qaraneynta;

2. Tacabka beeraha iyo burjuwaasiyadda yar yar, farsama yaqaanada iyo Farshaxanada oo loo beddelo tacab-wadaag hantiwadaag ku dhisan, iyada oo la hirgelinayo siyaasadda ku dhisan wax soo saarka tacab-wadaagnimo.

3. Wershadeyn hantiwadaagnimo ku dhisan oo dalka laga hirgeliyo.

Si siyaasaddaas u horseedeysa hantiwadaaggu u hirgasho waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo hab qorsheyn dhaqaale oo cusub, kuna dhisan hannaan iyo hoggaamin hantiwadaagnimo.

## B) SIYAASADDA QARANEYNTA QALABKA WAX SOO SAARKA:

Si loo tirtiro waxlahaanshaha hantigoosadnimada, degdegna kor loogu qaado xoogagga tacabka, waxaa loo baahan yahay in dawladda broletaariyaadku la wareegto: Wershadaha hantigoosadku leeyahay ee dalka, Wershadaha beeraha, gaadiidka (Badda, cirka iyo Dhulka), bannaanka, baayacmushtarka dibadda iyo kan gudaha.

**V. I. Lenin wuxuu yiri: «meel kasta in degdeg loo hantiwadaageeyo ma aha, waxa lagama maarmaan ah in la sameeyo asgogol iyo tallaabooyin ulajeeddada u horseedaya oo ay ka mid yihiin»:**

1. Shaqaalaha oo maamulka Wershadaha burjuwaasiyiinta kormeerkooda yeesha, inta aan la hantiwadaageyn; shaqaalaha oo ka qayb gala qorsheynta iyo hoggaaminta wax soo saarka, miisaaniyadda, qaybinta miraha iyo xisaabintooda, u kala qaybinta wershadaha loogu kala qaybinayo qalabka qaydhiin, makiinadaha, iibinta miraha tacabka, qiimo qoynta iyo amaahda intaba.

Qaabka, hanaanka iyo degdegga qaranaynta hantiwadaagnimadu waxay ku xiran tahay xaalaadka dalkasta ka taagan. Midowga Soofiyeeti qaraneynta wershadaha wuxuu ku hirgeliyey si dhaqso ah (Disembar 1917 ilaa iyo Juun 1918), taas oo la xirrirtey xaaladdii dalka markaas ka taagneyd oo ay burjuwaasiyiintii gudaha iyo dibadduba Kacaankii dagaal iyo kharibaad ku qaadeen wershadihiina joojiyeen. Dalalka kale ee hantiwadaagga khaas ahaan Shiinaha iyo GDR talaabadii hore waxaa lala wareegay wershadihii ay lahaayeen burjuwaasiintii lidka ku ahaa Kacaanka ee faashiisamkiina gacan siiyey intii ay dalka haysteen, kuwii kale ee lahaa wershadaha, wadajirna ula soo halgamay xoogsatada iyo imberyaalisamka in muddo ah ayey iyagu lahaayeen wershadahoodii, kaddibna si tallaabo tallaabo ah ayaa loo qaraneeyey, iyada oo loo qiimeynayo qof kasta xoolihiisii.

Qaraneynta qalabka wax soo saarku waxay burburineysaa iska horimaadka ugu weyn ee hantigoosadku ku caan-

ka yahay, **iska horimaadka ka dhex taagan wax soo saar dadku wax soo wada saaro, dheefkiina qof keli ahi qaadanayo isaga oo aan wax soo saarkiina ka qaybgelin.**

Qaraneynta hantida dalku waxay suuragelineysaa:

1. Waxa dhasha hanti dadka ka dhaxaysa oo beddesha hantigoosadnimadii;

2. Xiriirka dadku wuxuu noqdaa mid ku dhisan jaallenimo iyo iskaashi;

3. Xoogagga tacabka oo si dhaqso ah u bata;

4. Hantida ddwenyahaa oo si degdeg ah u korta oo keenta in nolosha xoogsatadu kor u kacdo;

5. Waxa suuragasha in si cilmi ah loo qoorsheeyo dhaqaalaha dalka, xoogagga tacabkana si habboon loo habeeyo, oo laga faa'iideysto.

6. Dhulka iyo dhirta iwm. oo noqda hanti dadweynuhu leeyahay.

## T) SIYAASADDA WERSHADAYNTA:

Wershaduhu waa asaaska dhaqaalaha dalka, wershadeynta hantiwadaaggu waxay ku hirgashaa si dhaqso ah, waxayna dhalisaa in heerka nolosha dhaqanka iyo aqoonta xoogsatadu kor u kacdo. Hannaanka wershadeynta ee hantigoosadku wuxuu ku dhisan yahay:

1. Dalalka yar yar oo ay dhacaan qalabkooda qaydhiin kana dhigtaan suuq ay u iib geeyaan miraha wershadahooda;

2. Xoogsatada oo la xaq darreeyo oo lagu kornoolaado.


Wershadeynta hantiwadaaggu waxay ku dhisan tahay.

1. Tacabka wax soo saarka oo kor loo qaado, taas oo ku timaadda in wershadaha lagu hubeeyo Tekniko cusub;

2. Qorsheyn suubban oo loo sameeyo;

3. Lacagta, xoogagga tacabka iyo qalabka oo si fiican loo qaybiyo;

Tacab wadaagnimada dhaqaalaha hantiwadaagga




Waajibkeena ugu weyni waa in hantida beeraleyda ee gooni goonida ku dhisan, u beddelo hanti tacab wadaag jaallenimo, khasab iyo xoogna aynaan ku hirgelin ee mitaallo la tuso, gacanna la siiyo si ay u hirgasho.

«F. Engels»

4. Oolitaanka (Bakhaarku jirka) alaabta iyo wareegeeda oo la yareeyo;

5. Lacag loo kaydiyo wershadaha;

6. Shaqaale, farsamo yaqaanno iyo injinneero aqoon sare leh oo loo abuuro wershadaha;

7. Dibadda oo looga keeno qalabkii aan dalka oolin, inta looga sameynayo dalka gudihiisa.

Wershadeynta hantiwadaaggu waxay dhalisaa: tirada shaqaalaha oo badata, taas oo keenta in asaaskii diktaatuuriyadu xoogeysato, u ballaarato siyaasi ahaan iyo dhaqaale inta, qalabka iyo dhaqsaha wershadeynta dalalku waa kala duwan tahay. Midowga Soofiyeeti xaalaadkii dibadda iyo gudaha ee uu la kulmay ayaa ku kalifay in uu si degdeg ah ay u hirgeliyaan wershadeynta dalka.

Dalalka Jokosloofaakiya iyo G.D.R. lama soo gudboonaan in aay wershadeeyaan Dalka, waayo wershado ayaa dalku lahaa, isla markaasna dalalkii kale ee hantiwadaagga ahaa ayaa dhinacaas gacan weyn ka siiyey, sidaas daraadeed, waxaa la soo gudboonaatey in ay hore u dhigaan wershadihii, tiknikada cusubna ku habeeyaan. Waaya aragnimada Jamhuuiryadda Mongooliya iyo dalka Kuuba wuxuu tusayaa in ay dalalkaasi markii hore wershadeynta ka bilaabeen wershadaha tacabka beeraha. Dalkasta oo hantiwadaag dhisayaa wuxuu dooran karaa habka iyo xaawliga u qalma una qabbaanaya danta dadweynaha.

## J) SIYAASADDA TACAB WADAAGGA:

Si loo dhiso hantiwadaag, waa in la hantiwadaageeyaa beeraha, taasoo ah in beeraleyda ku nool tacabka kelinimada loo habeeyo si wadajir iyo tacab wadaag ah. Haddii kale ma suura galeyso in dhaqaalaha dalka laga burburiyo hantigoosadnimada, lana tirtiro burjuwaasiyadda beerelayda. Engelis wuxuu yiri, **Waajibkeennu waa in aynu beeraleyda yaryar hantidooda iyo wax soo saarkooda u beddello mid jaallenimo iyo wadajir ku dhisan, innaga oo aan khasbin, ee aynu mitaal tusno ay ku qancaan.** (K. Marks iyo F. Engels B. 22. B. 513).

Dalka Midowga Soofiyeeti siyaasadda tacab wadaaggu waxay si buuxda u hirgashay 1929, halkaas oo si buuxda loo tirtiray burjuwaasiyaddii beeraleyda. Dalalka kale ee hantiwadaaggu waxay sameeyeen siyaasad ay xad u yeeleen gooni tacabka beeraha.

## X) WAAYA-ARAGNIMADA TACAB-WADAAGGA EE DALALK HANTIWADAAGGA

1. Waa in dawladdu gacan weyn siisaa tacab wadaageynta, sida qalabka wax soo saarka, teknikada, lacag amaaha iyo dad aqoon leh oo farsamo-yaqaan ah (Injineerada beeraha).

2. Tacab wadaagga waa in tallaabo tallaabo loo fidiyo.

3. Tacab wadaagga waa in lagu asaaso raallinimo ayna ku jirin khasbiye iyo haddidaadi.

4. Marka tacab wadaagga beeraha la hirglinayo, waa in la tixgeliyaa waxa gaarka u ah dal kasta, caadaadk iyo dhaqaalaha dalka.

5. Waa in laga billaabaa tacab wadaageynta midda ugu sahlan ilaa tan ugu adag.

6. Waa in qof kasta oo tacab wadaagga ka mid ahi loo qiimeeyo hantidiisa uu keensado.

Waayo aragnimada dalalka hantiwadaaggu waxay leedahay saddex nooc oo lagu qiimeeyo wax soo saarka oo wax lagu qaybsado:

1. **Jaallennimo iyo wadajir dhulka looga wada shaqeeyo;** oo ay shaqadu ka dhexeyso, dhulkana la kala leeyahay;

2. **Wax soo saar tacab wadaag:** Qalabka wax soo saarka iyo tacabka oo ka dhexeeya, dhulkuna isku jiro, laakiinse la kala leeyahay. Wax qaybsiguna yahay qof kastaa inta shaqadiisu le'eg tahay;

3. **Tacab wadaag ku dhisan (Artels)** oo ay dadka ka dhexeeyaan shaqada, dhulka iyo qalabka wax soo saarku, qof kastaana tacabkiisa wax ku helo.

Si siyaasdda hantiwadaagga ee beeruhu u hirgasho, waxaa lagama maarmaan ah:

1. In loo sameeyo beeraleyda hab waraabin beereed fiican, sida keliyaal, ceelal, biyo xir iwm.

2. In la siiyo qalab wax soosaar ku dhisan teknoolooji-yadu heerka maanta ay gaartey.

Tacab wadaagga beeruhu wuxuu suuragelinayaa in dhaqaalaha dalku noqdo mid hantiwadaag ah isla markaasna xoogagga tacabku koraan, nolosha dadkuna hore u kacdo.

## KH) WAAYA-ARAGNIMADA ISKAASHATOOYINKA JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA EE SOOMAALIYA

Iskaashtooyinka J.D.S. ka dhisan ee ka hirgalay waxay ka kooban yihiin saddex nooc :

1. Iskaashato lagu magacaabo Ujeeddo Badan.
2. Iskaashato lagu magacaabo Tacab Wadaag.
3. Iskaashato lagu magacaabo Heerka Sare.

### 1. UJEEDDO BADAN.

Qalabka tacabka iyo dhulkaba qof kastaa goonidiisa ayuu u leeyahay, shaqaduna kama dhexeyso, waxa keli ah oo ka dhexeeya agaasinka guud oo ay sameystaan oo shirweyne lagu doorto, xilkooduna yahay inay dawladda iyo iskaashatada u dhexeeyaan, una maamulaan deeqda dawladdu u fidiso iskaashatada sida (Saldhigga qalabka beeraha iyo tacabka oo ay iska kaashadaan oo tacabka tacab isugu gudaan).

### 2. TACAB WADAAG.

Waxay ka kooban yihiin beeraleyda Ueedjdo Badan, oo dawladdu u goyso dhul ay si tacab wadaagnimo ah u beertaan, waxaa ka dhexeeya dhulka, qalabka tacabka iyo shaqada, waxay sameystaan guddi agaasin oo hoos yimaada agaasinka Ujeeddo Badan. Waxay ku qaybsadaan mabda'a oranaya «Qof kastaa wuxuu wax ku helayaa intii tacabka uu goostay le'eg yahay».

## 3. HEERKA SARE.

Waxa weeye ujeeddada la rabo in iskaashatooyinku ku dambeeyaan, kaas oo ah inuu noqdo heer ku fadhiya mabda'a hantiwadaagga. «Qof kastaa inuu awooddiisa iyo kartidiisu inta ay le'eg tahay shaqeeyo, inta shaqadiisu le'eg tahayna uu wax ku qay qaato». Heerka Sare, waa marka iskaashatadu dhinac kasta isku fillaato oo is maamusho, kana qayb qaadato qorshaha dhaqaalaha ee dalka.

## 2. TIRTIRIDDA FARQIGA U DHXEEYA MAGAA-LOOYINKA, TUULOOYINKA).

Inta lagu jiro dhismaha hantiwadaagga, waxa lagama maarmaan ah, in la tirtiro farqiga u dhexeeya magaalooyinka iyo tuulooyinka (miyiga). Magaalooyinku waxay abuurmeen waqtigii bulshooyinkii habkii addoonsiga, khaas ahaan markii dadku uu u kala baxay xoolo dhaqato, beeraley iyo farsamo yaqaanno. Abuuritaankii magaalooyinka wuxuu keenay in wax soo saarkii farsamayaqaannadu korodho, in ay hore u maraan wershadihii iyo baayacmushtarkii, isla markaasna ay magaalooyinka isugu ururaan oo ka dhismaan xarumihii siyaasadaha, dhaqannada iyo tacliintuba.

Kala jaad ahaantaas ay kala jaad noqdeen magaalooyinkii iyo tuulooyinkii waxay noqotay calaamad ka mid ah calaamadaha lagu yaqaan antagoonisamka ka dhexeeya dabaqadaha. Kala duwanaanta magaalooyinka iyo tuulooyinka dalalka hantigoosadka ee hore u maray iyo dalalka ay gumeysan jireen, markii dambana raacay habka hantigoosadka, wuxuu gaarey heer sare, waxaa si weyn u xoogeysta farqiga u dhexeeya bulshada ku kala nool magaalooyinka iyo tuulooyinka.

Barbaarinta magaalooyinka habka hantigoosadku waxay caan ku yihiin qorsho la'aan, wershadaha badanaya oo ku rida qaxid ay dadka beeraleydu u soo qaxaan Magaalooyinka, taasoo ay muujineyso haddii dadka ku nool adduunku qarni iyo badhkii ugu dambeeyey korodhay 3,6 goor tirada dadka magaalooyinka ee adduunku, waxay korodhay 25 goor. J.D.S. Magaala madaxda Muqdisho min 1960 ilaa iyo 1970 tirada

dadka deggeni saddex laab ayey korodhay. Habka hantigoosadku wuxuu kale oo ku caan yahay in hore u marka degdegga ah ee magaalooyinku gaaraan ka timaaddo in magaalooyinku dulleystaan tuullooyinka iyo miyigaba dhinaca dhaqaalaha, Siyaasadda iyo niyadda intaba, waxa kale oo ka dhasha daaro iyo xaafado qurux badan oo nadiif ah, isla markaasna ay Gidaarradooda jiifaan boqollaal dadweyne ah oo ay hayso gaajo.

Warshadaha, baayacmushtarka iyo maalka bannaanka ee magaalooyinku waxay addoonsadaan xoogsatada dadweynaha ee ku nool miyiga iyo tuulooyinka, iyaga oo isticmaalaya fureyaasha dhaqaalaha, sida cashuuraha, kirada, amaahda iyo qiimaha miraha ka soo baxa warshadaha iyo beeraha iyo dhefka xoolaha oo si xaqdarro weyn ah u kala fog.

Marka hantigoosadku u dallaco imberyaalism, dulleynta iyo dhiig-jaqiddu way sii xoogaysataa, waxaa kale oo mataal cad ah, dhacii, gumeysigii iyo dhiigmiiradkii imberyaalisamku ku sameeyey dalalkii uu gumeysan jirey ee Afrika iyo Assiya oo uu ka dhigay (Tuulooyin heer adduunweyne ah), dalalkaas oo uu u geystay in ay boqollaal malaayiin oo qof oo aadami ahi, ku noolaadaan rafaad iyo gaajo, khayraadkoodiina uu qaarado kale u raro. Farqiga u dhexeeya magaalooyinka, tuulooyinka iyo miyiga hantigoosadku wuxuu ka kooban yahay:

1. **Dhinaca Siyaasadda:** Magaalooyinka oo dulleysta siyaasi ahaan tuulooyinka iyo miyiga.

2. **Dhinaca Dhaqaalaha:** Magaalooyinku waxay ku kor nool yihiin dhaqaale ahaan tuulooyinka iyo miyiga weyna dulleystaan.

3. **Dhinaca Dhaqanka iyo Tacliinta:** Magaalooyinka waxa ku urursan oo ka dhisan waxyaalihii asaaska u ahaa dhaqanka, macaahidii cilmiga iyo fanka intaba, tuulooyinka iyo miyiguna waxaas oo dhan waxba kama qabaan.

## B) DEJINTA IYO NOLOSHA DADKA

Dadka miyiga iyo tuulooyinku waxay ku nool yihiin

noloshii hore, ma leh gaadiid, waddooyin, war-isgaarsiin, nal, biyo iyo aqallo dhisan, intaasoo dhanna magaalooyinku aad ayey hore uga mareen, isla markaasna magaalooyinka hantigoosadku qorshe la'aan awgeed waxay caan ku yihiin ciriiri, iyo warshadaha oo hawada sare ee magaalooyinka xumeeya, markaasna keena in caafimaadka dadku aad u xumaado.

Farqigaas u dhexeeya magaalooyinka iyo tuulooyinka waxay dalalka hantigoosadku keenaan in danaha dabaqadaha xoogsatada iyo dabaqadaha hantigoosadku iska hor-yimaadaan. Farqigaas u dhexeeya magaalooyinka, tuulooyinka iyo miyiguna ma aha mid dhalinaya in shaqaalaha magaalooyinka iyo beeraleyda tuulooyinka iyo xoolaleyda miyigu iska hor-imaanayaan, ee waxaa dhalanaya wadajir iyo is-garabsi ay isgarabsadaan shaqaalaha, beeraleyda iyo xoolaleydu, si ay meel uga soo wada jeedaan dabaqadda burjuwaasiyiinta ah.

Waxaa lagama maarmaan ah oo Objektif ah in la tirtiro farqiga u dhexeeya magaalooyinka, tuulooyinka iyo miyiga si ay u suura-gasho:

1. In hore loo mariyo wax soo saarka warshadaha, beeraha iyo dheefka xoolaha.

2. In si habsami ah loo qaybiyo oo loo kala habeeyo xoogagga tacabka.

3. In magaalooyinka caafimaadkooda la ilaaliyo.

4. In malaayiin qof oo beeraley iyo xoolayey ah noloshooda iyo aqoontooda kor loogu soo qaado.

Waxaase jirta oo hubaal ah in arrimahaas oo dhammi ayna ka suura-geli karin habka hantigoosadka, waxayse suurageli karaan oo keli ah marka habka hantigoosadka si kacaannimo ah loogu beddelo hab hantiwadaag ah.

## T) WAAYA-ARAGNIMADA TIRTIRIDDA FARQIGA U DHEXEEYA MAGAALOOYINKA, TUULOOYINKA IYO MIYIGA EE DALALKA HANTIWADAAGGA

Marka kacaanka hantiwadaagga ahi guuleysto, waxaa burbura habkii hantigoosadka, isla markaasna waxaa bilaabma in la tirtiro farqigii

u dhexeeyey magaalooyinka, miyiga iyo tuulooyinka. Dalka Midowga Soofiyeeti iyo dalaka kale ee hantiwadaagga ahi guul weyn ayey ka gaareen arrintaas, waxaa loo abuuray beeraleydii kumaankum urur oo tacab-wadaag, beeraley iyo xoolayey iyo beera dawladeed (State Farms), kuwaas oo ah asaaskii kor u dhigitaanka nolosha dadka beeraleyda iyo reer miyiga. Waxaa kale oo is-beddelay saamigalkii dabaqadaha oo waxaa kordhay tiradii shaqaalaha, waayo siyaasadda warshadaynta ayaa asaas u ah arrintaas. Dadka Moongooliya waxay ku guuleysteen in dadkii reer miyiga ahaa ee xoola-dhaqatada ahaa ay dejiyaan, noloshii dadkaas, noloshii xoolaha iyo dheefkoodiina kor u kaco (waxaa loo sameeyey ceelal, waro iyo biyo-xireenno).

Waayo-aragnimada dalalka hantiwadaaggu waxay rumeysay gabagabeyntii abwaannadii (Hantiwadaagga Cilmiga), taasoo ahayd **«Farqiga u dhexeeya magaalooyinka, tuulooyinka iyo miyiga waxaa u asaas ah wax lahaanshaha gaar ahaaneed»**, (K. Marks iyo F. Engels B.3. B.50).

## J) FARQIGA U DHEXEEYA HAWLAHA GACANTA IYO KUWA MASKAXDA EE DALALKA SOO KORAYA

Arrimaha ugu waaweyn ee xoogsatadu u halgamayso in ay guul ka gaaraan marka dhismaha hantiwadaagga, waxaa ka mid ah in ay tirtiraan farqiga u dhexeeya hawlaha gacanta iyo kuwa maskaxda ee ay ku abuureen bulshada hababkii dulleynta iyo isku kor noolaanshaha aadamiga u horseeday. Farqiga u dhexeeya shaqada maskaxda iyo tan gacantu waa waxyaalaha keena in ay bulshada ka dhex-dhalato sinnaan la'aani, in shaqooyinku u kala baxaan kuwo maskaxeed iyo kuwo gacmeedna waa arrin la xiriirta taariikhda khaas ahaan markii ay hore u mareen xoogagga tacabku, waxaa dhacday in ay soo saaraan tacab ka badan inta ay u baahnaayeen, sababtaas daraaddeed waxaa suuragalay in la helo dhaqaale xubin bulshada ka mid ah ahayd ku noolaato iyada oo aan wax ka tacbin, dadkaas oo noqday kuwo qabta shaqada maskaxda. Kala baxaas ay u kala baxeen; shaqooyinku labadaas shaqo aawadeed waxaa hore u maray cilmigii iyo dhaqankii, arrintaas oo sabab u noqotay in bulshadii iyo xoogaggeedii tacabku iyo wax tacabkiiba hore u maraan.

Markii wax lahaanshaha gaar ahaaneed barbaaray, shaqooyinkii maskaxda waxaa monoboli ku qaatay dabaqaadkii wax ku kor noolaa, si ay u helaan gacan, dulleynta xoogsatada u sii xoojisa dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha iyo ruuxa intaba. K. Marks wuxuu yiri: **Madaxa iyo gacmuhu waxay ku wada yaalliin jidh qur ah marka shaqadana, shaqada maskaxda iyo tan gacantu waa isku mid keli ah»** (K. Markis, F. Engelis B.23. B.51). Haddii la rabey in shaqada maskaxdu noqoto mid hore u dhigta xoogagga tacabka khaas ahaan qofka aadamiga ah, dalalka hantigoosadka dabaqadaha burjuwaasiyiintu waxay u isticmaaleen shaqada maskaxda hub ay ku addoosadaan xoogsatada, waxayna shaqadii maskaxdu noqotay mid u gaar ah dabaqadda leh qalabka wax soo saarka dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha iyo ruuxaba, oo leh gacanta sare bulshada dhexdeeda. Dabaqadihii burjuwaasiyiintu waxay shaqadii maskaxda ka dhigeen mid u gaar ah iyaga oo keli ah. Xoogsatadii waxaa laga xaaraameeyey in aqoontoodii hore u marto.

Isla markaasna hore-u-marka ku dhacay teknoloojiyadu meeshii la rabay in ay u qabbaanto danta dadweynaha, burjuwaasiyiintu waxay ka dhigeen mid xoogsatada u keenta shaqo la'aan, gaajo iyo silic, isla markaasna ay dadyowga adduunka kale uga dhigtaan hub ay ku gumeystaan, dagaallana adduunka kaga ridaan. Dalalka loo yaqaan «Dalalka Saddexaad» khaas ahaan dalalka Afrika gumeystayaashii aad ayey ugala dìrireen dadyowga reer Afrika dhinaca tacliinta, waxay ahayd siyaasaddiisu in uu abuuro tiro yar oo aqoon-yahanno ah (Intellegensia) noqotana xiriirka u dhexeeya taliska gumeysiga iyo dadweynaha kana badnayn tirada uu maamulkaas uga baahan yahay. Aqoon-yahannadaasi intooda badani waxay ahaayeen carruurtii madaxda qabaa'ilka (Caaqillada, Garaad, Boqor, Suldaan, Malaaq, Ganacsatada yaryar ee magaalooyinka iyo Afhayeennada).

**Gumeystayaasha siyaasaddoodu waxay ahayd «Aqoonyahanno Afrikaan ah la'aantoodu waa rabash la'aan iyo xornimo-doon la'aan».**

Aqoonyahannadii Afrikaanka ee gumeystayaashu wax bareen badankoodu waxay noqdeen kuwo ka faana dadkoodii, kuwo dabeecaddii iyo qaab nololeedkii reer Galbeed-

ka qaata Mar dambe waxaa dhalatay in dad badan oo ka mid ah dadweynaha xoogsatada ahi carruurtoodii dugsiyaashii ku dareen, iyaga oo ay ulajeeddadoodu ahayd in ay wax ka dheefaan carruurtooda marka ay dugsiyada ka baxaan oo shaqaystaan, waxaa halkaas ka dhashay in aqoon-yahannadii reer Afrika waqtigii gumeystuhu dalka ka talinayey ay noqdaan kuwo dabaqado kala duwan ka kala yimaada arrintaas oo dhalisay in aragtidoodiina kala duduwanaato inkasta oo ay isku hab wax ku baran jireen.

Aqoon-yahannadii horusocodka ahaa waxay noqdeen kuwo hoggaanka u qabta dhaqdhaqaaqyadii xornimo-doonka waddaniga. Nasiibdarro markii dalalkii Afrika heleen madaxbannaanidoodii waxa talisyadii dalalka badankooda gacanta ku dhigay aqoon-yahanno ah ama la xiriira burjuwaasiyaddii yaryaryd ee markaas dalka jirtey, markaasna ay dhici weydo in himilooyinkii dadweynuhu ka lahaa gobannimada ay xaqiijin kari waayaan.

Gobannimadii kaddib reer Afrika waxay u kala bexeen laba qaybood:

1. Kuwo taageera siyaasadda burjuwaasiyiinta iyo habka hantigoosadka, nodqana kuwo si caddaan ah ula jira imberyaalisamka iyo gumeysiga cusub, kuwaas oo badankoodu yihiin kuwii ka soo jeeday dabaqadihii burjuwaasiyadda yaryar, si caddaan ahna uga soo horjeeda hantiwadaagga.

2. Kuwo yar oo ka mid ah aqoon-yahanno gumeysiga wax ku hoos bartay, laakiinse diiday maskax dhiqiddii gumeystayaasha una noqda madax kacaannada Afrika una horseeda hantiwadaag, gobannimada kaddibna iyaga oo u soo halgamay gobannimadii dalkooda ay noqoto lagama maarmaan in ay abuuraan axsaab mucaarid ah.

Burjuwaasiyiintii taliska gacanta ku qabtay waxay raaceen jidkii gumeystayaashu ugu tala galeen, waxay isku dayaan in ay sidoodii noloshooda u habeeyaan.

Nolosha magaalooyinka iyo tan miyigu «xooladhaqatada iyo beeraleyda» waxay noqdeen laba nololood oo farqi

weyni u dhexeeyo, farqigaas oo ah ku kor noolaansho tan hore ku kor nooshahay tan dambe, magaalooyinka Afrika waxay noqdeen xiriiriyeyaal u dhexeeya monoboolyada reer galbeedka iyo dadweynaha reer Afrika, reer miyigii iyo beeraleydii waxay noqdeen kuwo lagu kor noolaado oo la dulleysto wixii hantidooda ahna sida tacabka beeraha, hilibka, caanaha iyo saanta xoolaha qiime jaban lagaga iibsado, tacabka warshadahana lagaga gado qiime aad u sarreeya. Ma helaan daryeel caafimaad, tacliin, jidad iyo gaadiid, xoolahooda iyo beerahooduna ma helaan gacan dhinac kasta ha ahaatee. Waxaa dhalatay in dad badan oo beeraley iyo xoolaley ahaa soo aadaan magaalooyinka, marka noloshu ku xumaato ama abaaro ku dhacaan cidna wax u qaban weydo, halkaas oo ay noqdaan gidaar-seexato iyo shaqaale guryaha iyo maqaayadaha u qabbaana si ay cuntadooda uga helaan.

Dalalka Afrika iyo kuwa soo koraya ee kaleba, dhibaatooyinkaas wax ka qabadkooda waxa ku tala-jira, ama wax ka qabtay Dalalka qaatay Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ah sida Kacaanka Soomaaliyeed, inkasta oo la ogsoon yahay in dhibaatooyinkaas fulintoodu ku xiran tahay awoodda dhaqaalaha, waqti dheerna ay qaadanayso.

## X) TIRTIRIDDA FARQIGA U DHEXEEYA SHAQADA MASKAXDA IYO GACANTA.

Marka Kacaan Hantiwadaag ahi ka guuleysto dal waxaa tirtirma asaaska iyo sababaha dhaliya iska soo horjeedka Shaqooyinka Maskaxda iyo kuwa Gacanta, kuwaas oo ah jiritaanka dabaqado antagonisam dhexyaal oo ay dabaqadaha wax ku kor nooli ka dhigteen Shaqada Maskaxda wax iyaga u gaar ah, ayna monoboolyo ku haystaan. Hantiwadaaggu wuxuu tirtirayaa dabayaaqadii ka hartay dabaqadaha wax dulleysta iyo kala qoqobka bulshada ee keenay in bulshadu u qaybsanto kuwa ku shaqeeya maskaxda iyo kuwa gacanta ku shaqeeya, arrintaas oo **Hantiwadaaggu u beddelo in shaqadu noqoto wax waajib ku ah qof kasta oo bulshada ka tirsan.**

Shaqaalaha iyo beeraleydu waxay awood u helayaan in ay aqoontooda iyo heerka farsama-yaqaannimadooda si

joogta ah kor ugu qaadaan, isla markaasna ay ka qayb qaataan hoggaaminta arrimaha bulshada, sidaas daraaddeed waxaa suura gelaya in ay labadii shaqaba ka qayb-qaataan, oo ka koraan heerkii ahaa in ay shaqada gacanta oo keli ah ku ekaadaan. Si, si buuxda bulshadu uga gudubto iska hor-imaadkaas waxaa lagama maarmaan ah:

1. In la beddelo asaaska teknoloojiyada, dhaqaalaha, dhaqanka iyo tacliinta ee bulshada.

2. In la hirgeliyo mabda'a shaqada ee hantiwadaagga.

3. In la abuuro asaaskii teknoloojiyada ee hantiwadaagga «Technological bases of socialism».

4. In la tacab-wadaageeyo beeraleyda iyo xoolaleyda «miyiga iyo tuulooyinka».

5. In la sameeyo kacaan aqooneed.

6. In kor loo qaado garaadka iyo wax garadnimada xoogsatada.

7. In kor loo qaado heerka wax tacabka.

Waa kuwaas qodobbada keeni kara in lagu guuleysto arrintaas, waayo-arag fiicanna ay ka gaareen dalalka hantiwadaagga ee adduunku.

Marka intaas aan kor ku soo sheegnay fusho waxaa dhalanaya:

1. In heerka aqoonta iyo teknoloojiyada ee bulshadu kor u kacdo.

2. In uu dhasho tartan hantiwadaag «Socialist competition/emulation».

3. Wax soo saarka oo si saami-gal ah u barbaara.

4. Xoogsatada oo si ballaaran uga qayb-qaadata hoggaaminta dawladda, wax tacabka iyo siyaasadda ee bulshada.

Warshadeynta hantiwadaagga iyo kacaanka aqoontu waxay dhaliyaan, in ay abuuraan «Cadres» kaader ah shaqaale iyo injineerro karti u leh in ay ku shaqeeyaan teknika-

da cusub taas oo tusaysa in farsama-yaqaannada iyo aqoon-yahannadu aanay ka soo imaanayn dabaqad yar oo khaas ah, ee ay ka soo dhex-baxayaan dadweynaha u badan shaqaalaha iyo xoogsatada kale. Tirtiridda farqiga u dhexeeya labadaas shaqo, waxaa kaalin weyn ka qaata tacab-wadaageynta beeraleyda iyo reer miyiga xoola-dhaqatada ah, tacab-wadaageyntu waxay suura-gelinaysaa:

1. In ay burburaan dabaqadihii ku kor-noolaan jirey beeraleyda.

2. Waxay burburinaysaa wax tacabkii beeraleyda ee kala duwanayd kuna dhisnayd qorsha la'aanta iyo wax tacabka aad u hooseeya.

3. Waxay baraarujinaysaa dadka beeraleyda oo ka sarreysa badawnimada, xirxirnaanta iyo aragti-gaabnimada.

4. Beeraleydu waxay helayaan teknikada cusub ee qalabka beeraha, taas oo dhaxalsiinaysa in wax soo saarka beeraleyda iyo noloshooduba is beddesho.

5. Waxay tuulooyinka u suura-gelinaysaa inay ka dhismaan dugsiyo, maktabado iyo meelaha aqoonta iyo dhaqanka dadka barbaarisa. Sida shineemooyinka, Goleyaasha murtida iyo madadaalada iwm.

6. Waxay abuuraysaa in beeraleydu helaan dad aqoon u leh cilmiga Bioloojiga iyo Agronoomiyada.

7. Waxay yeelanayaan raadiyowyaal, raadiyaha la iska arko, wargeysyo, nal iwm.

8. Waxaa suura-geleysa in xoolaleydu degaan oo u helaan xoolahoodu biyo, baad iyo daawo isla markaas wax ka dheefkii xoolahooduna bato, intaas ka sokow waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo aqoon-yahanno hantiwadaag ah oo ka soo dhexbaxa shaqaalaha iyo beeraleyda. Sidaa daraaddeed tirtiridda farqiga u dhexeeya shaqada maskaxda iyo tan gacantu waa xeer ka mid ah xeerarka guud ee ka guuritaanka min hantigoosad ilaa hantiwadaag.

## KH) WAAYA-ARAGNIMADA SOOMAALIYA EE DARYEELKA DANAHA BEERALEYDA IYO REER MIYIGA.

Soomaaliya Kacaanka ka hor, waxay ahayd dal dhibaatooyin fara badani haystaan sida dalalka kale ee adduunka saddexaad, dhibaatooyinkaas oo ay ka mid yihiin kuwii haystay Dadweynaha ka Kooban Xoolaleyda iyo Beerayeyda oo ay ka mid yihiin:

1. Nabadgelyo la'aan dhexdooda ah;

2. Caafimaadka iyo tacliinta oo aad u hooseeyey;

3. Tacabka beeraha oo aad u yar;

4. Garaadkooda Siyaasiga oo hooseeya, Daneystayaashii Dalka hoggaaminayey ay sababtaas aawadeed kula kici jireen «qaybi oo xukun».

5. Hantidooda tacab xoolaadka iyo midka beeraha intaba oo qiime aan u dhigmin Burjuwaasiinta yaryari kaga qaadan jireen, uguna beddeli jireen qalabka magaalada oo aad u qaali ahaa.

6. Jid-xumo, Gaadiid la'aan iyo dhibaatooyinka dabeecadda la xiriira oo cidina wax uga qaban jirin. Iyada oo uu weli u horseedayo in dhibaatooyinkaas lala diriro wuxuu ilaa iyo imminka Kacaanku ku guuleystey:

1. In la daryeelo Amniga iyo Xasiloonaanta Bulshada meel kasta, lana abuuray Xeer u qabbaanaya, guulo waaweynna arrintaas laga gaaray.

2. Ololc daryeelaya arrimaha xoolaleyda iyo beeraleyda oo la sameeyey, halkaas oo laga gaaray Guulo ay ka mid yihiin:

— In 70% dalka Soomaaliyeed waxna qoraan waxna akhriyaan.

— Dadkii iyo xoolihii dalka oo la tirakoobay si qoorshe dhaqaale oo Hantiwadaag u horseeda loogu sameeyo.

— Dadkii Miyiga iyo Tuulooyinka iyo xoolohoodii oo Cudurro farabadan laga tallaalay lagana daaweyey.

3. Maamulkii Gobollada iyo Degmooyinka oo la fidiyey lana abuuray Gobollo iyo Degmooyin cusub, si Dawladdu u daryeesho danaha guud ee Dadweynaha, Gobolkastaana isku fillaado, Hoggaaminta Ururrada Bulshaduna wax ku leeyihiin.

4. Beeraleydii oo loo sameeyey Tacab-wadaag, guud ahaanna lagu dhiirriyey Tacabka beeraha,isla markaana loogu deeqay Qalabkii Beeraha iyo Dad aqoonyahan ah oo badan.

5. Dugsiyaal farabadan oo la sameeyey khaas ahaan tuulooyinka, lagana dhigay khasab in qof kastaa carruurtiisa Dugsiga geeyo.

6. Xoolihii oo loo sameeyey, Ceelal, Warar iyo Biyoqabatinno badan.

7. Wershado tacabka Beeraha iyo Xoolaha lagu Wershadeeyo oo Dalka looga dhisay.

Qodobbadaas aan kor ku sheegnay ka sokow, waxaa u ah waaya-aragnimo Adduunka, Dalalka Afrika iyo Aasiya khaas ahaan sidii ummadda Soomaaliyeed uga hor-tagtay dhibaatooyinkii abaaraha iyo sidii ay u tirtirtay jahliga, abaarahaas oo toddoba Gobol oo dalka ka mid ah saameeyey, Dawladda Soomaaliyeed ee Kacaanka ahina ay la soo gudboonaatay in 250.000 (Laba boqol iyo Konton Kun) Qof Xeryo lagu maamulo, ilaa iyo 500.000 (Shan boqol oo kun) kalena lagu daryeelo tuulooyinka. Dadka Soomaaliyeed iyada oo uu hoggaaminayo GSK, waxay arrintaas ka gaareen guulo waaweyn, waxaa la dejiyey oo laga dhigay Beeraleey iyo Kallu-umaysato Tacab-wadaag ku dhisan 168.000 (Boqol iyo Lixdan iyo Siddeed Kun) qof lana xiriirta ujeeddada ah in la abuuro Bulsho Hantiwadaag ah.

**Jaalle Siyaad oo arrintaas ka hadlay isaga oo qiimaynaya guushaas weyn ee Ummadda Soomaaliyeed gaartay wuxuu yiri «Hirgelinta Hawlaha raridda iyo guusha laga gaaray waxay muujinaysaa Urursanaanta, wax wada qabsiga iyo isku kalsoonida Ummadda Soomaaliyeed» (Xiddigta Oktoobar 21-8-75).**

Kacaanka ummadda Soomaaliyeed isaga oo u horseedaya in uu dhiso bulsho Soomaaliyeed oo Hantiwadaag ah, wuxuu ka gaaray arrintaas Guulo waaweyn, Guulahaas oo u ah waaya-aragnimo fiican Dadyoowga kale oo dhan.

## MADAXA XII

### 1. BULSHADA HANTIWADAAGGA

Bulshada hantiwadaaggu waa bulsho cusub oo ka duwan bulshadii xilliga kala guurka dhinaca qaabka dhaqaalaha, dhismaha dabaqadaha iyo siyaasadda intaba, astaanna waxa u ah xilliga kala guurka halganka ka dhexeeya hantiwadaagga dhashay ee barbaaraya iyo hantigoosadka sii dumaya.

Bulshada hantiwadaagga waxa astaan u ah:

1. In habka dhaqaalaha hantiwadaaggu saameeyo qayb kasta oo k amid ah dhaqaalaha dalka ee aanu ku ekeyn hal qayb oo keli ah, sida xilliga kala guurka.

2. Dabaqadii dadka ku kornoolaan jirtey oo aan jirin;

3. Dhismaha siyaasadda ee dawladda oo ah mid dadweynuhu leeyahay oo dadka u dhexeysa.

4. Dimuqraadiyadda oo aan ahayn mid dadka badankiisu yeesho ee dadka oo dhami yeesho.

5. Qalabka wax tacabka oo ah hanti bulshada u dhexeeya.

7. Dhaqaalaha dalka oo qorshe lagu habeeyo una horseeda haqab tirka baahida bulshada ee si joogta ah u kordheysa.

8. Beeraha oo tacab wadaag ku dhisan, hantiwadaagga dhismihiisuna wuxuu qaataa muddo, muddadaas oo lagu abuuro dhaqaalihii, dhaqankii siyaasadda, qalabkii iyo dhaqankii uu ku sifoobi lahaa.

### B) NUXDA HANTIWADAAGGA IYO MABAADI'DA ASAASIGA U AH DHISMIHIISA IYO HABEYNTIISA.

Hantiwadaaggu wuxuu ka hirgeli karaa dalal kala duwan, dalalkaas oo mid kastaa yeelaan karo xaalaadka taariikhiga

ah ee u gaarka ah iyo muddada dhismaha hantiwadaagga oo kala duwan.

Inkasta oo ay dalalku waxyaalahaas ku kala duwanaan karaan, misana qodobbada asaasiga iyo mabaadi'da hirgelinta hantiwadaaggu waa isku mid dalalka adduunka oo dhan. Dalalka adduunku waxay ku kala duwan yihiin oo ku kala sarreeyaan dhinaca teknoloojiyada, dhaqanka, siyaasadda iyo ruuxa intaba, dalalka hore u maray ee tirada shaqaaluhu ka badan tahay tirada beeraleyda, marka kacaan hantiwadaag ahi dalalkaas ka curto, si dhaqso ah oo dhibaato yar ayey u suurageleysaa in waajibaadka hantiwadaagga khaas ahaan dhinaca isbeddelka dhaqaalaha loo sameeyo.


Dalka Midowga Soofiyeeti markii Kacaankii Hantiwadaagga ahaa ka curtay, wuxuu ahaa dal dhinaca hantigoosadka heer dhexe ka joogey, tirada beeraleyduna ka badanayd tirada shaqaalaha warshadaha. Markiiba taliskii Midowga Soofiyeeti ee dhashay wuxuu ku dhaqaaqay in uu dalka warshadeeyo si loo abuuro asaaskii teknoloojiyada ee hantiwadaagga, arrintaas oo guul laga gaarey in soddonkii qarnigii 20aad dadka Soofiyeetku ku guuleystaan in ay taagaan asaaskii dhaqaalaha hantiwadaagga. Marka hantiwadaagga guud ahaan lagu guuleysto dhismihiisa, waxaa lagama maarmaan ah in si buuxda loo dhammeystiro dhismaha bulsho hantiwadaag ah, sidaas daraaddeed waxaa lagama maarmaan ah waajibaadka soo socda:

1. In la abuuro dhinac kasta asaaskii teknoloojiyada hantiwadaagga, sidaas daraadeedna kor loogu qaado nolosha dadka.

2. In si saami-gal ah loo barbaariyo waaxda dhaqaalaha dalka oo hadba waaxda dambeysa dhaqaalaha dalka kor loo soo qaado.

3. Dhaqaalaha dalka oo si buuxda loo hantiwadaageeyo «beeraleyda iyo farsama-yaqaannada weli keli tacabka ku nool oo laga dhigo tacab-wadaag», dadka tacab-wadaagga ku jirana laga dhigo in qof kastaa tacabkiisa wax lagu siiyo.

Asaaska dhaqaalaha hantiwadaagga



4. Dabaqadihii dadka dulleysan jirey ee ku kor-noolaan jirey oo si buuxda bulshada looga tirtiro, dimuqraadiyada hantiwadaagga oo la baahiyo oo dawladda diktaatuuriyada broletaariyaadku si isdaba joog ah u noqota dawlad daka oo dhammi wada leeyahay.

5. Garaadka siyaasiga ee bulshada oo kor loo qaado, lana abuuro dhaqan hantiwadaag oo heer sare ah.

Lenin wuxuu yiri: «**Arrimahaas oo dhan oo la dhammeystiraa micnahoodu waxa weeye in la abuuro bulsho hantiwadaag oo heer sare ah**». (Lenin B.36 B.139 iyo B.104).

Asaaska dhaqaalaha hantiwadaaggu waa wada lahaansho bulshadu wada leedahay qalabka wax soo saarka, arrintaas oo u horseedeysa in xoogagga tacabku barbaaraan, xiriirka tacabka ee hantiwadaagguna uu hirgalo, qalabka asaaska ee dhaqaalaha hantiwadaaggu waa soo saaridda makiinadaha culus «heavy machine production» asaaskaasina ama waxa intiisa badan bisleeyey habkii hantigoosadka ama waa mid taliska xoogsatadu abaareen markii ay xukunka la wareegeen.

Lenin wuxuu yiri: «**Hantiwadaag ma suurageli karo haddii uusan jirin qorshe habeysan oo dhaqaale, oo u horseedaya in malaayiin dad ahi, si isku mid ah u fuliyaan wax tacabka iyo qaybinta miraha tacabka**» (Lenin B. 43 B. 210).

Hantiwadaaggu ma qabo in wax tacabku ka koobnaado wax soo saar yaryar oo kala furfuran. Wax lahaanshaha hantiwadaagnimada ahi, wuxuu ka kooban yahay laba qaab:

1. Wax lahaansho dawladeed oo «dadka u dhexeeya».

2. Wax lahaansho ku dhisan tacab-wadaag.

Cilmiga teknoloojiyada ee hore u maray wuxuu si fiican wax u faa'iideyn karaa marka dhaqaalaha laga hoggaaminayo meel keli ah, haddiise warshadaha iyo faabrikooyinku ay yihiin kuwa aan lahayn hoggaamin dhexe, oo koox

kasta oo xoogsatada ka mid ahi goonideeda warshad u maamuleyso, waxaa dhici lahayd in midnimada iyo wadajirka dabaqadaha shaqaaluhu xumaan lahayd, taasina dhalin lahayd in kaaiinta hoggaaminta ee bulshadu liciifi lahayd.

Lenin wuxuu yiri: «**Si dabaqada shaqaaluhu kaalintooda hoggaaminta ee bulshada uga soo baxaan waa in ay siyaasi ahaan midoobaan, midnimadaas oo ay sababayaan dawladda iyo xisbigu, midnimadaasna asaaskeeda dhaqaaluhu waa qalabka wax tacabka oo bulshada u dhexeeya, bulshada oo dhammina waa inay isu beddeshaa xoogsato mid keli ah oo tacab-wadaag ah.** (Lenin B. 37 B. 346-347).

Wax lahaanshahaas bulshada ka dhexeeya wuxuu suura gelinayaa in qof kasta oo xoogsatada ka mid ahi uu noqdo qof hantida lahaanshaheeda u siman, kana qayb qaata wax tacabka, isla markaasna waxa abuurmaya oo adkaanaya xiriirka jaallenimada, iskaashiga iyo wadajirka ee dadka, iyaga oo ka madax-bannaan ku kor noolaansho iyo dulleyn. Qaabka xiriirka dhaqaalaha ka dhexeeya hantida dawladda ee ku dhisan wax lahaanshaha bulshada ka dhexeeya, sida warshadaha iwm iyo hantida tacab-wadaagga ee ku dhisan wax lahaansho ka dhexeeya dad tirsan oo tacab wadaag ahi waa «Exchange of commodities» badeecad isdhaafsi.

Bulshada hantiwadaaggu waa in ay heshaa hoggaamin dhaqaale iyo xiriir dhaqaale oo suura-gelinaya in si buuxda bulshada oo dhammi uga faa'iideysato oo loo istimaalo hantida ummadda guud ahaan iyo barwaaqada dalku leeyahay, taasina waxay suuroobi kartaa marka uu jiro qorshe u qabbaanaya horumarinta dhaqaalaha kuna dhisan xeer dawladeed.

## T) MABDA'A ASAASIGA U AH HANTIWADAAGGA :

Mabda'a asaasiga u ah habaynta nolosha dhaqaalaha iyo bulshada dadku waa **«in qof kastaa kartidiisa iyo shaqadiisa wax ku dheefo»**. Mabda'aasi wuxuu kulminayaa xuquuqda qofka bulshada hantiwadaagga ka tirsani leeyahay iyo waajibaadka bulshadu ku leedahay ee laga rabo, taasoo ah in qofku inta kartidiisa iyo awooddiisu tahay bulshada taro, bulshadana ka helo dheef le'eg hadba mugga iyo jaadka shaqa-

diisa. Mabda'a oranaya in mugga iyo jaadka shaqada wax lagu qaybsado, wuxuu tusayaa inay ka suureen bulshda ku kor noolayaal iyo lagu kor-noolayaal.

Mabda'aas hantiwadaaggu ma suura gelin karo in uu suuriyo sinnaan la'aanta, inta dadku kala leeyahay shahaadooyin kala sarreeya iyo karti kala sarreysa iwm. taas oo micnaheedu tahay in qof kastaa wax ku helayo shaqadiisa iyo nooca shaqadiisa, xataa labo qof haddii ay isku shahaado yihiin, misana waxaa dhacda in mid jilicsan yahay, mid xaas badan yahay. Arrintaasi waxay ina tusaysaa is sinnaan buuxda la gaari karo marka **hantiwadaagga buuxa la dhiso kaas oo ah heer sare ama labaad ee hantiwadaagga.**

Xilliga hantiwadaagga si loo dhiirrigeliyo oo hore ay u marto oo uu u bato tabacku, waxaa lagama maarmaan ah in qof kasta shahaadadiisa iyo kartidiisa shaqada lagu mushaar siiyo, abaalgudka iyo dallacaadduna ku timaaddo qof kasta wax tacabkiisa iyo shaqadiisa.

Xilligaas hantiwadaagga lagu jiro waxaa lagu khafiifin karaa sinnaan la'aanta, iyada oo hore loo mariyo xoogagga tacabka lana badiyo, lacagta loogu tala galay in danaha dadweynuhu u siman yihiin lagu bixiyo sida «waxbarashada oo lacag la'aan ah, daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah, lacagta loo qaato hawl-gabnimada, qofkii carruur badan oo dawladdu gacan siiso, xannaanada carruurta oo la gaarsiiyo bilaash iwm», ilaa iyo marka dambe laga gaaro in laga gudbo sinnaan la'aanta dhex taalla bulshada.

## J) ISLA XISAABTANKA IYO KORMEERKU WAA QODOB KA MID AH QODOBBADA ASAASIGA U AH MAAMULKA BULSHADA HANTIWADAAGGA

Waa lagama maarmaan in bulshada hantiwadaagga qof kasta oo ka mid ahi qiyaasta iyo abaalgudka shaqadiisu leedahay qiyaas le'eg helo sababta oo ah xilliga hantiwadaagga lagama gaari karo in la sameeyo, ama la tacbo qalab sida «cunto, dhar iwm», siyaado ah si qof qastaa wixii uu janto nooc kastaba ha ahaadee uu u helo, lamana gaarin in ay dadka shaqadu u noqoto wax u ah noloshooda lagama maarmaan, sidaas daraaddeed

waa lagama maarmaan in bulshada hantiwadaagga maamulkeedu ku socdo xisaab iyo kormeer adag oo ku saabsan qof kasta qiyaasta shaqadiisa iyo noloshiisa. Lenin buuggiisii (State and revolution) **«Dawladda iyo kacaanka» wuxuu ku yiri, «Isla xisaabtanka iyo kormeerku waa xaalaadka suura gelinaya in maamulka hantiwadaaggu si habsami ah u socdo** (Lenin B. 33. B. 101)».

Ujeeddada oo ah **in qof kastaa shaqeeyo intii uu kari karo, helana abaalgud le'eg shaqadiisii.** Waxa lagama maarmaan ah in mabda'aas laga hirgeliyo bulshada waayo waa qodobbada disibiliinka hantiwadaagga ka mid ah oo la rabo inuu noqdo wax dadku caadeysto. Lenin wuxuu yiri, **«haddii disibiliinka shaqada burjuwaasiyiintu ku dhisan yahay «anarchism», shaqada hantiwadaaggu waa in ay ku dhisnaataa disibiliin adag iyo hab maamuus iyo habsami aad u sarreeya»,** isla markaasna lagu habeeyo teknoloojiyad heer sare ah, si ay u suuragasho in miraha tacabku aad u bataan, Lenin wuxuu kale oo yiri, **«si shaqada bulshada hantiwadaaggu u hirgasho, waxaa lagama maarmaan ah in qof kastaa xuso in hantida bulshadu tahay hantidiisi, taasina waxay adkeyneysaa disibiliinka shaqada iyo kordhinta wax tacabka, waxaana u asaas ah in hoggaamiyayaasha shaqadu iyo xoogsatadu wada jiraan oo ay ka baxaan caadooyinkii xumaa oo hantigoosadka laga dhaxlay ee ku dhisnaa in dadka qaarna yihiin kuwa lagu shaqaynayo qaarna kuwa loo shaqaynayo.** Teknoloojiyada cusubi waxay u baahan tahay inay hesho shaqaale aqoon sare leh, waayo «automatization» ka qalabku wuxuu yareynayaa tiradii shaqaalaha, isla markaana wuxuu u baahan yahay shaqaale aqoon sare leh.

Bacdamaa aanay weli suuragal ahayn in bulshada hantiwadaagga ay ka suuraan si degdeg ah waxyaalihii laga dhaxlay hababkii hore, dhinaca qofka noloshiisa, maskaxdiisa, socodkiisa iyo nafsiyaddiisa intaba, bacdamaa aanay weli ka hirgelin bulshada in shaqada dadku gaarto inay noqoto noloshiisa oo ay jiraan dad jecel inay wax aan dhididkooda ahayn wax ku dheefaan, oo ay weli maskaxda dadka ku jirto qof jeclaysi, eex, musuqmaasuq, khiyaano, iwm, waa lagama maarmaan in maamulka hantiwadaaggu ku dhisnaado isla xisaabtan iyo kormeer.

## X) XIRIIRKA DHAQANKA-SIYAASADDA EE BULSHADA HANTIWADAAGGA AH:

Bulshada hantiwadaagga, weli waxaa jiraya dabaqado kala jaad ah, mase ahaa dabaqado anagnonisam dhex yaallo, oo leh lagu kor-noolayaal iyo ku kor-noolayaal, dabaqadahaasi waxay ka kooban yihiin shaqaalaha warshadaha iyo beeraleyda tacabwadaagga oo badanaaba shaqooyinkoodu yihiin gacanta iyo xubin bulshada ka mida oo ah aqoon yahanno, shaqadooduna maskaxda u badan tahay. Inkasta oo bulshada hantiwadaaggu yeelanayso dabaqado kala gaar ah, misana dabaqadaha bulshada hantiwadaaggu waa isku ujeeddo iyo isku fikrad, ma jirayaan dabaqado sidii kuwii xilligii kalaguurka loo baahan yahay in la cadaadiyo oo laga feejignaado, ma jirto beeraleydii labada niyadood lahayd waayo xilligii kalaguurka ayey u beddelmeen hantiwadaag, tuulooyinka miyiga iyo magaalooyinka intaba waxaa ka sameysan asaas dhaqaale iyo mid bulshanimo oo hantiwadaag ah, xiriirka u dhexeeya dabaqaduhu waa mid ku dhisan Jaallennimo, iskaashi iyo istaageer. Micnuhu ma aha haddii hantiwadaag dhismo ma jirayo halgan dabaqadeed, halganka dabaqiga ahi wuxuu ahaanayaa mid ah :

1. Halgan dabaqadeed oo heer adduunweyne, kana soo horjeeda adduunka hantigoosadka.

2. Halgan ka soo horjeeda kharibaadda iyo shirqoolka adduunka hantigoosadku rabo in uu ka sameeyo dalka gudihiisa.

3. Halgan ku saabsan in la abuuro dishibliin shaqo oo nooc cusub ah.

4. Halgan lid ku ah caadaadkii iyo qaab nololeedkii habka hantigoosadku reebay.

5. Halgan ku saabsan waaritaanka nabadgelyada adduunka.

6. Halgan lid ku ah gumeysiga, midabtakoorka iyo ku kor noolaanshaha imberyaalisamku ka wado adduunka, halgankaas waxaa ka qayb gelaya oo hoggaaminaya xoogsatada bulshada oo dhan horseedna uu shaqaaluhu u yahay, midnimada ay dabaqadaha bulshada hantiwadaaggu ka wadaagaan

xagga fikradda adduun aragga, sidaa draaddeed waxay leeyihiin isku ujeeddo qur ah, inkasta oo dabaqad kasta isla markiiba ay leedahay dan u khaas ah, waxaase kulmiya :

— In dhaqaalaha hantiwadaagga kor loo qaado.

— In la xoojiyo dhaqaalaha iyo gaashaandhigga dalka.

Dawladda iyo xisbigu waxay u horseedaan sidii la isu kaashin lahaa danaha gaarka ah iyo kuwa guud ee loo halgamayo, taas oo ah in la habeeyo xawliga kordhinta iyo kor u qaadidda warshadaha caamka ah iyo kuwa tacabka beeraha, in saamigal fiican loo sameeyo maalgelinta labada qaybood iyo qiimo u goynta miraha labada waaxood ee dhaqaalaha intaba.

Xeerarka guud ee barbaarinta dawladda hantiwadaaggu waxay u biyo shubanayaan in la gaaro bulsho aan lahayn dabaqado, sidaa daraaddeed isbeddelka ku dhacaya dhaqaalaha iyo dhismaha bulshada ka sokow, waxaa kale oo isbeddel ku dhacayaa maamulka dawladda, waxyaalo badan oo intii la suura gelinayey burburitaanka dabaqadihii hore iyo isbeddelkii bulshada ee dhinac kastaba lagama maarmaan ay ahayd in dawladdu ku dhaqaaqdo, ayaa la waayayaa, oo aan loo baahnayn mar haddii ay dhisantay bulsho hantiwadaag ahi. Haddii dawladdu ahayd mid ay leedahay diktaatooriyadda broletaariyaadku iyo dimuqraadiyadeedu, waxay isu beddeleysaa dawlad ay leeyihiin dadka oo dhami, dantooda guudna u horseedeysa.

Sababtu waxay tahay, dabaqado iska soo horjeeda oo halgan iskula jiraa ma jiraan, dabaqadaha iyo xubnaha bulbshadu ka kooban tahayna, waxay noqdeen kuwo siyaasaddii iyo ideoloojiyadii dabaqadda shaqaaluhu u horseedeysay, taasoo tusaysa in dadka oo dhami isku kaalin dhinac kasta nolosha kaga wada jiraan.

Hoggaaminta bulshada waxaa yeelanaya sidii horeba, dabaqadda shaqaalaha, waayo waa dabaqadda ugu urursan, ugu hayabysan ee isugu dubbaridan dabaqadaha, uguna hab dhaqaaleed hantiwadaagsan, **kaasoo ah qaab wax wada lahaansho ku dhisan hantiwadaagnimo**, isla markaasna ugu aam-

minsan ideoloojiyada Marksisamka. Siyaasadda dibedda ee dawladda hantiwadaagga ee hore u martay waxay ahaanaysaa:

1. Mid ka soo horjeedda imberyaalismka, gumeysiga, midabtakoorka iwm.

Mid u horseedda nabadgelyada adduunka iyo nabad ku wada noolaansho ka dhexeysa dawladaha oo dhan.

3. Mid taageerta dhaqdhaqaaqyada shaqaalaha iyo xoogagga horusocodka ah ee adduunka.

4. Mid u horseedeysa diimuqraadiyad, gobannimo iyo hantiwadaag adduunka oo dhan.

5. Siyaasad u halgamaysa barbaarinta iyo adkaynta walaalnimada iyo iskaashiga ka dhexeeya dalalka hantiwadaagga iyo xoogagga horusocodka oo dhan.

Waxaa kale oo isla waqtigaas aad u barbaaray diimuqraadiyadda dawladda hantiwadaagga, nuxdeeduna tahay in xoogsatada oo dhami si buuxda oo joogto ah uga qayb qaadato arrimaha hoggaaminta dawladda iyo danaha bulshada intaba, Lenin oo arrintaas ka hadlaya wuxuu yiri: **«Habka dhaqaalaha ee bulshada hantiwadaagga ku dhisan iyo dhismaheeda bulshada ayaa sife u ah diimuqraadiyadda dalka, diimuqraadiyaddaas oo kaalin ka qaadata horumarka iyo isbeddelka dhaqaalaha».** (Lenin B. 33 B. 79).

Diimuqraadiyadda hantiwadaagga ee barbaaraysa, dicaayadda burjuwaasiyaddu waxay ku tilmaantaa xoreyn «liberalisation» ka dhacay dalalka hantiwadaagga oo ay ula jeedaan in la siiyey xornimo dadkii ka soo horjeeday hantiwadaagga. Xornimada hantiwadaaggu waa xornimo ay leeyihiin xoogsatada danaha xoogsatadana u horseedaya, asaasna ay u tahay in xoogsatada oo dhami ka wada qayb qaataan hoggaaminta arrimaha bulshada. Horumarka xagga dhaqaalha, siyaasada iyo dhaqanka waxaa u adduun aragga Marksism-Leninism oo u horseedaya anshax, iyo ruux hantiwadaagnimo oo cusub sida:

1. In lala dagaallamo wixii ku lug leh noloshii hore ee hantigoosadnimada iyo hababkii ka horreeyey.

2. In ideoloojiyadda Marksismku noqoto tan gacanta sare leh, xoogsatduna ku wada qanacsan tahay.

3. In qof kasta ay ku abuuranto in uu jiro waajib bulshada ka saarani.

4. Wadajir (collectivism).

5. In dadka ay ku abuuranto shaqo jacayl iyo aadaminnimo.

6. In dadka hantiwadaagga laga haqabtiro dhinaca baahida iyo ruuxa intaba.


7. In dadka ay ka dhex abuuranto xiriir hantiwadaagnimo oo u baaqaya sinnaan, wadajir qof kastana u halgamo danta guud ee bulshada, bulshada oo dhammina u halganto qof kastaa dantiisa iyo wanaaggiisa.

## KH) WANAAGGA IYO GACAN SARRAYNTA HANTIWADAAGGA

Tan iyo intii bulshooyinka adduunkuu u kala baxeen dabaqado antagonisam ka dhexeeyo, horumar badan ayaa la gaaray oo antagoonisamku sabab u yahay, laakiinse horumarkaas la gaaray wuxuu aadamiga adduunka ku joogay qiime badan.

Dulleyntii, kor ku noolaanshihii badnaa iyo gumeysigii ay dabaqadahii iyo dalalkii gacanta sare lahaa ku hayeen dalalkii iyo dabaqadihii la gumeysanayey waxay sababeen in qalabka, dhaqanka, cilmiga iyo fanka intaba horumar weyn laga gaaro. Marks wuxuu yiri: **«Antagoonisam la'aan horumar ma jiri karo, xeerkaas oo xadaaradu ku barbaartay ilaa iyo waqtigan la joogo. K. Marks iyo F. Engels B. 4 B. 96).**

Xeerkaas Marks sheegay wuxuu ka hadlayey isaga oo faallo ka saarayey bulshooyinkii waqtigaas jirey ee hantigoosadka ahaa, Xeerarkaas waxay baaba'ayaan oo joogsanayaan jiritaankoodu marka loo gudbo habka hantiwadaagga, marka dhaqanka siyaasadda bulshada iyo fikradaha dadku middoobaan, sababna ay u tahay habka wax tacabka ee hantiwadaaggu, horumarka bulshadu dib dambe uguma xirna jiri-




Libaha habka hantiwadaaggu soo hooyo ee ugu waaweyn waxa ka mid ah abuuritaanka dhaqanka hantiwadaagga.

taan antagoonisam, mana jirayo bulshada dhexdeeda antagoonisam. Horumarka dhinaca dhaqaalaha iyo dhaqanka bulshadu wuxuu ku xirmayaa oo la xiriirayaa horeumarka iyo horukaca laga gaadho qalabka nolosha iyo dhaqanka xoogsatada, dhismaha dhaqaalaha iyo dhaqanka siyaasadda bulshada hantiwadaaggu waxay abuurayaan sababihii u qabbaanayey horumarkooda. Habka dhaqaalaha hantiwadaaggu ka wanaagsan kan hantigoosadka waayo, habka dhaqaalaha hantiwadaaggu ma leh: Khalkhal dhaqaale, wax tacab qofkastaa wuxuu doonayo tacbayo, shaqo la'aan, wuxuu leeyahay qorshe u horseedaya barbaarinta dhaqaalaha, xoogagga tacabka ee hantiwadaaggu si joogta ah ayey hore ugu maraan, waaxaha dhaqaalaha dalka oo dhan waxa suura gelaya in si wadajir ah oo habsami ah loo barbaariyo, hodannimada dalkana si fiican looga faa'iideysto, hantiwadaaggu wuxuu tirtiraa wax dheefka dullinnimada ah, wax tacabka hantiwadaaggu wuxuu u qabbaanayaa raaxada iyo horukaca xoogsatada, habka hantiwadaaggu wuxuu abuuraa qiyaas (norms) iyo niyad cusub oo ku saabsan hore u dhigga wax tacabka:

1. Shaqadu waxay ka xorowdaa kor noolaanshaha iyo dulleynta, waxayna shaqadu noqotaa in qofkastaa u fekero in uu naftiisa iyo dalkiisa u shaqaynayo.

2. Bulshada oo dhammi waxay noqotaa dad wadajira oo xoogsata ah.

3. Waxaa abuurma tartan hantiwadaag oo ka duwan tartanka ka dhexeeya monobooliyada dalalka hantigoosadka, ujeeddada tartankaas oo ah in tacabku bato, aqoonta shaqaaluhu korodhto, guul weynna laga gaaro in ay dhashaan ikhtiraacyo cusubi iyo in dishibiliinka shaqada hantiwadaaggu adkaato. Waxaa kale oo ka mid ah wanaagga iyo gacan saraynta hantiwadaagga mabaadii'da abaalmarinta, kaas oo keenaya in qofka shaqaalaha heerka iyo jaadka shaqadiisu tahay, ay ku xiran tahay wax dheefkiisu. Horumarka laga gaaro teknoloojiyadu wuxuu suuragelinayaa in ay hawshu ka debecdo shaqaalaha, in ay barbaarto aqoonta shaqaaluhu, in cilmiga iyo horumarka teknoloojiyada laga gaarey lagaga faa'iideysto dhinaca tacabka iyo in dadka shaqada gacantu noqdaan kuwo u beddelma in ay gu-

dan karaan shaqada maskaxda. **Horumarka bulsho kastaa kuma xirna dhaqsaha laga gaaro horumarka xoogagga tacabka ee waxaa kale ee ay ku xiran tahay maxaa qofka aadamiga ahi ka dheefayaa horumarkaas isaga ah.**

Ujeedada weyn ee hantigoosadku ka leeyahay wax tacabka waa faa'iido «Profit» dan kama leh ninka hantigoosadka ahi waxa uu tacbayo ,ma qunbuladbaa ma daawaa, ma sunbaa) waxaa isaga u daran inuu helo faa'iido saraysa, inkasta oo wax tacabkiisu faa'iid la'aan aanu dhacayn. Hantiwadaagguse uma aqoonsana wax tacabka in wax uun la iska tacbo, waa in tacabkaasi haqabtirayaa baahida koreysa ee bulshada.

Isla markaas hantiwadaaggu sabab uu hantigoosadka iyo dhibaatadiisu leedahay aawadeed wuxuu tacbaa qalab aan si toos ah dheef aadami laga heleyn laakiinse loo baahan yahay inta adduunka imberyaalisam jiro, kuwaas oo ay ka mid yihiin: qalabka gaashaandhigga dalka, oo haddii aan loo baahdeen oo aan imberyaalisam jirin nolosha bulshooyinka hantiwadaagga ee adduunka ay aad uga sarayn lahayd tan maanta ay joogaan, dalalka soo korayaana noloshoodu heerka maanta ka ficnaan lahaayeen, haddii aan imberyaalismku jireen, dhibaatooyinkii uu ku abuurayna jireen.

Dalalka hantiwadaagga ah nolol wanaagga xoogsatada laguma qiyaaso inta ay mushahaarada qofku le'eg tahay, hantiwadaaggu wuxuu qofka siiyaa xaquuq iyo daryeel badan oo bulshanimo sida:

1. In uu qofku helo oo uu xaq u leeyahay inuu shaqeeyo.

2. Xaquuq iyo daryeel caafimaad oo bilaasha.

3. Xaquuq iyo daryeel hawl-gab.

4. Xaquuq tacliimeed oo bilaasha.

5. Guryo jaban, oo haddii la isgarab dhigo kirooyinka guryaha ee dalalka hantigoosadka iyo kuwa hantiwadaagga, waxaa jira in dalalka hantiwdaagga ah qofku 5% mushahaar-

kiisa ay kaga baxdo kirada guriga, dalalka hantigoosadkase 25% shaqaalaha ay kaga baxdo mushahaarkooda.

Waxaa kale oo jira in qofka tacliinta ku jira ee dalalka hantiwadaaggu, weliba ka qaato dawladda lacag mushahaaro ah, dalalka hantigoosadkana ay adag tahay in qofku jaamacad galo.

6. Dadka oo hela raaxo bilaasha iyo carruurta oo guryo xanaano loo sameeyo.

Hantiwadaaggu wuxuu kasoo horjeedaa in dawladdi ama Ummaddi horumar ku gaarto dulleyn iyo kornoolaansho ummad iyo dawlad kale sida imberyaalisamku ku sameeyey dadka adduunka, khaas ahaan sidii uu u galay Aasiya, Afrika iyo Laatin Ameerika welina uu ku hayo.

Hantiwadaagga, dhaqanka - dhaqaalaha bulshadu wuxuu kaga duwan yahay hababkii dhaqanka-dhaqaalaha bulshooyinkii jirey adduunka oo dhan, waxaa weeye in uu ku habeeyo nolosha dadka qorshe dhaqaale iyo hoggaamin wadajir ah oo ay ka qayb galaan xoogsatada oo dhammi, taas oo uu Lenin yiri: **«waa qodobka ugu weyn abuuritaanka bulshada hantiwadaagga»**.

Kacaankii Oktoobar kaddib Lenin wuxuu si buuxda arrimahaas ugaga faalooday buugagtiisii iyo qoraaladiisii ay ka mid ahaayeen:

1. The immediate tasks of the Soviet government.

2. How to organise the socialist competition ikk.

Hantiwadaaggu wuxuu dedejiyaa xawliga horumarka taariikhda, si arrintaasi u suuragashana waxaa marka hore uu burburiyaa wixii dib u dhigaya ama is-hortaagaya arrintaas suuragalkeeda sida dabaqadaha dibusocodka ah, wuxuuna u horseedayaa in dadka oo dhammi si buuxda oo ballaaran uga qayb galaan iyaga oo habeysan, arrintaasina waxay u baahan tahay siyaasaddii iyo habkii suuragelin lahaa.

# MADAXA XIII

## 1. HOGGAAMINTA CILMIGA AH EE BULSHADA HANTIWADAAGGA

K. Marks wuxuu caddeeyey in barbaarinta bulshadu la xirriirto qawaaniinta socodka taariikhda, tahayna arrin dabiici ah, intii ka horeysey dhalashada habka hantiwadaagga, barbaarintaasi waxay ku iman jirtey si aan ku talagal ahayn «Spontaneous», hantiwadaagga ayaa abuura xaaladka objektifka ah ee suuragelinaya in la qoorsheeyo xeerarka guud ee bulshadu ku barbaarto iyo in si cilmi ah loo hoggaamiyo nolosha bulshada.

Marksism-Leninsm, waa hanaanka guud «Methodology» ee asaaska u ah aragtida hoggaaminta bulshada hantiwadaagga. Hantiwadaagga cilmiga ahi wuxuu abuuraa oo habeeyaa mabaadi'da, hanaanka iyo waajibaadka hoggaaminta dhinac kastaba.

## B) HOGGAAMINTA BULSHADU WAA LAGAMA MAARMAAN OBJEKTIFA

Marksismku markii ugu horeysey taariikhda fikradaha bulshada aadamiga ku saabsan, wuxuu caddeeyey in bulsho tahay hab aad u adag (complicated), kana kooban waxyaalo iyo socodyo badan oo kala du duwan oo isa saameeya «influence», isku xirnaantoodana ay keeneen sababo. Lagama maarmaanka objektifka ah ee hoggaaminta, Marks wuxuu yiri waxaa bilay oo kalifey murtida bulshada aadamiga iyo dabeecadda shaqada bulshadu leedahay.

Waxtacabku wuxuu keenaa ama abuuraa in shaqada la qaybiyo, in si saamigala xubnaha wax laga tacbo la isugu miisaamo, in nidaam iyo habeyn la isla ogyahay la raaco oo lagu shaqeeyo, in xidhiidh iskaashi dadku yeesho, in tacabka la soo saaro la isdhaafsado iyo waayo aragnimada intaba.

**Marks wuxuu yiri «Shaqo kasta oo wadajir iyo bulshanimo ku dhisani waxay u baahan tahay hoggaamin, hoggaamintaasi ama ha koobnaato ama ha ballaarnaato»** (K. Marks iyo F. Engels B. 23« B. 342).

Hoggaaminta sida shaqadu ugu baahan tahay waxa kale oo u baahan dhaqanka bulshada iyo nolosha bulshada dhinaca niyada iyo ruuxa. Qofku si ahaantiisaba, waa jiraal «being» bulsho, had iyo goor wuxuu la xiriiraa taariikhda iyo qaabka bulshadu ku jirto, dabaqad, ama urur bulshada ka mida (social collective) ayaa tusa ama xaddida shaqadiisa, ficilkiisa sida, uu u nool yahay iyo fikradihiisa intaba.

Marks hoggaaminta bulshada wuxuu u kala saaray laba jaad:

1. Mid aan ku talagal ahayn «Spontaneous» oo qofka ay geliso dan ka raadis aanu hubin waxa natiijadu noqonayso, laguna yaqaan tacabka hantigoosadka oo Marks aad u falanqeeyey.

2. Hoggaamin ku dhisan in dadka yool lagu kiciyo oo lagu abaabulo, natiijada la rabaana qorsheysan tahay oo la ogyahay.

Marks wuxuu kale oo sheegay ujeedada laga leeyahay hoggaaminta wax tacabka iyo bulshada guud ahaan, in ay tahay in la xoojiyo oo habka bulshadu maamul galo oo barbaaro, in la ilaaliyo intii suuragala, **oo laga ilaaliyo jaahawareerka, kacakufka iyo marba wax ku hanbaberka.**

Bulshada dabaqado u kala baxsani hoggaanka waxaa leh, ku tagrifala oo ay u qabbaanaysaa hadba dabaqadda taliska haysataa waxay abuurtaa dhismo iyo habeyn maamul u qabbaanaya hadba habkaas taagan. Dalalka hantigoosadka iyo kuwa jidka hantigoosadka haya hoggaaminta bulshada waxa gacanta ku haya (dawladda iyo asxaabta siyaasiga ee burjuwaasiyiinta), kuwaasina waxay daryeelaan danaha burjuwaasiinta, xooleeyntooda iyo inay cidhiidhyaan oo ceejiyaan xoogsatada. Abwaannadii Marksism-Leninism, waxay wax badan ka hadleen koobnaanta iyo qorshe la'aanta hog-

gaaminta hantigoosadka, burjuwaasiyiintu waxay si fiican u awoodaan hoggaaminta wershad ama wershado badan oo la isu geeyey, laakiinse ma awoodi karaan inay hoggaamiyaan tacabka bulshada giddi ahaan.

Wax soo saarka maanta jooga ee adduunka waxaa lagama maarmaan ah in meel keli ah laga hoggaamiyo oo heer bulsho. Maanta wax soo saarku wuxuu ka kooban yahay waaxyo badan oo kala jaad ah, una baahan in waaxyahaas la isu geeyo oo la ururiyo. Haddii kale waxaa ka dhex dhalanaya iska horimaad, sidaas darteed waxaa lagama maarmaan ah in la isu geeyo awoodda, lacagta, qalabka iyo tacabka dadka oo dhan, oo la xidhiidha wax soosaarka cusub ee ay tahay lagama maarmaan ururrintiisa, mideyntiisa iyo hoggaamintiisa oo qorshe u baahan iyo wax lahaanshaha gaar ahaaneed ee keena suuqa iyo sicirka aan xadka lahayn, si ay taasi gabal ahaan ugu badbaadaan waxay sameeyaan in dawladaha hantigoosadku barnaamijeeyaan oo toostoosiyaan dhaqaalahooda.

Ideoloojiyiinta burjuwaasiyiintu waxay ku tilmaamaan barnaamijeynta dawladda hantikoobadku in ay tahay mid dabeecadii hantigoosadnimada beddeleysa oo ay yidhaahdaan mar haddii bulshau noqoto bulsho sinaaci ah, ma jiro hantigoosad, mana jiro hantiwadaag ee waxaa jira bulsho sinaaci ah.

Dawladda hantikoobadka barnaamijkeeda iyo habeyntoodu marnaba lama dhinac dhigi karo, mana gaareyso hoggaaminta cilmiga ah ee hantiwadaagga, waayo barnaamijeyntoodu waxa dhici karta in ay yareyso ama dedejiso sababa keena sicirka iyo suuqa aan xadka lahayn, laakiinse ma tirtiri karto. **Si bulshadu dhibaatooyinkaas uga baxsato waxaa lagama maarmaan ah in la tirtiro hantida gaar ahaaneed, laguna beddelo hanti bulshada ka dhexeysa, taas oo micnaheedu tahay in bulsho hantiwadaagga laga dhigo bulshada. Hantiwadaagga ayaa suura gelin kara in hoggaamin cilmi ah la hoggaamiyo bulshada, lagana baxsho jahawareerka iyo qorshe la'aanta (K« Marks iyo F. Engels B. 3. B. 70-71).**

## T) ASAASKA IYO MURTIDA OBJEKTIFKA HOGGAAMINTA CILMIGA AH EE BULSHADA HANTIWADAAGGA.

Marka dal hantiwadaag ku guuleysto waxaa suura wixii lagu yiqiin hantigoosad, sida wax soo saar aan qorshe ku fadhiyin, tartan xaqdarro ah iyo qiimaha alaabta suuqa oo aan lahayn sicir go'an iyo wixii kale ee lagu yiqiin bulshooyinka hantigoosadka.

Xidhiidhka bulshadu wuxuu isu beddelaa mid hantiwadaag oo ay asaas u tahay shaqada dadku, xubnaha dawladda iyo ururrada kale ee bulshada waxa hoggaanka u qabta xisbi hantiwadaaga, isbeddelkaas oo uu asaas u yahay qorshe ku habeysan cilmi iyo waaqicinimo.

Maamulka iyo barbaarintaanka hantiwadaaggu waa socod taariikheed oo dabiici ah kuna hirgala xeerar objektifa. Xeerarkaasina waa kuwo la ogaan karo looguna adeegi karo danaha bulshada. Xeerarka hantiwadaaggu waxay si fiican u hirgeli karaan marka bulshadu ugu adeegtaan si iskaashi iyo wadajirnimo ku dhisan, arrintaas oo ah qodobka subjektifka ee suuragelinaya hoggaaminta cilmiga ah iyo kaalinta ay ka qaadato taariikhda bulshada.

Asaaska objektifka ah ee hoggaaminta cilmiga ah ee bulshada hantiwadaaggu waa wax lahaanshaha qalabka tacabka ee ku dhisan wax lahaansho ka dhexeysa bulshada.

Taas oo dhalinaysa in dadku midoobo oo iskaashado, xooggooda, qalabkooda iyo awooddooda dhaqaalaha isu geeyaan si ay arrimaha bulshada waajibka ku ah u fuliyaan.

Waxaana intaas oo dhan u asaas ah xeerka qorshaha iyo saami-galka barbaarinta saameyneysa dhinaca dhaqaalaha iyo dhinac kasta ee bulshada.

Xeerarka qorsheynta iyo saami-galka tixgelintoodu ma keenayaan in bulshadu si otomaatik (automatic) ah hore ugu kacdo, waxaa abuurmaya awood arrintaas suuragal ka dhigta, awooddaasina si ay xaqiiqo ahaan iyo dhab ahaan u suura-

gasho waxaa lagama maarmaan ah in la barto xeerarkaas.

Xeerarkaas garashadooda iyo barashadoodu waa wax adag oo mucaqad ah, waxaana sii adkeynaya xaaladka maanta jooga ee loo yaqaanno xiriirka dalag-ganaca iyo lacagta (commodity-money relations), xaalaadkaas oo arrimo lama filaan ah ku rida socodka bulshada, sidaas daraaddeed waajibka xubnaha hoggaamintu waa, in iyaga oo qabbaansanaya furayaasha dhaqaalaha «key factors of the economy» ee xiriirka la leh dalag-ganaca iyo lacagta ay xiriirkaas si firfircoon ugu yeeshaan gacan ku hayn iyo saameyn, iyaga oo u soo maraya qorshaha dawladda ee guud.

## J) NUXDA HOGGAAMINTA CILMIGA AH

Hoggaamin cilmi ah, micnaheedu waxaa weeye in si maskaxi ku jirto o dhab ah loo hoggaamiyo bulshada, asaasna ay u tahay garashada iyo habsami u qabbaansashada xeerka objektifka ah.

Bulshada oo si cilmi ah loo hoggaamiyaa waxay tahay in la suuliyo, lagana gudbiyo bulshada wixii iska horimaad iyo xannibaad u keeni kara bulshada hore u markeeda, horukaca bulshadu wuxuu ka dhashaa hadba inta uu le'eg yahay dadaalka dadka bulshadu la yimaado, sida ay u diyaarsan yihiin dhinac kastaba, sida saxa ah ee loo habeeyo hawl u xilsaarkooda iyo hadba heerka iskaashigooda, iyo gacan isa siintoodu le'eg tahay. Qodobka objektifka ah ee hoggaaminta kaalinta weyn ka qaadanayaa waxaa weeye hadba sida dadka ugu fiican, ugu ildheer ee ugu kacaansan xoogsatada ay u suuragasho in ay noqdaan kuwa Xisbiga iyo dawladda hoggaaminaya. Jaalle Siyaad oo arrintaas faafis ugu diray Wasaaradaha, Wakaaladaha, Xafiisyada Siyaasadda ee MGSK Gobollada iyo degmooyinka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya wuxuu ku tilmaamay sifooyinka Kacaanku rabo in ay ku sifoobaan laguna barbaariyo maamulayaasha Xafiisyada Dawladda, kuna soo baxay Wargeyska Xiddigta Oktoobar 8dii Sebtembar 1975 ay tahay :

1. Xayinimo.

2. Toosnaan iyo caadilnimo.

3. Aaminsanaan iyo xamaasad xagga hawsha.

4. Karti xagga hawsha.

5. Karti go'aan qaadasho.

6. Kalsooni.

7. Jaallenimo.

8. Dhugnimo.

9. Aqoon.

10. Deggenaan.

Marka bulshada Hantiwadaagga ahi hore u marto, Kacaanka Teknoloojiyadu wuxuu ku ridayaa qaabka hoggaaminta isbeddel weyn, hoggaamintu way sii adkaataa. Kacaanka Xiriirka Teknoloojiyadu, wuxuu isbeddel ku ridayaa wax tacabka, xirriirka dadka u dhexeeya iyo noloshooda dhinac kastaba, waxaa noqonaysa lagama maarmaan in isbeddel ku dhaco aqoonta shaqada, nolosha dadka, fikradahooda iyo dabeecadooda intaba. Waxaa kle ee teknoloojiyadu suuragelineysaa oo dedejinaysaa suulitaanka dabaqadaha bulshada. Waxa kale oo koraya kaalinta culuunta ijtimaaciga khaas ahaan dhaqaalaha siyaasiga iyo hantiwadaagga cilmiga ah, kuwaas oo bara xeerarka guud ee dhismaha hantiwadaagga iyo barbaarintiisa. Arrimaha ugu adag hoggaaminta waxa ka mid ah: sidii danta guud ee bulshada iyo tan khaas ahaaneed ee dabaqadaha iyo xubnaha bulshadu ka kooban tahay loo daryeeli lahaa, sidii guud ahaan bulshada iyo gaar ahaan dabaqadaha iyo xubnaha, loogu abaabuli lahaa in ay u fuliyaan si firfircoonaan ah waajibaadka bulshada horyaal.

## X) WAAJIBKA HAY'ADDA WAX HOGGAAMINTA

Hoggaamintu kama dhalato jiritaanka wixii la hoggaamin lahaa sida (bulshada iyo waaxaha ay ka kooban tahay oo keli ah) ee waa in la helaa ha'yadii wax hoggaamin lahayd kaas oo ah, habkii isku xidhi lahaa waaxaha la hoggaaminayo oo dhan, isku xirriirin lahaa oo saxi lahaa. Bulshada Hantiwadaagga ha'yaddaasi waa dawladda iyo ururrada bulshada.

## HOGGAAMINTA SUBJEKTIFKA AH

Hoggaaminta arrimaha bulshada waa in uu leeyahay Xisbigu, xisbigaasina noqdaa Xisbi Marksi - Lenini ah. Lenin wuxuu yiri, **«Si hoggaamin fiicani u suuragasho waxaa loo baahan yahay ciidan habeysan oo kacaana, hantiwadaagga, ciidankaas oo la yiraahdo «Xisbi» (Lenin B. 42. 2584).**

Xisbigu wuxuu dhigaa oo sameeyaa Siyaasadda lagu barbaarinayo bulshada, ideoloojiyo ahaan iyo dhisme ahaan intaba, wuxuu sameeyaa xulashada kaaderka, qaybinta iyo edbinta Kaaderka hoggaanka qabanaya iyo kormeerka taloo-yinka Xisbigu goostay fulintooda.

Siyaasadda Xisbigu waa in ay ku dhisnaataa asaas cilmi ah kaas oo ah Marksism-Leninism, waayo waa cilmiga bulshada hoggaamin saxa dhaxalsiin kara. Marksism-Leninsm wuxuu xisbiga awood siinayaa in uusan ujeedada weyn ee saxa ah ka leexleexan, inuu helo jidkii bulshadu kaga samata bixi lahayd marka dhibaatoyoin la soo gudboonaadaan go'aan sax ahna u qaadan lahaa Xisbigu. Siyaasadda Xisbigu waa in ay u asaas noqotaa aqoonta xeerarka bulshadu ku barbaarto, si joogta ahna ugu halgamaa danta guud ee xoogsatada iyo danta dadka oo dhan. Hoggaank Bulshada waxaa kale oo kaalin weyn ka qaata dawladda Hntiwdaagga ah, ahna habeeyaha (regulator) socodka bulshada.

Niyadda iyo ujeedada hoggaanka si dawladdu u hirgeliso oo dadku u raaco waxaa loo sameeyaa si sharciya. Dawladda oo keli ah ayaa leh xubnaha sharci socodsiinta sida (Maxkamadaha, Xeer Ilaaliyaha, Booliiska, Ciidammada Na-

bad Sugidda iwm), isla markaasna dawladdu waxay leedahay qalabka tababarka iyo hanuuninta maskaxda qofka sida (Dugsiyada, wargeysyada, Sinimaha, Raadiyaha, Raadiyaha la iska arko iwm), Awooddaas iyo qalabkaas ay haysato awgeed dawladdu waxay ka qaadataa kaalin weyn hoggaaminta bulshada hantiwadaagga ah, **waxayna tahay gudbiyaha iyo fuliyaha Siyaasadda Xisbiga.** Hoggaaminta dawladdu waxay u kala baxdaa oo fuliya xubnaha Wasaaradaha dawladdu ka kooban tahay sida xubnaha:

— Dhaqaalaha.

— Qorshaha.

— Lacagta.

— Gaashaandhigga.

— Siyaasadda dibedda iyo kuwa kale.

Lenin wuxuu yiri «**Si aad wax u hoggaamisid waa in aad waxa aad rabtid in aad hoggaamisid aqoon u leedahay. Ma aha in qof aan karti lahayn, cilmiga hoggaamintana aqoon hoggaamin loo dhiibo.**» Lenin wuxuu ku dardaarmay in hoggaamiyuhu yaqaan Marksism-Leninism iyo aqoonta gaar ahaaneed ee ku saabsan arrinta uu maamulayo. Shaqada dadka dawladda ee hoggaanka haya, waxaa laga rabaa in ay ku sifoobaan:

1. In ay yihiin dad hantiwadaagga (didicated to the principles of Socialism).

2. Dad aqoon iyo karti xeeldheer shaqada u leh habsamina u fulin kara.

3. Dad Xilkasnimo iyo mabda' leh.

4. Waayo-aragnimo iyo hoobalnimo hawleed (experience and practicalness).

5. Karti (Efficiency).

6. Habsami iyo dishibiliin (Organisation and Descipline).

7. Isku dubaridnaan (Systematic character).

Ujeeddada oo ah in dadka hoggaanka, shaqadoodu ay ku dhisnaato in arin kasta laga fiiriyo dhinac kasta si maskax ku fadhida oo habboon, la tixgeliyo arrimaha iyo qodobbada xidhiidhka ay leeyihiin iyo waqtiga ku habboon go'aan qaadashada, lana tixgeliyo arrimaha guud iyo kuwa gaar ahaaneed ee horyaal Bulshada.

Lenin wuxuu yiri labadaas qodob ayaa dhalin kara hoggaamin cilmi ah. Sidaas darteed, dadka hoggaanka hayaa waa inay leeyihiin karti maamul (administrative capamility), in dadka ay xukumaan waajib siin karaan, shaqadooda kormeeri karaan iyaga oo adeegsanaya sharciga maamulka loo dhiibey u yaal. Dadka hoggaanka hayaa waxaa ku waajib ah inay dhowraan qawaaniinta iyo maba'diida bulshada hantiwadaagga u degsan, mitaal lagu daydana u noqdaan. Lenin sifooyin fiic-fiican oo heer sare ah ayuu ka dooni jirey in Kaaderka hoggaanka qabanayaa ku sifoobo, sifooyinka uu ku tilmaamay inuu yeesho qofka xil loo dhiibayaa waxay yihiin: waxay yihiin:

1. Waa inuu yahay qof hantiwadaaga dhinac kastaba.

2. Waa inuu karti aad u sareysa leeyahay.

3. Waa inuu waayo-aragnimo ballaaran u leeyahay shaqada.

4. Waa inuu ku sifoobaa deggenaansho, aqoon iyo farsamo yaqaannimo shaqadiisa ah.

5. Waa in uu ka dhex abuuri karaa ururka ama dadka uu la shaqeynayo Jaallenimo, kuna sifoobaa isagu Jaallenimo iyo hantiwadaagnimo.

**DADKII QODOBBADAAS KOR KU QORAN KU SIFOOBA AYUU, LENIN KU TALIN JIREY IN HORE LOO MARIYO, LA DALLACSIIYO OO LOO DHIIBO HOGGAAMINTA IYO XILKA** (Lenin B. 36 B. 194).

Lenin wuxuu uga digey dadka hoggaanka haya inay iska ilaaliyaan in go'aannadoodu noqdaan kuwo ku dhisan degdeg, hubsasho la'aan, dhalanteed iyo run ka fogaansho,

Lenin wuxuu yiri, hannaanka, qaabka iyo habka hoggaamintu waa inuu ku dhisnaadaa, digtoonaan, baaraandeg, u kuurgal, ka fiirsasho, waayo-arag, tixgelin iyo saxid la saxo khaladaadka la galo, waayo aragnimona laga dhaxlo. Waa lagama maarmaan in kaaderka la xusho, shaqo fulintoodana la kormeero, hoggaamintuna ku dhisnaan kelinimo ee ku dhisnaataa wadajir iyo wax wada hoggaamin, dimuqraadinimo ballaaran, naqdi iyo isnaqdi Jaallenimo, arrimahaas ayaa dhalin kara oo keeni kara hoggaamin saxa.

**Saldhigga maamulka hoggaaminta.** Shaqa hoggaamintu waxay bilaabataa marka yoolka waajibka la bixiyo ilaa iyo inta laga gaadhayo ama ay xaqiiqoobayaan midhihii waajibku. Marka waajib la guto, mid kale ayaa la isa siiyaa, maamulka hoggaamintu wuxuu ka kooban yahay:

1. Go'aan qaadashada oo ku fusha qaab brograam, faafis ama amar.

2. Isku duwidda (Organisation) waayo go'aan isma fuliyo ee wuxuu u baahan yahay shaqo iyo isku duwid. Lenin wuxuu yiri **«Si hoggaamin suubani u suuragasho waxaa lagama maarmaan ah in si camali ah loo habeeyo (B. 36 B. 173).**

3. Habeyn (Regulation and adjustment). Wax kasta oo la isku duwaa, kama caagana, murug, kama' iyo wax aan lagu tashan oo iska dhaca oo la xirriira dabeecadda, sidaas daraaddeed waxa lagama maarmaan ah in la daryeelo iskuduwidda, la habeeyo si joogta ah lana barbaariyo.

4. Isla xisaabtan iyo kormeer (accounting and control).

Bulshada hantiwadaagga isla xisaabtanka iyo kormeerku waa qodob ka mid ah qodobada asaasiga ah, si loo ogaado in qof kastaa ama xubinkastaa oo dawladda ka mid ahi (gudatay waajibkii lo oqrsheeyey waa in la kormeero, kormeerkana ay yeeshaan xoogsatadu· Qodobadaas kor ku qorani, waa isku xiran yihiin mana kala baxsana. Si hoggaamintu habsami ugu socoto, waxaa lagama maarmaan ah wargelin joogta ah. Wargelintu waxay lagama maarmaan u ta-

hay go'aan qaadashada, habeynta isku duwiddaa iyo fulinta go'aannada.

Madaxdu waa in ay ka helaan wargelin joogta ah sida go'aannadii u fuleen, haddii loo baahdana in go'aannadii hore la habeeyo, waa in la helo asaas saxa oo lagu dhiso kuwa cusub.

Go'aan qaadasho aan ku dhisanayn wargelin fiicani waa go'aan ku dhisan riyo iyo dhalanteed, mana suurageliyo hoggaamin cilmi ah.

## KH) MABAADI'DA LENINISAMKA EE HOGGAAMINTA CILMIGA AH

Mabaadi'ida Leninismka ee hoggaamintu wuxuu ka kooban yahay:

1. Guddoominta dimuqraadiyada dhexda (Democratical centralism) nuxdeedu waxay tahay, tixgelin la tixgeliyo dimuqraadinimada, micnaha oo ah xoogsatada oo Taliska leh, oo isla markiibana hoggaaminta meel keli ah laga wado, dishibiliin aad u sareeyaana jiro. Guddoominta diimuqraadiyada dhexda ee bulshada hantiwadaaggu, waa in ay saameysaa dhinaca dhaqanka dhaqaalaha, dhaaqnka Siyaasadda ee bulshada iyo dhinaca ruuxa intaba.

2. Waaqicinimo «Objectivity» socodka bulshada ayaa laga heli karaa xeerarka objektifka ee barbaarinta bulshada, ahna lagama maarmaan in xeerarka objectifka ee barbaarinta bulshada, ahna lagama maarmaan in xeerarkaas la tixgeliyo.

3. Hoggaaminta kuran (Concerte) oo ay u asaas tahay wax cad oo run ah, lana taaban karo iyo wargelin saxa.

4. Yididiilo iyo wax tarnimo «Optimism and Effectivenesss» labadaas qodob ayaa waxaa ku arruursan ujeeddada weyn ee hoggaaminta Bulshada, dhinaca dhaqaalaha, siyaasadda, bulshada iyo ruuxa intaba, taas oo ah in go'aannada fulintoodu waqti go'an leeyihiin isla markiibana shaqada, qalabka, lacagta iyo kharashka ugu yar lagu fuliyo.

5. Himmad gelin iyo abaalgud «Stimulation» in dadka bulshada lagu hoggaamiyo waa lagama maarmaan, waayo qofku waa abuur fekeraya oo han leh, si firfircoonaanta shaqadu u sare marto, si tacabka wax soo saarku u bato, taas oo keenaysa in hantida ummaddu kor u kacdo, qofkuna tartan u galo, waa in la tixgeliyaa oo la hamad geliyaa qofka, taas oo ah in qof kasta shaqadiisa la tixgeliyo, laguna abaal mariyo.

## 6. Hoggaaminta ha'yadnimo iyo tan Juqraafinimo.

Hoggaaminta ha'yadaha dhaqaalaha iyo dhaqanka, iyada oo aan loo eegin meesha ama Gobolka ay ka dhisan yihiin, misana hoggaamintoodu waxay ku dhisan tahay **mabda' hoggaamin ha'yadnimo,** taas oo micnaheedu tahay in meel keli ah laga hoggaamiyo si toos ah, iyada oo loo marayo Wasaaradda khuseysa si, siyaasadda waxtacabka iyo hore u marka ha'yaduhu dhinac kastaba ula socdaan qorshaha guud ee dawladda, dhinaca kale ha'yadu haddii ay ka dhisan tahay Gobol ama Degmo dalka ka mid ah, waxaa isla markiiba laga hoggaaminayaa khaas ahaan xagga dhaqanka Siyaasadda Gobolka ama Degmada ay ka dhisan tahay, taas oo la yiraahdo hoggaamin ku dhisan maamul juqraafinimo; waxaa loo baahan yahay in xubnaha hoggaanku labadaas hab hoggaamin isu eegma dayaan isuna dheeli tiraan, taas oo ku imanaysa in aragtida dhaqaalaha ee Marksism-Leninism Kaaderka hoggaamintu bartaan. Hirgelinta iyo barbaarinta mabaadi'ida hantiwadaagga cilmiga ahi, waxay suuragelinayaan in bulshada hantiwadaagggu si habsami ah u barbaarto si ay u rumowdo ujeedada guud ee loo halgamayo, taas oo ah in bulshadu heer nololeed sare gaadho.

## ERAYBIXIN

| AF INGIRIISI | AF SOOMAALI |
|---|---|
| 1. Subject | Mawduuc |
| 2. Component Part | Qayb ka mid ah |
| 3. Content | Nuxda/dulucda |
| 4. Method | Hab |
| 5. Origin, Beginning | Dhalasho, bilow |
| 6. Founder, Initiator | Abwaan |
| 7. Stage | Heer |
| 8. Matter | Maaddo |
| 9. Essence | Murtida |
| 10. Form | Qaab |
| 11. Base | Asaas |
| 12. Fundamental, basic | Asaasi |
| 13. Theory | Aragti |
| 14. Surplus value | Qiimaha dheeraadka |
| 15. Historical Process | Socodka taariikhda |
| 16. Chapter | Madax |
| 17. Part | Qayb |
| 18. Law | Xeer «Qaanuun» |
| 19. Development | Barbaarin/hore u mar |
| 20. Epoch | Waa/casri |
| 21. Transition | Kalaguur |
| 22. Socio-Political | Dhanka siyaasadda |

| | | |
|---|---|---|
| 23. | Manifest | Ba a q |
| 24. | Inevitability/Inescapable | Lama huraan |
| 25. | Humanity/Mankind | Aadaminimo |
| 26. | Teaching/Doctrine | Aqoon |
| 27. | Science | Cilmi |
| 28. | Political Economy | Dhaqaalaha siyaasiga |
| 29. | Conflict | Iskhilaaf/is-herdi |
| 30. | Contradiction | Iska horimaad |
| 31. | Commune of Paris | Komuunkii Baariis |
| 32. | Anarchy | Faawda «Qas» |
| 33. | Moral | Macnawiyad/anshax |
| 34. | Strategy | Istraatiijiyad |
| 35. | Environment | Deegaan |
| 36. | Economical Structure | Dhisme dhaqaale |
| 37. | Concrete | Kuran |
| 38. | Socio-Political/Teachings Doctrine | Aqoonta dhaqanka siyaasadda |
| 39. | Transformation | Isbeddel |
| 40. | Social-relation | Xiriirka bulshada |
| 41. | Labour/Work | Shaqo |
| 42. | Public Ownership | Wax lahaansho bulshada u dhexeysa |
| 43. | World Out look | Adduun-arag |
| 44. | Being/Exsistance | Jiraal/nolol |
| 45. | Consciousness | Damiir/garaad |
| 46. | View/opinion | Ra'yi/fikrad |
| 47. | Formation | Qaab |
| 48. | Sacrifice | Tadxiyad/naf u hurid |

| | | |
|---|---|---|
| 49. | Military form | Qaab milleteri |
| 50. | Wise Leadership | Hoggaamin suuban ama hagaagsan |
| 51. | Socialization of production | Hantiwadaagaynta tacabka ama wax soo saarka oo caam laga dhigo |
| 52. | Concentration | Isugeyn/ururin |
| 53. | Production | Wax soo saar/tacab |
| 54. | Spiring/Source | I L |
| 55. | Source of raw meterial | Meesha laga helo qalabka qayriin |
| 56. | Agricultural economy | Dhaqaalaha beeraha |
| 57. | Forces of production | Xoogagga tacabka |
| 58. | Socio-economical | Dhaqanka dhaqaalaha |
| 59. | Relations of production | Xiriirka tacabka |
| 60. | Objective | Objektif |
| 61. | Subjective | Subjektif |
| 62. | Struggle | Halgan |
| 63. | Exploitation | Dul-ku-noolaansho |
| 64. | Basis | Gundhigga/asaaska |
| 65. | Superstructure | S a a b |
| 66. | Landlord | Dhulgoosad |
| 67. | Spritual | R u u x a |
| 68. | Mode, method of production | Habka wax tacabka ama «wax soo saarka» |
| 69. | Subjectivism | Subjektifisam |
| 70. | Fatalism | Fataalisam |
| 71. | Spontaneous | Ku talo gal la'aan |
| 72. | Invention | Hindise |

| | |
|---|---|
| 73. Antagonism | Iska soo horjeed/isdiid |
| 74. Marksist-Leninist Party | Xisbi Marksi-Lenini ah |
| 75. Up-rising | Kicitaan |
| 76. Organisation | Habsami/dhisme |
| 77. Influence | Saameyn |
| 78. Conclusion | Gabagabeyn |
| 79. Government Apparatus | Waaxaha ama maamulka dawladda |
| 80. Meaning/sifnificance | Mince/qaayaha |
| 81. Power | Talis |
| 82. Proletariat | Broletaariyaad |
| 83. Proletariat Internationalism | Broletaariyaadnimo caalami ah. |
| 84. Civil war | Dagaal ahaliya |
| 85. Consumption | Quudasho |
| 86. Centre | Badhtame |
| 87. Democratical Centralism | Diimuqraadiyad guddoominta dhexe |
| 88. Fort | Qalcad |
| 89. Dogmatic/Dogma | «Garmaqaate» |
| 90. Stage | H e e r |

# TUSMO

## QAYBTA I

## HANTIWADAAGGA CILMIGA AH

### MADAXA I

1. Mawduuca Hantiwadaagga Cilmiga ah: Bogga 1

b) Hantiwadaagga cilmiga ahi waa qayb ka mid ah Marksism-Leninism . . . . . » 2

t) Murtida hantiwadaagga cilmiga ah . . . miga ah . . . . . . . . . . . » 5

j) Hannaanka hantiwadaagga cilmiga ah . . » 12

### MADAXA II

1. Hantiwadaagga dhalanteedka ah: » 14

b) Hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa ee qarnigii XVI - XVII . . . . . . . » 14

t) Hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa ee qarnigii 19aad . . . . . . . . . . » 18

j) Hantiwadaaggii dhalanteedka ahaa ee Ruusiya . . . . . . . . . . . . » 21

### MADAXA III

1. Dhalashadii iyo heerarkii barbaarinta hantiwadaagga cilmiga ah: » 27

b) Marks iyo F. Engels waa abwaannadii hantiwadaagga cilmiga ah . . . . . . . » 27

t) Barbaarintii uu ka qaatay V.I. Lenin hantiwadaagga cilmiga ah Kacaankii Oktoobar ka hor . . . . . . . . . . . » 39

j) Barbaarintii V.I. Lenin hantiwadaagga cilmiga ah Kacaankii Oktoobar kaddib . » 43

MADAXA IV

1. Halganka dadyowga Afrika: » 48

b) Gumeysi la dirirkii dadyowga Afrika . . » 51

t) Afrika iyo Marksism-Leninism . . . . » 55

QAYBTA II

UGUDBITAANKA HANTIWADAAGGA

MADAXA V

**Aragtida Kacaanka hantiwadaagga ah - waaga cusub iyo socodka kacaannada adduunka**

1. Lagama maarmaanka taariikhiga ah, waxyaalaha dhaliya iyo qaababka kacaanka hantiwadaagga ah ee (dalalka hantigoosadka): » 61

b) Waxyaalaha objektifka ah ee dhaliya ugudbitaanka hantiwadaagga . . . . . » 61

t) Bislaanshaha kacaanka . . . . . . . . » 62

j) Xoogga kacaanka . . . . . . . . . » 64

x) Halganka dimuqraadiga ah iyo halganka hantiwadaagga ah . . . . . . . . . » 66

kh) Qaababka uu ku dhasho kacaan nabad ama dagaal ah . . . . . . . . . . » 69

d) Isku mid ahaanta iyo kala gaar ahaanta kacaannada adduunka . . . . . . » 73

2. Kacaankii Oktoobar ee weynaa waa guulihii muujinayey aragtida hantiwadaagga cilmiga ah: » 74

b) Aragtidii Lenin ee kacaanku waa run . . » 75

t) Kacaankii 21kii Oktoobar ee Soomaaliya waa kacaan u horseedaya hantiwadaag . . » 76

j) Waajibaadka kacaanka hantiwadaagga ah . » 79

3. Waaga cusub iyo kacaanka adduunka: waxyaalaha asaaska u ah iska horimaadka waaga cusub . . . . . . . . . . . . . . » 82

b) Waxyaalaha asaasiga u ah iska horimaadka waaga cusub . . . . . . . . . » 84

t) Xiriirka ka dhexeeya xoogagga kacaannanada adduunka ee waaga cusub . . . . » 86

## MADAXA VI

### Dhaqdhaqaaqyada xornimo-doonka waddaniga ah

1. Meesha taariikhda ay kaga jirto dhaqdhaqaaqyada xornimo-doonka waddaniga ahi: » 91

b) Kaalinta iyo dabeecadda kacaannada xornimo-doonka waddaniga ah . . . . . » 91

t) Kacaanka xornimo-doonka waddaniga ahi waa kacaan ku xiran kacaannada hantiwadaagga sababtoo ah . . . . . . » 94

2. Gumeysiga cusubi waa saldhigga siyaasadda imberyaalisamka: » 95

b) Xornimo-dhaqaale - waa waajibka koowaad ee dalalka soo koraya . . . . . » 96

t) Hab doorashada dalalka xoroobey . . » 99

j) Dhismaha dhaqaalaha (socio-economic structure) dalalka soo koraya . . . . . » 104

x) Ujeeddooyinka mideynta bulshada ee dalalka soo koraya . . . . . . . . . . » 107

kh) Dagaalka ideoloojiga ee dalalka xoroobey ka taagan . . . . . . . . . . . . » 111

## MADAXA VII

**Khalkhalka adduunka hantigoosadka iyo dhaqdhaqaaqyada kacaannimada dabaqadaha shaqaalaha.**

b) Heerarkii khalkhalka hantigoosadku soo maray . . . . . . . . . . . . . » 115

t) Iska horimaadka dhaqan dhaqaalaha ee koritaanka bulshooyinka hantigoosadka . » 116

j) Dimuqraadiyada iyo burjuwaasiyada . . » 120

x) Khalkhalka ideoloojiyada burjuwaasiyada . » 122

kh) Kacaannimada iyo garaadka siyaasiga shaqaalaha oo koraya . . . . . . . . . » 124

d) Waxyaalaha gaarka ah ee asaaska u ah halganka broletaariyaadka . . . . . » 126

r) Wadajirka iyo isbahaysiga halganka xoogagga lidka ku ah monobooliyada dalalka hantigoosadka . . . . . . . . . . . » 127

## MADAXA VIII

**Aragtida dagaalka iyo nabadda ee Marksismka**

1. Imberyaalisamku waa huriyaha iyo oogaha dagaallada adduunka . . . . . . . . . » 130

b) Sababaha iyo waxa dhaliya dagaalka . . » 131

t) Dagaallada xaqa ah iyo kuwa xaqdarrada ah. . . . . . . . . . . . . . . . » 134

2. Mabaadi'da hantiwadaagga ee Siyaasadda dibedda: . . . . . . . . . . . . . » 136

b) Mabaadi'da Siyaasadda dibedda ee J.D.S. » 138

t) Waxyaalaha suuragelinaya in dagaal adduuneed aanu dhicin . . . . . . . . » 140

j) Nabad u halgan iyo kacaannada xornimodoonka . . . . . . . . . . . » 145

## MADAXA IX

### Habka hantiwadaagga adduunka

b) Abuuritaankii adduunka hantiwadaagga » 149

t) Horumarinta habka hantiwadaagga . . . » 152

j) Dalalka adduunka ee xoroobey iyo dawladaha hantiwadaagga adduunka . . . » 155

x) Tartanka labada hab adduunyo . . . » 157

## QAYBTA III

## DHISMAHA HANTIWADAAGGA

## MADAXA X

1. Martida xilliga kala guurka: » 159

b) Maxaa looga baahan yahay xilliga kala guurka? . . . . . . . . . . . . . » 160

t) Waajibaadka waqtiga kala guurka . . . » 162

j) Xeerarka guud ee dhismaha hantiwadaagga iyo kala gaar ahaanta dalalka . . . » 165

2. Diktaahuuriyada broletaariyaadka: » 170

b) Waajibaadka diktatuuriyada broletaariyaadka . . . . . . . . . . . . » 172

t) Kala gaar ahaanta qaababka dikaatuuriyada broletaariyaadka . . . . . . . » 175

j) Kaalinta iyo waajibka xisbiga shaqaaluhu ka qaato diktaatuuriyada broletaariyaadka » 179

## MADAXA XI

**Arrimaha asaaska u ah dhismaha hantiwadaagga**

1. Abuurista asaaska dhaqaalaha hantiwadaagga: » 182

b) Siyaasadda qaranaynta qalabka wax soo saaridda . . . . . . . . . . . » 183

t) Siyaasadda warshadeynta . . . . . . . » 184

j) Siyaasadda tacab-wadaagga . . . . » 185

x) Waaya-aragnimada tacabwadaagga ee dalalka hantiwadaagga . . . . . . . » 186

kh) Waaya-aragnimada iskaashatooyinka Jamhuuriyadda Diimuqraadiga ee Soomaaliya » 187

2. Tirtiridda farqiga u dhexeeya magaalooyinka. iyo tuuloyinka . . . . . . . . . . » 188

b) Dejinta iyo nolosha dadka . . . . . » 189

t) Waaya-aragnimada tirtiridda farqiga u dhexeeya magaalooyinka, tuulooyinka iyo miyiga ee dalalka hantiwadaagga . . . » 190

j) Farqiga u dhexeeya hawlaha gacanta iyo kuwa maskaxda ee dalalka soo koraya . » 191

x) Tirtiridda farqiga u dhexeeya shaqada maskaxda iyo gacanta . . . . . . » 194

kh) Waaya-aragnimada Soomaaliya ee daryeelka danaha beeraleyda iyo reer miyiga . . » 197


## MADAXA XII


1. **Bulshada Hantiwadaagga**

b) Nuxda hantiwadaagga iyo mabaadi'da asaasiga u ah dhismihiisa iyo habayntiisa: » 199

t) Mabda'a asaasiga u ah hantiwadaagga . » 202

j) Isla xisaabtanka iyo kormeerku waa qodob asaasi u ah hantiwadaagga . . . . » 203

x) Xiriirka dhaqanka - siyaasadda ee bulshada hantiwadaagga ah . . . . . . . . » 205

kh) Wanaagga iyo gacan sarreynta hantiwadaagga . . . . . . . . . . . . . » 208


## MADAXA XIII


1. Hoggaaminta cilmiga ah ee bulshada hantiwadaagga: » 212

b) Hoggaaminta bulshadu - waa lagama maarmaan objektif ah . . . . . . . . . » 212

t) Asaaska iyo murtida objektifka hoggaaminta cilmiga ah ee bulshada hantiwadaagga . » 215

j) Nuxda hoggaaminta cilmiga . . . . . » 216

x) Waajibaadka Hay'adaha wax hoggaaminta. » 218

kh) Mabaadi'da Leninismka ee hoggaaminta cilmiga . . . . . . . . . . . » 222